# MIIDAAMIN IYO MAGAC XUMO SIYAASADEED

## SHIRKII DIB U HESHIISIINTA SOOMAALIDA, KENYA, 2002-2005

**Qore: Dr. Qaasim Xirsi Faarax**

(Murashaxii Madaxweynenimo, 2003/4)

# ARAR

Buug yarahakan siyaasdeed waxaa ku fara yaraystay **Dr. Qaasim Xirsi Faarax** oo isagu ka mid ah isla kooxdii filinka jilaysay xiligaas, isagoo ka mid ahaa u tartamayaashii xilka Madaxweynenimada Soomaaliya (***Presidential Candidate***), xilligii 2004 tii ee isla shirkaan buuga looga hadlayo.

Qoraaga buugani qoraanimda goob jooga ah ka sokow, waxa uu ka mid ahaa maskaxyadii u ololeeyey qabashadii shirweynihii ugu mudnaa ee Carta, ee sanadkii 2000. Waxa kale oo uu qoraagu la soo shaqeeyey dawladii fashilantay ee Carta ee uu hogaaminayey C/Qasim Salaad Xasan isaga oo ahaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Bii'ada iyo Horumarinta Reer Miyiga/markii dambena "Bii'ada iyo La dagaallanka Nabaad Guurka", isla markaana ahaa xubin dawrka siyaasadana firfircooni dheeri ah ka muujiyey (*out standing political activist*).

Qoraagu waxa uu bilaabay diyaarinta iyo xog aruurinta qormada buugan isla maalintii la isugu tagay magaalada Eldoret, isaga oo weliba ayaamahaas xanuunsanaa oo isbitaal jiifay. Waxa uu hadafkiisa koowaad ka dhigtay in uu kala ilaaliyo ujeedooyinkiisa siyaasadeed iyo diyaarinta warbixinta oo ugu dambaystii laga sameeyey buugan. Waxa uu ku dadaalayey in uu aad uga dheeraado caadifad ku kalifaysa u eexashada wejigiisa siyaasadeed iyo dareenkiisa gaarka ah marka la joogo diyaarinta buuga. Sidaa darteed waxad arkaysaa in buugani uu xambaarsan yahay macluumaad badan oo laga yaabo inuu qoraaga qudhiisa ku lid yahay, maadaama ay cilmi baaristu u hadlayso si ujeedo guud ah een marna ahayn ujeedo gaar ah (*objective and not subjective*).

Dhammaan macluumaadka uu sido buugani waxay leeyihiin meel loogu noqdo iyo caddaymo la wada xusayo si looga dheeraado masabid iyo soo bandhigid wax si gaar ah loo danaynayo. Waxaad arkaysaa in buugu u badan yahay warbixin oo ay ku yar tahay dhiraadhirinta siyaasadeed (*political analysis*), waayo wuxuu qoraagu iska dhawray in loo qaato inuu ku leexiyey dhanka aragtida gaarka ah si uu u duufsado akhristaha. Haddaba waxaa loogu tala galay

in qofka akhristaha ihi uu isagu adeegsado maskaxdiisa isaga/iyada oo dhan walba u fikiraya, kuna darsanaya wixii macluumaad kale ah oo hor yaalla. Sida uu akhristuhu go'aankiisa ka dhiganayo waa mid isaga uun utaalla, laakiin waajibka qoraaga saarani waa in uu soo gudbiyo wixii uu goob jooga u ahaa oo indhaha ku daawanayey mudada dhawrka sano ah ee halka shir loo fadhiyey.

Haddaba maadaama ay daraasadani tahay mid ku salaysan xeerka cilmi baarista (*research methodology*), dariiqada loo marayaana ay tahay mid goob joognimo (*emprical research*) waxaa lagama maarmaan noqonaysa in ay marba qof ama koox ka soo hor jeesato ayna si aan laga filanaynin u leexato dhanka qof ama koox kale ilaa ay gaarayso in ay qoraaga qudhiisa wax ka sheegto oo soo bandhigto qaladaad uu galay iyo fikrado ka il duufay.

Sidaa awgeed akhristow marka aad aragto faqrad ku taabanaysa ha ka xanaaqin ee sii wad akhriska si aad u gaarto faqrad kale oo kaad ka soo hor jeeday wax ku duraysa, lagana yaabo in ay adiga ama kaad taageersan tahay ku waafqayso talada oo ku amaanaysa waayo waxay soo bandhigaysa wixii ay koox ama qof ku gardarnaa iyada oo sidaa si la mid ah u cadaynaysa wixii uu ku gar lahaa ee ku qumanaa. Intaa ka dibna la kaasho maskaxdaada adoo cadaalad samaynaya. Marka aad xukunkaas samaynayso ka soo qaad in aadan adigu ahayn kan akhrinaya ama go'aanka xukun samaynaya ee aad ka hadlayso qof kale. Sidoo kale ka soo qaad inaad tahay ninka siyaasad ahaan iyo qabiil ahaan uga soo horjeeda kan aad taageersan tahay. Hubaal marka aad dariiqadaas raacdo waxaad gaaraysa xal waara oo cadaalad ku qotoma.

**Daabacadii Koowaad, April 2005, Nairobi, Kenya**

Buugan lama daabacan karo lamana guursan karo qayb ka mid ah iyo kulligii toona, laakiin way banaan tahay in la tixraaco iyada oo la xusayo sida waafaqsan qaanuunka tixraaca.

**Dhamaan Xuquuqda buugani waxay sharci ahaan u xiran tahay Qoraaga.**

*Waxaan u hibeeyey: dhammaan Ergadii ku jactaday madashii shirkii dib u heshiisiinta Soomaaliyeed ee Kenya – Min Eldoret ilaa Mpagathi.*

## XUSITAAN SIYAASIYADDA "CAASHA AXMED CABDALLAH"

Waxaa xusid mudan in **Hon. Caasha Axmed Cabdalla** oo ka mid ahayd maskaxyadii ugu horeeyey ee curiyey fikrada qabashada shirkaan ay qayb libaax ku leedahay buugaan. Anaga oo fikrada qoraalka isku ogeyn ayaan bilowgii shirka uga daahay jiro culus oo markii koowaad I haleeshay. Waxan saarnaa sariiraha labada Isbitaal ee ugu sareeysa dalka Kenya ee loo kala yaqaan: Aga Khan iyo Nairobi West siday u kala horeeyaan (*respectively*).

Bil ka bacdi markaan madashii Eldoret imid ayey Hon. Caasha faraha iga saartay wixii war bixin ay sii aruurisay oo isugu jira qoraal iyo af labadaba. Waxayna intaa iigu dartay guubaabo iyo dhiiri gelin, inaga oo bilownay wada shaqayn rasmi ah oo isugu jirta dhinacyo fara badana oo siyaasadeed. Sidaa darteed ugu yaraan cutubka koowaad ee buugani waxa uu ka soo maaxayaa maskaxda Xildhibaanad Caasha Axmed Cabdalla oo iyadu ahayd gabadha keliya ee ku mintiday tartankii madaxweynenimada ee la isugu cirbinayey sida dhibka badan.

**CUTUBKA KOOWAAD**

# 1. HORDHAC

Soomaaliya waxay guri ba'ay iyo galaangal faadhidaa inta qof dhashaa ku qaangaaro oo ah 15 sano. Waxaa afarteeda jiho iyo gudaheeda is daba meeraysanaya wiilal qawlaysata ah oo ku hubaysan hub aad u qaali ah. Inta suxuun bariis ah taalla iyo inta qori yaalla dalka gudihiisa waxa badan inta qori iyo rasaas taalla.

Inta la ogyahay 14 shirweyne oo loogu qasday in Soomaliya dawlad loogu dhiso, ama halaga daacad ahaado ama yaan laga daacad ahaane, ayaa lagu kala qabtay dunida deriska ah sida; Jabuuti, Ethiopia, Masar iyo Kenya. Kan iminka buugan laga qoray waa kii ugu caansanaa, inkastoo uusan u muuqan kii ugu wax tarka badnaa. Haddaba sow ma mudna in la is weydiiyo halka ay xariga iyo xanjadu iska qabsna la'yihiin.

## 1. 2. CURINTII SHIRKA ELDORET

Laba saac oo habeenimo iyada oo loo fadhiyo xilligii cashada ayey koox ka mid ah xubnihii dawladdii ku meel gaarka aheyd (hada ka dib DKMG) ee lagu soo dhisay tuulada Carta ee dalka Djibouti oo isgu jirta xubno Golaha Wasiirada (hadda ka dib GW), Xubno Agaasimayaal Guud (hadda ka dib AG) iyo Saraakiil Sare ee Ciidamada Qalabka sida, waxaa si sheeko goos goos ah ku bilowday qiimeyn waxqabadka dawladda. Halkaa ayaa waxaa ka soo baxay in aysan dawladu sidii la rabay wax u qaban ayna u baahan tahay dhamaystir iyo dib isugu yeerid dambe ee xubnaha lagama maarmaanka ah ee Soomaaliyeed oo ay ugu horeeyaan kooxaha mucaaradka ah ee hubaysan iyo gobolada dhistay maamul goboleedyada.

Fikrad is tusaaleyn iyo dhiraandhirin cilmiyeysan ka dib waxaa la isla gartay in loo gudbiyo talada noocan ah Madaxweynaha iyo Golaha Shacabka. Hadaba toban Wasiir oo ay ka mid yihiin xubnihii curinta fikirka lahaa ayaa usoo gudbiyey talada Madaxweynaha iyo Golaha Shacabka.

Bilowgii sanadkii 2002 ayaa waxa la soo hordhigay isla taladaas Golaha Wasiirada iyo Golaha Shacabka halkaa ayeyna labaduba si talantaali ah isugu raaceen madaxweynihiina ansixiyey. Bishii Maarso ee isla sanadkii 2002, ayaa la soo hordhigay talada shirkii madaxweynayaasha Midowga Afrika ee ka dhacay magaalada Durban ee Koonfur Afrika. Madaxweynaha DKMG ayaa arintaa ka codsaday in ay madaxweynayaashu ku taageeraan waana laga aqbalay. Waxaa loo xil saaray madaxweynayaasha lixda wadan ee kale ee ku midoobay uruka IGAD. Waxaa tifatirka heshiiskaas loo xilsaaray Madaxweynaha dalka Suudaan Mr. Cumar al-Bashir oo ahaa madaxaweynaha xilligaas ee ururka IGAD.

Madaxweynayaasha Afrikada IGAD waxay ka sii shidaal qaadanayeen go’aankii ka soo baxay go’aankii qaramada midoobay ee lamarkiisu ahaa 4401 ee Golaha amaanka ee soo baxay 31 kii Oktoobar 2001. Go’aankaas nuxurkiisu waxa uu ahaa in iyada oo la tixgelinayo mirihii ka soo baxay shirweynihii dib u

heshiisiinta ee Carta, Djabouti, la abaabulo shirweyne dib u heshiisiin qaran ee Soomaaliyeed oo lagu dhamaystirayo wixii ka soo baxay Carta[1].

Bartamihii isla sanadkii 2002, waxaa shir goboleed ballaaran ay dawladaha ku bahoobay urur goboleedka IGAD ku qabteen shir kale magaala madaxda dalka Suudaan ee Khartum. Halkaas ayey golaha wasiirada ee dalalka IGAD ku gaareen go'aan ah in la heshiisiiyo DKMG ah iyo hogaamiye kooxeedyadii ka soo hor jeeday ee qaadacay dawladdii C/Qasim sida ugu dhaqsaha badan. Ka bacdina ururka IGAD waxa uu go'aamiyey in saddexda dawladood ee xuduudaha tooska ah la leh Soomaaliya oo kala ah Ethiopia, Djabouti iyo Kenya ay mid walba oo ka mid ihi u magacawdo Ergay Khaas ah arimaha dib u heshiisiinta Soomaaliya, halka ay dawladaha kale ee ku jira urur goboleedka IGAD iyo xataa kuwa ku bahoobay ururka midowga Yurub ama guud ahaanba beesha caalamku soo wada dirsadaan Ergayo goob joogayaal ah.

Dawladdii KMG ahayd waxa ay codsatay in aan loo deyn labadooda keliya maadaama ay iska soo horjeedaan ee lagu daro 100 qof oo bulshada rayidka ah sida Aqoonyahano, Culima'u diin, Hogaamiye dhaqameedyo, Dhallin yaro, Haween, iwm, iyaga oo ka shidaal qaadanayey shirarkii hore ee dhicisoobay sida kii Nakura, Kenya oo ahaa mid uu markaas raadkiisu qoyan yahay. Waxa kale oo ay DKMG ihi codsatay in shirka lagu qabto dalka Kenya iyada oo uu madaxweynaha DKMG ihi ku ciseeyey madaxweynaha Kenya, H. E. Denial Arab Moi maadaama uu ahaa madaxweynaha ugu da'da iyo cimir xukunka weynaa ee todobada dal ee ku bahoobay IGAD. Go'aankaan waxa laga tixraacay kii Qaramada Midoobay ee lagu gaaray Xarunta UN ee New York, USA.

Wada hadallo jiitamay ka dib waxa la isla gartay in shirka lagu qabto meel ka yara durugsan magaala madaxda oo loo arkay in ay fara gelin badan iyo qas kaga imaan karaan xagga shacabka taas oo laga yaabay in ay amaanka shirka wax udhinto. Sidaa darteed waxaa la go'aamiyey in lagu qabto magaalada

[1] . United Nations Security Council, S/PRST/2001/30, Distr.: General, 31 October 2001, New York, USA., 2002

Eldoret oo u jirta Nairobi masaafo dhan 330 km. Inta badan dadka arimaha dhanka baasaysiga ka eega waxay doorashada magaalada Eldoret ku fasirayeen in uu madaxweyne Moi ugu tala galay in jifadiisa oo halkaa degta lagu eexiyo dhaqaalaha ka soo galayey martidaas oo dhinacyo fara badan ku imaanayey.

Inkasta oo taasi si lama huraan ah u dhacaysay, hadana madaxweyne Moi waxa uu ku difaacayey doorashada magaaladaas ku door bidida xaga ammaanka. Laakiin dhan kale dad iyaguna xaga gulufka (*negative*) wax u fasirta waxay ku fasirayeen in sababtu tahay oo keliya in nimanka qabqablayaasha dagaalka ah inta tuuladaas lagu xareeyo halkaa lagu wada xabisayo deedna dalka dawlad qasab ah loo dhisayo. Kuwa fikirkan dambe lihi waxay daliilsanayeen dagaalkii uu dalka Maraykanku kula jiray ciidamadii Alqaacida oo weliba markaa Soomaaliya si weyn loogu tuhunsanaa.

# CUTUBKA LABAAD

# 2. 0. MIN ELDORET ILAA MBAGATHI

## 2.1. WAFDIGII UGU HOREEYEY OO SOO CAGA DHIGTAY ELDORET

Wafdigii ugu horeeyey ee madasha shirka soo caga dhigta wax ay ahaayeen wafdigii ka socday DKMG ah oo ka koobnaa 65 xubnood oo uu hogaaminayey Wasiirka koowaad ee DKMG ah iyo Afhayeenka Golaha Shacabka. Isla markii ay xubnaha wafdigaasi soo caga dhigteen gegida dayuuradaha ee Eldoret waxa ay tabanayeen soo dhaweyn la'aan xaga beesha caalamka ah iyo xataa dawladda loo martida yahay, waxayna si habaqtan ah ku dageen hotel iska caadi ah. Hase ahaatee wafdigaasi waxa uu isku qanciyey in ay wax walba ka doortaan midnimo raadinta Soomaaliyeed.

Laba subax ka dib markii ay xubnihii wafdigaasi tageen madashii shirka ayey dareemayeen in aysan meeshu ku habooneyn shirweyne qaran ee dib u heshiisiin iyaga oo lahaa "xataa soo dhawaada kuma qorna", madasha shirku calaamad aan ku garano ma lahan, iwm. Sidaa darteed waxaa dhacday in ay dibadda is tubaan oo ay ku adkaysteen waa in ugu yaraan la helaa calankii Soomaaliyeed oo goobta ka babanaya[2] waayo waxaa halkaa laga arkay lixdii calan ee dawladaha IGAD oo ay calamadoodii goobta ka babanayaan iyo calankii Soomaalida oo aan ka muuqan meesha, haba ahaado kii keliya ee loo dan lahaa ama uu shirku khuseeyey. Mudaaharaadkaa lagu doonayey calanka Soomaaliyeed waxaa keliya ee uu ku gaar ahaa xubnaha wafdiga DKMG ah. Ka

[2] . BBC, Warka Madaxdiisa, 15 kii Oktoobar, 2002.

dib waxaa ku soo biiray wafdigii bulshada rayidka ah oo ay xamaasad weyni ka muuqato.

Laakiin sidaas waxaa ka dareen duwanaa xubnihii horseedayaalka dagaalka ahaa oo iyagu si aan la qiyaasi karin u baygagsanaa. Waxaa wejiyadooda ka muuqatay dhiillo colaadeed iyaga oo qabay dareen ahaa in subaxaas godkooda biyo ugu soo galeen. Waxay ka baqayeen in marka ay shirka u fariistaan oo la hubsado inay fadhiga ku dhan yihiin la wada katiinadayn doono xabsi iyo maxkamad cadaaladeed ee xuquuqda aadanahana loo taxaabi doono. Waxaad arkaysay in ay intooda badani ku yimaadeen si qoor dhiibasho ah oo ay is lahaayeen hadada is dhejisaan waa laydinkaga darayaa, mana baxsan kartaan. Inkasta oo dawladda Ethiopia ay soo guubaabisay oo ku dadaashay in ay ucadayso in aan wax dhib ihi soo gaareyn hadana kuma aysan aamin qabin dhiri gelintaas, hadaladii iyo guuxii la isla dhex marayey iyo caradii Maraykanka oo taagneyd awgeed.

Inkastoo aysan weli muuqan cid dhab ahaan u dareensanayd waxaa iska muuqatay in shirkani uu ku dambayn doono halkii ay kuwii ka horeeyey ku dambeeyeen oo ahayd fashal iyo bur bur. Sababta ugu horaysa ee mar walba shirarka Soomaaliyeed fashilisaana waa la'aanta barnaamij horay looga soo shaqeeyey oo lagu qeexayo waxa shirka looga hadli doono, qaabka loo hadli doono, qaabka loo maamuli doono, cida shir gudoominaysa iyo mudnaanta ku wejihan, mudada loogu tala galay in uu shirku socdo oo xal lagu gaaro, daraasad horay loogu soo sameeyey qodobada la isku hayo iyo waxa ugu dhaw ee xal looga gaari karo, waxa laga filayo in ay ka soo baxaan iyo tallaabooyinka horumarineed ee lagu hirgelin doono miraha ka soo baxa halkaa ama meel marinta xalka kama dambaysta ah ee la gaaro.

Qodobadaas oo ay lagama maarmaan tahay in mar walba la eego ayaan weligood la isku soo hadal qaadin marka shir dib u heshiisiineed loo qabanyo Soomaaliya. Waxa ay guud ahaanba shirarkii Soomaalida loo qabtay ahaayeen kuwa ku soo boodo ah oo loo baahnaa in mudo bilo ah laga soo shaqeeyo qodobada la isku haysto iyo qaabka xal loogu heli karo ama ugu yaraan habkii

shirka loo agaasimi lahaa. Nasiib darro kan aan hada ka hadlaynaana isla wadadii ayuu iska raacay, iyada oo aan la iska waraysan.

## 2. 2. FURITAANKII SHIRKA

Markii la isgu yeeray shirka waxa uu markiiba suuqa ku soo galay ka hadalkiisu hab u muuqda in lagu hanadadyo sharci ahaan qabqablayaasha dagaalka, iyada oo lagu soo degdegayo muujinta khaladaadkooda, oo loo ekaysiinayo hadalka in ay dambiileyaal maxkamad sugayaal ah yihiin. Arintaasi waxa ay noqotay mid neef naxdineed iyo neef farax labadaba dad ka soo goysay.

Dadweynaha rayidka ah oo 13 sano dhib iyo silic ka soo daalay ayaa u ekaa kuwa neefsanayey oo ku mashxaradayey waraabayaalkii na dilooday ee uu caalamku nagu dayacay maantaa loo soo jeestay oo nala ka qabanayaa. Dhanka kale qabqablayaalka dagaalku waxay u ekaayeen kuwa uu waaberi baasi oogga uga soo dilaacay. Waxaa la arkay kuwii oo ku soo kala tartamaya madasha shirka oo xataa iyagu isa soo kharash garaynaya intay sugi waayeen soo qaaditaankii lagu soo qaadi lahaa asaaska casuumadii loo fidiyey. Waxa kale oo la arkay kuwii oo qaarkood uu dhiig-kar ku kacay ama ku dhacay naxdin awgeed.

Dhab ahaantii marka laga eego xaga dardartii uu shirku ku bilowday iyo nidaamkii u ekaa mid laga soo qorsheeyey ee uu shirku ku furmay, waxaa la dhihi karay shirkani wax uu muujiyey rajo lagaga samri karo kuwii hore oo iyagu bilowga horeba ay faashilnimadoodu iska muuqatay. Waxaa aad loogu riyaaqay qorshihii ay xoghaynadu la soo galeen madasha oo ahaa in wax qoran la soo hor dhigo madasha ama gogosha wada hadalka (*plenary*), ka dibna la bilaabo in qodob qodob looga doodo ama la isaga dhaadhiciyo iyada oo isla markiiba intii ogolaata laga saxiixayo, inta kalena si isugu jirta cilmi ahaan iyo handadaad dadban lagu soo dabayo oo ay ku saxiixayaan.

Taariikhdu markay ahayd 15 kii Oktoobar 2002, markii la isku wada arkay madasha shirka ee Eldoret ayaa waxaa markiiba loo soo bandhigay dhamaan

hogaamiye kooxeedyada iyo cidii kale ee maamul iyo madaxnimo sheeganaysay in ay saxiixaan heshiis ka kooban laba qodob oo kala ah:

1. Baaq Colaad joojin, iyo
2. Nidaam qaab dhismeed iyo Mabaadi' dib u heshiisiin Qaran ee Soomaaliya[3].

Haddaba taariikhda isla bishii markay ahayd 27 Octobar 2002 ayey dagaal oogayaashii iyo hogaamiyeyaashii kale ee meelaha kala haystay qalinka ku boobeen heshiiskaas xataa iyaga oo aan iska akhrin kana fiirsan nuxurkiisa iyo waxa ka askumi kara. Kooxihii saxiixay heshiiskaas waxay kala ahaayeen: TNG, SRRC, PUNTLAND STATE, HIIRAAN POLITICAL AUTHORITY, JAWHAR ADMINSTRATION, SAMO SRRC, NAKURU GROUP, RRA, JVA, SNF, USC, USC/SSA IYO CIVIL SOCIETY.

Maalintii ugu dambaysay ee isla bishaas Octoobar; 31,Oct 2002 Madaxwaynahii dalka kenya Danial Arap Moi ayaa ku dhigay Aqalkiisa Madaxtooyada ee magaalada Eldoret, halkuu shirku ka socday. Xafladaas waxaa looga gol lahaa in la sii xoojiyo heshiiskii ay gaareen hogaamiyaasha Soomaalidu. Kulankaas oo muhimad weyn lahaa waxaa joogay Wasiirka Arimaha Dibada ee Djibouti iyo wasiiro kale oo ka socday dawlada Kenya iyadoo ay halkaasi hadalo ka soo jeediyeen kuwii sheegtay inay yihiin hogaamiyaasha Soomaalida qaar ka mid ah.

Heshiiskaasi waxa uu soo jiitay indhihii caalamka waxana lagu dhiiranaaday taageerada shirka oo ay markii hore wadamada qaarkood u ekaayeen kuwa saluugsan oo ka caga jiidaya iyaga oo is leh suurta gal ma ahan in ay Soomali heshiiso. Soo jiidashadaasi waxay dhalisay in 21- Nov-2002 uu Ururka Midowga Afrika u magacaabo Danjire gaar ah oo u dhashay dalka Tanzania.

---

[3] . Baaq Colaad joojin iyo qaabka dib- uheshiisiinta Qaran ee Soomaaliya, 15 Oktoobar 2002, Eldoret, Kenya.

Laakiin maalmo yar ka dib waxaa dagaal oogayaashii soo galay neeftii naxdin goynta oo waxay dareemeen in aan cidina xabsi u taxaabanayn wax dan ahna ka lahayn. Sidaa darteed waxaa bilaabatay in mid koodba mar dib isaga noqdo oo hadana soo jiireeyo. Waxa ugu hor noqday Cabduli Yusuf oo markaa ahaa Madaxweyne goboleedkii Puntland oo dib u safray taariikhdu markay ahayd 2 dii Nofembar, 2002.

Taariikhdu markay ahayd 13 kii Nofembar 2002 ayaa isla madashii shirka ee Eldoret waxaa looga dhawaaqay in wejigii labaad ee shirku si rasmi ah u furmay. Halkaa waxaa loogu tala galay in maadaama wejigii koowaad ee shirku qaatay in ka yar bil uu wejiga labaadna qaato isla bil ama ka yar, halka wejiga saddexaad oo isagu ugu adagna uu qaadan karo qiyaastii laba bilood.

Laakiin la mood noqonse wayday, halkii bilo laga xisaabayey waxay ka noqotay sanooyin, inkasta oo ay haday daacadnimo jirto lagu gebangebayn karay shirka oo dhan laba todobaad oo keliya. Wejiga koowaad ma qaldamin oo bil ayuu si macquul ah ku qaatay, wejigii labaad mudo aan ka badnayn laba bilood ayuu si seeta dheerayn ah ku qaatay, inkasta oo lagu ansaxiyey tallaabooyin boob iyo miidaamin ah. Laakiin wejigii saddexaad ee ugu dambeeyey ayaa keligii qaatay laba sano iyo bar. Haba qaatee maxaa lagu qabtay? Bal adba sheeg. Kolley intaa waan taagnaa hal wax oo la taaban karo oo mudadii wejigaas la qabtayna ma sheegi karo oo xataa wax shirar iyo kulamo ah, haday ahaan lahayd mid guud ama mid gooni gooni ah ma aysan jirin. Waxa keliya oo mudadaas socday isa silcin iyo is bahdalayn.

2-Decmber-2002 ayaa magaalada Eldoret waxaa baaq nabadeed, laakiin aan afka dhaafsiisnayn ka soo saaray raxan dagaal oogayaal ah oo isku haysta Muqdisho iyo nawaaxigeeda, kuwaas oo kala ahaa:

1. Maxamed Qanyare Afrax,
2. Muuse Suudi Yalaxow,
3. Xuseen Maxamed faarax  Caydiid,

4. Cismaan Xasan Cali caato iyo
5. Cumar Maxamuud Maxamed (finish)

Nuxurka baaqaasi waxa uu ka koobnaa:

1. In la joojiyo dhamaan colaadaha iyo wax kasta oo hurin colaada

2. In si wada jir ah looga hor tago kooxaha burcadda ah ee caadaystey dilka, Afduubka, dhaca gaadiidka, burcadnimada iyo wixii la mid ah ee ka dhaca magaalada moqdisho iyo nawaaxigeeda

3. In la furo Furadadii Qaranka iyo in la furo gegida dayuuradaha ee Qaranka,

4. In wixii khilaafaad ah ee jira lagu xaliyo wada hadalio walaaltinimo.

Xafalada maalintaasi baaqaasi looga hadlayay ayaa waxaa ka soo qayb galay oo hadalo ka jeediyay Mr.Mwangale, ergayga khaaska ah ee Kenya, ahna guddoomiyaha gudiga farsamada ee IGAD, wakiilka Djibouti ee shirka, ergayga Ethiopia, wakiilka Soomaaliya ee Ururka Jaamacadda Carabta, safirka Masar Soomaaliya uqaabilsan, wakiilka ka socda xafiiska Wakiilka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, safiirka Talyaaniga u qaabilsan Soomaaliya. Hase ahaatee kooxda heshiiskaan isla saxiixday waxay u muuqdeen kuwa aan dib dambe isugu imaan wada hadal, hawl fulina warkeedba daa.

## 2.3. ABUURKII KOOX ISKU MAGACAWDAY "SIDEEDAAD" (Group- 8)

Maalmo yar ka dib markii la eegay qaab u socodka shirka iyo sida ay kooxuhu isu garbinayaan ayey koox isugu jirtay qabqablayaal dagaal oo laga awood roonaaday iyo kooxo siyaasadoodu ay habacsnayd waxay ku midoobeen dalad cusub oo ay u baxsadeen Kooxda Sideedaad – group 8. Kooxdani waxay si cad ugu muuqdeen kuwo ku tala galsanaa inay shirka majaxaabiyaan ama ugu

yaraan marinkiisa ka leexshaan. Ragaan waxaa hor boodayey Dagaal oogaha caanka ah ee loo yaqaan Mr. Caato oo maalmahaas ka soo bogsaday dhiig karkii kula kacay naxdintii hore iyo Mr. Qanyare.

Kooxdan isbahaysiga cusub ihi iyaga oo la xafiiltamaya kooxihii kale ayey muujinayeen dadaalo cusub oo ay qayrkood kula tartamayaan. Waxa ay soo saareen qoraalo badan oo is daba joog ah, iyaga oo mar walba hadalkooda u jeedinayey Gudoomiyaha shirka oo ah Ergeyga khaaska ah ee Kenya. Kooxdani waxa ay ugu horeynba ku mintideen in ergada iyo wax kasta oo habsami usocodka shirka khuseeya ku baxaan qayb ku salaysan qabiil. Waxa ay warqadoodii ugu horaysay ee 4 tii Nofembar ku talo bixiyeen in qaybta ergada iyo weliba ka qayb galka wejiga labaad lagu saleeyo nidaam qabiili ah oo ay u arkayaan in uu daacada ugu dhaw yahay[4], ama ugu yaraan iyaga garabkooda lagu buuxin karo. Warqadoodii xigaty ayey kooxadani ku codsadeen qodobo dhawr ah oo ay dawrkooda kor ugu qaadayeen, ayna ka mid ahaayeen:

1. In loo qorsheeyo kooxdooda ergo khaas ah oo la mid ah mida loo qorsheeyey kooxda SRRC iyo dawlada TNG;
2. In aan la aqbalin koox dambe oo cusub siiba koox ama isbahaysi lagu sameeyey madasha shirka ee Eldoret, tooduna ahaato mid aan laga hadlin isla markaan la fac sinaata ama la falgasha labada geesood ee kale; DKMG ah iyo kooxda SRRC ee Ethiopia wadato. Waxayse marmarsiyo ka dhigteen in sii fasixida kooxo cusubi abuurayso fawdo iyo fidno hor leh. Waxaba ha la yaabin akhristow in kooxani ay ka bilowdo wax qabadkeedii in ay naftoodii isku cadeeyaan sharci darro ka dib markii ay codsadeen in cidii la timaada sifihii ay iyagu asbuuc ka hor ku bilowdeen la karaantiilo. Waxaad akhrin doontaa boqolaal gardarooyin iyo caqli xumo oo lagu kacay hadana la hir geliyey ama xal ha loo arko ama ha loogu dan lahaadee.

4 . Group eight – G-8, Baaq talo bixin ah, 4 tii Nofembar 2002, Eldoret, Kenya.

3. In tirada ergada ee Group Eight la gaarsiiyo in ka badan 147 oo ka mid ah 262 ka ergay ee la qorsheynayo, kuwaas oo aysan ku jirin kooxaha iyaga uga soo gelaya dhinaca Bulshada Rayidka ah
4. In aan laga doodin ee la iska indha tiro xuquuqda dadka laga tirada badan yahay, iyo
5. In uu Gudoomiyaha shirku cadeeyo mawqifka uu ka taagan yahay labada hogaamiye ee isku haystay kursiga maamul goboleedka Puntland ee kala ah; Jaamac Cali Jaamac iyo Col. Cabdulahi Yuusuf[5].

Marka dhab loogu fiirsado nuxurka ay xambaarsan tahay warqada labaad ee kooxdan waxaa la ogaan karaa sida ay kooxdan oo markii hore geedka gabashada fooda ku haysay uga soo baxday qaabkii fulinimada. Markii ay u hirgashay warqadii hore ee ay ku dalbadeen in iyaga la aqoonsado isla markaana la diido cid kale oo dariiqooda soo marta, waxay durba isku dayeen in warqadooda kale looga aqbalo codsigooda labaad oo ah in la qab jabiyo kooxda iyaga markaa ugu muuqatay hanjabaada (*threat*) ama cadawga adag. Kooxdaas ay ka baqayeen waxay ahayd qaybta SRRC da uu hogaaminayey Cabdulahi Yusuf. Sidaa awgeed waxay ku mintideen in Jamac Cali Jaamac loo aqoonsado madaxweyne goboleedka Puntland, maadaama ay isaga tin jileec bidayeen. Marka dhab loogu fiirsado dhaqdhaqaaqyada iyo afkaarta kooxdaan waxaa la dareemayey in aysan runtii wax awoodooda ah ka hagran sidii ay shirkaan ku dhicisayn lahaayeen.

Dhanka kale in Cabdulahi Yusuf loo aqoonsado nin aan cidna matalin oo ugu dambaystana shirka laga cayriyo. Waxay wadnaha farta ugu hayeen in uu Cabdulahi Yusuf ku noqdo madaxweynaha la dooran doono. Laakiin is moog aqalkiibay aslaysaa. Waxaysan weli hubsan awooda cidda wadata Cabdulahi Yusuf oo ay ka go'an tahay in Cabdulahi madaxweyne ka noqdo Soomaaliya ama

[5] . Group Eight – G-8, Bayaan ku jeeday Gudoomiyaha Shirka, 18 Nofembar 2002, Eldoret, Kenya.

in aysan weligeed madaxweyne yeelan. Cabdulahi Yuusuf oo taas ka dagaalamaya waxa uu isna u tafaxaytay sidii uu Jaamac Cali uga saari lahaa shirka ugana dhigi lahaa rayid aan xataa ka qayb galka shirka loo ogolaanin. Isaga oo sidii cunugu hooyadiis u suuroonaya gafuurka taagaya ayuu ku andacooday in uu isagu shirka isaga baxayo mar haddaan laga saarayn Jaamac Cali, taasina waxay gaartay ilaa maalintii dambe uu askar Kenyan ah u soo dirsado si ay Jaamac fadhiga uga saaraan, wayna ku dhaqaaqeen oo qorta ka qabteen Jaamac oo ku fadhiyey in uu yahay madaxweynaha dawlad goboleedka Puntland. Ugu dambaystiise waa lagu soo celiyey dagaal ba'an ka dib.

## 2. 4. MAAMULIHII SHIRKA OO LA BADELAY

Ka dib markii ay isa soo tartay dacwooyinka ka dhanka ah ergaygii gaarka ahaa ee dawladda Kenya u xilsaaratay maamulka shirka ayaa waxa isku soo aaday dhicitaankii madaxweynihii dalka Kenya ee Moi iyo dareen nacayb oo sii kordhaya kana dhan ah ergaygaas, MR. Mwangala. Mwangala waxa uu ahaa nin bir xadiida ah oo aan fudayd lagu mari karin. Sidaa awgeed nin dagaal ooge Soomaaliyeed ihi uma adkaysan karin maamulkiisa birta ah. Ninkaasi waxa uu u ekaa nin hawsha kala socodsiin kara. Allaylehe cillada keliya ee lagu eedayn karay waxay ahayd in uu hanti xad dhaaf ah meesha ka daldalanayey, inkastoo uu dhamaadkii shirka dhintay isaga oon shilina sahay ahaan uga sii qaadin hantidii tirada badnayd ee uu daldashay. Halkaa waxaa ku soo baxday in uu Mwangala ahaa nin isaguna samaysanayey lacag inagana inoo samaynayey nabad (*peace maker and money make*r).

Haddaanu wax yar ka taabano adduunka – lacagta lagu khasiri jiray maalintiiba madasha shirka, ma teeda runta ah mise teeda beenta ah ee diiwaan gashan; aan ku horeeyee, teeda beenta ah waxa loo qorsheeyey shirka oo la

diiwaan geliyey lagana qaadayey beesha caalamka adduun dhan sideetan iyo shan kun oo doolar (USD: 85,000) maalin Ilaahay qorax soo bixiyaba.

Laakiin teeda runta ah waxaan anigu ku qiyaasay xisaabtan ah in ergada la casuumay ee la kharash-garaynayey ay ahaayeen 300 ergay, jiifka habeenkiina waxa uu ahaa K.Sh. 300, cuntada iyo casariyahana waxay isku ahaanayeen qiyaastii K. Sh. 300, adeega guud iyo mushaarada shaqaalahana waxay qiyaas ahaan isku noqonaysay in ay qofkiiba ku soo aado K. Sh. 100. Hadaba waxay noqonaysaa; 300X700= K. Sh. 210,000 maalin walba. Haddaba intaas u rog lacagta Maraykanka oo xilligaas sarifku marayey halkii dolar todobaatan iyo shan Shilin. Waxay noqonaysaa ilaa laba kun iyo sideed boqol oo doolar ($2,800) maalintiiba. Bal akhristow adna ila xisaabi oo soo saar kharashka ku bixi karay maalintiiba ergadaas tiradeedu dhan tahay 300 oo qof. Ka dibna is weydii faraqa u dhexeeya xisaabta ah USD: 85,000 iyo USD: 2,800. Waa run in ay ergada joogtay meesha intaa ka badnaayeen oo xataa ay mar tiradu ku dhawaatay 1,000 laakiin runtii inta u qornayd in la quudiyo lana jiifiyo waxay ahayd intaas inta kalena iyagaa is bixinayey inkastoo ay jireen qaar badan oo inta la quudiyo ku lafa ruugayey.

Dabcan waxaa jiray xisaab midaas joogtada ah een sheegnay aad uga badan oo ku baxaysay khamriga iyo casuumadaha malaha loogu tala galay in lagu fariisiyo maskaxaha ergada si ay uga mashquulaan muhimadii loo keenay. Mar ay warbixin xisaabeed soo saartay hay'ad ka mid ah kuwii dabagalka ku samaynayey habsami usocdka shirka waxay sheegtay in kharashka ugu badan ee la isticmaalay lagu bixiyey khamri iyo casuumado aan loo baahnayn. Waxayna u muuqatay in marka ay sarkhaamaan ergadu in wixii la rabo laga saxiixanayey. Casuumadahaasi waa kuwa soo saaray khamriileyaal (*alcaholics*) cusub oo horay u asturnaa isla markaana ka dhigay khamra rukuntayaal (*drug addicted*)

Waxaa lagu soo badelay nin oday ah oo wax xoogaa aqoon iyo khibrad ku filan ah u leh cilmiga diblomaasiyada oo la yiraahdo; Bethuel A. Kipligat. Kipligat waxa uu ka soo shaqeeyey meelo badan oo uu qaarkood abaal marino ka soo

helay. 22 Janaayo 2003 dii Wasiirka arrimaha dibedda ee dalka Kenya Hon. Kolonzo Musyoka ayaa booqasho ku tagay xarunta uu shirku ka socday, isaga oo wada oo gacanta haya Ergeyga cusub ee uu Madaxweyne Kipaki u magacaabay shirka dib u heshiisiinta Soomaaliya Amb. Bethuel Kiplagat iyo weliba Ergaygii hore ee la bedeley Amb. Mwangale. Maalintaas waxa uu Misyoke carrabka ku dhuftay inuu madaxweyne Kipaki markii la doortayaba caddeeyey inay ka go'an tahay sii wadidda hawlaha nabadaynta Soomaaliya iyo Suudaan.

Hase ahaatee Mr. Kipligat ma noqon nin si sharaf iyo guul ah ku fulsaday hawshii uu Soomaalida ku heshiisiinayey dhawr cilladood oo uu lahaa awgood:

A. Waxa uu ahaa nin aad ugu dheereeya laba wejiilanimada oo asalkeedu yahay munaafaqnimo. Qof kasta oo la hadla Kipligat waxa uu dirayey isaga oo qanacsan laakiin weli lama sheegin hal balan oo uu fuliyey. Qof kasta oo la hadla wuu dhegaystaa laakiin qodobkuu ka hadlayey ugama jawaabo.

B. Kipligat waa nin laga dareemi karo necayb uu u qabo Muslimiinta siiba Soomaalida. Waxaa taas xoojinaya in uu ninku yahay nin ka gaaloobay reerkiisa keligiis oo qoyskiisa oo ka soo jeeda qoys asalkoodu Muslim yahay, waxaana dabiici ahaan iska jirta in qofka diin ama mabda' ka ridooba oo u gala qolo kale uu mar walba ku dadaalo in uu colaad iyo weerar culus ku qaado caqiidadii uu ka soo baxay si uu ugu yaraan kuwa uu u soo galay ugu muujiyo ka dhabnimada mabda'a uu ku cusub yahay ee uu ku soo biiray oo uu markaa uga helo kalsooni buuxda. Waxaa xusid mudan in Kipligat uu isaga oo ku dadaalaya in uu magaciisa ka reebo raadka Muslinimada usoo gaabin jiray magacii aabihii ee Cabdullahi (A.) keliya oo aan meel loo raaco lahayn, marna u qori jiray ama ugu dhawaaqi jiray "Adul".

C. Waxa uu u ekaa nin mid aad uga calool goostay Soomaalida maamulkeeda kadib markii ay aad u dhibeen isaga oo waayeel ah. Nasiib darro waxa uu la macaamilayey oo magaca Soomaalida sitay waxay ahaayeen qabablayaalkii dagaalka iyo gaandhariyaashoodii.

D. Waxa ficiladiisa ka muuqatay in uu Kipligat u eexanayo mar walba dagaal oogayaasha markay arintu timaado iyaga iyo bulshada rayidka ah, ama

iyaga iyo danta guud ee Soomaaliya. Wax kasta oo uu usheego qof aqoonyahan ah dhegaha ayuu ka furaysan jiray, haduuba marka hore qaabilaad ka ogolaado. Sidoo kale qoraalkii ay aqoonyahanada iyo bulshada rayidka ihi soo gudbiyaan waxa uu ku biirin jiray qumaamada qashin qubka.

E. Waxa uu ahaa nin aad uga dambeeya awaamirta ay bixiyaan dawladda Ethiopia iyo dawladaha reer Yurub ee lacagta shirka bixiya. Sidaa awgeed aan awoodin inuu usheego waxa ka jira meesha. (qaybta soo socota ee isla buugaan ayaan ku sii faahfaahinaynaa sifaha aan lagu amaanin odaygii Kipligat ahaa). Waxa keliya ee uu Kipligat noqday mid ku qaybsan jiha wareerinta Ergada.

Haddaba odaygan oo aad ugu dheereeya xaga is maskiininta iyo mujaamalada ayaa si uu eedaha qaar isaga wareejiyo waxa uu xilalkiisa inta badan isaga wareejiyaa nin ka hooseeya oo isagu aan marnaba ku tala gelin in uu wax wanaag meesha ka dhitaysto. Ninkaas oo lagu magacaabo Kibooy – Kipoi, waa nin ay guud ahaanba ergadu uga cabanayeen laaluush qaadad iyo jaaxidnimo. Marka uu qof aan qabqable dagaal ahayni la hadlo Kipligat waxa afkiisa saarnayd kelmada ah usheeg warkaas Mr. Kipoi. Laakiin Mr. Kipoi waxa uu ahaa nin loogu yimaado kibir iyo is qaad qaad, kuna dareensiinaya inaad qof wakiiladiisa ka mid ah soo martid si aad lacag laaluush ah ugu soo dhiibtid, markaa ka dibna aad is waraysataan.

## 2.4. GUDIGA HOGAAMIYEYAASHA

Tan iyo waqti ku dhaw bilowgiiba waxaa soo baxay koox loo bixiyey "Gudiga Hogaamiyeyaalka" (*Committee Leaders*). Kooxdani waxa ay ku midoobeen oo loogu magac bixiyey saxiixii caanka ahaa ee ay saxiixeen 27 kii Oktoobar 2002 ee ku sabsanaa heshiiskii xabad joojinta (*cession of hostility*). Maalinkaa waxaa abuurmay is maqiiqyo iyo jini boqorro badan oo hor leh. Si kasta oo la isugu ogaa ama ay caqliga la wada dareemayo u ahayd in qofna aan loo ogolaan adeegsiga derajo hogaan inta isla goobtaas looga dhisayo qofkii

hogaamiye noqon lahaa, hadana waxaa dareenkaas ka xoog badiyey damacii madaxtinimo oo helay fursad baqdin la’aaneed.

Inkasta oo ay kooxdaas sheegatay gudiga hogaamiyeyaashu isugu jireen qaar awood ay wax ku fuliyaan ku leh nuxurka heshiiskaas iyo qaar ay uga dheganayd mar uun wax iska saxiixa si aad seerada siyaasada usoo gashaan ama ugu xoogaysataan, hadan waxaa is weydiin leh miyey ka daacad ahayd saxiixidaasi mise dano kale ayaa ku jiidayey. Waxaa dhiraandhirin ka dib la soo saari karay in ay ujeedada ku xambaaraysay u gacan qaadka saxiixaasi ahayd dhawr nooc oo u kala ekaa;

1. Qaar ay cabsi ay ka qabaan beesha caalamku ugeysay,
3. Qaar ay ka daacad ahayd oo u muuqday kuwa ku dhaw hawlgab xaga dagaal oogida sidaa darteed isku dayayey in ay tabartooda inta aysan dhulka ku dhicin meel ku furaan dhaankooda,
4. Qaar xiiso ay uqabaan seerada siyaasada awgeed ku magac raadsanayey,
5. Qaar dantood ahaan u miciin biday ama isaga gadayey beesha caalamka si ay ammaan uga helaan,
6. Qaar aan inaba haba yaaraate fahamsanayn ujeedada ka dambaysa saxiixooda, iyo kuwa kale intaba.

Dhiraandhirintaasi waxay ku rumowday natiijadii soo baxday saxiixa heshiiskoodaa ka bacdi oo u muuqatay mid aan waxba ku soo kordhin sida aysan waxna uga dhimin dagaaladii sokeeye ee socday iyo kuwa ka dib soo cusboonaaday intaba.

Gudigani waxa ay marka ay go’aanadooda soo saaryaan isku dayayeen in ay garab jilicsan kula dhaqmaan maamulka shirka, dawlada marti gelisay iyo madaxweyneheeda intaba. Sidaa darteed waxay dhawr jeer ku celceliyeen in ay u xilsaareen madaxweyne D. A. Moi, in uu xataa ka dib marka uu xukunkisa madaxweynenimo ka dhaco sii wado hawsha shirkan qaran ee dib u heshiisiinta Soomaaliyeed.

Nasiib darro siyaasiyiintaas hor boodayey dadka Soomaaliyeed marna kama aysan fikirin raadka xun ee ay hadaladaasi ku yeelan karaan madaxweynaha cusub ee Kenya oo aysan koley sinaba isu huri doonin xataa haday dawlad dhistaan inta uusan kursiga fuulin. Taasina way dhabowday markii ay dadka indheer garadka ihi dareemeen hagarta iyo ka taxadar la'aanta ka soo fi baxday madaxweyne Kipaki oo u muuqday mid ka masayrsan caadifada ay wafdiga Soomaaliyeed u hayaan madaxweynihii hore ee Moi.

Isla maalmahaas waxa car car ku bilowday dawrkii Ethiopia oo ku dhisnaa xulashada xubnaha ergooyinka shirka oo kala matalaya qabiilada Soomaaliyeed. Si ay taasi u hirgashana waxaa muran iyo nux nux la geliyey cida ka qayb galaysa wejiga labaad ee shirka, iyada oo mar marsiyaha koowaad laga dhiganayo waa in ergooyinka la yareeyaa.

Waxay si wada jir ah 23 ka xubnood ee gudigaasi bishii Disember 2002, 15 keedii u soo saareen bayaan ay qodobadiisa ka mid ahaayeen:

1. In wejiga 2 aad ee shirka ay ka qayb geli doonaan ergo dhan 300 oo qof oo qaybtoodu ay ku imaanayso nidaamka 4.5 (afar qabiil iyo bar), iyaga oo qabiil barka ku qeexay in uu noqonayo qabiil kasta oo ka soo hara Hawiye, Daarood, Dir iyo Digil & Mirif.
2. In xubnaha Baarlamaanka dawlada soo socota ee la maagan yahay uu ka koobnaado 450 qof. Iyo
3. In madaxweyne Moi uu sii wado maamulka iyo mas'uuliyada shirka hadii uu ka dhaco xilka madaxweynenimo ee uu dawladiisa u hayo oo markaa gebangebo ahaa ayna maalmo yari ka harsanaayeen[6].

Halkaa waxaa ku suurtowday in wax xoogaa horumar ah laga gaaro shirka iyada oo la saxiixay laba heshiis oo wax ku ool ahaa haddii ay heli lahaayeen awood fulineed, kuwaas oo kala ahaa:

[6] . Bayaan ay soo saareen 23 xubnood ee Gudiga Hogaamiyeyaalka, 15 Desember, 2002, Eldoret, Kenya.

B. Heshiiskii Xabad Joojinta, iyo T. Heshiiskii lagu ansaxiyey nidaamka uu shirku ku soconayo ilaa inta uu ka hirgelayo oo dawlad loo dhan yahay lagu soo saarayo.

Waxaa la siiyey Gudiga Hogaamiyeyaasha awoodo badan oo ugu dambaystii dhaliyey iska hor imaadyo iyo isku dhacyo sababay xanibaad dheer oo ku timaada shirka. Waxaa ka mid ahaa awoodahaas la isku khilaafay go'aankii lagu gaaray in ay Gudigaasi soo xulaan ergada rasmiga ee ka qayb galaysa wejiga labaad ee shirka[7]

Dhamaadkii bisha Disember ayaa waxa loo kala tagay fasaxyo is daba joog ahaa oo isugu jiray qaar caalami aha iyo qaar heer qaran ah ee u gaar ahaa dawlada Kenya ayna wehliyaan doorashadii isla maalmahaas ay ku jirtay dawladda Kenya oo ahayd tii ugu dhibka iyo welwelka badneyd ee soo marta taariikhda dalkaas, maadaama lagaga ridayey xukunka madaxweyne cimri adkaa oo dalka haystay in ka badan 24 sano.

Ka dib markii la isaga soo noqday fasaxyadaas waqtiga dheer qaatay iyada oo weliba laga soo neefsanayo naxdintii iyo welwelkii dadka geyiga ku nool oo dhan ku taagneyd oo ahayd armaa qarax ka daran kii Soomaaliya ka dhacaa dalka Kenya ee martida loo yahay, ayey Gudigii Hogaamiyeyaashu mar kale isugu soo noqdeen madashii shirka oo ahayd teendho aan sidaa loo qurxin oo laga dhinac dhisay dhismaha Hotelka la deganaa ee Sirikwa. Waxa ay kulankoodii ugu horeeyey la qaateen Ergeyga Khaaska ah ee dalka Kenya, Mr. Elijah Mwangale, balse weji farax lagalama soo gadoomin. Waxa uu ergayga Kenya ku noqday geed adag oon la goyn karin. Waxaa la yaab ahayd in uu ergaygani ula macaamilayey kuwii madaxnimada sheegtay si horor iyo handadaad ku salaysan oo waafaqsan dabeecadooda waraabenimo.

Gudigaani waxay u badnaayeen raga ay sababtooda ku abuurmayeen ilaha fisqiga iyo fasahaadka ee meesha ka caadiga noqday sida; gabdhaha gaajaysan ee isugu jira Soomaali iyo Kenyan ee ka soo naq raacayey

---

[7] . Wareegto ku saabsan Abuuritaankii Wejiga labaad, 22 Nofembar 2002, Eldoret, Kenya.

magaalada Nairobi iyaga oo dhacarsanayey madasha shirka oo laga noolaaday rag badar noole ah oo mid walba ay jeebadaha uga buuxdo lacag uu si fudud ku soo xareeyey uuna doonayo meel uu ku daadiyo. Marka aad gasho Hotel Sirkwa waxa ugu horeeya eed indhaha qac ku siinaysaa waxay ahaayeen gabdho isa soo labisay oo garaaraha wada ridaya badankoodan ay qaadiro ka muuqato oo u eg am ah wax xalay Hotelka seexday, hadayba seexdeen.

Gabdhahaas waxaa ka fool xumaa dayuuradaha lagu soo shixnaday Qaadka ee sida ayaxii ugu soo hoobanayey garoonka aan qaadin ee degmada Eldoret. Waxaa maalintay ugu yaraato soo degi jirtay afar diyaaradood oo buuxda. Dadka shirka ka qayb galaya waxaa laba jibaar ka badnaa dadka ka ganacsanaya qaadka, sigaarka iyo shaaha ee meesha tuban. Hadii lagu sii daro gabdhaha sida maldahan jirkodoa uga ganacsanayana waxaa qarsoomaya tirada shir u joogta meesha.

## GUDIGA FARSAMADA IYO MWANGALA

Taariikhdu markay ahayd 9 kii bishii Disember 2002, waxaa la asaasay Gudi loo bixiyey Gudiga Farsamada. Isla maalintiiba iyaga oon Gudigu fariisan balse aan kabihiiba iska bixin ayey sidii caruur aabahood u dacwoonaysa Gudiga Hogaamiyeyaashu cabasho ka dhan ah Ergayga khaaska ah ee Kenya u soo jeediyeen madaxweyne Moi, iyada oo isla maalintiiba soo gaartay Gudiga cusub ee Farsamada.

Waxyaalaha loo xilsaaray Gudigaas oo laga sugayey waxaa ka mid ahaa qodobadaan soo socda:

1. Caddaynta hawlaha iyo ujeedada shirka

2. Sida loo qabanayo shirka. Nasib darose shirka hada la raadinayo qaabkii loo qaban lahaa waa shir maraya bishii saddexaad.
3. Go'aaminta inta qof ee ka qayb galaysa shirka
4. Diyaarinta kharashka ku baxaya shirka.

Waa yaab iyo amakaag in shirkii meeshii laga sugayey gebangebo iyo soo af jarid gunaanad ah looga dhiso gudi soo qiimeeya ama soo go'aamiya qodobada aan kor ku soo xusnay ee looga baahnaa bilowgii shirka. Hadaan usoo noqono, cabashadii ay Gudiga Hogaamiyeyaashu soo gudbiyeen waxay ahayd mid si toos ah u taabanaysay go'aan uu si rasmi ah soo u saaray Ergaygu maalin ka hor[8]. Waxa ugu muhimsanaa nuxurka warqadaas cabashada ah ee madaxweynaha loo gudbiyey:

1. In uu Ergaygu carqalad joogto ah ku hayo habsami u socodka shirka, iyaga oo taxay dhawr caqabadood oo uu si aan loo baahnayn u keenay ayna ka mid ahaayeen: B. In uu si ula kac ah udiiday isaga oo kaashanaya Gudiga Farsamada ee IGAD wufuud loo baahnaa oo la martiqaaday in ay yimaadaan shirka, T. In ay Gudiga Farsamadu dhawr jeer kordhiyeen Gudiga Dib u heshiisiinta iyaga oo aan cidna kala tashan tiradaas oo ay marsiiyeen cadadyo kala bad-badanaya marba marka ka dambaysa oo kala ahaa; 138, 167 iyo 180. Sidaa darteed loo arki karo wax is ka sii soconaya oo aan xad lahayn isla markaana ay si keli talisnimo ah ugu tashanayaan Ergeyga iyo Gudigiisa Farsamadu. Waxyaalahaas oo dhan marka la dhiraandhiriyo waxa ka soo baxaya in markii hore ay cid walba oo ka mid ahayd ajnabigaas hawshaas loo xilsaaray isku dayeysay in ay iyada marooqsato oo afduub aan laga daba tagin ku qabsato maamulka

[8]. Faafin Rasmi ah oo uu soo saaray Ergayga Khaska ah ee Kenya oo shirka Dib u heshiisinta Soomaaliyeed Shir gudoonkiisa lahaa, Mudane, Mwangale, 8 Disember 2002, Sirkiwa, Kenya.

shirka. Tartankaasina wuu socday tan iyo intuu shirku ka dhamaanayey oo ay ugu dambaystii dawlada Ethiopia ku guulaystay xarig jiidkaas.

Haddaba waxa ay Gudiga Hogaamiyeyaashu ku taliyeen qodobada soo socda:

- In lahaanshaha shirka dib loogu soo celiyo gacanta Soomaalida qudheeda;
- In dawrka Gudiga Farsamada lagu ekeeyo Hawl Fududeyn oo keliya;
- Ergada rasmiga ah ee shirka soo xaadiraysaa in aysan ka badan kuwii sida rasmiga ah loo soo martiqaaday ee liiskooda la hayo;
- Tirada ergadu in ay ku ekaataa 400 qof oo keliya;
- Tirada Gudiga Dib u heshiisiintu in aysan ka badan 138 qof;
- In tirada ka dheeriga ah ergada rasmiga ah dib loogu celiyo meelihii ay ka kala yimaadeen;
- In si joogto ah loola tashado iyaga oo ah Gudiga Hogaamiyeyaasha ayna Gudiga Farsamadu lahaadaan hawlfulinta iyo hawlfududeynta oo keliya[9]

Taariikhdu markay ahayd 25 kii iyo 26 kii Janaayo 2003, waxa ay Gudiga Hogaamiyeyaashu qabteen war-saxaafadeedyo iyo shirar is daba joog ah waxayna ka soo saareen qoraal ay faafiyeen oo ay ka mid ahaayeen waxyaalihii ay ku xuseen go'aan ka qaadasho arinta Gobolada Waqooyi galbeed in ay ka soo qaybgaalaan shirka ah. Go'aankaas oo ay isugu wada raaceen in aan shirku nuxur yeelanayn ilaa ay gobolada Waqooyi galbeed ee la magac baxay Soomaaliland ka soo qayb galaan, waxayna eed dusha kaga tuuren maamulka shirka oo ka gaabiyey keenitaanka Waqooyi galbeed madasha shirka. Isla bayaankaas waxa ay ku taliyeen Gudigu in 50 qof oo

[9] . Bayaan ay soo saareen 15 ka mid ah 23 kii loo bixiyey Gudiga Hogaamiyeyaasha, 9 kii Disember 2002, Eldoret, Kenya.

wafdi ugooni ah Waqooyi galbeed goobta la keeno, in 5 xubnood laga siiyo Gudiga Hogaamiyeyaasha, iyo in la furo wada hadal heer sare ah oo lagu doodsiinayo Waqooyi galbeed iyo Konfur[10].

# 3. 0. DAWRARKII LA KALA CAYAARAY

## 3. 1. DAWRKII WAFDIGII DKMG AH (TNG)

Wafdiga matalayey dawladda ku meel gaarka ah oo loo bixiyey "TNG" ayaa eed kulul iyo canaan usoo jeediyey maamulka shirka taariikhdu markay ahayed 13 kii Disember 2002. Wafdigani waxay ku adkaysteen in haddaan dhawr qodob oo muhim ah wax laga badelin uu shirku khatar ku sugan yahay aysana iyagu ka mas'uul noqon doonin cawaaqib xumada ka ratibmata. Ceebahaas ay xuseen ayaa waxaa ka mid ahaa:

1. In uusan shirku gacanta ugu jirin Soomaalida ee ay u yihiin uun kuwa wax loo yeeriyo, sidaa darteed ay lagama maarmaan tahay in dib loogu soo celiyo gaacntooda,
2. In shirku uu noqday wax u xaniban oo ay ku amar ku taagleeyaan shakhsiyaad fara ku tiris ah oo ka mid ah shaqaalaha IGAD ee hawsha gacanta ku haya,
3. In maamulka shirku uu aad u habacsan yahay oo uu dhiman rabo
4. In aysan Beesha caalamku daacad ka ahayn ka mira dhalinta shirka oo ay lama huraan tahay in ay go'aan wax qabad wata ka gaaraan[11]

Waxaa mid lala yaabo ahayd sidii fudaydka ahayd ee lagu burburiyey is haysadkii iyo midnimadii Wafdigii dawladdii ku meel gaarka ahayd. Iyaga oo

[10] . War Saxaafadeed ay soo saareen Gudiga Hogaamiyeyaasha, 26 Janaayo 2003, Eldoret, Kenya.
[11] . Qoraal Saxaafadeed uu faafiyey Mudane. Xasan Abshir Faarax, Ra'is al-Wasaaraha Dawladda Ku meel gaarka ah, 13 kii Disember 2002, Eldoret, Kenya

mudo dheer ku doodayey shirkaan aniga iyo koox yar oo mucaarad nagu noqotay ayaa lagu heshiisinayaa ujeedadiisuna waa in dawladeena lagu soo shaqlo dhawr xubnood oo mucaaradkeena ah ayaa ugu dabayntii laga war helay iyada oo la iloobay jiritaankii magacii Dawladii ku Meel Gaarka ahayd. Qof sheegaya xataa in uu ku yimid martiqaadkeeda lama haynin. Xubnaheedii iyaga oo kala dhuumanaya ayey ku kala biireen qabiiladoodii iyo qabqablayaalkii hogaaminayey gaandhariyaasha ay isku cidaha yihiin.

Waxaa ugu horayntiiba laga duufsaday dhawr xubnood oo horay u caraysnayd ka dibna waxaa la bilaabay isku dirka iyo isku soofaynta dhexdooda. Mar waxaa fooda is darayey Raisulwasaarihii hogaanka u hayey iyo Raisul-Baarlamaankii. Mar waxaa soo baxayey mid ka mid ah Wasiiradii oo isna markiisa isa soo maqiiqayey. Intaa waxaa sii dheeraa oo kooxdaas dhabarka ka jabiyey Madaxweynihii soo dirsaday oo isku darsaday Bakhaylnimo, cuqdad, sasitaan, xaasidnimo, iyo ficiltan jifaajiliq ah oo ay xataa gabar foodley ihi ka xishoon lahayd ama ka sabri kartay. Sidaa awgeed waxaa hir gashay siyaasadii ay Ethiopia majaraha u haysay ee ahayd “Qaybi oo xukun”. Waxay u tafaxaydatay in ay kala daadiso kooxdii u muuqata wax garad oo dhan sida; Dawladii ku Meel gaarka ahayd, Bulshadii Rayidka ahayd, Culimadii, Xubnihii khuburada ahaa ee loo yiqiinay “resource persons”.

## 2. 3. DAWRKII BULSHADA RAYIDKA AH

Bulshada rayidka ah waxay isugu jirtay ururo bulsho rayid ah iyo shakhsiyaad la door biday oo lagu marti qaado shirka si ay u cayiliyaan ka mira dhalinta ujeedada shirka. Waxay markii hore u badnaayeen dad aqoonyahano ah, waxaana ka mid ahaa shakhsiyaad loo marti qaaday si ay shirka udubadiisa u hayaan oo wixii dheelli ah uga ilaaliyaan iyaga oo

kaashanaya aqoontooda[12]. Shakhsiyaadkaas waxaa la siiyey magac ah "Shakhsiyaad manaafacada" (*resource persons*). Laakiin taasi waxay markii dambe iska noqotay jara ka boodo cayaareed oo lagu qancinayey Beesha Caalamka iyo dadwewynaha Soomaaliyeed ee daawadayaasha cayaarta ah (*spectators*) si loogu muujiyo in shirkan aan cid gooni ihi dan ku wadan oo ay Soomaalidii dul dhigeen waxay aqoon iyo khibrad hayeen. Waxaa maalintii shirku dhamaaday la is weydiiyey halka ay ku dambeeyeen aqoonyahanadaasi iyo kuwa ay ahaayeen.

Waxaa ka mid ahaa kooxaha kala duwan ee isugu imaanaya magaca Bulshada Rayidka ah dhallin yaro aad u firfircoonaa oo ka kala yimid dibadaha ee qaaradaha Yurub, Waqooyiga Ameerika iyo Aasiya. Dhallinyaradaasi waxa ay muujiyeen isku dayo fara badan iyaga oo hididiilo iyo kalsooni weyn qabay maadaama ay ahayd markii ugu horaysay ee ay shirweyne dib u heshiisiin Soomaaliyeed ka qayb qaataan, marka laga reebo kii Carta oo ay dawr yar oo aan midaysnayn ka muujiyeen.

Todobadii Nofember 2002, ayey qoraalkii ugu horeeyey soo saareen dhalinyarada qurbaha ka timid, waxaana ka mid ahaa waxyaalhii ay qoraalkoodaas ku muujiyeen is barid ay naftooda barayeen Gudoomiyaha shirka oo ah Ergayga khaaska ah ee Kenya, mudanae; Elijah Mwangale iyo guud ahaanba safaaradaha iyo wakiilada wadamada iyo ururada ku mashquulsan arimaha shirka ee madasha ku xaadirka ah.

Kooxihii dagaaal-oogayaasha ahaa waxay iyagu dabiici ahaan cadawgooda u arkayeen kooxaha DKMG ah, Bulshada Rayidka ah, iyo Aqoonyahanada madaxabanaan. Sidaa awgeed xookdii SRRC oo ahayd garabka Ethiopia horayna ay usoo dhisatay dawlada Ethiopia ayaa luuq kaste u martay in ay xubnaha qabiiladooda ah ee ku jira Bulshada Rayidka ah ay la soo baxaan oo dhankodoa inta ku soo darsadaan ugu hanjabaan ama baxa ama anaga na

[12] . Dr. A. Suufi, chairman of SODDO, Warqad la wareejiyey oo ku socotay Ergayga Khaaska ah ee Kenya, 7/11/2002, Eldoret, Kenya.

taageera. Run ahaantii marka loo fiirsado xataa qeexitaankii Bulshada Rayidka ah ayaa u muuqday mid mugdi ku jira oo aan maamulka shirka u cadayn.

Waxaa afarta gees ee madasha shirka u kala yaacayey raxamo dhalinyaro ah oo rag iyo dumarba isugu jiray oo wada gashanaa shaarka Bulshada Rayidka ah. Halkaa ayaa waxaa si xor ah waxay rabaan u samaysanayey tira aan yarayn oo isugu jirtay arday jaamacadeed oo cilmi baaris ka samaynaysay shirka iyo shakhsiyaad ay qolooyin kale oo qarsoon soo dirsadeen oo iyaguna sii gudbinayey war bixino aan la garanayn ciday u sii gudbinayaan iyo cida usoo dirsatay toona.

Marka aan runta taabano xubnaha Bulshada rayidka ah qudhooda waxaa ka muuqday ka gaabis dadaal oo waxay u ekaayeen kuwo marti ku ah cido aysan aqoon. Waxaa ka maqnaa isku dheeli tirkii aqoon yahanimo iyo wada shaqayn, iyada oo ay ka muuqatay in labadii is fahmaysaaba gooni u wada ordayaan iyaga oo kuwa kale ka madax qarsanya. Waxaana taas garab socday kala fur fur iyo isku dir dhexdooda ay ka wadeen qabqablayaasha dagaalku, maadaama ay cidaani u ekayd kuwa dariiqa saxda ah ee looga bixi karo luuq luuq yada lagu habaabay ku ridi kara riwaayada meesha lagu jilayo. Waxay dareemayeen qabqablayaashu in haday dhacdo in riwaayadii hala jilo keliya la isku ogaa ay qolo inta run moodo ka dhabayso in uu ugu yaraan filinku dhamaanayo ka dibna sinemada lagu kala tagayo oo ay waayayaan meel ay nac nac iyo xanjo ku sii gadaan. Sidaa awgeed Bulshada rayidku waxay ahayd mida ugu cadawga iyo cayrinta badan oo ku sifaysnayd macnaha Marti aan la filayn (*unexpected guest*).

Laakiin sidaas ooy tahay waxaa la dareemayey waxun horumar ah ooy qabteen, waxaana ku jiray xubno mudan inaan halkaan ku xuso amaantooda ku salaysan in ay u dadaalayeen si daacadnimo ah uu ka barax la’ danaysi gaar ah ay ka mid ahaayeen: Jaamac Qaalib – Jaamac yare, Prof. Gaandi, Hon. Caasha X. Cilmi, iyo Ruqiyo M. Shiikh Cusman. Iyo kuwa kale.

Hase ahaatee, Bulshadii rayidka ahayd waxay noqdeen kuwo aakhirkii laga raayo oo la bur buriyo sidii maalinba tiir looga bixinayey. Waxa loo kala saaray koox koox iyo qof qof iyada oo laga abuuray ugu yaraan laba kooxood oo iska soo horjeeda. Sidii kala findhicilis loogu waday ayaa lagu keenay xilligii qaybsiga xubnaha Baarlamaanka.

## 3. 3. DAWRKII CULIMA'UDIINKA

Tan iyo markii ugu horaysay ee lagu baaqay shirka waxa ka mid ahaa dadkii ugu horeeyey ee lagu ballamay in lagu marti qaado Culima'udiinka. Hase ahaatee, waxaa aad loo dareemayay in balankaas la garab maray ama ugu yaraan la marin habaabiyey. Waxaa jirtay in dhawr nin lagu marti qaaday in ay yihiin culuma'udiin, laakiin waxay ahaayeen kuwa magac ahaan loogu gariin tiranayey ee aan dhab u ahayn culimadii diinta ee la yaqaanay ama yaanu ahaanba mid la yaqaane isagu ku hubaysan aqoon diineedkii lagu marti qaaday.

Waxaase aqoon yaridoodaas ka sii daran in ay keliya meesha iska yimaadeen loogana aamusay si ay derbiyada isaga fariistaan oo keliya. Weligood su'aal lama weydiin, salaad ina tujiyana xataa laguma oran, taasina waxay keentay in aysan dadka badankoodu ogeyn in culimadii diinta dad laga marti qaaday iyo in kale. Ragaasi waxay ahaayeen kuwa lagu soo xushay si ay booska uga xiraan culimadii diinta ee dhab ahaan magaca uga tarjumi lahayd, waxaana marka la xulanayey marmarsiyo laga dhiganayey in la rabay inay noqdaan culimo aan ahayn kuwa casriga ah ee loo yaqaan xarakaatka ama dhaqdhaqaayada mucaasirinta ah oo iyaga la isaga eedaynayey inay ururka adduunka laga mamnuucay ee Al-qaacida ku lug leeyihiin.

Maalmihii dambe iyagii qudhoodii waa la sii kala eryay oo waxa laga soo reebay hal sheekh oo loo reebay si uu marka madaxweyne la doorto isagu dhaariyo. Laakiin sanad iyo bar ka dib ayaa la dareemay eedo ka dhan ah

maamulka shirka oo lagu eedaynayo in culimadii diinta laga xirtay albaabka shirka, iyada oo loo baahnaa in lagu martiqaado culimo diineed ka soo kala jeeda qabiilada kala duwan iyo xataa dariiqooyinka suufiyo ee kala duwan. Markaa ayaa la go'aamiyey in dhawr nin oo kale lagu soo daro, laakiin waxaa war ka dhacay markii qabiiladii Soomaaliyeed qaarkood laga waayey wadaad suufi ah oo ay wadaadadoodii wada noqdeen xarakiyiin casri ah. Waxa bilowgii shirka isku dayey in ay ergay u soo dirsadaan ururka Islaax oo ku fir tirsada Al-akhwaanul Muslimiin. Waxaa is keenay shirka Shiikh Axmed Qurdubi oo isagu caqiido ahaan iyo dhaqan ahaanba lagu tirinayey nin aad ugu dhaw wadaadadii Suufiyada. Nasiib darose xataa isagii noocaas ahaa waa laga eryey meeshii iyada oo lagu salladayey wadaadadii kale ee xerta ahaa.

Inkastoo aan weligeed eragada laga maqal wax diin ku doodid ah, waxaa isa soo taray eedaymo ka soo yeerayey gudaha Soomaaliya oo sheegayey in aan shirka loo ogolayn dadka diinta Islaamka ku dhaqma dhab ahaan. Waxa la isla dhex marayey hadii meesha aan diinta lagula dagaalamayn maxaa Culimadii diinta loogu marti qaadi waayey, iwm.

Haddaba si eedahaas la isaga rido waxaa lagu dhawaaqay in mar kale la marti qaadayo culimada diinta. 28.July.2004, Urur goboleedka IGAD ee iyagu maamulayay Shirka ayaa casuumad u diray Hogaamiyayaasha Maxkamadaha Islaamiga ah ee ka jira Magaalada Muqdisho iyo qaar ka mida Culuma'udiinka Soomaalida si ay uga qayb qaataan dib u hishiisiinta Soomaalida ee xiligaasi dhacaysay.

Si loo fuliyo go'aankaas qawda maqashii waxna ha u qaban ah, waxaa la gartay in aan diyaarad gooni ah lagu kharash garayn culimada diinta ee lagu soo daro kolka loo yeerayo hogaamiye kooxeedyada iyagu maalinba dhan usii socday oo todobaadna Nairobi joogay todobaadna Soomaaliya joogay iyaga oo ganacsigooda caadiga ah ee dunida ka xaaraansan iska watay. Sidaa awgeed ayaa taariikhdu markay ahayd 13, June, 2004, Gudiga farasmada ee IGAD

ee kala waday shirkaasi ay ugu baaqeen Hogaamiyaasha siyaasada Soomaalida ee iyagu ka maqnaa shirkaasi inay Nairobi oo ahayd halka shirku ka socday ku soo gaaraan mudu 10 bari ah gudahood cidii ku imaan waydana aan markaasi la sugi doonin oo aan waqti dambe lagu sii luminayn.

Wafdiyadaas loo yeerayey waxaa ka mid ahaa; C/Qaasim Salaad Xasan oo hogaamiya Kooxda TNG-da, Col.Barre Hiiraale oo madax ka ah Kooxda Dooxada Jubba, Jen.Morgan oo ka mida Kooxda SRRC iyo dagaalyahano ka soo jeeda garabyada iska soo horjeeda ee ururka lagu magacaabo ciidanka iska caabinta ee Raxanweyn (RRA).

Markaa ayaa xisaabta wafdiga imaanaya lagu daray tiradii la go'aamiyey in culimaudinka ergo ahaanta u jooga lagu daro. Laakiin su'aashu waxay ka imaanaysay waa noocee culimada la martiqaaday? Culimada la marti qaadayo waxaa lagu xulanayey qodobo ay ka mid ahaayeen: aqoon yari xaga diinta, suufinimo, u janjeerid xaga Ethiopia, nacaybka xarakaatka diiniga ah ee casriga ah, iwm. Taasina waxay sababtay in mid kasta oo ka mid ah culimadii shirka la keenay lagu tuhmo inuu jaajuus u yahay dawlada Ethiopia.

Si kastaba ha ahaatee, culima'udiinkii la wafdiyeeyey kama darin oo magac ahaan unbay ujireen walax bartood oo dadaal ahna way muujiyeen. Waxaa ugu muhiimsanayd wax tarkooda in ay markii lagu daahay wejigii 2 aad ee dhibka badnaa ee la gaaray heer uu dhab ahaan ugu sigtay shirku burbur oo ay xataa ergadii badankeedii iska kala tageen ayuu amiirkii culimadu oo ahaa Sheekh Cabdirashiid Macallin soo qaban qaabiyey mudaaharaad nooca casrigaa ah oo ka kooban in ay inta banaanka madasha shirka weliba dariiqa la sii/soo maro iska fariistaan, Qur'an akhriyaan, iyaga oo sooman oo maalintii oo dhan iska fadhiya, kuna mashquulsan wardi iyo quraan akhris iyo baryo Allah. Taasi waxay socotay mudadii loo qorsheeyey mudaaharaadkaas cunta ka soonka ah oo gaartay bil, maadaama uu shardigu ahaa inay wadaan ilaa la isugu soo noqdo shirka oo laga heshiiyo wuxuu ka mid noqday waxyaalihii suurta galiyey iska soo

af jarka iyo muquuninta ama miidaaminta shirka oo iyada qudheedu ahayd guul rasmi ah oo la gaaray.

## 3. 4. DAWRKII MADAXWEYNE MUZAVENI IYO WASIIR MIZYOKE OO GAABAN

Waxaa xusid gaar ah oo amaan ah mudan dawrka u muuqday daacadnimada iyo hagar la'aanta ee ay hawlhihii shirka ka geysteen madaxweynaha dalka Uganda, Hon. Mozaveni iyo Wasiirkii Arimaha dibadda ee dalka Kenya, Mr. Mizyoke, maadaama ay ahaayeen laba qof oo ugu adeegayey dibuheshiisiinta Soomaalida si daacadnimo ka muuqato, halka ay dhigoodu wax hagranayeen. Runtii waxaa la dareemi karay haduusan shirkaasi heli lahayn daacadnimada iyo dadaalka geesinimada run taabasho ku dhisan ee ay bixiyeen madaxweyne Muzaveni iyo Wasiir Misyoke way adkaan lahayd in uu guulaysto oo wax dawlad loo maleeyaa ka soo baxaan.

Taariikhdu markay ahayd 3/July/2004, Kolonzo Mizyoke oo ahaa Wasiirka arimaha dibada ee dawlada Kenya ayaa waxaa lagu beddeley Wasiir Mulsim ah oo lagu magacaabo Kiero Cali. Hase ahaatee Cali wax weyn kuma soo kordhin waxna kama badelin hanaankii shirka. Dhab ahaantiina lama helin nin kaga haboon maamulkaas Mr. Kolonzo Mizyoke. Taasna waxaa toos loo dareemay markii uu ka tagay kursiga oo lagu soo badelay nin lagu eexinayey Muslinimo.

Mr. Mizyoke waxa uu mudan yahay in bilad geesi Soomaaliyeed la siiyo marka la qiimeeyo wax tarka daacadnimada ahaa ee uu ka geystay dib u heshiisiinta Soomaaliyeed. Waxaa xusid mudan sidii uusan uga haybaysan jirin qabqablayaalka dagaalka ee uu runta ugu sheegi jiray, halka ay madaxda kale kala xishoonayeen ama ula hadlayeen si dublomaasiyad ah oo aysan iyagu garan karinba wax qadarin ahna siinayn.

Waxaa si gaar ah in loo sii xuso mudan maalintii la isugu keenay Hotel Safari Park kooxihii is haystay oo ay u waa weynaayeen kooxdii ku tacasubaysay Etheopia iyo kooxdii lagu soo dhisay Balcad ee loo bixiyey Samatabixinta. Maalintaas oo kulankaas lagu badelay mid ka sii qaab darnaa oo laga baajiyey in lagu aado Mombaasa si dib loogu soo xisaabtamo (*retreat*). Maalintaa iyada ah Mr. Mizyoke isaga oo si dhab ah u xanaaqsan ayuu u sheegay qabqablayaashii dagaalka inay iyagu yihiin kuwa umaddii Soomaaliyeed kala reebay oo maanta gurigaa ba'ay soo istaajiyey. Markii uu ka waayey in ay waxun ku heshiiyaan kulankaas ayuu sameeyey in uu qolo walba ama qabqable walba gooni ugu yeero oo ka saxiixo inta uu ogol yahay, deedna isu keeno saxiixyadoodii isga oo ka dhigay wax is waafaqaya halkaana ku dhawaaqay in qodobadaas la isku af gartay. Hadal keliyana kuma ekayn wax-tarkiisu ee marka uu go'aan soo saaro durba wuu fulin jiray tiiyoo ay diidan yihiin oo ka san taagleynayaan dagaal oogayaashu.

Dadaalkaas daacadnimadu ka muuqato mid la mid ah waxaa isna muujiyey madaxweynaha dalka Uganda, Muzaveni oo mar walba u heellanaa ka mira dhalinta dhirka isaga oo qabliga ku hayey dhibaatooyinka ay dawlad la'aanta iyo jabhadnimadu leedahay oo uu isagu khibrad ahaan usoo maray. Waxa uu ku calaacalay dagaal oogayaashii isla maalintaas la fadhiyey Hotel Safari Park isaga oo si caro ka muuqato ugu qayliyey: "war maanta waxaad dadka Soomaaliyeed ku haysaan wax loo dulqaadan karo ma ahan, waxaad wadaan xasuuq ba'an oo tartiib tartiib u socda. War anaa og musiibooyinka laga dhaxlo dagaal sokeeye ee maad joogtaan, war maad eegtaan dhibaatada haysata caruurta iyo hooyooyinka ee aad idinku ku kallifteen, war miyaadnaan marnaba jir naxa lahayn. Ogaada hada ka dib kii dib u heshiisiinta diida ee ku sii adkaysta dil iyo qas waxan soo taageynaa maxkamad cadaalad ah". Hadaladaas iyo kuwa la mid ah ayuu indhaha ka saaray isaga oo ku celcelinaya madaxweyne Muzaveni isla markaana ku sii darayey ficil hawl fulin ah.

Iyada oo laga sii amba qaadayo dib uheshiisiintaas cusub ee lagu gaaray qaabka dib u gurashada ama dib usu soo habaynta ah ayaa waxaa laga faaiidaystay safarkii uu Afrika ku soo gaaray 8.July.2004 Xoghayaha Guud ee Jamciyadda Quruumuhu ka dhaxayso Mr Kofin Annan oo laga codsaday in uu soo gaaro magaalada Nairobi oo uu ka socday shirkii Soomaalidu. Mr. Annan waxa uu la kulmay gudigii IGAD ee Shirka hawlihiisa waday oo ka dhagaystay warbixino, intaasna kuma ekaysane cagihiisa ayuu ku tagay goobtii gogosha wada hadalka ahayd, wuxuuna la kulmay oo u khudbeeyey ergadii Soomaalida ee halkaa joogtay. Intaas ka dibna waxa uu sheegay in ay taageeri doonaan shirka iyo miraha ka soo bixi doona.

Ugu dambaystii waxay Muzaveni iyo Misyoke naga mudan yihiin xusitaan gooni ah inaga oo ku qadarinayna dadaalkooda daacadnimada huwanaa ee ay noo geysteen.

## 2. 5. DAWRKII DUMARKA

24 kii Janaayo 2003 ayey madax ka mid ah hogaamiyeyaashii dumarka oo weli markaa u muuqday kuwa aan sidaa isugu habaysneyn kulan culus la yeesheen Ergeygii Khaaska ahaa ee dalka Kenya u joogay shirka, iyaga oo kula kulmay xafiiskiisa ku yiilay madasha shirka ee Hotel Sirikwa.

Dumarka oo u ekaa kuwa ciil iyo caro ay ku raagtay marka laga eego dhanka dareenka siyaasadda Soomaaliya ayaa bilaabay in ay si cidiyo ku dagaallan ah u halgamaan. Waxa ay soo hordhigeen Ergeyga Khaaska ah dhawr arimood oo ay ka mid ahaayeen:

1. In tixgelin gaar ah la siiyo ka qayb qaadashada dumarka ee shirkan dib u heshiisiineed maadaam 66% tirada dadka Soomaaliyeed ay tahay Haween;

2. Maadaama ay yihiin kuwa ugu horeynba uu dagaalku naafeyey ama ku haleelay musiibadiisa;
3. Dood adag oo ay ka soo jeediyeen sababta ay dumar ugu jiri waayeen Gudiga Hogaamiyeyaasha ama waxa loo bixiyey saxiixayaasha;
4. In 50% ama ugu yaraan 120 kursi ay ku yeeshaan xubnaha Baarlamaanka dawladda la maagan yahay, arinkaas oo loo baahan yahay in la xalliyo inta uusan wejiga 3 aad ee shirku bilaaban.

Ergeyga Khaaska ihi waxa uu ugu jawaabay Haweenkaas dhawr qodob oo kooban ayna ka mid ahaayeen:

1. In 300 oo qof oo ah Ergada matalaysa qabiilada Soomaaliyeed ay yihiin kuwa fariisanaya madasha shirka (*the plenary*) si ay uga hadlaan go'aamada ay soo saari doonaan lixda guddi ee la dhisay, markaa ka dib ayaana la gaari doonaa in laga hadlo ama la go'aamiyo cida soo gelaysa Baarlamaanka iyo sifaadka lagu dooranayo;
2. Mas'alada caddaalada iyo sinaanta waa mid ku cakiran wadamada Afrika intooda badan sidaa darteed u baahan taxadar gaar ah;
3. In uu guubaabinayo in ay dumarku ahaadaan halbawlaha shirka iyaga oo ku dadaalaya siday wax ku ool guul ku dhamaada uga dhigi lahaayeen shirka;
4. In ay xubnaha Dumarka iyo Bulshada Rayidka ihi isla shaqeeyaan iyaga oo raadsanaya kalsoonida shacabka;
5. Ergeygu waxa uu saacadaas dumarka ku waaniyey in aysan sida raga ku mashquulin is haysad iyo is fiirsi shakhsiyeed ee ay u jihaystaan sidii ay dalkooda uga samata bixin lahaayeen musiibada ku habsatay iyaga oo ka tusaale qaadanaya haweenka kale ee qayrkooda ah ee dalkooda mushkiladaha dagaal oo ka jiray xaliyey sida haweenka Suudaan iyo kuwa magaalada Wajeer ee Kenya. Ugu dambaystiina waxa uu u cadeeyey

haweenkii uu la hadlayey in uu daacad yahay aysana jirin wax qorshe ah oo u qarsoon[13].

Hase ahaatee dadaalkii iyo halgankii dumarku halkaa wuu ka sii ambaqaaday markii la isugu tagay xeradii Mpagathi ee ay Soomaalidu u bixiyeen Doofaarey. Koox gabdho ah oo naftood hurayaal noqday ayaa asaasay xarun u gaar ah haweenka oo loo bixiyey "*Somali Women Resource Center - SWRC*". Xaruntaan ayaa joogtaysay dadaal dhan walba oo siyaasadeed leh sida tababaro loo fidiyo gabdhaha ergada ah, qabasho kulamo heshiisiin oo hoos laga soo bilaabayo, diyaarinta iyo faafinta marba qodobada ugu dhaw ee la isku af garan karo, soo saarida qoraalo waano iyo guubaabo isugu jira, qabashada xaflado ku beegan munaasabadaha Qaran ee Soomaaliya oo soo noqnoqday sanooyinka badan oo meesha la fadhiyey awgood.

Dumarkaas mintidka noqday oo ku adkaystay in ay dawrkooda dhabta ah cayaaraan si kasta oo dhinacyada looga qayliyo dacaayado looga faafiyo ama gacan loogu geysto waxaa ka mid ahaa; Hon. Caasha Axmed Cabdallah, Hon. Caasha Xaji Cilmi, Ruqiyo M. Shekh Cisman, Sahra Ugaas Faarax iyo Khadiija Nuunow oo dhanka dagaalka siyaasadeed jilibka u dhigay. Sidoo kale Bilot Calan Sido, Maryan Jacayl oo la taagneyd gabayo guubaabo iyo qiiro leh oo lala ilmaynayo, Mama Jini Boqor oo iyada oo da' ah habeen iyo dharaar la taagneyd calanka iyo guubaabo. Xaga warfaafintana waxaa dumarka dawr aad u weyn uga cayaaray Khadiija Mayow (Iqra), Nafiso (Irin/BBC), Canab Mumtaz (IKK, iyo Somalitalk.com), iyo Maryan Qalanjo (Hiran. Com).

---

[13] . Natiijadii ka soo baxday kulankii ay Hogaamiyeyaal Siyaasiyiin dumar ah la yeesheen Ergayga khaaska ah ee Kenya, Mr. Mwangale, 24 kii Janaayo 2003, Hotel Sirkiwa, Kenya

Waxaa kale oo jiray haween iyaguna dadaal badnaa laakiin u dadaalayey si ay u gaaraan danahooda gaarka ah ee ku salaysan sidii ay jago ku heli lahaayeen, laakiin kuwaas qudhoodu waxay ku biiriyeen dadaalkooda kan Dumarka ee guud maadaama ay magacii sitaan, walow ay danahooda keliya u harjadayeen.

## 3. 6. DAWRKII DALALKA SHISHEEYE

dalalka shisheeye ee halkaan masraxa soo galay waxan u kala saari karnaa Midowga Yurub – EU, Jaamacadda Carabta, Maraykan – USA, iyo Midowga Afrika – AU oo isagu usii kala baxayey ilaa sadex derajo oo kala saraysa kalana ah: AU, IGAD iyo Fronta line States oo laga wado Djibouti, Ethiopia iyo Kenya. Haddaba intaa qoloba si goobi ah ayey cayaarta uga soo boodaysay nasiib darana jaanta iyo cagta la islama helaynin ee waxay heelladii ku dhamaatay si dhaqabaqtan ah. Taasina waxay ahayd in markii ugu dambaysay ee ay cid waliba daashay la isaga heshiiyey ama lagu kala aamusay waxaad rabtaan sameeya ee mar uun shir ku-sheegaan dabada dheeraaday naga soo xira oo soo af jara. Waxaa xusid mudan jawaab uu bixiyey wiilkii dawladda loo martida yahay ee Kenya uga wakiilka ahaa shirka oo ahayd in lagu cataabay war ina adeerow sow nin Soomaali asalkiisu yahay ma tihid maad shirkaan sida u dhaantaan oo ka badbaadisid Soomaaliya in maanta loo dhoodhoobo dawlad ku sheeg been been ah oo u horseeda halaag hor leh, sow ma dareemaysid in hadii sidaa iyo sidaa la sameeyo ay taas iyo taasi ka ratibmi karaan. Markaa ayuu isaga oo xanaaqsan oo muujinaya karaahiyada uu kala kulmay Soomaalida ku qayliyey "war na dhaafa, anagu waxun baan idiin dhoodhoobaynaaye hadday rabtana Ilaahow may albaabka xeradaan idinka burburtee idinkoon weli ka bixn".

Haddaba hadaan dulmar gaaban oo la wada dareemi karay ku sameeyo ujeedooyinkii iyo dawrarkii kala duwanaa ee dawladahaas waxay ku soo

aruurayeen ugu horaynta in ay dawlad waliba doonaysay in ay iyadu naaquude ka noqoto doonta haddii kale ay gadoonto. Dhab ahaantii way jireen dawlado si qalbi furnaan ah ugu dadaalayey sidii ay Soomaaliya dawlad u noqon lahayd oo cagaheeda isugu taagi lahayd dantay doonaanba iyagu ha ka lahaadeene, laakiin waxaa ka tan badinayey dawladaha mijaxaabinta wada iyo kuwa aan wax dan ah ka lahayn ee iska daawanayey.

Dawladaha Carabta intooda badan waxay u ekaayeen kuwa ka xishoonaya ama ka cabsanaya inay ka xumaadaan kuwa reer Galbeedka ihi oo is leh yaaney eedi idinku soo gaarin meesha. Waxay iska go'aansadeen inay marba intay taageero u awoodaan ku soo biiriyaan dhawrtada loo aruurinayey shirka. Dawladda Masar ayaa ugu dhaweyd mid fara galin ku lahaanaysay hawsha iyada qudheeduna way yara gabbanaysay. Dawladda Maraykanku wax dan iyo xiiso ah uma hayn arintaba oo waxay u ekayd mid ay isaga mid tahay in Soomaaliya dawlad noqoto iyo in kale. Waxay isku hallaynaysay awoodeeda ay dunida oo dhan ku qab jebisay oo ay is lahayd hadii ay ka soo baxdo dawlad noocii aad rabteen ahna waa kheyr ee la shaqee hadii kalena bareega u taag illeen caano kaaga daadan mahayaane. Xataa waxay dawlada Maraykanku cadaysan wayday mawqifkeeda ku aadan tuhunka xumanata ah ee ay Soomaalidu ka qabeen e ela xiriira in ay dawladda Ethiopia ka soo adeejisay gumaadka Soomaaliya oo ku dhaqaalayso.

Mar aan Wafdi Maraykan ah weydiiyey sababta ay Maraykanku uga aamusna yihiin masabidka ay Ethiopia ku hayso ee ah in aad u fasaxdeen cirib tirka Soomaaliya iyaga oo si qaldan u fasiranaya wasaayadaii (*mandate*) kii loo siiyey in ay Geeska Afrika kala dagaalanto Argagixisada oo ay Ethiopia ugu gabtay colaad diineed oo ah in ay Islaamka kala dagaalanto Soomaaliya, waxay iigu jawaabeen waxanu nacaynaa ka hadalka waxyaalo taafih ah oo tabar daran. Dhanka kale dawladaha Yurub oo weliba markaa joogay xilligay isugu dhawaayeen ee ay midoobeen waxaa ka muuqatay isku waafaqsanaan la'aan arimaha shirka iyo Soomaaliya, laakiin hubaal waxay u badnaayeen kuwo ka

daacad ah oo waxay la kor taagnaayeen taageero dhaqaale oo aan kala go' lahayn.

Haddaan u soo dhaadhacno xaga dawladaha Afrikaanka ah, waxaan daah saarnayn in aysan badankoodu wax dan ah ka lahayn arinta sababo dhawr ah awgood. Sababahaas waxaa ka mid noqon kara; Jinsiyada ama Hawiyada (*identity*) Soomaalida iyaga oo ugu caraysan in ay Soomaalidu sheegato Carab halka ay ka filanayeen inay ku faanaan Afrikaanimo sida dawlada aan isku midabka nahay ee Ethiopia. Halkaa waxaa ka muuqatay in ay leeyihiin waataase bal Carabi wax ha idiin tarto oo meel ha idinka soo saarto maanta idinkaa tolkiin ka tagaye. Dhanka kale waxaa muuqatay in ay Carabtunba sidaas si la mid ah nagu colaadinaysay oo lahayd Soomaalidu Carab sax ah ma ahan sida dalwada aan isku midabka nahay ee Suudaan.

Si kastaba ha ahaatee, Allah baa noo maqane, waxay dawladaha Afrika iyaga oo weji wanaag ah tusinaya ku adkaysteen in soo celinta Soomaaliya uu xil ka saaran yahay Afrikaanka la deriska ah ee ay iskula jiraan urur goboleedka IGAD. Laakiin kuwii ku midaysnaa IGAD qudhoodu si ay eed isaga dheereeyaan ayey usii xil saareen saddexda wadan ee xuduudaha la wadaaga Soomaaliya. Nasib darro sadexda wadanba waxay wadanaha farta ugu hayaan in ay Soomaaliya inta dawlad xoog leh noqoto ku qabsato dhulal ay ka haystaan. Djibouti kulligeed ayey Soomaali sheegan doontaa, Ethiopia kala bar oo bar bay ka sheegna doontaa, Kenya saddex u dhigoo dhig bay ka sheegna doontaa. Waa yaab, ma waraabaad isku korin kartaa.

Inkasta oo fikradaasi aysan iminka mid meesha la keeni karo ahayn hadana waxay dawladahaasi u fikirayeen isla si la mid ah sida ay Soomaalida qudhoodu u fikiraan ee ah sheekadii lagu fashilmay ee Soomaali weyn. Fikirkaan oo ku shaqaynayey si qarsoon oo hoos ka ogaan ah ayaa maalintii dambe waxaa qarxiyey madaxweynihii markaa xukunka laga tuuray ee Danial Arab Moi oo ku sheegay khudbad uu ka jeediyey dalka Maraykanka in aysan sadexda wadanba ka daacad ahayn in Soomaaliya dawlad loo dhiso iyaga oo ka baqaya in ay hadhow dhul ku sheegtaan oo dagaal ula soo bareeraan.

Kala daadadkaas iyo is waafaqid la'aantaas ku kala dhex jirtay dalalka shisheeye ee arinta shirka ku hawlanaa awgeed ayey kooxihii iyo shakhsiyaadkii Soomaaliyeed oo danahooda u gaarka ah raacanayey bilaabeen inay marba mid isku leexiyaan oo garab ka raadsadaan iyaga oo dabcan u ballan qaadaya wixii ay uga baahdaan. Halkaana waxaa ka abuurmay in lagu kala mashquulo xulufo samaysi iyo xaafiisyo safaaradeed hor taagnaaantooda. Inkasta oo ay kala badnaayeen juhdiga iyo halganka ay geliyeen siyaasi isku sheegyada Soomaaliyeed hawshaas iyo intay ka heleen hadana waxaa suurtowday in kooxo iyo shakhsiyaad ay waxun taageero ah ka heleen dawlado ajnabi ah, kolley ajnabigaasina dantiisa ayunbuu ku ilaashanayey ee wax axsaan ah uma samaynayn iyaga.

Mararka qaarkood ayaa waxaa dhacasay intay kooxi ka xanaaqdo shirka aysan ka jawabi karin sababta ay u xanaaqeen iyo waxa ay qoonsadeen, ka dibna iyadoo la dareensan yahay in ay cidii ka dambaysay soo weydiinayaan jawaabta laga war sugayey maalmo si ay jawaab usoo helaan. Waxaa iska caadi ahayd in ay kooxiba mar inta is xanaajiso oo shirka ka baxdo u dudaysay sidii inan ninkii qabay ka soo duday. Markaa ayey kooxdii dudaaba u qaylo dhaansanaysay dawlad ama urur shirka faraha kula jiray. Ka dibna waxaa bilaabanayey in dawladaas ama kooxdaas ay caruurteedii ku soo ooyeen wada hadal ula tagaan dawladii ka mas'uulka ahayd kooxda kale. Halkaa waxaa ka dhacaysay mararka qaarkood inay dawladuhu waxun ku heshiiyaan, inkastoo mararka qaarkoodna ay labadaas dawladood ka dhex tafanaysay oo arinku cirka isku shareerayey.

Waxaa xusid mudan in mar ay is qabsadeen dawlada Kenya iyo Ethiopia ay dawlada kale u gar naqday xaajadii garta lagu gooyey oo la dhaqan Soomaaliyeeyeyna waxay u dhacday sidatan:

Sanawi: odaygeenow, aniga iyo walaalkey hal baa noo wada qalnayd. Nasiib darro walaalkey waxa uu damcay in uu isku darsado waxay hashu laf iyo lud lahayd oo macneheedu yahay in uu rabo in uu isagu isku qato saddexda waaxood ee meesha taalla oo kala ah: siyaasad, magac iyo maal. Bal fiiri isaga

ayaa magicii meesha ka yimaada la siinayaa oo gogosha fidiyey, isaga ayaa maalkii meesha ku baxayey oo dhan afka u dhigtay, isaga ayaana raba in uu maamulkii iyo siyaasadii hogaanka lagu waday isaga tashado. Ma xaq Ilaahay baa mudane?!!!

Kibaki: Maya wax waan u ogolahay laakiin cad la yaqaan ha qabsado hana ila shaqeeyo.

Odaygii: haddaba, Kibaki adigu qaado xubinta sharafta iyo xubinta dhaqaalaha, labadaas xubnood sow kuguma filna? Sanawi isna ha loo daayo xubinta siyaasada laakiin isna hala shaqeeyo dadka. Shirkuna waa noo xiran yahay.

Markii gogosha lagu kala tagi rabo ayuu odaygii mar kale bal fariista ku yiri oo usoo jeediyey fikrad oranaysa; war heedhee waa ceeb iyo uqubo inaad keligiin hasha wada cuntaane wiilkaan yar oo maskiinka ah ee isna idinla deriska ah, Mr. Gelle maxaad u hambayseen?

Senawi: mudane igu hallee aniga in aan wiilkaa yar raalli ka soo dhigo oo uu nala shaqeeyo, hoos baan ula hadlayaa, ha ka welwelin.

Odaygii: Waa yahaye arintaa iska xil saar oo hanagu ceebayn shirkuna waa noo xiran yahay.

Alleylehe hadaan run sheeg ku dadaalno, waxa aan la dafiri karin in ujeedada uu Raisulwassaraha Ethiopia ka leeyahay Soomaaliya ay tahay mid weji aan dhib keenin, wanaag ba yuusan ahaane loo adeegsan karo. Waxa uu ku dadaalaa Sanaawi in uu u abaal gudo dawladii Barre iyo dadkiisii oo soo dadeeyey isaga. Sidoo kale waxa uu Barre ku waafaqsan yahay fikir uu qarsanayey oo ahaa in Soomaaliya iyo ethiopia inta la isku daro ay xukun wadaag ah yeeshaan magac ahaana u la baxaan; "*Great Abbasinia*" ama "Horn of Africa" marba tii la isku raaco. Taas oo loo arkayo dariiqada ugu sahlan ee lagu soo af jari karo colaada labada qawmiyadood ee dhaxal tooyada ah. Waxaa in badan oo khudbooyinkiisa iyo ficiladiisa ah marka la isu geeyo laga dareemi karaa in uusan waxba ka qabin midnimada iyo horumarka Soomaaliyeed balse uu rabo in ay taais timaado iyada oon wax dhibaato ah isaga iyo dawladiisa u

geysanayn, wuxuuna taas mar walba ku raadshaa nidaam nabad iyo walaaltinimo abuur ah. Hase ahaatee waxaa muuqata oon la inkiri karayn in ay laba cilladood mar walba hor taalo; kuwaas oo kala ah; waa tan hore ee; Shacabkiisa oo ay ka daadegi la'dahay soo dhaweynta iyo walaalaysiga Soomaalida oo ay ku neceb yihiin diintooda awgeed. Iyo tan labaad oo ah in shacabkii soomaaliyeed ay dan iyo barwaaqo moodeen is ruugitaan iyo is raamsi dhexdooda ah.

Runta ficilada laga dareemayey ama soo baxaysay marka siyaasadaha meesha ka socda la dhiraandhiriyo ee Ethiopia waxay isugu jirtay ujeedooyin ay ka mid tahay;

1. In si loo soo af jaro sheegashadii Soomaalidu waagay dawlada ahayd sheeganaysay dhul ay Ethiopia ka haysato lala saaxiibo dadyowga ku dhaqan goboladaas ay ka midka yihiin Dida Liibaan ama Nagayle Mareexaan (waayadaan dambe loo badelay Nagayle Boorane), Guud ahaanba Soonaha Shanaad ama Ogaadeniya, iyo dhulka Ciisaha ee ku dherersan xuduudaha Djibouti iyo Ereteria.
2. In shakhsiyaad asalkoodu ka soo jeedo Goboladaas looga helo dawlada Soomaalida loo dhisayo jagooiyn sare si dadkoodaas loogu qanciyo in ay u guuraan Soomaaliya, halkaana dhulkii uu haro Ethiopia laakin dadku xamuulkooda uga qaadaan,
3. In gudaha Soomaaliya la soo geliyo ama lagu soo riixo qabilada Ethiopia ee soo xiga Soomaaliya sida Oromo,
4. In si tartiib tartiib ah loo cirib tiro madaxda iyo dhaqdhaqaaqayaalka ururada Diiniga ah ee wacyiga halganku ku jiro.

Maalintii dambe waxaa iyaga oo gacmaha is haysta madashii shirka yimid dawladihii saddexda ahaa ee safka hore oo uu qola walba hogaanka u hayo Wasiirkooda Arimaha Dibada. Waxaa hadlay Wasiirkii Arimaha Dibadda ee Ethiopia, wuxuuna nuxurka hadalkiisu isugu soo biyo shubanayey maanta waan idin soo heshiinay ee sidaan anagii isku kiin haysanay heshiis u nahay idinkuna u heshiiya oo aan kulligeen gacmaha is wada qabsano. Waxa uu yiri Wasiirku

"Hubaal dawladaydu waxan ahayn caqabad iyo dhib hortaagan shirkaan, laakiin maanta laga bilaabo waxanu nahay kuwa xalkii wada oo sama ka talis ah – *we were part of the problem, but now part of the solution*".

Bishaas bishii ka horaysay ayey Wasiirudawlaha Arimaha Dibada ee Ethiopia oo ka jawaabaysa eedayn ay dawlada Kenya usoo jeedisay oo ahayd in aysan la shaqayneyn (waa khilaafka uu odaygu xaliyey ee aan kor ku xusnaye) waxay tiri: "waa tan nalaku eedaynayo shirkay ka baxday iyo nabada Soomaaliyey diidan tahaye, bal car ha la isku dayo in wax go'aan ah la gaaro inaga la'aanteen. Waxan doono ayaan ka samaynaynaa Soomaaliya. Marba hadaanu nahay qayb ka mid ah mushkilad abuurka waxaanu nahay qayb ka mid ah xalka - "*we are part of the problem and we must be part of the solution*".

Heshiiska iyo hididiilaha soo dhawaaday ee maalinkaas madasha shirka ka dhacay ayaa caddaalad iyo cadaalad daraba waxa uu ahaa kii lagu furay wejiigii saddexaad ee shirka laguna dhisay dawladda. Dawladaha ka sokow waxaa iyaguna ka xumaa oo hoos ka dagaallamayey Hay'adaha caalamiga ah ee ka hawlgala Soomaaliya oo qaarkood markii ay maqleen in dawlad loo dhisay Soomaaliya si rasmi ah salka dhulka u dhigay Nairobo oo guryo ka gatay sidii in ay weligood Kenya ka hawlgeli doonaan. Taasina waxay tusinaysaa in dhan walba lagala dagaallamayey dawlad u dhalata Soomaaliya, iyada oo dhanka Soomaalidana ay u muuqato in aysan dawladnimo weli u qaan gaarin.

Hadaan in yar taariikhda maalmahaas dib u jalleecno, waxaa jirtay in markii la diyaarinayey furitaankii wejigii saddexaad ee ugu dambeeyey shirka ay bilaabatay dib ugurasho xiilad siyaasadeed oo ay qola walba soo diyaarsanaysay qorshihii ay ku kasban lahayd guul ay madasha kala hoyato.

Haddaba kala showrkaas iyo kala caroodakaas is daba jiitamay awgiis ayey dawladii Kenyana ka dhaadhicisay dawladihii deeqda bixinayey – IPF in la sameeyo farsamo siyaasadeed oo loo yaqaan "dib u gurasho xiilad siyaasadeed" (*retreat*). Waxaa la soo jeediyey in inta ugu qabqablaysan meesha oo ay kujiraan xubnaha isku magacaabay Hogaamiyeyaalka Siyaasada iyo kooxda markaa cusbayd ee lagu so unkay Balcad ee la magac baxday Badbaadada Qaranka iyo

ilaa 3 qof oo ka mid ah Bulshada Rayidka ah isugu tagaan magaalada Mombasa ee dalka Kenya.

Muddo bil ah markay qabanqaabadaasi socotay asaan waxba ka suurtoobin ayaa waxaa la soo dejiyey Hotelka ugu qaalisan dalka Kenya ee Safari Park kooxdii cusbayd ee Badbaadada Qaranka oo uu horkacayo Cabdiqasim, madaxweynihii markaa dhacay.

Hadaan u soo noqono dawrarkii kala duwanaa ee ay dawladaha reer Yurub iyo Afrika ka kala cayaarayeen garoonka waxaa xusid mudan in Alleylehe Aadane laguma abaal furee, dawladihii isku bahaystay maamulkii loo bixiyey IPF badankoodu ay jeclaayeen in dalkaan ay dad aqoon iyo ilbaxnimo lihi hogaanshaan laakiin waa laga xoog badnaa maadaama ay ka xishoonayeen in ay si saqajaanimo ah wax walba u fara geliyaan. Tusaale dawladda Ingiriiska waxaa ka go'nayd in ay ka dhisto shirka dawlad Soomaaliyeed oo ay aqoonyahanadu dawr weyn ku leeyihiin hadaysanba iyagu hogaankeeda haynin. Sidaa darteed waxay iyaga iyo kuwa kale oo reer Yurub ihi ku adkaysteen markii xildhibaanadii la xushay ee wada jaahiliin laga dhigay ay ka hor istaagayaan aqoonsi hadaan lagu darin tiro aqoonyahano ah iyo hadaan wasiirada la xulan doono laga wada dhigin dad aqoonyahano ah.

Tan hore waxay dhalisay in beel kaste dhawr qof oo aqoon leh lagu qasbo sida dumarkaba loogu qasbayey. Beesha Harti Daarood ayaa ugu darnayd oo sanka laga geliyey Cabdulahi Yusuf in uu ku soo daro shan xildhibaan oo aqoon leh, inkastoo ay ilaa hada ka takooran yihiin Beeshii ay ka dhasheen inteedii kale oo loo yaqaan Xildhibaanadii IGAD iyo IPF. Nasiib darose wasiiradii iyo hawlwadeenadii dawlada oo la isku ogaa in ay noqdaan dadka aqoonta huwani way suurtoobi wayday oo kuwii jabhadaha ahaa ee sharci dejinta loo doortay ayaa dejistay sharci qeexaya in qof aan iyaga ahayni waxba ka noqon oo soo gelin dawlada. Sidaas ooy tahay weli waxaa jiray dawlado reer Yurub ah oo ku tala galsanaa in ay meesha ka soo saaraan dawlad aan aqoon shuqul ku lahayn laakiin dad ay gooni u rabene hogaaminayaan, waxaana dawladahaas ka mid

ahaa Talyaaniga oo isagu weligiis la bah ah qabiil ka mid ah qabiilada Soomaaliyeed.

Hadaan u soo jeesano xaga dawladha Afrikaanka ah ee isku bahaystay urur goboleedka IGAD, waxaa iska cadayd in dawladaha Uganda, Sudan iyo Eretaria ay jeclaayeen ama dadaal qayaxan ku muujinayeen in Soomalaiya ay u dhalato dawlad u qalanta oo dhab ah. Hadaanse eegno xaga sadexda dawladood ee safka hore oo iyagu doolshaha qaybinayey; Kenya waxa aad uga maqnaa aqoonta dhabta ah ee ay u leeyihiin Soomaalida, hadaba iyaga oo taas og ayey ka dhawrsanayeen in ay dhex galaan waxyaalo aysan isku hubin. Taasina waxay ku qasbaysay in ay Ethiopia oo iska dhigaysay khabiirka kaliya ee Soomaalida yaqaan uga dambeeyaan. Halkaana waxaa Ethiopia uga soo baxday fursad dahabi ah oo ah in si caalami ah loogu aqoonsado khabiirka arimaha Soomaaliya, taasina waxay ku sii dhiiri gelisay ujeedadoodii ahayd sidaad rabto ka yeel kuwana maantay kuu jaban yihiine.

Dhanka kale dawlada Djibouti waxay caqligeedii iyo dadaalkeedii isugu geysay taageerada DKMG iyo C/Qasim. Intaasna waxaa u dheeraa xinka aan xal ahayn ooy u haysay Ethiopia iyada oo mar walba khilaafaysay hadafka iyo fikradaha Ethiopia. Taasina waxay dhalisay in ay sadexda dawladood ee deriskeen ah ee arinteena loo xilsaaray iyada oo wilaayadeena ama wasiyadeena (*mandate*) loo dhiibay inta aan agoonimada ka baxayno oo qaan gaarayno ama ugu yaraan hooyadeen nin kale ka guursanayo ay nagu seexdaan oo nagu noqdaan buste baas oo korkeena ku dadan, nagana qarinaya umadihii kale ee na arki lahaa in aan bacad jiifno oo markaa noo soon gurman lahaa.

Guntii iyo gebangebadii is khilaafkii iyo is jiidadkii dhex yiilay dawladaha shisheeye waxa uu aha amid aan ka yaraysan kan dhex yiilay kooxaheena iyo qabqablayaalkeena dagaal, sidasina waa tan riiqday oo cardaadiqaha ka dhigtay maslaxadii umada Soomaaliyeed. Waxayse ku kala roonaayeen in ay qaarkood sida kuwa ku midaysna ururka qaaradeedka EU ee reer Yuurb ay mar walba isku raacayeen halkii uu codku u bato iyaga oo tixraacayey dhaqankooda Dimoqraadiyada. Sidaa darteed IPF waxay mar walba soo saarayeen

go'aankooda oo idaysan walow ay badnaayeen khilaafyada dhexdooda yaallaa. Laakiin waxa na dayacay sadexda dawladood ee noo hayey wilaayada oo midi taagnayd; aan iska daynee ha lanoo ballan qaado in aan qof wadada ihi ku soo darsamayn liiska dawlada la dhisayo. Halka ay mid kalena taagnayd; hadaan xumaan loo dan lahayn maa la tixraaco oo la sii amba qaado gogoshii hore een dhignay iyo dawladii aan ku soo dhisnay maxaa wax tarkeenii loo inkirayaa?. Halka ay tan sadexaadna ku dhex dabaalanaysay shaki iyo xayraan ay ka qaaday dhaqankii iyo dabeecadii Soomaaliyeed oo filan waa ku noqday iyo ilaalintii dantooda gaarka ah oo ku ekayd shilimo aruursi. Sidaa darteed ay u af gobaadsanaysay; "war bal idinku waxaad rabtaan ku soo heshiiya anagu gogoshii unbana idiin haynaa waxan danteena iyo mas'uuliyadeen ahayna ma dhex galaynee".

## 3. 7. DAWRKII BAHDA WAR BAAHINTA

Waxaan la hilmaami karin mucjisooyinkii samaha iyo xumaha (*positive & negative*) isugu jiray ee ay dhallin yaro is maqiiq miiran ih oo ku wada qaraabanayey magaca weriyenimo madax banaan (free-lance) ay ka muujiyeen madashii shirka. Dhallinyaradaani waxay u badnaayeen kuwa aan wax aqoon ah oo la taaban karo lahayn badankooduna ku dhex qaan gaaray ama ku garaadsaday xilliyadii dagaalada Soomaaliyeed ee dhiiga faraha lagula jiray. Aqoon yaridooda ka sokow waxaa dhallinyarada dhibaato ku haysay dhaqaalo yari ba'an maadaama aysan jirin cid masruufaysay iyo meel cayiman oo uu dakhli ka soo gelayey. Intooda badan waxay ahaayeen dhallinyaro wanaag doon ah oo meherad ka dhiganayey weriyenimadaas inta ay ka helayaan dariiq ay ugu dhoofaan dunida horumartay si ay markaa waxun nolol ah usamaystaan.

Haddaba inta aanan waxba ka sheegin dhallinyaradaas waxaa haboon in aan ku amaano dadaalkooda dadnimo ka dheeriga ah ee ay ku dhaqaaqeen iyaga oo ku indha qaaday meel aan wax dawlad iyo wanaag ihi ka jirin ee la isku cunayo deedna ay ku dhaqaaqeen ficil ka tarjumaya ilbaxnimo iyo horukac gaar ah iyo mid guud labadaba. Waxaan shaki ku jirin in ay dhibaatada guud ee dhacday uga faaiidaystaan dhankii samaha si ay ugu yaraan naftooda waxun mehered ah ugu sameeyaan.

Aan usoo dhaadhacno ujeedadee, dhallinyaradani iyaga oo la dagaalamaya dhibaatadooda dhaqaale ayey hadafka ugu horeeya ee hawshooda ka dhigteen ka ganacsiga warka. Run ahaantii ka ganacsiga warku ceeb kama ahan dunidaan aan ku nool nahay sida uusan horayba ceeb uga ahayn dunidii aan soo dhaafnay. Berigii hore dadka warka buufiya ee noloshooda ku xirta waxaa loo aqoon jiray "af-Maal", waxayna ahaayeen dad meherad haysta. Maantana waxay war baahintu ka mid tahay ilaha dhaqaale kuwooda ugu mudan.

Haddaba si ay waxun shilimaad ah u helaan waxay dhalinyaradani sidii bisadii hoos ordi jireen kuwa xoogaa dhaqaale ahaan u ladan ee ku hanweyn siyaasadda iyaga oo marba barnaamij ay ku buun buuninayaan usoo bandhigaya. Waxay halhays ka dhigteen "war ninkaan anigu buunbuuniyo waa barmoosay ninkaan dabva dhigtaana waa dhacay". Run ahaantii waa war aan gardaradiisa ku soo dhaweeyey mar haduu dagaalkeenii feerka iyo faralaabka ahaa u badelmay in uu wiil aadnaan is aqoon kuugu hanjabo hadaadan iska kay laaluushiin waan kula dagaalayaa oodan hadana waxba ka qaban karin ee ay dantu kugu kalifayso in aad iska laaluushto.

Dhallinyaradaasi iyaga oo la soo baxaya awoodooda dagaal-oogenimo ayey ka go'nayd in ay luqmadooda ka bislaystaan nimanka ku naaxay xoolihii shacabka oo ay ka midka ahaayeen iyagu, ha ahaadeen kuwa rasaasta iyo ruux dhibka kula jira shacabka ama kuwii mar hore ka daldashay wixii hanti ahaa ee raasumaal ugu yiilay dalka. Taasina waxay ku jiidaysay dhalinyarada in ay qudhoodu bahaloobaan oo ku mashquulaan dhaqanka loo yaqaanay "ii daadi" oo

ay ku dhaqmayeen gabdhaha Soomaaliyeed ee iyaguna halkaa u soo shaqa tagayey intay ka soo jarmaadaan xaafada Eastleigh ee Nairobi.

Waxaa iska caadi ahaa ganacsiga warbaahinta ee ah aan wax fiican kaa qoree meeqaad isiinaysaa? Walow uu ganacsiga noocna ihi xaaraan ku yahay xaga qaanuunka warbaahinta, akhlaaqda aadanaha, sharafta wariyaha, iyo guud ahaanba damiirka ruuxa, hadana ma muuqanin ilo dhaqaale oo kale oo uu kaga maarmi karo wariyaha gaajaysani. Waxaad intaa arkaysaa wiil ama gabar dhalinyaro ah oo ka laadlaada nin qabqable ah oo ku tirtirsiinaya; "war anigu ninkaan buunbuuniyo waa buun buunsan yahay, kaan ka daba qaatana balaayaa godkiisa ugu soo gashay, sow ma arag waxaan hebel ka qoray, iwm".

Musiibada ugu daran ee bahda warbaahintu ay ku aqdaamanayeen waxay ahayd in ay ku mashquuleen faafinta wararka iyo dhacdooyinka fool xumada iyo halaaga ku saabsan iyaga oon marnaba laga maqlayn kelmad wanaag iyo sama ka talis ah. Taasina waxay dhalisay in dadweynihii u gartaan in macanaha dhabta ah ee war-baahin iyo saxaafadu yahay in la sheego war xun iyo dhibaato dhacday sida dagaallo, abaaro, iyo musibooyin isugu jira dabiici iyo dad-samee (*natural and manmade disasters*). Hase ahaatee hadaad ka hadasho sama ka talisnimo, wanaag tilmaamid, iyo wacyigelin dad weyne cidina war baahin kaama sheegayso balse hadii lagaa sheego xataa cidi kuma dhegaysanayso, hadii lagu dhagaystana warkaasu wax xiiso iyo raad toona ah ma yeelanayo.

Sidaa awgeed waxay si lama filaan ah wariyeyaashii ula saftaan colkii dagaal-oogayaasha inkastoo aysan ku ballamin hadana dantiibaa isku wado qaadsiisay. Waxay iyaga oon is ogeyn wariyeyaashii dagaal cadaan ah kala soo hor jeesteen aqoonyahanadii ayna u jebiyeen cadawoodii ay keeb la yuurarka isku ahaayeen. Hase ahaatee kooxda aqonyahanada ihi markay arkeen wiilashaan jidbaysan ee wada xayraanka ah ayna muuqato sababtii ka dhigtay xayraanka waxay bilaabeen in ay ka gaabsadaan. Qaarkii aan ka maarmi kairn warbaahintoodana waxay go'aansadeen oo ku dhaqaaqeen in ay iyagu naftooda isugu wataan siyaasiyiin iyo suxufiyaal. mid waliba waxa uu ilaabay in uu isagu war isaga tebiyo xarun warbaahin oo uu horay ula soo heshiiyey.

Aqoonyahanada qurbaawiyiinta ihi iyaga oo ku salaysan ama ka duulaya aqoontii iyo ilbaxnimadii ay is dheeraayene ee ay dalalkay ka yimaadeen kala yimaadeen ayuu midiba heer ka cayaarayey siyaasada. Waxaa la arkayey qaar qurbaawiyiin ah oo dhan walba kaga liita qabqablayaalka dagaalka, iyada oo badanaaba ay kuwaasi ahaayeen kuwo ka yimid wadamo shisheeye oo ay ku ahaayeen hawlgab ama cayr. Laakiin dhanka kale qaar kale ayaa ka aqoon badnaayeen, ka siyaasisanaayeen, ka garaad sareeyeen, ka miyir badnaayeen, ka wacyigalsanaayeen kana fiicnaayeen dhan walba siyaasiyiinta aduunka ugu caansan ama loogu amaani og yahay.

# CUTUBKA AFRAAD

## 4. 0. MIDNIMADEENII MUGDI GASHOO MAGACEEN BA'YEEY

### 4.1. DIYAAR GAROW LA'AAN

Gebigaba shirku markuu bilowday waxa lagu bilaabay ilsa tabtii kuwii hore lagu bilaabi jiray oo ahayd mid aan inaba haba yaraatee waafaqsanayn shir qabashada caalamka aan ku noolnahay. Iska daa nidaamka dunida cusube ma waafaqsanayn nidaamkii shirarkii reer baadiyaha ee la isugu imaan jiray marka dhib dhaco oo dhabbaqo meel beesho.

Waxaa lagama maarmaan ah marka shir la qabanayo in ka hor la soo diyaariyo qodobada laga hadli doono, qaabka shirku ku soconayo, cida hogaaminaysa, inta kharash ku baxaysa, cida kharash garaynaysa, cida wixii ka soo baxa hir gelinaysa, daraasad guud oo lagu sameeyo waxa la isku haysto, daraasad guud oo lagu sameeyo waxa lagu xallin karo mushkilad kasta oo meesha taalla oo horay loo ogyahay iyada oo la sii saadaalinayo waxa caqabado ka hor imaan kara, iyo in la waafajiyo qawaaniinta caalamiga ah ee maslaxa samaynta (*concensus and compromise tactics*).

Nasiib darro taasi weligeed ma dhicin inta shir dib u heshiisiin loo qabtay Soomaaliya. Ma jirin shir keliya oo lagu soo bandhigay ama horay looga soo fikiray waxa xal noqon kara, iskaba daaye mid ay diyaarsanaayeen qodobada (*agenda*) looga wada hadlayaa. Waxaa taas oo dhan ka sii daran in aysan marnaba dhicin in aqoonyahanada iyo khuburada dalka si dhab ah looga qayb geliyo qorshaha dalka. Waxay dhammaan shirarku ku salaysnaayeen in kuwa dadka laayey dalkana burburiyey lagu heshiisiiyo sidii ay u qaybsan lahaayeen dadka ay qasheen hilbahooda. Waxayse Soomaali oo dhami farxi lahaayeen una wada sacaba tumi lahaayeen dib dambana aysna weligood u eedayn lahayn marka ay kuwaasi ku heshiiyaan qaybsiga hilbahooda. Masalka xaalka

Soomalaida maanta waxaa lagu qeexi karaa Lax intay dhawr nin gawraceen markay birtii dhexda ku marsiinayaan ku murmeen siday xubnaheeda u kala qadaan lahaayeen ka dibna feer iskula jeesteen iyadoo aysan weli laxdii birta ku dhamayn, xubnaheediina dhab u kala goyn.

Qodobkaas diyaarinta iyo qorsheynta shirka oo kas cad looga tagay waxaa mar walba kaalmaynayey garasha la'aanta kuwa shirka loo qabanayo oo aan weligoodba dareemin cilladaas say maba oga inay jirtee. Laakiin taasi dhib weyn ma sii lahaateen hadaysan kaalmaysan cilladaha kale ee iyagana ula kaca loo sii raacshay.

## 4.2. U QUURID LA'AAN KAADIR HAWLAHA HESHIISIINTA HANAN KARA

Waxaa ceeb iyo foolxumo weyn ahaa yasmada ay dawladaha shirkii Kenya loo xilsaaray muujiyeen markay usoo dirsadeen maamulka shirka shakhsiyaad aan ku qaan gaarin shaqada ay qabanayaan. Saddexda dawladood ee safka hore; Ethiopia, Djibouti iyo Kenya waxay usoo xilsaareen hawlaha shirkaan dawladda dhan oo xaalkeedu aadka u culus yahay min hal wiil oo la dareemi karo in lagu soo xulay qaab yasmo shaqada loo hayo ah. Nimankaas la soo xulay oo lagu magacaabayey inay yihiin ergayo khaas ah ama safiiro Soomaaliyeed waxaysan ku mudnayn xilkaas sababo soo coda:

1. Saddexda wiil mid walba waxa uu ahaa da'da 30 jir, inkastoo ay Soomaalidii meesha isugu timid diideen in Axdiga lagu qoro in uu qof 30 jir ihi jaga sare ee dalka u tartami karo oo ay ku adkaysteen waxaa jagada sare ee dalka u tartami kara qof 40 ka weyn, da'diisa dhamaadaan aan la cayimin oo ay banaan tahay in mid 140 jir ihi isu soo taago xilka,

2. Saddexda wiil waxaa jaamacad heerka hoose (*under graduate*) ah ka baxay midka ay dawlada Kenya soo dirsatay oo keliya. Labada kale lama hubo heerkooda tacliineed,
3. Saddexda wiil midkoodna ma leh wax khibrad ah oo la taaban karo, ha ahaato shaqadan loo dirsaday ama mid kale toona,
4. Saddexda wiil laba ka mid ah waa niman ay balwad xuni dilatay oo aan ceebahooda asturan karin. Midka ay Kenya soo dirsatay oo isagu yara dhaamay qudhiisu waa nin dabaysha dhankay usocoto u raaca oo tiisa uun ilaashada,
5. Saddexda wiil laba ka mid ah waxay iska ilaalinayeen in lagu tuhmo u eexasho Soomaaliyeed oo ku qotonta gobolka uu ka yimid oo gacanta ugu jira dawlada soo dirsatay. Midka ay Djibouti soo dirsatay oon isagu taa ka welwelayn qudhiisu waxa uu ka welwelayey in laga xoog badiyo oo uu noqdo nin ku daalay eedina ku raacday wax uusan waxba ka qaban karin. Waxa keliya ee uu ilaalinayeyna waxay ahayd fikradii alkiisa oo kukoobnayd shirku ha ahaado sii dhamaystirka mirihii ka soo baxay Carta, taas oomacnaheedu yahay ha la sii xoojiyo dawladdii ku meel gaarka ahayd si ay Djibouti ugu magac yeelato dib u yagleelidda dawlad Soomaaliyeed.
6. Saddexda wiil midkoodna ma yaqaan Soomaalida illeen waayaha iyo garaadkuba ma gaarsiin karine.

## 4.3. BOOYAASOOYIN IYO KARIYEYAAL AAMAR KU TAAGLAYNAYA

**W**axaasi wax weyn ma ahan ee waxaa ceeb iyo fadeexo noqotay qaabkii loola dhaqmay eragdii Soomaalida ee magaca madax ahaanta lagu soo martiqaaday. Waxa uu nin walba ugu dulqaadanayey bahdalaynta iyo harawsiga dhoocilaha cunta kariyeyaalka ah iyo kuwa dhulka xaaqa si uu mar uun ku gaaro

in uu isagu madax noqdo. Waxaa iska caadi ahayd in ay aroortii nimankii madaxda Soomaliyeed sheegtay loona arkayey ku soo jarmaadayeen miiska kushiinka cuntada lagu kariyo oo saf dheer isku cirbinaya kuna murmaya anaa kaa soo horeeyey iyo anaa kaa soo horeeyey. Nasiib darro nimanka noocan ihi badankoodu xalay oo dhan ma seexan oo way qayilayeen, kaba sii darane mid mid unbaa ka soo tukaday salaadii subaxa. Waxaa aad loo dareemayey in ay qaar badan ka baqayeen in haddii lagu arko salaad tukasho ay dawlada Ethiopia tallaabo culus oo la xiriirta xil doonimadooda ka qaado.

Murugadaas waxaa dhab loo sii dareemayey marka kushiinka ay ku silciyaan gabdhihii kariyeyaasha ahaa ee booyaaso ahaanta loogu tala galay ee Kenyan ka ahaa. Waxaad arkaysaa gabdho dufan leh oo intay nin walba is hor taagaan ku qaylinaya oo ku dhahaya; waryaa I tus warqadahaaga cadaynaya inaad meesha wax ka cuni kartid, waryaa xaga u leexo, waryaa rootiga xabad dheeri ah baad ka qaadatay ee dhig, waryaa ukuntii way kaa go'day ee cun rootiga qalalan, iwm. Tusaale ahaan waxaa jiray nin isagu haystay koobka harawsiga iyo laaluush qaadashada oo kibirkana sanka ka hadlayey. Ninkani ma ahayn mid xukunka dawlada ka cabsada ama ka xishooda oo waxa uu isku hallaynayey matalida uu matalayey qabiil xoog weyn oo asal ahaan dhulka Nairobi iyo nawaaxigeeda iska lahaa sidaa darteed ay dawladu ka baqdo oo ka dhawrto wax kaste oo ay dhibsanayaan. Qiyaastii ninkani waxa uu ka mid yahay dadka tirada yar ee matala qabiilkaas maadaama ay adag tahay in qabiilkaas laga helo qof aqoon iyo siyaasad ku hubaysan.

Haddaba ninkaasi waxa uu si garab ah ku keensaday jikadii ama miiskii cuntada gabar walaashiis ah si ay laaluushka qulqulaya dhinaceeda uga soo aruuriso. Gabadhaas qaab dhismeedkeeda awgii oo ay aad u adag tahay in aad aragtida koowaad garato nooca dad ee ay tahay ayey badanaaba Ergada Soomaalidu ku qaldamayeen. Ma kala garan kartid in ay nin tahay iyo in ay naag tahay say waa murgaxan tahaye. Ma garan kartid in ay weyn tahay iyo in ay yar tahay say waa isku cuban tahaye. Ma garan kartid in ay faraxsan tahay oo qoslayso iyo in kale saa wajigeedu waa ilko cad oo iska furan iyo goobaabo

mugdi ah. Haddaba gabadhaasi iyada oo ay ka muuqato kalsooni buuxda ayey eragada u fariisan jirtay albaabka makhaayada deedna ka guran jirtay laaluush iyada oo kii warqad u fasaxaysa cunat haystana uga qaadaysa in ay cuntada u wanaajinayso kii kalena hade qiimihii cuntada.

Maalintaan naxdin gooyey waxay ahayd markaan aroor hore arkay nin mudo ku dhaw 20 sano Wasiirka ugu sareeya ka ahaa, derajada Raisulwasaare ku xigeena ka gaaray dawladii Kacaanka ahayd ee 1969-1991 kii, tan hada loo fadhiyana ugu sharaxan Madaxweyne oo ku soo kallahay kushiinkii Hotelka uu degenaa si aan looga soo hor marin oo hadana muran kulul ugu jira in aan xabadiisa bursaliidka ah la dhaafin. Aniga oo ciilkiisa la hadli la' ayaan ka codsaday saaxiibkey ooy wada hadli jireen inuu ka qanciyo bal ugu yaraan inuu si xasilooni ah wax ku dalbado. Saaxiibkey ayaa ku qanciyey war ha ceebayn walaalkaagii wanaagsanaa ee madaxa umadda Soomaaliyeed ahaa, Allaha u naxariistee ee naga fariiso.

Waxaa in ahlakan lagu xuso mudan qiso la adkeeyey dhabnimadeeda oo ahayd sidatan; waxaa safar dheer oo gaajo iyo harraad badan isla socday laba nin oo saaxiibo ah. Waxay ku soo baxeen guri ay leedahay sodohdii midkood. Markay aragtay ayey iyada oo ka naxday rafadaka iyo arag xumada nimanka ka muuqata u fidisay gogol martiqaad oo aysan wax ka hagran si ay u waraysato makay dhargaan ka dib. Baaquli soor ah ayey ugu soo iidaantay sugab sixin ah oo ah ka soo shubtay tabadeedii ay ku kaydinaysay, illeen waa ayeeyee, mudo aan ka yarayn 10 sano. Goor ay xeeradii bar ka cuneen ayey ka iidaan beeshay, markaa ayuu kii aysan sodohda u ahayn ku adkaystay in ay iidaan ku darsadaan ama ugu yaraan duqdii u yeeraan si ay ugu idaanto. Laakiin kii sodahda loo ahaa aad buu uga xumaaday oo ka diiday isaga oo ku adkaysanaya aan iska dayno cuntsada hadaanaan cuni karin oo ku qancino duqda in aan ka dharagnay intaana ana soo hambaynay. Hase ahaatee xariifkii kale dheg jalaq uma siin ee intuu daf yiri ayuu tabadii subaga soo qabsaday oo ku foorariyey. Halkaana waxaa afka goostay subagii ka buuxay ee tobanka sano lagu aruurinayey gogoshii oo dhana waxay noqotay balli biyo ah oo fadhigoodii qariyey. Ninkii

sodohada ka xishoonayey markuu arkay waxa dhacay ayuu naxdintii la go'ay oo naftiiba ka haaday. Goor dambe ayey duqdii usoo gashay kii ma xishoodaha ahaa oo intuu ka dhargay soortii weli iska sii dhex fadhiya gal xareed ah oo subag ah (ogow subaguna waa hantida ugu qaalisan baadiyaha). Iyada oo naxsan bay weydiisay waxa dhacay. Markaa ayuu inta qoslay ugu jawaabay; "EEDO CEEB NINKII YAQAANAY WAA DHINTAY NINKII KALENA WAA DHEX FADHIYAA".

Booyaasooyinka cuntada waxa ka sii gumaysi badnaa booyaasooyinka guryaha xaaqa. Guri xaaqyadu waxay amar u haysteen in ay markay doonaan iska soo furtaan qolka oo ay furihiisa gooni u haystaan ayna isaga dhex sheekaystaan ama ku nastaan. Waxaa intaa sii dheer qaylada iyo canaanta ay ku hayeen ninka madax ahaanta loo soo marti qaaday ee xalay oo dhan qayilayey ama cabsanaa ee huradada la qaadiraysan. Qaarkood waxay ninka qolka jiifa isugu bandhigayeen ama toos u weydiinayeen in uu la tunto.

Waxaas oo dhan ii daa mushkilad ma lahane, ka waran haddii ugu yaraan bishiiba mar qof kaste boorsadiisa banaanka loogu soo tuurayey oo laga xiranayey qolkii Hotelka. Ka dibna marka orod iyo qaylo ka dhamaato loo fasaxayey in uu dib ugu noqdo. Kaaga darane marka la arko qofkii oo dibad wareeg ku jira waxaa loo qabsanayaa maxaa ku wareejiyey? Amaanka ayaad khatar ku tahay ee xarood, iwm. Haddii uu dhibanahani iska aado magaalada oo jiif u doontana ficilku wuxuuba gaarayaa nidaamkii caadiga ahaa ee "l*eta kibaandha/kitaanbulushd*" oo macnaheedu yahay keen warqad aqoonsi ama dhalasho. Markaasna hade waa magac ba'ay oo xaaladii waxay gaartay baraka-laay.

Jiif dhibkiisa bal xaga ii dhige, cuntadii ayaaba intaa ka sii darnayd. Sidaa si la mid ah bishiiba mar ayaad maqlaysaa maanta cuntadii waa la goostay oo xeradii qado ma leh. Intaas oo dhan intay dhacayso lacagtu si caadi ah ayey ugu socotaa hoteladii iyo makhaayadihii kunturaada qaatay, xataa iyaga oo aan cidna marti gelin. Sidaa ayey ahayd soo dhaweynta martidii loo yeeray marka laga eego xaga hoynta iyo cuntada (*accommodation*), laakiin bal aan ka eegno xaga fiisooyinka iyo dib u soo dhoofinta.

Inkasta oo markii hore la siinayey fiisaha ama dalku galka, hadana markii dambe xaaladu waxay gaarsiisneyd in qaar ergadii la keenay ka mid ihi ay dalku gal ku raadiyaan qaab sharci darro iyo laaluush ah iyagoo adeegsanaya mukhallas. Xagii dib usoo dhoofinta dadkii meesha way ku bad xirmeen oo tan iyo markii la kala tagay qaar ba ago'don ku ah halkii oo xeradii looga soo guuray. Boqolaal maalmood ayey ergo laga tagay oo raxan raxan u banaanbaxayaa isa soo tubeen xafiisyada dawladii la doortay, UNDP, Wasaaraddii Arimaha Dibadda ee Kenya, iyo meelo kale oo ay is lahaayeen waxbaa la idin kaga qabanayaa.

Ugu dambasytiina waa tay dhacday in qaar badan xabsiyo loogu taxaabo deyn loogu haysto jiif iyo cunto awgood. Waxaa dhakafaaris ahayd markii ay dawladii Kenya eragadii Soomaalida ahayd oo u xaraysan iyo weliba dawladii ay u dhistay oo loogu fadhiyey aqoonsi ay siiso ka sokow ay hawlgeliso iyadu hadalkii ay ku dhawaaqday ee ahaa in aysan baasaboorka Soomaaliyeed aqoonsanayn. Halkaana ay talo jiq ku noqotay. Magac ba'ay !!!. dhab ahaantii waxaas oo dhan waxaa loola dan lahaa si dadkaas loo maaweeliyo oo loogu seeta dheereeyo ma fikirenimo lagu kor danaysanayo.

## 4. 4. WAARDIYAASHII MADAXDA ISKA DHIGAYEY IYO HALGANKII AQOONYANAHADA

Waardiyaha albaabka xerada waxay haysteen derajo sare oo dabeecad ahaan ku soo if baxday. Qofka ergada ah iyo kan booqdaha ah labaduba isku si ayey u dareemayeen baqdin canaaneed kolka ay soo gelayaan. Way joojinayaan ergayga iyaga oo si fiican u yaqaana markaa ayey weydiinayaan su'aalo ay ujeedadoodu isugusoo biyo shubanayso baad iyo laaluush isii hadii kale ma gelaysid xerada Doofaarey; I tus warqadaadii aqoonsiga, I tus baasaboorkaagii si aan isu waafajiyo sawirkaaga iyo magacaaga, I tus warqadii aad fasax ahana uga baxday albaabka, maxaad doontay shirkii lagugu martiqaaday xeradan unbuu ka socdaaye? Iwm, ugu dambaystana sheekadu waa war ii iibi soodha (cabitaan).

Waxaadan hadal iyo dood isku deyeyn ee jeebka gacanta ku boobaysaa kolka uu qof saaxibkaa ihi kula socdo ood dano awgood ugu yeeratay.

Xaga laaluushka iyo baadda waxba ha iga weydiin meeshu waa Kenya, dadka loo adeegayaana waa Soomaali aan aqoon ku filan lahayn ee dhaqan hore iyo baqdin ku shaqaynaysa. Warkii oo dhan qof kasta oo eragda ka mid ihi waxa uu ku tala galayey oo qorshihiisa kharash garayn ku darsanayey laaluushka shaqaalaha adeegaha ah ee xerada. Waa in uu gacanta ka hadlaa marka uu doonayo warqada soo gelitaanka albaabka, marka uu doonayo jiif, marka uu doonayo miiska cuntada, marka uu doonayo in fikirkiisa la geeyo golaha shirka, marka uu doonayo in mid dhib wada laga qabto meesha ama uu doonayo in uu cirbiyo ama dhibaateeyo midka ay siyaasad ahaan isaga soo hor jeedaan. Waxaa iska caadi ahayd in dad aan ka mid ahayn eragada iska degan yihiin qolalkii la diyaariyey iyaga oo laaluush ku helay isla markaana ay qaar ergada ka mid ihi la'yihiin qol ay degaan.

Hadaan u soo noqono isku cirbintii siyaasada, loolankii siyaasadeed waxa uu isugu soo biyo shubtay; Laaluush siinta, dhillo u keenida, qaad u soo gadida, iyo fagaara ka amaanida wiilasha ay Ethiopia soo dirsatay ee kala ah Yemani iyo Cabdicasiis. Waxaa indhaha la saaray nin iyo naag lugaha gondahooda ka dhunkanaya mid ka mid ah wiilashaas si ay uga dhigaan Xildhibaan. Waxaa taas ka sii naxdin weyn, salaad tukashada la isaga dhaafayey cabsi awgeed, kii tukadana la soo dacweynayey iyada oo la raadinayo raalli ahaanshaha Xabashida.

Aaway Aqoonyahan iyo Wax garad?. Aqoon yahan iyo wax garad waa la cunay oo waxba way tari waayeen. Waxan intaan qorayo la ilmaynayaa xusuusta sidii ba'nayd ee loola dagaalamayey wax garadka iyo sidii aan looga taxadarayn in dawlad Soomaaliyeed oo macno leh la dhiso. Waxaan maalmihii ugu dambeeyey ee la xulanayey dadkii xildhibaano noqon lahaa kala hadalnay safiirkii Kenya u qaabilsanaa Soomaaliya oo maamulka shirkana ka oday ahaa, ninkaas oo ahaa wiil dhallinyaro ah oo ugu dhawaa xaga waxgardnimada iyo Soomaali u nixida inta kale ee la shaqaynaysay waxa uu ku jawaabay "war Wallaahi haday

rabto waxan idin dhoodhoobaynaa albaabkaas xerada ha idinkaga burbuto oo yaadnaan kala bixin ee mar uun anaga na dhaafa". Hadalkaas markaad eegto waxaad dareemi kartaa dacdarada iyo yasmada nalaku hayey ka sokow inay Soomaalidii meesha isugu tagtayna ahaayeen wax xarig lama sitaan ah.

Waxaa is abaabulay koox aqoonyahano ah oo iyagu jeebadooda isku maalgeliya iskuna dhaarsaday in ay ka shaqeeyaan sidii uu shirku u mira dhali lahaa ayna uga badbaadin lahaayeen dalka cadawga dagaal oogayaasha ah. Laakiin waxay kuwaasi la kulmeen ciqaab dhan walba leh. Waxaa loo diiday goob ay ku shiraan, laga mamnuucay in ay miiska cunta tagaan oo wax ka cunaan, in ay xerada albaabka ka soo galaan iyo in loo cusboonaysiiyo fiisooyinkii dalka ay ku joogeen.

Laba dambe waxaa lagu sameeyey markay arintoodu joogsan weyday oo marka cunta loo diiday ay ka gadan jireen makhaayada caruurta ardayda Machadku ay wax ka cunayeen. Ka dib markii maamulka makhaayada Machadkaas lagu dhiiri geliyey in uusan ka gadin cunto una ogolaan inay albaabka makhaayada soo galaan shakhsiyadakaasi, ayey hadana bilaabeen in ay aroortii tuulada u dhaw xerada ka soo gataan oo derbiyada ku cunaan. Ka dib markii jiifkii loo diidayna waxay u kala dheelman jireen caasimada iyo tuulada u dhaw xerada. Hase ahaatee markuu dagaalku gaaray albaabka xerada yeynan soo gelin, meelaha ay ka cunteeyaan halaga xiro, hotelada ay seexdaan halaga eryo, iyo dal ku joogii yaan loo cusboonaysiin ayey tabar beeleen oo qaarkood iska cararay. Hase ahaatee weli qaar baa mintid ahaa ilaa ugu dambaystii xerada looga kala guuray. Kooxdaasi waxay la magac baxeen; "Geedka Nabadda".

Warkaba waxaad ku daysaa in ay meesha ka kacday canaasiir dagaal qayaxan oo toogasho ah wada. Dhawr aqoonyahan oo ay ugu horaysay Istarliin Caruush oo la dilay 20 kii Octobar 2002, uguna dambeeyey Mr. Rashiid Axmed oo la dilay 6 dii November 2003 ayaa lagu khaarijiyey oo naftoodii ku waayey si dil qarsoodi ah "*assasination*". Sidoo kale dhawr aqoon yahan oo ay ka mid yihiin Ina Saciid Samatar iyo Cali Khaliif Galaydh ayaa si hanjabaad iyo horor ah looga

cayriyey dalkii. Sidoo kale dhawr aqoonyahan oo ay ka mid yihiin Prof. Gaandi iyo Hon. Caasha Axmed Cabdalla ayaa loo geystay jir dil iyo dhaawacyo ku raaga oo aysan ilaa hadda ka soo waaqsan, cid is weydiisay ama wax ka qabatayna aysan jirin. Sidoo kale dhawr aqoonyahan oo ay ka mid ahaayeen Cabdi yare/gaab oo wafdiga beesha Ciise ka mid ahaa iyo Mr. Maxamed Adeec oo wariye aad u firfircoon ahaa ayaa xabsi la dhigay oo mudo ku raagay iyada oo loogu hanjabay haday horusocdnimada joojin waayaan in edeb loo yeelayo. Shakhsiyaadkaas waxan u soo qaadanay tusaale laakiin mujaahidiintu way badan yihiin.

Sidaa darteed rag iyo dumar jihaaday waa jireen laakiin waa looga adkaaday dagaalkii waxaana jabiyey dagaal oogayaalka ilma adeeradood ah, maadaama ay dheeraayeen dhaqaale; taageero gudaha iyo dibadaba oo isugu jirta maal, muruq, niyad, iyo guubaabo intaba.

Jugtaas iyo dilkaas waxaa garab socday iska fogeynta iyo dhego ka furaysigii qoraalada ay soo gudbiyaan aqoonyahanadu, siiba kuwa ka socday bulshada rayidka ah. Waxaa bilaabatay in ay aqoonyahanadu laaluush ku dhiibaan si loo soo ban dhigo fikradahooda, ka dib markay iska caadi noqotay in qashinka lagu daro warqadaha nuxur aqooneed ama nabadoonimo laga dhadhamiyo. In la tuuro qoraalka iyo warka ay soo gudbiyaan aqoonyahanadu keliya ma ahayn ee waxa jirtay in qofka fikrado dhaxal gal ah keena la daba gelayey oo ugu dambaystana lagu calaamadaynayey in uu dambiile yahay sida in lagu eedeeyo waa Al-Qaacida.

Dadaalkaas waxaa lala kaashanayey go'aan rasmi ahaan la isugu raacay oo ahaa in dawlada soo socota laga dhawro qof waxun xiriir ah la yeelan kara ururka afka laga sheego ee Al-Qaacida. Taas ayaa keenaysay in qofka salaada lagu barto si hal haleel ah looga dhigayey tuke cambaar leh. Xilligii la galay wax qaybsigana waxaa iska caadi noqotay in marka uu qof doonayo in uu ina adeerkiis ka riixdo kursigii xildhibaanimada oo ay ku tartamayeen uu miciin bido

dacwad oo ina adeerkiis ku eedaynayo inuu ka mid yahay ururka Al-Qacido isaga oo dacawadaas u gudbiya dawlada uu ka madaxda ahaa Mr. Melas Sanawi.

## 4.4. DURBA NIDAAMKII QAYBI OO XUKUN

Tan iyo bilowgii shirka waxaa socday barnaamijka siyaaso ahaan loo yaqaan "qaybi oo xukun". Waxaa la go'aamiyey in si saacada gadaal loogu celiyo la diyaariyo lana qoro Axdi Qarameed cusub oo hor leh (*drafting new Charter*). Waa yaabe wadanka subax walba ma waxaa loo diyaarinayaa Axdi cusub? Ma dawlad cusub oo maanta calankii xornimada heshay baa?. Fadhi kasta oo la isugu yimaado waxaa halhays noqotay hala qoro Axdi Qarameed. Haba la qoro ee maxaa lagu qorayaa?. Waxaa qodobada ugu muhiimsan ee Axdiga laga dhigay:

1. Wadanka waxaa looga hadlaa afar luuqadood oo kala ah:

A. May tiri,
B. Maxaad tiri,
C. Af Talyaani, iyo
D. Af Ingiriis.

Waxaa kale oo la go'aamiyey dalkuna waa dal Afrikaan ah oo aan wax xiriir ah la lahayn Jaamacada Carabta. Tanuna waa tu noo dambaysay ee dagaalkii ujeedo la'aanyta ahaa ina dhaxalsiiyey. Waxaa mahad weyn halkaan ku mutaystay Madaxweynihii xilligiisu markaa dhamaaday ee CabdiQasim Salaad Xasan oo isaga iyo asxaabtiisii la magac baxday "Samata Bixinta" ay si geesinimo ah ugu dagaallameen in luuqadii labaad ee dalka oo ah Af Carabi aan la inkirin ee loo ogolaado siday ahayd. Inkasta oo ay ku guul daraysteen la dagaalanka kala qaybinta Af Soomaaliga ee May iyo Maxaad tiri, hadana waxaa guul aan la illobi karin ah soo celinta Af Carabiga. Ugu dambaystiina waxaa lagu soo daray afartaas luuqadood Af Carabi oo shaneeya. Si halgankaas macno darada ah loo hirgeliyo waxaa la abaabulay koox aqoonyahano Digil iyo Mirifle ah oo soo

diyaariyo qoraalka far cusub ee lahjada Maay si looga dhigo luuqad garab socota afka Soomaaliga. Nasiib darro aqoonyahandaasi ma oran war hawlo ka muhiimsan baa inoo yaalle naga daaya waxaas ha nagu mashquulinee ee waxay door bideen barnaamijkaas. Dhanka kale siyaasiyiinta kale waxay ka gaaabsanayeen in ay taas ka hadlaan iyaga oo ka cabsi qabay in ay waayaan taageerada reer Digil iyo Mirif. Nasiib daro kuma aysan xisaabtamin in ay jiraan dad cidahaas ah oo hadana naftooda siisanaya midnimada Soomaaliyeed, iyaga oo dareemaya in gobol waliba uu ku doodi karo anaguna luuqad gooni ah ayaan leenahay ilaa ay arintu ka gaarto in Raxanweyn qudheedu sii kala saarato lahjadeheeda, tiiyoo maanta ay habooneyd in lagu taliyo ka takhalusida luuqada Soomaaliga oo dhan maadaama ay dunida naga reebayso ku dhegenaanta luuqad aan caalami ahayn oo caruurteenu ku daahayaan barashada luuqado ajnabi ah si ay u bartaan cilmiga ku qoran.

2. Baabi'inta taariikhdii iyo Qaanuunkii Dalka; waxaa la soo jeediyey lana waafaqay, iyada oo ama dhib laga dheeraanayo ama aqoon yaraan siyaasadeed jirto, in waddanka oo dhan hada kow laga soo bilaabo. Waxaa waxaan jirin laga soo qaaday dhamaan dawladihii dalka soo maray iyo wax qabadkoodii, markaa ayaa la tixraacayey Axdigii iyo dastuurkii 1960 kii markii xornimada la qaatay. Sida la wada ogsoon yahay waxaa wadan loo sameeyaa Axdi- weliba Axdi ku meel gara ah iyo nidaam maamul marka uu wadankaasi xornimada qaadanayo.

Laakiin Soomaaliya waxaa loo sameeyey ilaa labaatan Axdi qarameed oo isu dhaw dhaw, inkasta oo uusan midkoodna wax tayo ah lahayn haday ahaan lahayd xag cilmi ama xag xaq iyo cadaalad toona. Xataa mar keliya la iksuma soo hadal qaadin in Axdigii iyo dastuurkii horay ugu yiilay wadanka dib- uhabayn lagu sameeyo. Halkaa ayaa wixii la rabo Axdi Qarameed ku meel gaar ah oo cusub lagu qortay,

3. Wadanka waxaa loo qaybinayaa dhawr qaybood oo aan isku sharci, isku dhaqan, isku dhaqaale, isku xeer, isku maamul iyo isku deegaan iyo isku dan toona ahayn. Nidaamka dunida qaarkeed ka jira ee "*Federal*" ayaa hoosta

laga xariiqay in la qaato. Nidaamkaan qaadashadiisa waxaa sahlay dhawr ciladood oo taagnaa sida:

A. Beelaha Digil iyo Mirif oo laga dhaadhiciyey in hadii Federaal la qaato looga kacayo dhul hada laga haysto oo ay reer Mudug xoog uga haystaan, isla markaana ay iyagu noqonayaan kuwa ugu taajirsan dalka, marka laga eego xiriirkooda shisheeye iyo kheyraadka dabiiciga ah ee dhulkooda.
B. Beelaha Puntland oo iyagu iska dhaadhiciyey in ay umada inteeda kale ka wax tar badan yihiin, ka dhaqaale badan yihiin, ka dawladnimo aqoon ogyihiin, ka xiriir shisheeye badan yihiin, hada oo la joogana ay haystaan wax dawladnimo iyo maamul lagu tilmaami karo. Intaa keliya ma ahane iska dhaadhiciyey in qorshe ahaan loogu wareejin doono maamulka Jubbada Hoose. Sidaa darteed u arkay midatan fursad ay inta kale qabiilada kale kaga hormari karaan.
C. Siyaasiyiinta ka soo jeeda beelaha lagu eedaynayo xoog ku haysashada dhulka Koonfureed oo ka dhawrsanayey in ay ka hor yimaadaan fikrada Federaalka si aan loogu malayn in ay beelahooda ku taageersan yihiin qabsashada dhulka dadow oo aysan halkaa ku waayin codka beelo badan.
D. Siyaasad baradka (*young politicians*) Soomaaliyeed ee meesha ku tababaranayey oo dhegta ka maqlay waxaa jira nidaam la yiraahdo "*Federal*" oo ay umadaha is qaban li'I ku midoobi karaan, deedna is tusinayey in ay walax bartoodo siyaasad ah ooy yaqaanaan soo bandhigayaan.

## 4.6. SOOMAALIYA IYO FEDERAL – DAWLAD WADAAG: DULMAR GAABAN

Waxaase aad u haboonaan lahayd bal in uu akhristuhu ogaadaa macnaha *Federal* iyo ujeedada laga leeyahay. Inkasta oo uusan mawduucu kiisa ahayn hadana bal aan in yar ka bidhaamino qeexitaanka Fedaral iyo ujeedadii naloogu dirqiyey.

Macanaha Federal waa Qaybsanaan iyo Wadaag. Taas macnaheeduna waa in kor la iskala jiro hoosna loo kala qoqobnaado (geel jire geela waa wada jiraa waana kala jirtaa). Federal waxaa isticmaala dhawr wadan oo dunida ka mid ah oo ay u geysay duruuf qallafsan oo ay waayeen qaab kale oo ay uga baxaan. Beryahan dambana nidaamka federalka dunida badankeedu way ka dayriyeen oo kuwii horay federal u ahaa ayaa ka sii baxaya, qaarkoodna isaga oo magac ahaan u jira ayuusan dhab ahaan u shaqaynin oo nuxur beelay.

Tusaale ahaan wadamada ka takhalusay iyo kuwa uusan nuxur la taaban karo ka lahayn waxaa ka mid ah Jarmalka iyo Maraykanka – USA. Tusaale ahaan kuwa ay duruufaha culusi ku kalifeena waxaa ka mid ah Tanzania oo ka dib markii ay laba qolo oon is lahayni inta isku qabsadeen dal ballaarsi ugu dambaystii xal loo arkay inay inta dawlad mid ah noqdaan hadana wax kasta u kala baxsanaadaan. Sidaa darteed xataa magaca ay haystaan ee Tanzania uu ka kooban yahay labadoodii magac ee ay kala wateen oo ahaa; Tanganika iyo Zanizibar oo mid walba saddexda kelmad ee ugu horaysa laga soo qaatay.

Wadamadaasi waa kuwa ay ku kaliftay federalnimada ka dib markii ay ku heshiin waayeen ku midowgii dawlad hal xafiis laga xukumo oo ay danahoodii isla qabsan waayeen sida; iyada oo ay dhex mareen colaado lagu wiiqmay oo ku salaysan isku dhac isir raac, isku dhac midab, isku dhac diineed, isku dhac dhaqan, isku dhac dhaqaale, isku dhac xuduudeed, iwm.

Haddaba aan is weydiinee maxaa dhici kara marka Soomaaliya laga hirgelinayo nidaamka federal. Waxa ugu horeeya ee shaki la'aan dhacaya waa muran iyo dagaal gacan ka hadal ah oo ku salaysan xuduudaha iyo halkii laga kala xariiqi lahaa. Bal aan ka fikirnee yaa sheegi kara laba qabiil oo maanta xuduud ukala cad leh?. Dhanka kale yaa sheegi kara hal qabiil oo hal gobol oo lagu ogyahay dega dhul kalena aan sheeganayn?. Xataa haddii aan go'aamino ha la isticmaalo nooc federal oon dunida horay looga aqoon ee ah in qabiil walba iyaga oo ku kala firirsan daafaha dalka la yiraahdo sidiinaas baad gobol federal ah ku tihiin, xagee lagu xadidayaa qabiilka illeen isagiina waa wax sida basasha

usii kala dhilmayee? Xageese qabiilkaasi kheyraadkiisa wax soo saar ka dhiganayaa?.

Marka xigata waxan shaki ku jirin in uu imaanayo muran dhaqaale oo ka imaanaya in isha wax soo saar iyo xoogsadaha ka hawlgala. Marka xigta waxaa la sugayaa waa isu qaan sheegasho hantiyadii ma guuraanka ahaa ee ay cid waliba ku lahayd dhulka cida kale degan tahay. Mida kale, ku dhawaad qof kaste oo Soomaaliyeed reer hebelna aabihii baa ah, reer hebelna hooyaadiis baa ah, reer hebelna xaaskiisaa/keedaa ehe reerkee buu raacayaa?

Intaas oo dhan waxaad isaga soo gaabisaa marka ay dawlad deriska ihi berito heshiis la gasho gobol ka mid ah goboladii dalka ee la kala qoqobay ayna lama dhaafaan noqoto inay ugu yaraan jidkay sii marayeen ka dhigtaan gobol kale ama hawsha ay gobolkaas kula heshiiyeen tahay mid dhibaato ugeysanaysa gobol kale xagee lagu hurayaa isku dhac hor leh oo dhex mara beelaha Soomaaliyeed.

Isku soo duuduub ujeedadu waa qaybi oo xukun. Waxaa lagu fikirayaa nidaam la isticmaali jiray dagaalkii koowaad ee aduunka iyo xilliyadii uu gumaysiga adduunku cusbaa. Nasiib wanaag maanta waxaa la joogaa qarni huradadii laga wada toosay oo ay adag tahay inay fikradaasi shaqayso. Dhab ahaantii Soomaaliya maanta iyo beriba waxay u baahan tahay xukun hal xaafiis ah oo gacan bir ah ku wada qabta, isla markaana isku dhex qasa si ay uga guuraan kala qoqobka jifanimada ku salaysan.

# CUTUBKA SHANAAD

## 5. 0. LIX GUDDI FARSAMO OO LA QABTAY

### 5. 1. QEEXITAAN GUDIYADA

Si loo fududeeyo hawsha nidaamka meelmarinta shirka dib-u heshiisiinta Soomaaliyeed, waxaa la qaatay tabo iyo xirfado lagu kala saarayo shaqooyinka loo baahan yahay iyo dadka kala fulinaya, iyada oo koox waliba ay leedahay shaqo u gaar ah oo lagu og yahay. Waxaa la sameeyey guddi farsamo oo ka kooban lix guddi.

Nasiib daraduse waxay ahayd in aan mid keliya oo Gudiyadaas ka mid ah xataa xubnihiisa lagu soo xulin aqoon iyo khibrad ay u leeyihiin mawduuca loo dhiibay in ay ka soo talo bixiyaan. Xataa haday jireen qofaf Gudiyada ka mid ah oo walax bartoodoo aqoon ah lahaa waxaa laga leexinayey mawduuca ama layliga (*assignment*) loo dhiibayo oo waxaad arkaysaa aqoo yahan soo bartay cilmiga beeraha ama farsamada oo loo dhiibay sharci dejinta, iyo mid shacri ku soo takhasusay oo la leeyahay dhaqaalaha iyo kheyraadka dalka ka soo hadal.

Waxaa xusid mudan in nin Gudiyada ka mid ihi uu maalin laga doodayey Axdi Qarameedkii la soo bandhigay ee dalka uu isaga oo doodiisa ka dhiibanaya ku dhawaaqay: "horta waan garanay kheyraadka dhulka oo ka kooban inta ku jirta badda, dhulka guudkiisa, iyo hawada ee waa maxay waxa aad ku sheegaysaan dhulka hoostiisa iyo badda hoosteeda ma waalan tihiin? War naga tirtira waxaas yaan la idinla yaabine".

Markuu intaa dooduhu la qaylinyeyna waxaa u sacbiyey raxamo ergada ka mid ah oo u riyaaqday fikradiisa cajiibka ah!!!. Markay taasi dhacday ayaan soo xusuustay dhacdooyin qosol wada ah oo laga hayo Boqorkii Cabdallah Ala

Sucuud oo ay hada faraciisu xukumaan dalka Sacuudiga iyaga oo weliba magacii qoyskooda ku dhejiyey dalkii oo dhan. Boqorkaas oo runtii caqli wanaagsan ku badbaadiyey dalka Sacuudiga waxa ayaamihii ugu horeeyey laga dhaadhicn waayey qaabkii loo xariiqi lahaa xuduuda dalkiisa oo markii loo sheegay in la isticmaalayo cabbir kilo mitir iwm ah waxa uu ku dooday in uusan waxaas isagu fahmi karin ee u baahan yahay in xuduudiisa lagu cabiro awr dhaan ah iyada oo la leeyahay inta uu dhaanku u socdo jihadaas iyo inta uu usocdo jihadaas. Laakiin Boqorkaas oo dib ka ilbaxay ayaa bilowgii ilbaxnimadiisiba gartay waxa uu maanta garan waayey ergaygaas Soomaaliyeed ee u taagnaa in loo daayo xukunka dalka. Boqorkaasi waxa uu markii dambe qabiilkii ama magaaladii uu qabsanayaba kula heshiin jiray qodob ahaa; "waan idin xukumayaa waxanan idinkula heshiinayaa in aad idinku leedihiin wixii kheyrada ku jira dhulka, badda, iyo hawada intaba. Laakiin waxaad aniga ii daysaan wixii dhulka hoostiisa ku jira oo keliya. Markaa ayey ku xisaabtamayeen maxaa dhulka hoostiisa ku jira oon ka ahayn lafihii awoowayaasheen? War naga daaya haduu intaa ku qancayo dhibkiisa. Nasiib wanaag maanta waxa uu Boqorkii – ama farciisii ka masruufaa dhammaantood wixii aan loo jeedin ee ay kula heshiiyeen in uu keligii iska qaato, intii uu iyaga u daayeyna waxba lagama soo qaado.

Hadaan soo gaabino hadalka, Gudiyadaasi waxay kala ahaayeen:

1. Guddiga Dib u Dhiska, Hub ka dhigista iyo dib isu soo dhex galka oo ka kooban 27 qof,
2. Guddiga Xallinta khilaafaadka dhulka iyo hantida la kala haysto oo ka kooban 27 qof,
3. Guddiga Dib u soo nooleynta dhaqaalaha, kaabayaasha dawladda, dhismaha iyo abaabulka ilaha wax soo saar oo ka kooban 29 qof,
4. Guddiga Xiriirka Gobolada iyo Caalamka oo ka kooban 21 qof,
5. Guddiga Xalinta khilaafaadka iyo dib u heshiisiinta oo ka kooban 24 qof[1].
6. Guddiga Nidaamka Federaalka iyo diyaarinta Axdi Qarameedka oo ka kooban 40 xubnood.

## 5. 2. GUDDIGA NIDAAMKA FEDERAALKA IYO DIYAARINTA AXDI QARAMEEDKA

Guddiga Nidaamka Federaalka iyo diyaarinta Axdi qarameedku waa kan ugu muhiimsanaa intii gudi la qabtay maadaama uu yahay kan qoraalka uu soo gudbiyo lagu hagi doono dawlada la dhisayo iyo guud ahaanba mustaqbalka dalka. Mar hadduu gudigani ahaa udub dhexaadka ama halbawlaha gudiyada, fikirkiisuna noqonayo kan waaraya ee weligii lagu shaqaynayo rasmi ahaan waxay dawladda Ethiopia xooga saartay sidii ay gudigaan gacanteeda ugu maamuli lahayd.

Guddigaan magicii ugu horeeyey ee ay qaateen waxa uu ahaa: "**Federaalnimo iyo Axdi Hawlgal**". Guddigan oo loo xilsaaray in ay soo diyaariyaan Axdi ku meel gaar ah oo lagu dhaqo dalka inta uu iskii isu qabsanayo ayaa marku hawshii dhex galay is khilaafay oo labo ukala jabay. Labada kooxood oo tiro ahaan kala ahaa; 16 iyo 17 ayaa sinaba isugu imaan waayey ilaa ay gaartay in qolaba goonideeda usoo bandhigto waxay rabtay iyaga oo hoos isaga nux nux leh.

Si hal haleel ah ayaa labada garab ee Gudigaan loogu kala baxshay kooxda **A** iyo kooxda **B.** kooxda (**A)** waxay u badnaayeen dhallinyaro qurbaha ka timid oo xamaasadaysan ayna ka muuqato in ay wataan fikrado laga soo minguuriyey qolooyin kale oo ajnabi ah, halka ay kooxda (**B**) u muuqatay odayaal sharci yaqaano u badan oo dalka ku sugnaa mudadii burburka, shirkana kaga soo qaybgalay magaca Bulshada Rayidka ah. 8 ka mid ah 16 ka ayaa ku socday magaca Bulshada Rayidka ah halka ay 8da kale isugu jireen Ururada dagaalka ee kala duwan. Waxaa wax aad looga naxo ahaa in kooxda A oo sidaan usheegnayba dhallinyaro qurbaha ubadnaa laga dhadhaminayey doodooda inay u adeegayaan shisheeye oo ahaayeen mikarafoonkii ama war baahiyihii cadawga Soomaaliyeed, tusaale qodobada ay ku mintidsanaayeen ee laga fujin waayey waxaa ka mid ahaa:

- In waxa loo yaqaan Federaalka oo la isku afgartay in Soomaaliya hadda ka dib lagu maamulo la hirgeliyo isla marka dawladda shirkaan laga dhiso ay cagaha saarto ciida dalka. Taas oo macnaheeda qayaxani yahay in marka dawlada la geeyo ciida Soomaaliyeed ha bilowdo dagaal sokeeye oo ka sii a'an kii hore illeen kii hore ujeedaba ma lahayn oo waa la iska daaweyn karaye.
- In dalka loo qaybiyo afar gobol ama dawladood oo yar yar
- In luuqada rasmiga ah ee dalka lagu soo daro lahjado yar yar oo laga dhigo luuqado garab socda luuqada Soomaaliga si loo aqoonsado in ay dalka isla degaan quruumo kala duwan.
- In dadka Soomaaliyeed ee deegaan ahaan u badan xuduudaha Kenya iyo Ethiopia aan loo ogolaan inay helaan dhalasho Soomaaliyeed.
- In aan Soomaaliya laga dhigin dawlad dhab ah oo iskeed utaagan ee loo sameeyo Gole madaxweynayaal halkii ay hal madaxweyne iyo hal calan ka yeelan lahayd, kuwaas oo aan midkoodna madaxbanaaneyn in uu go'aan ka gaaro arimaha Soomaaliya.
- In aan dib dambe looga hadlin gobol Soomaaliyeed oo maqan.
- Iyo dhawr qodob oo kale oo u ekaa iga dheh uun oo keliya ee aan ku salaysnayn cilmi iyo caqli toona, balse u ekaa kuwa is wada burinaya[14].

Muramadaas oo cirka isku shareeray xalintoodana lagala kulmay dhib fara badan ayaa waxay dhaliyeen muran ku saabsan yaa Soomaali ah iyo waa tuma Luuqadda Soomaaliyeed ee dhabta ah. Waxaa la yaab ahayd in ergada reer Digil iyo Mirif oo u ekaa kuwa maslaxadii laga maslaxaynayey weeraradii gardarooyinka ahaa ee sida isdaba jooga ahaa loogu soo qaaday u fahmay inay yihiin dad ka ajnabi ah Soomaalida inteeda kale oo hada gobanimo doon ah ay ku adkaysteen in lahjadooda Af Soomaaliga asalkiisa ah laga dhigo luuqad ka

gooni ah Afka Soomaaliyeed. Waxay ku adkaysteen in luuqadaha rasmiga ah ee Soomaaliya laga dhigo Af Soomaali iyo Af Maay, ilaa ugu dambasytii lagu masalaxeeyey in laga dhigayo Af-Soomaali oo u kala baxaya; Maay iyo Maxaad tiri.

Xanaaqa ay dad badani ka xanaaqayeen iskala qoqobkaas macna darada ah ayey ergada qaar badan oo ka mid ihi la soo istaageen iyagana in lahjadahooda laga dhigo luuqado kale. Waxaa la maqlayey ergada reer Waqooyiga oo ku cabanaya "anaga lahjadeenii waa la xaqiray". Sidaa si la mid ahna ergada reer Banaadir, Jareerweyne, Abgaal, Reer Bari, Dadka deegaamada gobolada dhexe iyo kuwa kale. Laakiin kulligood waxay maalmo ka dib umuuqdeen kuwa is ceebsaday oo isaga haray sheegashadaas iyo ku dayashadaas, arintiina waxay ku dhamaatay in Af-Soomaaligii loo kala qaybiyo Maay iyo Maxaad tiri.

Waxaas oo dhan waxay daliil utahay heerka jaahilnimada iyo badawnimada umadda Soomaaliyeed. Maanta caalamka oo dhan ayaa isu yimid oo noqday hal qol oo lagu wada xaraysan yahay. Waxaa la isugu aruurayaa hal luuqad iyada oo quruumo fara badani ay ka tagayaan luuqadahoodii si ay u kasbadaan ilbaxnimo iyo furfurnaan dhan walba leh, ka dib markii ay ku xeel dheeraadaan akhrinta qoraalada aysan iyagu haysan ee ku soo baxa luuqadaha kale iyo qalabka qoraal intaba, sidoo kalena ula socdaan filimada, wararka, masraxyada, caqliyada, dhaqamada, iwm ee qolooyinka kale. Waxaa la marayaa heer luuqado aad u waa weynaa oo dunida laga tixgelin jiray sida Afka Carabiga laga guurayo oo la isugu imaanayo Afka Ingiriiska si wax walba la isu gaarsiiyo loona wadaago oo la isu dhaafsado faafinta cilmiyada, dhaqamada, diimaha, dabeecadaha iyo qaab nololeedka.

Waxaa iyana taas ka sii darnaatay qaabka loogu doodayey in wadanka lagu maamulo nidaamka Federaalka oo aysan weligood Soomaalidu ku dhaqmin. Nidaamkaan oo ah mid ay dunidu zaman hore ka guurtay umadihii ku

---

[14] . Somali National Reconciliation Conference, Federalism and Provisional Charter – Committee one, Group A, Draft, Comments by Group A on the Draft Proposal Made by Group B on the Committee of

dhaqmayeyna ay badankoodu iska dhaafeen ayaa noqday wax ay xiiseeyaan qaybo xoog leh oo ka mid ah Soomaalida, taas oo intii kalena markii lagaga xoog badiyey oo lagu calaamadeeyey in ay argagixiso yihiin haday nidaamka Federaalka ka soo horjeestaan ay iska ogolaadeen oo ugu dambasytii la isku waafaqay. Waxaa laga fujin waayey nidaamkaan ergada Digil iyo Mirif iyo Reer Puntland oo midba dan gaar ah ka lahaa.

Reer Puntland waxay isugu dhejinayeen Federaalka waa in ay isu arkeen inay ka horeeyaan gobolada dalka intiisa kale oo ay leeyihiin horumarka ana gaarnay yaan lanala qaybsan ee cid walba meeshay is dhigto aan aragno intii la isku dhex gabban lahaa. Laakiin reer Digil iyo Mirif, sidana kor ku soo xusnay, iyagu waxay qabeen in mar haddii Federaal la yiraahdo ay dhamaan dadka degan goboladooda ka kici doonaan oo ay tahay fursadii ay dhul dib ugu soo ceshan lahaayeen. Waxa kale oo ay ku fikirayeen in dhulkoodu yahay dhamaanba gobolada Muqdisho ka soo xiga dhanka xuduuda Kenya oo ah laga bilaabo xaafadda Waaberi ee Muqdisho ilaa Kismaayo ilaa Doolow.

Hase ahaatee, waxaa la yaab leh fikirka ay qolooyinkana iska dhaadhiciyeen iyo sida uu waaqicu ugu muuqdo. Waxaa aad u cad marka dhan kasta xaaladda laga eego in dhulka ay Digil & Mirif ku doodayaan uu yahay mid gacanta ugu jira dadyow kale siday doonaanba ha ku hantiyeene dhiibidiisana uu dhiig badani ka sokeeyo. Teeda kale dhulka gudaha goboladooda ah ee laga haysto sidee ayuu Federaal ugu soo celin karaa? Sow laguma xisaabtami karo in ninkii shalay xooga ku hantiyey dhulka uu maantana xiilad iyo muran ku hantin karo.

Qoraalka Axdigaan oo markii hore ku salaysnaa qaabkii loo furay heshiiska ee ahaa in la isu keeno oo la is waafajiyo DKG ah iyo mucaaradkeeda oo ay hogaaminayaan SRRC ayaa waxa uu ku dheeraaday qiimo gelinta iyo awood siinta buuxda ee Madaxweynaha dalku yeelan doono. Waxaa laga dhadhamin karaa qoraalkii ugu horeeyey ee diyaarinta in xubnaha guddiga ee wax soo diyaariyey uu dhegahooda ka sii dhawaaqayey nidaamkii kelitaliska ahaa ee

---

Federalism and Provisional Charter, Nairobi, 23 March 2003, pp. 1-3

dawladdii ugu dambaysay hogaanka dalka. Waxay dhamaan awoodihii maamulka dawladda isugu soo aruuriyeen madaxweynaha oo ushaqayanaya qaab xukun militari u eg. Inta ka dhex leh jago magacaabid hoose ilaa iyo taliyaha xooga dalka waxaa maamulkoodu hoos imaanayaa Madaxweynaha ayey isugu soo aruurayaan marka mid mid loo eego qodobada lagu awood siinayo madaxweynaha ee ku soo baxay daraaftigii ugu horeeyey ee ay soo diyaariyeen Guddiga koowaad ee Federaalismka iyo Axdiga[15].

## 5. 3. GUDDIGA XIRIIRKA GOBOLADA IYO CAALAMKA

Gudigani waxa uu ku soo gudbiyey qoraalkiisii qodobo loo arki karo in laga soo shiilay maskaxyo fiyow oo ka soo maaxday qalbiyo ay ka daacad tahay fikrada dib u soo nooleynta dalka.

Haddaan u soo noqono canaawiintii lagu soo aruuriyey gudaha buug yarahaas waxaa ugu horeeyey uguna mudnaa marka siyaasada laga eego hadba marxalada ay ku jirto, kaas oo ahaa; sugitaanka ammaanka gobolka iyo la dagaallanka argagixisada caalamiga ah. Arinkaa ayey gudigu u kala qaadeen dhawr nooc oo ay hawlfulintiisu ku sahlanaan karto ayna ka mid yihiin:

1. In marka hore la sugaa amaanka dalka si markaa ay u sahlanaato sugitaankla amaanka gobolka ee guud. Halkaa ayey ku soo bandhigeen tabcooyin lagu xaqiijin karo dadaalka loo gelayo la dagaalanka argagixisada
2. In iyada oo la adeegsanayo tabo macquul ah oo waxtar ah la joogteeyo wada hadalo iyo dood siyaasadeedyo dhex mara wadama kuwada nool gobolka
3. In la adeegsado iyo weliba habkii loo adeegsan lahaa farsamooyin casri ah oo lagu xalinayo khilaafaadyada iyo xurgufaha badanaaba sida lama

15 . Somali National Reconciliation Conference, Federalism and Provisional Charter – Committee one, Group A, Draft, Nairobi, 23 March 2003, pp. 11-12.

filaanka ah ku dhaca. Dariiqadahaas waxa ay noqon karaan kuwa wax weyn ka tari kara helitaanka nabad waarta oo gobolka si xasilooni ah uga timaada iyo weliba wada shaqayn dhan walba leh ee dhex marta quruumaha kuwada nool geyiga ee is wada colaadinaya.

4. Tabtii lagu fulin lahaa qaacidooyinkaa loo dejiyey in lagula dagaalama sii faafitaanka nacabnimada argagixisada caalamiga ah. Sidoo kale sidii looga hortagi lahaa askunka kooxo cusub oo argagixiso ah iyo sidii looga hortagi lahaa fulinta dhaqdhaqaaqyo cusub ee ay fuliyaan kooxo horay u jiray hala yaqaano ama yaan la aqoone.

Qodob kale oo muhim ah ee ay isna qormadooda ku soo qeexeen waxa uu ahaa; is kaashiga heerka gobol ee looga baahan yahay in ay dawladaha gobolka ku deriska ihi wada fuliyaan iyaga oo wada ixitiraamaya heshiisyada heerka gobol iyo kuwa caalamiga ah. Iskaashigaas oo ay badanaaba gudigu uga hadleen xaga horumarinta ganacsiga ka dhexeeya ama dhex mari kara dalalka jaarka ah ee ay xuduuduhu ka dhexeeyaan, waxa ay ku celceliyeen arinta sugitaanka amaanka xuduudaha oo ah lagama maarmaan. Waxaa ka mid ahaa qodobada ku hoos jira baabkaas iskaashiga wadamada deriska ah;

1. Sidii Soomaaliya loogu soo dabbaali lahaa seerada xiriirka heerka gobol ee ay haboon tahay ama lama dhaafaanka tahay in ay la wadaagto dersikeeda, iyada oo ka qaybgalaysa xubina ka noqonaysa guud ahaanba heshiisyada, axdiyada iyo shirarka khuseeya arintaas
2. Sidii loola dagaalami lahaa ganacsiga xaaraanta ah ama koontarabaanka ah ee la isaga gudbiyo xuduudaha. Ka soo horjeedka kaasna sidii loo hor marin lahaa ganacsiga kiisa xalaasha ah oo ay ka mid tahay horumarinta dalxiiska
3. Sidii loola macaamili lahaa hawlaha ay fuliyaan hay'adaha aan dawliga ahayn ee ku mashquulsan hawlaha samafalka iyo horumarinta gobolka
4. Sidii looga hor tagi lahaa faafitaanka hubka yar yar ee xuduudaha la isaga gudbiyo iyada oo laga amba qaadayo axdigii heerka gobol ee lagu kala

saxiixday Nairobi iyo meelmarinta go'aankii qaramada midoobay ee lagu xaaraantimeeyey hubka yar yar

5. In la diyaariyaa nidaam mustaqbalka dhaw ay ku wada shaqeeyaan dawladda Soomaaliya iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee heer caalmai iyo heer gobol labaduba, iyo in la adkeeyaa nidaamka diplomaasiyada ee ay Soomaaliya la yeelanayso caalamka intiisa kale[16].
6. In la helaa nidaamyo dib loogu soo celinayo qaxootiyada Soomaalida u dhashay ee ku kala firirsan dunida inteeda kale.

Haddaba hadaan halkan ka eegno gaabiska ka soo if baxay qoraalka waxa ka mid ah in ay Gudigu ku dheeraadeen ka hadlida sidii uu ku yimid qaxootiga Soomaalidu iyo taariikhdiisii, taas oo ahayd mid aan wax baahi ah loogu qabin in lagu faahfaahiyo qoraalka noocan oo kale ah. Dhanka kale in aysan ka muuqan qorshe la taaban karo oo dib loogu soo celiyo qaxootigaas, iyada oo la waafajinayo nidaamka hay'ada qaxootiga adduunka, sharciga caalamiga ah, iyo xuquuqda qaxootiga intaba. Sidaa darteed waxa ka muuqata qoraalka in ay qorayaalku u baahnaayeen la taliyeyaal ku soo takhasusay nidaamka iyo xuquuqda qaxootiga ee caalamiga ah.

## 5. 4. GUDDIGA XALLINTA KHILAAFAADKA IYO DIB UHESHIISIINTA

Guddigaan oo mashruuca loo dhiibay uu ahaa dhumucda mushkilada Somaaliyeed oo loo baahnaa in xaaladiisa ay ka baaraan degaan dad u go'doomay, waxay ku dadaaleen in ay dhiraan dhiriyaan mushkiladda Soomaaliyeed si ay u helaan xal dhab ah oo lagu kalsoonaan karo.

[16] . Regional and international Relations (Committee five), Somali National Reconciliation Conference, phase two, KCCT, Mbagathi, Kenya, march 2003.

Dhab ahaantii waxa lagu dhaliili karaa buugyarahooda in ay ka buuxaan macluumaad badan oo aan meeshiisii la dhigin maadaama uusan ahayn mid wax baahi ah loo qabay in qoraalkaas lagu xuso. Tusaale ahaan qaybta koowaad ee war bixintooda oo ka hadlaysa taariikhda Soomaaliya waxa uu u muuqdaa qoraal si aan loo baahnayn loogu dheeraaday ka hadalkiisa oo buuxiyey bogag badan oo loo baahnaa in lagu qoro erayo ujeedada toos u taabanaya. Taas ka soo horjeedkeedana waxaa la dareemayaa in macluumaad badan oo lagama maarmaan ay xusidiisu ahayd ka maqan yihiin.

Ceeb kale oo jirtaa waxay tahay in uu dhinacyo fara badan uga hor imaanayo xeerka wax qoraalka iyo wax allifidda iyo guud ahaanba xeerarka soo gudbinta warbixinta ama saxaafadda. Waxaa muuqata in bogag badan oo ka mid ah war bixinta ay yihiin kuwa laga soo gooyey qoraallo kale iyada oo aan wax tixraac ah loo samaynin.

Waxaa muuqata in ay guddigu taariikhdaa dheer u galeen si ay ugu keenaan in mushkilada khilaafaadka ee Soomaalidu ay tahay mid xidido dheer oo soo jiitamaysay tan iyo bilowgii Soomaalida. Hase ahaatee siyaasad ahaan waxaa jirta in fikradaasi aysan ahayn mid la isku wada raacsiisan yahay oo u baahan baaritaan siyaasadeed iyo mid cilmi nafsaani. Waxay sharaxeen in Soomaalidu ay taariikh ahaan u leedahay dhaqanka is khilaafka, laakiin waxaa haboon in la kala saaro nooca is khilaaf ee ay horey Soomaalidu caado ugu lahayd iyo noocan cusub ee hariwaaga noqday.

Waxaa qofkii mushkiladaan dhiraandhirinteeda ka soo gala dhinaca siyaasadda u soo baxaysa in aysan inaba haba yaraatee is khilaafkii hore iyo kan maanta ee Soomaalida wax xiriir ah lahayn. Kii hore waxa uu ahaa mid la isku haysto baad iyo biyo ama xurguf ka dhalatay faraxumayn iyo af xumo shakhsiyaad dhex martay ka dibna hurtay, waxaana lagu xallin jiray si fudud oo ay odayaashu geed hoostii ku dhamayn jireen. Laakiin khilaafka maanta waa mid ka duwan kaas oo la garan la’ yahay wax la isku khilaafay iyo wax la isku haysto toona sida aan looba garanayn si Alle si loo xalliyo. Haddaba haddii aan arinta daba gal ku samayno waxan ogaanaynaa in aysan wax khilaafaad ihi dhex oolin

Soomaalida balse ay shakhsiyaad fara ku tiris ihi ku adeeganayaan dhallinyaro ay kaga faa'iidaysanayaan aqoon li'idooda iyo damacooda nolol casri ah oo ay ogaadeen in dadka ilbaxa ihi ay ka hormarsan yihiin iyaga.

Sidaa si la mid ah waxaa iyaduna dood culus oo caqli iyo cilmi ku dhisan u baahan halka ay ka soo askuntay colaadan iyo is khilaafkaan dardarta cusub lihi. Dhab ahaantii haday jirto colaad iyo khilaaf dhex yaalla qabiillo Soomaaliyed waa mid ay abuureen rag siyaasad uga dan lahaa oo keliya doonayey dariiq ay ku gaaraan xukun. Kuwaas oo maalinba khilaaf dhalanteed ah u abuura dhallin yaro iyaga ugu xiran nolol ahaan.

Qaybta labaad ee war bixinta ayaa marka laga soo tago ciwaanka ugu horeeya waxa uu taabanayaa qodobo aad loogu baahan yahay oo kala ah;

1. Isha ama asalka khilaafaadka Soomaalida dhex yaalla
2. Daraasadayn khilaafaadka heerka qaran ah ee jira
3. Daraasayn khilaafaadka heerka degmo ama gobol ah ee jira
4. Tabaha ama tabcooyinka la haysto ee lagu xallin karo khilaafaadka, haday yihiin qaar hab dhaqameed ah iyo haddii kale
5. Qaabka lagu samayn karo xallin khilaafeed oo heer qaran ah
6. Sida loo xallin karo khilaafaadka la xiriira hogaamiyenimada oo loo heshiisiin lahaa kuwa hogaamiyeyaalka ah[17]

Waxay Guddigu ka hadleen xaaladda xaqiiqada ah ee maanta uu ku sugan yahay dalku iyaga oo u kala qaaday gobol gobol xooggana saaraya kuwa ay waxun maamul ihi ka jiraan sida Somaliland, Puntland, Dawladda ku meel Gaarka ah - TNG, Benaadir, Bay iyo Bakool, Gedo, Jubbada dhexe, Jubbada hoose, Shabeelada Dhexe, Shabeelada hoose, Hiiraan, Galgaduud, iyo Mudug.

[17] . Conflict Resolution and Reconciliation (Committee 6), Somali National Reconciliation Conference, phase two, Eldoret, Kenya, 2003.

Intaa waxaa dheer in guddigu ay ku dheeraadeen ka hadalka xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, iyaga oo muujinaya in ay heer ay caadiyowdo marayaan xaggudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanuhu. Waxay xuseen in ku xad gudubka xuquuqdaa aadanuhu ay mar walba sabab u noqoto burburka iyo khilaafaadka daba dheeraada.

Sidaa darteed. Waxay buuga ku soo bandhigeen dariiqooyin si gaar ah loogu sharixi karo xad gudubyada sida qaabka daran uga dhaca Soomaaliya. Sidoo kale sidii loogu abuuri lahaa Gole u dooda xuquuqda aadanaha oo heer caalami ah. Ugu dambaystiina waxay gudigani soo jeediyeen talooyin ku aadan sidii wax looga qaban lahaa is xaq dhawrka iyo dhawritaan xuquuqda aadanaha ka dib markii uu dagaalku dalka ka dhamaado.

## 5. 5. GUDIGA HUB KA DHIGISTA, ABAABUL KA SAARKA IYO DHAQAN CELINTA

Gudigan oo ah kuwa ugu hawsha culus marka la eego hawsha u taala ee loo baahan yahay in ay sida ugu haboon kaga soo talo bixiyaan, inkasta oo liiska magacyadooda ay ka buuxeen Col. Iyo Dr. oo qiyaastii mid kasta magiciisa ku hor qoranayd, hadana waxaa marka horeba, marka la eego talooyinka ay soo bixiyeen iyo ka dhex muuqashadooda bulshada, lagu dhaliili karay in ay ku yaraayeen shakhsiyaadka aqoonta ama khibarad u leh barnaamijka hub ka dhigista siiba wadan ku yaallla Afrika weliba siiba Soomaaliya oo uu xaalkeedu dhan kasta oo laga eego u eg mid ka duwan kan dunida inteeda kale, ha ahaadeen culimadaasi ama khubaradaasi kuwa soo ahaan jiray saraakiil ciidan oo ku xeel dheer hubka yaala Soomaaliya, ama aqoon yahano ku soo takhasusay barnaamijka hub ka dhigista.

Sidoo kale waxa aan ka dhex muuqan aqoonyahano soo bartay cilmiga dhaqan toosinta oo isagu weliba laamo badan lahaan kara. Iyada oo aysan taasi ahayn wax mid ka mid ah gudiyadaas lagu ceebeeyo waayo shirka dadka isugu yimid oo dhan ayaa si guud mar ah loo oran karaa in aysan ahayn kuwii ugu haboonaa in ay maslaxa Somaaliyeed raadiyaan haday tahay xag aqooneed iyo xag daacadnimo intaba. Hase ahaatee waxaba kooxdan lagu amaani karaa dadaalka ay ka muujiyeen sidii ay wax meel mar ah u soo bandhigi lahaayeen. Si kastaba ha ahaatee waxaa xusid mudan in dhawr aqon yahan oo iyaguna aan khibrad la taaban karo lahayn ay ku jireen gudigaan.

Haddaan wax ka soo qaadano qoraaladii ay gudigaasi warbixintoodii shaqada guri ahaanta ay usoo diyaariyeen ku soo gudbiyeen waxaa ka mid ahaa in la baadi goobo talaabooyinka ku haboon in la qaado si loo gaaro marxalad lagu guulaysan karo in hubka laga dhigo mooryaanta iyo jabhadaha Soomaaliyeed. Sidoo kale sidii lagu joojin lahaa shaqaaqooyinka socda iyada oo laga soo marayo xaga bulshada oo laga saaro xaaladaha is abaabul ee u muuqanaya hab ciidameed. Waxaa kale oo ay xooga saareen sidii ay iyaga oo magaca iyo shaqada la siiyey is waafajinaya uga hadli lahaayeen nidaamka ugu haboon ee lagu dhaqan celin karo dhalinta marin habowday ee dagaalada ku fareejowday.

Waxyaalahaas oo dhan ayey gudigu ku soo qaateen qaybta koowaad ee qoraalkooda. Ka dibna waxay u gudbeen sidii dib loogu dhisi lahaa hay’adihii iyo agabkii dawlada ee lagu fulin lahaa asal ahaanba hawlaha kala duwan ee loo baahan yahay. Markaa ka dib ayey u dhaadhaceen qeexitaan ay ku baarayaan horta cidda hubka haysata ee dalka ku sugan, noocyada hub ee dalka yaalla, iyo cidda laga sugayo in ay soo aruuriso oo ka soo saarta gacanta shacabka rayidka ah, isla markaana ku soo wareejiso gacanta ciidamada qalabka sida ee dawladda dhexe.

Si lagama maarmaanimo ah ayaa hadaba waxay uga hadleen dariiqooyinka ugu mudan ee lagu aruurin karo hubka. Qorshooyinka taa lagu gaari karo ee ay soo bandhigeen waxa ka mid ah; in waqti go’an loo qabto

fulinta barnaamijka hub ka dhigista isla markaana la ilaaliyo waqtigaas, in la adeegsado barnaamijka Wacyi gelinta oo loo marayo war baahinta, in la abuuro gudiyo heer degmo iyo gobol ah oo mid walba uu deegaankiisa ka hawl galo, in laga adeejiyo guud ahaanba dadka wax garadka ah ee isugu jira oday dhaqameedyada, culima'u diinka, haweenka, iwm, iyada oo halkii ay ka fursan weydana la adeegsanayo cudud militari.

Intaa ka dib waxa ay gudigaasi qormadooda uga hadleen qaybta labaad ee shaqadooda oo ahayd abaabul ka saarka, dib u habaynta iyo dib u dhaqan celinta. Halkaa ayey ku taliyeen in la dhiso xarumihii talisyada ciidamada qalabka sida oo ay ugu horayso xaruntii ciidanka asluubta oo looga baahan yahay in ay la wareegaan shaqada dhaqan celinta

Gebangebadii waxa ay gudigu soo jeediyeen sadex qodob oo ay u arkeen in ay soo koobi karaan taladooda, kuwaas oo kala ahaa:

1. In muhimada koowaad la siiyo barnaamijka hub ka dhigista iyo miino saaridda
2. In dalka oo dhan isku mar laga bilaabo hawsha hub ka dhigista si loo abuuro jawi is aaminid iyo kalsooni buuxda
3. In barnaamijka hub ka dhigista iyo dhaqan celinta si sinaan ah looga wada fuliyo dalka oo dhan[18]

Waxa ay gudigu soo bandhigeen jaantus sharaxaya qaab dhismeedka hay'ada qaranka ee hub ka dhigista, abaabul ka saarka iyo dhaqan celinta oo ay soo jeediyeen in laga dhigo mid hoos timaada xaafiiska madaxweynaha dalka.

[18] . Guddiga Hub ka dhigista, Abaabul ka saarka iyo Dhaqan celinta, Shirka Dib u heshiisiinta Qaran ee Soomaaliyeed, wejiga labaad, Eldoret, Kenya, Disembar 2002.

# 5. 6. GUDDIGA DOODAHA DHULKA IYO XUQUUQDA LAHAANSHAHA

Marka laga eego dhinacyaha qaarkood iyada oo dooda lagu cabirayo si xaqiiqo taabasho cilmiyeysan gudigani waxay u egyihiin kuwo ka hadlaya wax aan soconayn oo ay arintoodu ku dhamaanayso maaweelo iyo damac. qaabka ay soo qormeeyeen war bixntoodu waa mid loo qaadan karo inay ujeedadiisu tahay yaan laga hadlin wax dambe oo la isu celiyo. Arinta ah in hantidii la kala qaaday 15 sano ka hor la isu celiyo waa mid u baahan maskaxyo badan oo la shiilo ee aan sida loo malaynayo u fududeyn.

Hantidii qaarkeed waa baaba'ay, qaarkeed waxaa haysta caruurtii uu dhalay kii dhacay booli qaatihiina waa dhintay ama dheeraaday, markaa ayuu inankii la dhalay ku doodayaa in uu haysto dhaxal aabihii uga tagay oo loo sheegay inaabihii xaq u lahaa, qaarkeed waxay marayaan gacantii tobnaad oo kala gadasho iyo isa siin ah, qaarkood waxa laga min guuriyey halkay ku yaalleen oo meel kale ayaa lagu rakibtay.

Sidaas oo jirta ayaa hadana la arkay qaar ka mid ah gudigaan hanti isu soo celinta oo ku doodaya aan iska dayno wixii hanti guurto iyo ma guurtaba la kala haysto in ka badan toban sano. Dadkani waxay tusaale usoo qaadanayeen qaar dunida ay taasi horteen ka dhacday ah oo maslaxo ahaan door biday in dadkii wax dhacay loo xalaaleeyo. Haddaan arintaa ka eegno xaga qaanuunka dawliga ah waxaa jirta in hantida la kala haysto in ka badan 2o jiil *(20 generations)* aan la isu celin ee laga samro, laakiin tan Soomaaliya iyada oon da'daas ku dhaweyn ayaysan wax nuxur ah oo 15 sano ka dib laga doonaba aan la haynin.

Marka ay hantida qaarkeed uga faalaynayeen guddigu si daacadnimo ka muuqato waxay sheegeen in hantida loo tixgeliyo mulkiilaheedii iyada oo aan loo eegayn jinsi ah lab ama dhedig ee nooc kasta oo uu qofku yahay uu hantidiisii

xaq u leeyahay, taas oo lagu salaynayo diinta Islaamka iyo Xeerka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha.

Waxaa lagu amaani karaa guddigaan in ay taabteen guud ahaanba noocyada dhul ee jirta xataa qabuurihii mar hore lagu aasay dad ajnabi ah. Waxay kale oo ka hadleen xilka dawladda dhexe ka saaran hanti gaar ah samaynta iyo u sahlidda shacabka sida in ay si gaar ah uyeeshaan qaar ka mid ah hantiyadii ay dawladu keligeed lahaan jirtay sida Radio, Television, Mad-bacad iyo noocyada kale ee qalab is gaarsiin.

Sida ay u badnaayeen guddiyadu, waxay gudigani iyana ku dheeraadeen ka hadalka hantiyihii la kala qaatay waayadii ka horeeyey dagaalka siiba ku wii lakala haystay tan iyo waayadii gumaysiga. Waxay dhiiri geliyeen in dalwdii timaadaa ay samayso guddi khaas ah oo ka shaqeeya dib isugu soo celinta hantiyadii la lakala qaatay xilliyadii gumaystaha.

Guddigaas oo isku dhaf dhawr Wasaaradood iyo khuburo isugu jira. Hase ahaatee aad moodo in la yiri keena barnaamij maaweelo ama is caruureeya ayaan sidii la rabay u taaban xaqiiqada dhabta ah ee hantiyada la kala haysto. Waxay daba galeen hantiyo aan wax cadaymo ah loo heli karin oo la sheegayo inay la wareegeen dawladihi dalka soo maray ee sharciga ahaa, halka loo diray inay ka soo hadlaan antiyada la kala boobay sanadihii dagaalka sokeeye ee la ogaan karo mulkiilihii rasmiga ahaa iyo kan boobka ku haysta.

Marka ay ka hadlayeen hantida ay dadweynuhu kala haystaan waxay far waa weyn ku qoreen in dhammaan mooryaanta xooga ku haysata dhulal iyo hantiyo kale oo aysan iyagu iska lahayn isaga baxaan ama iska sii daayaan si shuruud la'aan ah.

Iyaga oo xal ka raadinaya ayey guddigu qoreen in loo baahan yahay in qabiilada Soomaalidu ay ku kala ekaadaan xuduudihii uu gumaysigu waa hore kala xariiqay (*linea Tomaselli*). Iyaga oo arintaa ka sii amba qaadaya ayey kooxdani u egyihiin kuwa ka jecel nidaamka Federaal guddiyada kale, marka loo eego sida ay u adkaynayaan iyo sida ay ugu celcelinayaan.

Waxyaalihii ay ku taliyeen waxaa ka mid ahaa;

1. In dawladda soo socotaa ay dhaqso u dejiso sharciga lahaanshaha dhulka iyo dhul nidaaminta iyada oo khibrad ka qaadanaysa wadamada ku horeeya maamulka noocaas ah. Marka ay dawladaasi baadi goobayso hantidii dawladda ee ma guurtada ahayd waxaa u haboon in ay adeegsato khariidada ay UNDP dejisay sandkii 1999.
2. In codsi ahaan ay dawladaha deriska ihi ku soo celinyaan wixii ay ka hayaan hantidii laga soo bililiqaystay Soomaaliya noocay doontaba ha ahaatee. Sidoo kale waxa laga codsaday hay'adaha dawliga ah ee ay khusayso arintu oo ay ka mid yihiin Ururka Badaha Adduunka in ay Soomaaliya ku caawiyaan sidii dib loogu soo celin lahaa wixii weli ka dhaqan hantidii qaran ee lagala baxsaday ee meel kale lagu haysto. Hadana sidaa si la mid ah in ay hay'adaha ku shuqul leh arimaha qaxootiga iyo wadamada ay joogaan si codsi ah ku soo celiyaan qaxootiga Soomaaliyed ee qurbaha quban oo iyaguna si lagama maamrmaanimo ah kula baxsaday maskaxdoodii ay dalka ugu adeegi lahaayeen.
3. Waxa ay muujiyeen hanjabaad iyo talo siin ku wejihan kuwa weli iska haysta hanti dawladeed iyo hanti dadweyne oo ay xoog ku haystaan in ay sida ugu dhaqsaha badan isaga soo celiyaan.
4. In guddiyo heerar kala sareeya ah loo xilsaaro sidii loo soo celin lahaa hantida dadka iyo tan dawlada ee gacanta ugu jirta dad aan lahayn. Waxay ku taliyeen in guddigaas oo min heer dawlad dhexe ilaa heer tuulo ah ay xaq u leeyihiin in ay qofkii si daacadnimo iyo kalsooni ah ku soo celiya hantidii uu xooga ku haystay oo bedqabta la abaal mariyo, halka kii isku sii dhejiya ciqaab mudan lagu abaal marinayo. Guddiyadaas ayaa lagu qeexay kuwo ka kala imaanaya hay'ado iyo xarumo ciidan oo kala duwan, kalana heer heer ah, taas oo ay qoraalkooda ku cadeeyeen dhawr jeer in

loola jeedo in xalka laga gaarayo isku haysadyada dhulka iyo hantida kaleba uu ahaado mid ay bulshadu kuwada qanacdo[19].

Si loo kala saaro dadyowga dhulalka deegaanka ah ee ka baxsan boos qoys dego, guddigu waxa uu soo jeediyey in ay dawladda dhexe u magacawdo guddi aan iyagu cid kale sii wakiilan Karin oo soo kala xaqiijiya cidda dhab ahaan u leh dhulkaas iyo cidda dhaca ku haysata ama ku doonaysa.

Waxa kale oo ay guddigani ka hadleen dhibaatooyinka soo gaaray bii'ada ama deegaanka Soomaaliya oo si ba'an u asiibay bad iyo barriba, taas oo dabar go' kuhaysa ugaadhii iyo nooleyaal kale oo bad iyo barriba lagu ogaa. Sidaa si la mid ahna xaalufin xoog leh ku haysa dhulkii oo ka dhigtay lama degaan, isla markaana caafimaadkii dadka khal khal gelisay. Sidaa darteed waxay guddigu ku adkeeyeen dawladdii la dhiso inay ahmiyad gooni ah siiso arimaha dib u soo nooleynta qiimihii iyo nuxurkii ay lahayd Bii'ada Soomaaliyeed. Waxa ay soo jeediyeen in la saaro guddi xoogan oo ka kala socda dhawr hay'adood oo ay arintu khusayso iyo weliba qabiillo isku dhaf ah. Iyada oo Guddiyadaas la adeegsanayo waa inay dawladdu u hawl gashaa sidii lagu dejin lahaa sharci, nidaam, qorshe, xeer ciqaabeedyo, maamul canshuureed iwm oo lagu ilaalinayo bii'ada dalka.

Gebangebadii war bixinta ayey guddigani soo ban dhigeen shax cilmiyeysan oo ay ku qeexayaan qorshe hawleedka loo baahan yahay in lagu xasilliyo nidaam lagu xallinayo muramada dhul iyo hanti ma guurto ah ee la kala haysto. Waxa kale oo ay shaxdaas ku cadeeyeen ciddii hawl-galka fulin lahayd iyo meelihii laga fulin lahaa. Intaa keliya kuma ekaysane guddigu waxay sameeyeen shax kale oo ay ku qeexayaan ama ku qiimaynayaan inta kharash ku baxaysa barnaamijka iyo weliba inta mashruuc laga fulinayo gobol kasta oo dalka ka mid ah.

[19]. Land and Property Rights (Committee 3), Somali National Reconciliation Conference, Eldoret, Kenya, 2003.

Sidaa darteed waxan ku qiimaynay guddigan mid cilmiyeysan oo soo bandhigay qorshe iyo tabo la taaban karo oo weliba tixraac wada leh, laakiin qoraaladooda iyo doodahooda (intay soo ban dhigeen iyo intay soo hadal qaadayeen markay doodayeen) laga garan karay in ay ku jireen qaar aan ka daacad ahayn shaqada oo isku deyayey in ay ujeedada jiha wareeriyaan ama ugu yaraan dhicisoobiyaan. Tusaale ku daba wareegaysiga waxyaalo aan loo dirsan oo aan ku jirin waajibaadkooda (*mandate*) sida in la isku kallifo hanti la dhuleed oo la sheeganayo waqtiyadii dawladaha, xilligii gumaystayaasha iyo ka sii hor. In ay ku mashquuleen mawduuca Bii'ada, mawduuca dhaqaalaha dalka sida ganacsiga, iyo arimaha xiriirka siyaasadeed ee dawladaha deriska ah, iwm.

**CUTUBKA LIXAAD**

# 6. 0. WEJIGII LABAAD IYO DOOFAAREY

## 6. 1. WAXAA LOO GUURAYAA MPAGATHI (Doofaarey)

Mar Allah markuu jagadii ka dhacay madaxwqeynihii hore ee dalka Kenya, mudane Moi, waxaa lala soo booday in shirka dib u heshiisiinta Soomaalida laga rarayo xaruntiisa Eldoret oo loo rarayo meel caasimada Nairobi u jirta 70 km. Waxay dawlada Kenya is tusinaysay in awalba Eldoret loo doortay qorshe naas nuujin loogu tala galay ehelada Moi oo halkaa degan isaga qudhisuna uu ku dhashay.

Dhanka kale ergadii Soomaalida oo aan weli ka bixin walaahow iyo iska daba wareeg, waxay isaga mashquuleen dhiillada cusub ee geediga hor leh. Waxaa kale oo lagu mashquuliyey ka qayb galka wejiga labaad ee shirka oo lagu qabanayo Mpgathi. Taasina waxay cirka ku shareertay dadaalkii qof ahaaneed ee jiray oo uu ruux waliba nafta u hurayey sidii uu uga mid noqon lahaa ergada loo qoondeeyey wejiga 2 aad. Sidaa ayaa lagu degay xeradii Mpgathi oo isla maalintii la degayba loo bixiyey Doofaarey iyada oo lagu cadaynayey Ergadii Soomaaliyeed ee madax ahaanta u matalaysay oo lala dejiyey bahaladii Doofaarada ahaa.

Xerada waxaa ardaydii halkaa iskuulka ka dhiganaysay ku wehliyey Doofaaro, Daanyeero, iyo Lo'. Waxaan xusuusanayaa galab ay meel luuq xerada ka mid ah igu heleen raxan Daanyeero dhallinyaro ah oo ay inta I weerareen I riteen oo lug iga murgiciyeen, iguna qoslayeen ilaa ay iga soo gaartay mid Daanyeerad dumar ahayd oo qiyaastii hooyadood ahayd oon u duceeyey ayna iga kaxaysay.

Waxa ugu weyn ee ay ergadu taas isugu mashquulinayeen waxay ahayd in uu kashifmay qorshihii Ethiopia oo ahaa in inta markaa lagu qoro wejiga 2 aad

ay noqdaan xildhibaanada qaranka ee la soo xulan doono. Haddaba maalmahaas waxaa la isla dhex marayey baroor iyo tol beelayey aniga miyaa layga tagayaa?. Tiradaas ergada laga dhigay ee ay Xabashidu markii hore usoo xushay si looga dhigo xildhibaanadii dalka Soomaaliya waxay ahaayee kuwii markay arkaan shaqaalaha hoose ee Kenyanka ihi ee ay weydiiyaan ma kuwan baa Soomaalida u madaxsan? Ee loogu jawaabo haa ay salaadooda oo salaad shukri ah tukanayeen iyaga oo markiiba faraha ku boobaya taabashada labada garab iyo wejiga oranayana "Inanka, Ruuxulquduska, iyo Aabaha".

Si qorshaha Xabashidu u fulo waxaa laga shaqeeyey in beel walba laga qoro qofka ugu jaahilsan uguna axmaqsan. Laakiin waxaa mar walba dhibaato ku noqonaysay Xabashida iyo taageerayaashooda in ay helayeen qabiilo qaarkood oo uusan qof jaahil axmaq ihi u joogin shirka. Haddaba si ay uga gudbaan caqabadaas waxay joogteeyeen mashruuc loo bixiyey "ergo kala dhimis". Mashruucaas waxa uu si halhaleel ah ugu soo baxay in la hawlgeliyo.

Dawladda Kenya waxaa ka muuqatay in ay fulsadaan hadafkooda oo ahaa in lacag laga sameeyo munaasabadaas. Waxay markiiba mashruucaan ergo dhimista ka arkeen kharashka duulimaadyada, hoteelada, mushaarka, adeega, iwm ee uga soo baxaya mar kasta oo diyaarad buuxda inta la celiyo hadana diyaarad kale la keeno. Dhab ahaantii mashruuca magiciisa waxa loo qurxiyey si loogu xifdinayo dano siyaasadeed, laakiin magaciisa dhabta ah ee waafqsan shaqadiisa waxa uu ahaa "mashruuca dib u celinta ergada wacyiga leh iyo soo daad gureynta dad caamo ah badelkooda".

Waxaa jirtay in la is weydiinayey oo baaritaan daqiiq ah lagu keenayey qofaf reer baadiye ah oo jifa hebaalyo ka tirsan si loogu badelo kooda aqoonyahanka ah ee shirka jooga. Waxaa si gaar ah loo rifayey ergadii ku timid magaca Bulshada Rayidka ah (*civil society*). Dhanka kale hadii dhaqso la keeni waayo qof jaahil ah oo aqoonyahan jifadiisa ah lagu badelo waxaa markiiba liiska qaybta laga saarayey jifada oo dhan iyada oo laga soo bilaabayey cayaarta in beesha guud tiradii loo qoondeeyey wax laga dhimayo, ka dibna kooda qaybinaya lagu guubaabiyo in uu jifadaas ka boodo.

Haddaba asbuucyadaas dhiilada ergo dhimista iyo geediga gaaban lagu jiray qof walbaa dheg la qabto ma lahayn. Waxaa ergadii u cadaatay in qofkaan Xabashi adeege u noqonayn uusan meesha xildhibaanimo iyo jago kale toona ka qaadaynin. Maalmahaas iyaga ah qaar ka mid ah wax garadkii shirka lagu soo casuumay ayaa isaga noqday iyaga oo ka cabanayey fara gelinta qaawan ee Ethiopia. Dadka sidaa uga baxay shirka waxaa ka mid ahaa Cali Mahdi Maxamed, ninkii madaxweynenimada sheegtay markii Maxamed S. Barre xukunka xooga looga tuuray.

Nasiib darro dadka Soomaaliyeed ee meesha isugu yimid ma lahayn qadiyad ay sidaas oo kale ugu fikiraan oo go'aan dadnimo u qaataan. Si kasta oo ay u dareemeen inay gacan Xabashi ku jiraan hadana waxa ay in badani ku xisaabtamayeen in uu mid walbaa isagu noqdo kan kowaad ee ay Xabashidu adeegsanayso oo ka dhigayso mas'uul Soomaaliyeed. Habeenkii xalay ahaa oo tagay ayey ahayd in ay ku fikiraan in jagooyinka aysan iyagu dhaxal u helin ee ay jiraan dad kale oo Soomaaliyeed iyagana loo soo dirsaday – waa hadiiba la soo dirsadaye – in ay meesha heshiis uun ka keenaan.

Run ahaantii way jireen dad badan oo dulinimadaas ka dhiidhinayey oo ku dadaalayey in ay xildhibaan iyo mas'uuliyad kaleba helaan si ay ula ficiltamaan Xabashida, laakin shakhsiyaadkaasi waxay ahaayeen kuwa aan wax garab ah haysan isla markaana ficiladoodu ahaayeen gacan gadaal ka baqaysa geed ma goyso. Waxay qaarkood is lahaayeen Ethiopia waa dawlad weyn oo ay dawladda maanta adduunka ugu xooga weyn ee Maraykanku u soo dirsatay in ay Soomaaliya dawlad u dhisto si ay argagixisada uga ilaaliso. Haddaba koley tani joogsan maysee adigu ha ka qadin. Nasiib darase taasi waxay ahayd farsamo ay Ethiopia ku waabsanaysay Soomaalida in uu Maraykanku iyaga ka soo adeejiyey inkastoo ay sheekadaasi been iyo masabid tahay.

Ayaamahaas waxaa la badelay ergaygii khaaska ahaa ee Kenya u fadhiyey shirka Safiir Mwangale, waxaana badelkiisii la soo magacaabay safiir hore Pethuel A. Kipligat. Kipligat waa oday mici libaax ah oo duni badan ka soo

shaqeeyey, laakiin ay iska muuqato inuusan ka daacad ahayn nabadeynta Soomaalida dhawr sababood oo jira awgood:

1.Odaygu waa baadari la yaqaan oo diinta masiixiyada ku adag ilaa heer xagjiranimo,

5. Odaygani waxa uu ku dhashay Muslinimo oo waxa uu ka soo jeedaa qoys Muslim ah. Hase ahaatee isaga ayaa qof ahaan ka ridoobay Islaamka. Taasina waxay qofka noocaas oo kale ah ku kalliftaa in uu aad u nebcaado aadna ula dagaalamo diintii uu ka soo baxay si uu ugu yaraan u qanciyo indhaha kuwa uu diinta cusub la soo galay oo uu ka cabsi qabo inay aamini waayaan.
6. Odaygu waxa uu aad u fahamsanaa aragtida iyo ujeedada Kenya oo ahayd in mashruucaan shirku iska socdo si ay dadka reer Kenya uga cootaan oo ugu yaraan arrad baxooda uga helaan.
7. Odaygu waxa uu ku naaloonayey amaano iyo qadarino waa weyn oo uu ka soo helay wadamo kale oouu soo heshiisiiyey iyo hawlo diblomasiyadeed oo uu soo qabtay, sidaa awgeed waxa uu ku kalsoonaa in uu ku guulaysanayo dawlad u dhiska Soomaaliyeed, isaga oo xataa hadduu wax haleeyo ka helaya sharaf iyo amaan iyaguna ay mar walba yihiin kuwa ceebaysan,
8. Odayga waxaa ka go’nayd in uu maanta fursadaan uga faaiideeyo diintiisa cusub oo uu soo saaro jaaliyad Soomaaliyed oo masiixiyiin ah. Si uu hadaba taas u hir geliyo waxa uu aruuriyey dhawr qof oo macna laawayaal ahaa oo madasha shirka indha taagleynayey. Kuwaas ayuu u bidhaamiyey jid qabiilo cusub oo ay ku doodaan.

Haddaba subixii dambe ayaa la arkay koox cusub oo la magac baxday “Somali Christian Community SCC” (Qawmiyada Kiristaanka ah ee Soomaaliyeed). Kooxdan oo ahayd shakhsiyaad lala soo dardaarmay oo loo jeexay fikrada ayaa markiiba la soo baxay qaylo dhaan ay ku doonanayaan xuquuq ka maqan.

Kooxdan waxay ku doodeen inay tiro fara badan ku joogaan dalka ayna u baahan yihiin xaqooda ah in ay wax ku yeeshaan xukunka dalka, si ay u ilaashadaan danahooda iyo baahiyadooda. Dhanka kalena ay la kulmeen cadaadis fara badan oo kaga yimid dadkooda, kuwaas oo aan marnaba u ogolayn inay wax xukun ah hunguriyeeyaan. Sidaa awgeed maanta ay beesha caalamku u dhiciso xaqooda.

Odaygii Kipligat ahaa oo markii horeba usoo calan lulay ayaa markii la dhameeyey qormadii ergada oo la isku dhaarsaday inaan qof dambe gadaal looga darin, iyagiina laga wada tagay u yeeray. Markaa ayuu guubaabo ka dib u sameeyey liis gooni ah oo uu ku dalbaday inay noqdaan ergo uu isagu keensaday oo xushmadiisa ku jooga yeeshana xuquuqda ergada kale. Sidaa ayaana looga aqbalay ooy ku noqdeen ergo xoog ah. Intaa keliya maahan ee waxa uu siiyey ilaalo iyo dhawritaan gooni ah (*special protection*). Waxa uu u kireeyey guri weyn oo ku yaalla tuulada ugu dhaw ee la yiraahdo Lanagata. Sidoo kale waxa uu saaray makhaayad iyo baar cabitaan oo ay ka helaan baahi tirkooda caloosha arra-tirkooduna u dheer yahay. Intaa waxaa dheeraa guubaabinta iyo ku dhiiri gelinta in ay u sabraan dhib kasta oo kaga yimaada in ay dad badan Soomaaliya ka dhigaan Masiixiyiin oo ay ugu adkaystaan dhibka sidii uu Ciise Masiixba ugu adkaystay.

Ayaamahaas waxaa wax walba loo marayey sidii lagu heli lahaa ka mid ahaanshaha xubnaha ergada ah. Waxaa naxdin leh in la xuso in ay si hal haleel ah u dhacday in la arkayey rag ku biirayey kooxda “Somali Christian Community” si ay ugu helaan warqadda casuumada ama marti qaadka shirka ee ergonimo. Waxaa naxdintaas kuwa ugu weyn ka mid ahaa in la arkay nin ahaa mu’adin oo ka adimayey mawlac ku yiilay Eldoret oo ku soo biiray kooxdii Kiristaanimada sheegatay isaga oo weliba hor boodaya, inkastoo ninkaasi hadana ayaamihii dambe lagu arkayey masaajidka oo uu sheegay in uu Islaamkiisii dib ugu soo noqday.

Dadkii qaar diintoodii bay ka baxeen si ay xubinimo Ergo u helaan, qaarna Xabashi bay daba dhaqe u noqdeen, qaarna waardiyeyaalka xerada oo laga soo

aruuriyey baadiyaha Kenya bay laaluush siiyeen oo ka codsadeen inay ku daraan liiska Ergada, qaarna way dagaalameen oo dhig bay daadiyeen.

Balse kuwaas oo dhanse waxaa ka sii magac dheeraaday oo yaabkoodii isku fuuqsaday laba nin oo midna goobtii shirka oo buuxda Oohin iyo cabaad qaylo dhaan ah sidii in uu mas qaniinay kula soo dhex dhacay oo la aamusin waayey ilaa loo ogolaaday xubinimadii. Ninkaas oo magiciisa la yiraado Maxmed Cisman Maye wuxuu raftaba ugu dambaystii wuxuu dawladii la dhisay ka helay Wasiir. Nin kale oo ka sii darayna waxa uu iska soo riday dhawr dabaq oo dhulka isku durbaaniyey isaga oo leh ama waan is dilayaa ama ha la igu daro liiska Ergada. Ninkaasina waa Mr. Cali Daacuun oo hada ka horna riwaayadaas mid la mid ah ka dhigay masraxii Carta oo intuu dharkiisii iska saaray oo dhinacyada isaga wareejiyey kibriid iyo gaas ku bilaabay si ay isaga iyo dharkiisu isugu gubtaan, balse laga gaaray oo xoog looga qabtay inkastoo aan labadii dhib ee uu is gaarsiiyeyba aan wax jago lagu siinin ilaa hadda.

Hadalada wasakhda ah; af xumada, af lagaadada, xanta, nabiibyada, diin cayga, iwm waxay ahayd mid iska caadi ah oo malaha xeradaba loo ooday. Dhanka kale qolo walba dacaayad faan ah ayey suuqa isu gelisay iyada oo qolada kalena xumaan suuqa u gelinaysa. Waxaa kale oo ka mid ahaa halkudhegyadii madashaas ka soo caan baxay: looma dhama, xor uma nihin shirka, waa nala qasbaayaa, aaway lahaanshihii Soomaalida, iwm. Intaas waxaa ka sii yaab badan isla qumanaanta iyo isla weynida gaarsiinaysay qof walba in uu yahay tiirka keliya ee uu shirku ku taagnaa waxaa xusid mudan in aan aroor ku soo kallahay xeradii Doofaarey ee aan ninkii iigu soo horeeyey ee isoo balleeyey weydiiyey xaalka xerada ee uu igula soo booday "hade waad ka warqabtaa in shirkii labada sano loo fadhiyey saaka burburay", saane; sabab, suuye; hade anga ilmo hebel ihi shirka waan isaga baxaynaa, waayo markii hore waxay ballantu ahayd in 8 xubnood lana siiyo, maantana sidii marba xubin loo goosanayey ayaa 2 keliya nala soo istaajiigyey.

## 6. 2. HAWSHII OO KA BILAABATAY MBAGATHI

Laba cisho ka dib markii la soo degay Mpagathi ayuu maamulkii IGAD ku dhawaaqay in ay Guddiyadii lixda ahaa sii wadaan hawshoodii. Hase ahaatee waxaa soo ifbaxday dhiilooyin cusub oo qaarkood ay ku salaysmeen dhacadii shilka madaxdii DKG, shaki laga qaaday in ay maamulka IGAD u janjeeraan xagga kooxda SRRC, iyaga oo cagta ku riiqaya DKG, iyo guud ahaanba meesha loo sahmiyey deegaankooda oo ahayd mid ergada ka nixisay.

Waxaa kale oo jirtay in madaxda DKG ah qudhoodu ay ahaayeen kuwa lagu tilmaami karay ujeedda badan, iyada oo qaarkood ay ku fikirayeen in ay qaar madaxdooda ka mid ah ka masaafuriyaan madasha si iyaga boos ugu banaanaado, iyo in qaarkood aysanba doonayn sii socodka shirka iyaga oo dantooda ka arkayey in shirku uu burburo ka dibna xilliga dawladnimo (*mandate*) loo cusboonaysiiyo DKG ah.

Halkaana waxaa iska taageeray labadii ujeedo ee ay madaxda ergada DKMG ihi kala duwanaa, waxayna sii waafaqeen ujeedadii ay wateen qaar ka mid ah dawladihii hawsha loo xilsaaray ee loo bixiyey dawladaha safka hore. Taasina waxay dhab ahaan usii waafaqday ujeeddadii ay wateen kooxaha Dagaal oogayaasha ihi oo ahayd in aan wax dawlad ihi Soomaaliya usamaysmin inta ay iyagu noolyihiin si ay uga baxsadaan isla xisaabtan iyo maxkamad la hor keeno. Haddaba taasi waxay abuurtay in ujeedooyin kala duwanaa oo iska soo horjeeday ay isku hadaf noqdaan oo isku dan ku wada shaqeeyaan iyaga oo wax heshiis ah isugu imaanin.

Intaa ka bacdi waxaa si lama filaan ah ubilowday is bahaysi aan lagu tashan oo laba dhinac oo aan horay isu aqoon, laakiin dani isu soo jiidayso ah. Labadaas isbahaysi oo aan is cadayn waxaa lagu kala tilmaami karay koox ku shaqaynaysay ujeedo baas abuurnimo ah iyo koox samajecla ah oo ay ka daacad ahayd soo helitaanka dawlada Soomaaliyeed.

Haddaba labadaas fikradood oo aan u qaabaysnayn hab laga shaqeeyey laakiin ku kala firirsanayd maskaxyada iyo ficilada dadyowga meesha isugu yimid ayaa foodda is geliyey. Waxaa dhacday in saddex Wasiir iyo laba xildhibaan oo ka mid ahaa ergadii DKG ahayd, oo ay taageerayaan 21 kale oo Goob joogayaal, ay ku mintideen taageerada Shirka iyo badbaadadiisa, taas oo ugu dambaystii dhalisay in laga casilo xilalkoodii. Inkasta oo shakhsiyaadkaas laga faquuqay DKG ah hadana waxay u muuqatay mid aan shaqaynin oo ka dhigtay DKG ahayd tusbax afka laga furay, iyada oo la ogaaday in khiyaanooyin kala nooc nooc ah la isku wada minjaxaabinayey.

Si loo gaaro xal ay qolana ku marmarsiyooto qolana dan moodo ayaa waxa ay DKG ihi soo saartay wareegto ay ku magacaabayso Guddi cusub oo DKG ah u matala shirka. Shakiyadaas DKG ah soo kala dhex galay oo gaaray heer aan la cayimi Karin cidda u ah go'aan gaaraha (*decision maker*), halka uu Raisulbaarlamaankii sheeganayo in uu yahay Mas'uulka labada xildhibaan casilay, ka soo hor jeedkana uu Raisulwasaaruhuna sheeganayey in uu yahay kan casilay 3 da Wasiir iyo 2da xildhibaan. Waxaase la yaab ahayd markii ay sheegashooyinkoodii halamsatay in iyagii qudhoodii uu casilay ninkii ay u kala dhuumanayeen ee ahaa Cabdiqasim oo isaga ay ka muuqatay in uusan ka raalli ahayn dawlada laga dhiso shirkaas.

Cabdiqasim casilaadiisii cidina dheg uma jalaq siin, waayo waxay intuu casilay oo dhami ku doodeen in aysan meeshu dawlad dhab ahba ahayn ee ahayd qabiilooyin isu yimid oo markay rabaana kala baxaya. Taasina waxay si toos ah uga hor imaanaysay fikirkii C/Qasim oo ku salaysnaa in uu wax ku qaybsado sidii dawladdii buurnayd ee uu hogaaminayey Maxmed Siyaad Barre oo ku dhisnayd kelitalisnimo iyo isku amar taaglayn oo uu la soo shaqeeyey. Waxaas oo dhana waxaa ifiyey xanaaq xad dhaaf ah oo ay guud ahaanba Golaha Wasiirada iyo golaha Xildhibaanadu ugu xanaaqsanaayeen madaxweynahooda Cabdiqasim in uu keligii iskii ugu tashaday dhammaan lacagihii tirada badnaa ee uu ku helay magaca dawladda DKG ah.

Waxaa naxdin iyo anfariir ku noqotay guud ahaanba intii ka shaqaynaysay DKG ah in aan shilina looga taagin malaayiin doollar oo ay dawladooda ugu deeqeen dawlado ajnabi ihi iyo xataa isaga oo aan shilin ka bixin malaayiin deymo loogu leeyahay oo uu qaarkood rahmaad ugu dhigay Hoteladii dawladda ee xoolaha dawladeed ahaa. Taas oo iyaduna caqabad iyo dhibaato hor leh ku noqon doonta dawlad kasta oo Soomaali loo dhiso.

Waxaaba ka sii caqabad weynaan doonta in qaar ka mid ah Wasiiradiisii uu aadka ugu kalsoonaa ay dhulal iyo dhismayaal badan oo dawladu lahayd, siiba dhismihii Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed u cabireen dad gaar ah iyaga oo ka gadanaya uguna qoraya warqadaha “waa hanti qaran oo laga maarmo”. Waxaas oo dhami waxay shaki hor leh iyo quus gaarsiiyeen dadkii awalba qabiil ahaan awgeed looga eryey Muqdisho oo qabiiladoodii uga soo noqday bal in ay si islaax iyo dulqaad ahaan ku dayaan (colka waraf ma lagu dayey) oo iyagu inta shirka Mbagathi la joogay ku doodayey in aysan Muqdisho meel mar dambe magaalo madax ahaan loogu noqdo ahayn.

Arimahaas iyo dhinacyo kale oo badan marka laga eego waxaa soo baxaysay in uu C/Qasim ka mid yahay qabqablayaasha dagaalka ee dhiig cabnimada ku caan baxay oo dadka iyo dalka Soomalaiyed eed weyn ka galay. Inkasta oo uu C/Qasim yahay nin aad u neceb dhiig la daadiyo iyo isku dhacyo beeleed, hadana waxaa lagu eedayn karaa in uu dadka intii ka soo hartay xabada dagaal oogayaasha hal mar niyadooda dilay oo uu markaa u geystay dagaal quusin iyo niyad jebin ah.

Waxaa xusid mudan abaabulkii la isku dayey ee ay qabqablayaalka dagaalka ee ku abtirsanayey deegaanka Muqdisho ay ku dhawaaqeen taariikhdu markay ahayd Disembar 2002 in ay shirka ka baxayaan iyaga oo ku marmarsiyoonaya in ay dekedii qaranka ee Muqdisho iyo gegidii dayuuradaha furayaan, hase ahaatee waxaa jawaabtooda siiyey Waliid Muuse oo wakiil ka ahaa Midowga Yurub oo ku yiri: "“ar hadaad baxaysaan beritaba soo qaata boorsooyinkiina”.

## 6. 3. WAA LA ISKU HAYSTAA WIXII MADAXDA KAA DHIGAY

Maamulka shirka dib u heshiisiinta Soomaaliyeed ayaa waxa uu tan iyo bilowgiiba u ekaa mid uu qof walbaa gacanta kula jiro isaga oo aan qofna ka sugin amar. Inkasta oo shirku uu ku furmay dib u heshisiin loo dhigay DKG ah iyo hogaamiye kooxeedyadii ay Ethiopia wadatay ee ka soo horjeeday, si loo gaaro dawlad qaran oo loo dhan yahay, hadana fikradaasi kama soo gudbin miiskii lagu go'aamiyey. Tan iyo bilowgii ka dib shirku waxa uu u muuqday sidii hashii ay habar dugaag u heshiisay oo midba cad la kacay.

Waxaa isku qabsaday cadkii Soomaaliyeed saddexdii dawladood ee jiidda hore ee loo xilsaaray arinta oo kala ahaa; Djibouti, Ethiopia iyo Kenya. Taasina waxay noqotay mid waafaqda hadalkii taariikh galka ahaa ee madaxweynihii hore ee Kenya Moi, ka jeediyey Aqalka cad ee Maraykanka oo ahaa in 3 da dal ee jiidda hore midna ka daacad ahayn in dawladi ka dhalato Soomaaliya. Waxaa dhaqaaqyada socda laga wada dareemayey kelmadihii gabayka xikmadeed ka mid ahaa ee: "waxaa badan mid baadida kula daydaya daalna kaa badane, oo aan hadana doodayn in aad hesho daa'in abidkaaye".

Waxaa xujo lama furaan ah noqotay waxa dawladda Djibouti oo uu dadaalkoodii iyo deeqdoodii iyo daacadnimadoodii oo dhan fashiliyey Cabdiqasim waxa ay weli isugusii adkaynayeen taageerada Cabdiqasim. Taas oo markii dambe sababtay in dawladii Djibouti inta loo heshiiyo daaqada lagala baxo oo la gaarsiiyo heer ay ka carooto shirkii. Halkaa waxaa ka muuqday in dawladaha IGAD aan midoodna doonaynin in dawlad Soomaaliyeed oo cageheeda isku taagtaa ka dhalato. Sidaa awgeed waxay dawlad walbaa isku mashquulisay dano iyada u gaar ah oo lid ku ah jiritaan Soomaaliyeed. Sida shaqaalaha dawlada Kenya oo ay ka muuqatay in ay doonayaan oo keliya lacagata san dareertada ah ee ay ku helayaan adeega iyo martigelinta shirka.

Dal kasta oo ka mid ah kuwa Jiidda hore waxay samaysatay koox gaar ah oo la yiraahdo kooxda u nacamleeya dawladii soo dhisatay. Tusaale kooxda SRRC oo iyagu abidba iska ahaa camiil ay Ethiopia u adeegsato burburinta iyo minjaxaabinta qaranka Soomaaliyeed, marka laga eego taariikhda ay baalka mugdiga ah uga jiraan shakhsiyaadka kooxdaas hogaamiya.

Waxaa xusid mudan hadal uu Cali KH. Galayr ka yiri xaflad uu ku dhigay Hotel Grand Rechency oo ahaa "anagu waxaanu nahayn dawlad dhicis ah oo kobci lahayd hadaan loo adeegsan ragaas maanta na garab fadhiya ee SRRC ee bal aan weydiino iyaga waxay guul gaareen illeen waa anagaa haatan isku miiska wada fadhinee, iga ogaada nin kasta oo Xabashi hoos gala hoog baa u dambeeya. War hooy haddaan casharo wada qaadanay haatan ma wada tashanaa oo isku garab ma noqonaa"?. Ra'isulwasaarihii hore, Galaydh, inkastoo ay iska jiraan dad ku eedaynaya lacaga fara badan oo uu horay iyo gadaalba uga cunay qaranka Soomaaliyeed, waxa uu sharaf iyo qadarin weyn uga mutaystay wadaniyiinta Soomaaliyeed go'aankiisa caanka ah ee Xabashi necaybka ah iyo sida geesinimada leh ee uu ula dagaalamo, sidaa awgeed waxay dad ku doodaan xataa haduu dambi kaste horay uga galay qaranka waa in wanaagiisani isku fuuqasadaa oo la cafiyo.

## 6.4. DAWLADIHII JIIDDA HORE OO IS ERYANAYA

Mudadii oo dheeraatay awgeed iyo dadkii ku hawlanaa shirka nabadaynta Soomaaliyeed oo is wada fahmay is barasho guud ahaaneedna ay dhex martay ayay in badan oo ka mid ah xubnihii ay soo dirsadeen dawladaha jiidda hore oo asal ahaan Soomaali isugu wada imaanaya ay u adeegsadeen is barashadoodii xaga cadaawada iyo is jilaafaynta. Waxaa dhacday in matalayaashii dawladda Djibouti ay sida dadka reer Djibouti u caadada ah ku mashquuleen cunitaanka qaadka oo gaarsiisay heer ay habeenkiina qayilaan maalintiina quuriyaan.

Haddaba taasi waxay dariishad furan tustay matalayaashi dawladda Ethiopia oo aan dayicin fursadaas oo bilowday in ay hoos cagta uga laado inta u muuqatay wax garadka ee aan ku soo jeesan Karin suuldhabaalaha ayna ku guulaysteen in ay hogaankii shirka gacanta ku dhigaan, bilowgii markii laga soo guurayey Eldoret.

Wiilashii Soomaaliyeed iyo Tigreega ee dawladda Ethiopia matalayey oo iyagu ahaa kuwa madaalayaal ah ayaa ku guulaystay inay noqdaan madaxda shirka oo qodob walba iyo dhacda walba loola soo noqdo. Wiilashaasi xataa waxay hayeen shaqadii Booliska oo habeenkii inta ay madasha shirka ku wareegaan si rondo ah marka ay taageerayaashooda kooxda SRRC ah mid kasta ka mid ah ku soo hubsadaan goob uu ku qayilayo oo uusan ka soo dhaqdhaqaaqi Karin, rag ama dumar kuu ahaadaba. Waxay ku guulaysteen in ay Soomaalidii intii nuxurka lahayd ka dhigaan mid ay qaataan oo gacantooda ku jira iyo mid ay ka takhalusaan oo iska carara sida xubnihii ugu muhiimsanaa Bulshada Rayidka ah iyo xubnaha aqoonyahanka ama waxgaradka ahaa (*resource persons)*.

Mar dambe ayaa waxaa hurdadii ka soo toosay dawladdii Djibouti oo isla markay aragtay in iyaga oo banaan qorrax ah jiifa waagii ugu baryey shadaaftoodii ka qaatay shirka oo dibada ka istaagay. Laakiin waqtigaasi waxa uu ahaa mid lala daahay oo ay taageerayaashi Ethiopia diyaarsadeen xataa xubnihii dawlada Soomaaliyeed ee la dhisayo u soo gali lahaa Golaha Shacabka – Baarlamaanka. Sidoo kalena Golihii Wasiirada iyo xataa Madaxweynihii.

Waxyaalihii ergada iyo dawladda Djibouti ka gacshay hurdada oo tusay inay Ethiopia geed gaaban iyo geed dheerba ufuulayso sidii ay shirka ku burburin lahayd ama uga dhigi lahayd mid iyada uun dan u ah, waxaa ka mid ahaa warqaddii lagu tuhmay inay Ehtiopia inta soo qortay u dhiibtay hogaamiye kooxeedyada iyada taageersan. Warqaddaas oo nuxurkeedu ahaa in Dawladda Djibouti ay tahay mida burburinaysa shirka horeyna u jebisay cahdigii lagu mamnuucay hub la geeyo Soomaaliya. Taasina waxay kicisay in dad badan oo ka mid ahaa ergada ay ka xanaaqeen warqadaas iyo waxa ay xambaarsan tahay, dabadeedna si kulul ugu jawaabeen dawladda Ethiopia. Sidoo kale dawladda

Djibouti waxay qabatay war saxaafadeed ay arintaas uga jawaabayso isla markaan ay ku cadaynayso inay shirka ka baxday inta ay dawladda Ethiopia ku amar ku taaglaynayso.

Dhaqdhaqaaqaas oo soo jiitay dareenka ergada shirka iyo xataa Soomaalida dibadda ka joogta ayaa gaaray in uu hawlgeliyo qaramada midoobay, dareenkaas oo ku salaysnaa in ay aqoonyahano iyo waxgarad Soomaaliyeed ka dhiidhiyeen ficilada ay labada dawladood ee ay ku qanacsanaayeen in ay Soomaalidu ka wada ilbaxnimo horayso ku kacayaan. Is khilaafka labada dawladoodna lama xallin tan iyo markii la gaaray go'aanka ah in lagu kordhiyo hawsha dawladaha ku jira IGAD oo dhan, ayna arinta Soomaaliyed ka wada taliyaan, iyada oo amarka laga wareejiyo dhallinyaradii khibrada iyo aqoonta laga badiyey ee ku guuldaraystay inay shirka ka mira dhaliyaan lagana dhigayo heer Wasiir.

Bishii Oktoobar ee 2003 ayaa shirweyne heer Madaxweyne ah oo arinta Soomaaliyeed looga hadlayo lagu qabtay magaala madaxda dalka Uganda ee Kambala. Waxaana ugu muhiimsanaa ee shrikaa la isku afgartay in shirweyne heer Wasiir ah oo isla arinta lagu falanqaynayo lagu qabto Nairobi, kaas oo guddoonkiisa lahayd dawladda Kenya. Shirkaas isagana waxaa ka soo baxay in la sameeyi nidaam dib u gurasho xiilad dagaal – retreat si loogu saxo qaladaad iyo ceebo ay ka cabanayeen ergada Soomaaliyeed iyo weliba kuwa dhanka kale ee ka soo horjeeda. Waxaa kale oo shirkaa lagu go'aamiyey in la kordhiyo dawladaha IGAD ee ku hawlan shirka oo laga dhigo dhammaan dawladaha ku bahoobay IGAD halkay awal ka ahaayeen kuwa Jiidda hore la ah Soomaaliya oo keliya.

Waxa kale oo la isla afgartay in la baabi'iyo shirkad iskeed isaga samaysantay oo loo bixiyey Guddiga Hogaamiyeyaasha (*leaders' committee*), iyada oo loo dad badinayo gogoshooda oo lagu soo biirinayo dad kale oo u badan aqoon yahano. Taasina waxay rucbi iyo argagax ku riday kooxdii 24 nin ahayd oo ka cabsi qaba in la harqiyo. Waxaana ka mid ahaa waxyaalihii ay ku

doodeen ee ku adkaysteen in laga saaro meesha dadka aqoonta culus ku hubaysan ee loo yiqiinay aqoonyahan iyo waaya arag siyaasiyiin ah (*resource persons*), codsigaas oo markii dambe laga aqbalay. Nasiib darrose taasi waxay noqotay albaab uu furihiisii lumay oo looga bixi waayey qolkii Safari Park.

## 6. 5. IS HARDIGII (SRRC) & SAMATA-BIXINTA OO MADAXWEYNEYAAL DHIBAY

Wax la iska daba raftaba waxaa galabnimadii 8 dii Janaayo 2004 ka soo degay Ariportka Joma Kenyata madaxweynaha Uganda, Musafeni oo habeen iyo maalin ku khasaariyey dhexdhexaadinta iyo la kala shawrka kooxaha Soomaaliyeed ee is haysta. Waxa ugu weyn ee uu arkay madaxweyne Musafeni ayaa u muuqday dareen yasid oo uu ka qaatay hogaamiye kooxeedyada Soomaaliyeed oo waxa ay isku haystaan iyo waxa ay dhabtu tahay ay yihiin kaaf iyo kala dheeri, hase ahaatee waxa uu ku salaynayey oraahdiisa iyo waanooyinkiisa sidii mar uun looga gudbi lahaa musiibada haysata ummadda Soomaaliyeed.

Markii uu habeenkii oo dhan la kala hadlayey oo kuwada qanciyey in aroortii la qabto xaflad lagu heshiiyey oo lagu furayo kulankii dib ugurashada ee la isku afgartay, ayaa nasiib darro aroortii markuu ku soo asbaxay si uu xafladdii u furo waxa uu la kulmay wejiyo ka gedisan kuwii uu xalay ka seexday oo waxay ku noqdeen "Kas Rag Soomaaliyeed waa gadaloob rag kaaga dambeeyey oo kaad ku ogyed maahan". Waxaa ka mid ahaa xujooyinkii ay kooxo ka mid ah kuwa is haysta la yimaadeen "hadde shirka looma dhama oo waxaa ka maqan dawladihii tan iyo sanadkaa soo waday hawsha ee ma la'aantood baan wax bilaabi karnaa, iyo maxaa loo soo kordhiyey madaxda cusub ee loogu talo galay inay nagu ciriiriyaan xulashada xubnaha xildhibaanada".

Is jiid jiid iyo sabsabitaan dheer ka dib waxa uu Musafeni ku guulaystay inuu ku qanciyo hogaamiye kooxeedyadii in la furo xafladdii. Intii uu waanada

waday madaxweyne Musafeni waxa uu isagoo marna xanaaq marna xasilooni kudeyaya usheegay hogaamiye kooxeedyada in aysan haatan waxba ahayn balse ay wax ku nonon karaan karaamaynta dadkooda, isaga oo run ahaan ugu cadaynaya in aan cidina soo dooran, xoogna aysan wax ku qabsan, boqortooyana ku helin sidaa awgeed ay dani ugu jirto inay hadda inta gacmaha is qabsadaan wax wada raadsadaan iyaga oo ka bilaabaya qaranimo doon ay dalkood dantiisa ku eegayaan. Wuxuuna ugu goodiyey in ahdaysan taldiisa yeelin ay ku dambaysnayaan halkay ku dambeeyeen hogaamiye kooxeedyadii iyaga ka horeeyey ee Soomaaliyeed sida Caydiid oo talo walaal ka diiday madaxweyne Musafeni qudhiisa.

Intaa markay arintu marayso ayey hogaamiye kooxeedyadii bilaabeen inay u kala ordaan kuwii iyaga ka soo horjeeday ee uu hogaaminayey madaxweynihii DKG, C/Qasim. Intaan hadalkii la afjarin balse ujeedadiisii la isla gartay ayaa durba waxaa la iskula soo booday dhunkasho iyo xabad isku qaad dhex maraya kooxihii iska soo horjeeday sida Cabdulahi Yusuf iyo Cabdiqasim. Ama DKG ah iyo SRRC hadaan si kale u dhahno. Laakiin dawladdii Ethiopia oo horeyba u sugaysay waxa dhaca si ay uga ficil qaadato ayaa goobtii ka caroortay iyadoo u qaadatay in kooxdoodii laga caqli badiyey. Beddelka kuwaasna dawladda Djibouti ayaa baarka firatay oo ugaratay inay marakan guul ku fadhido, inkasta oo arintu ay ku dambaysay cayaar kugu celi  ama cayaari waa gelin dambe. Haddaba xafladaas oo u ekaatay gari laba nin kama wada qosliso ayaa kooxina mashxaradaysay tan iyo maalmihii dambe kooxina ku mashquulsanayd is abaabul iyo kala orod aad moodo in col usoo dhacay.

10 kii Janaayo 2004 ayaa mar kale waxaa la isugu yimid xiritaankii qabanqaabada gogosha wadahadalada dib ugurashada, iyada oo xafladdii heerka madaxweyne lagu furay lagu xirayo heer wasiir. Xafladaas qadada ahayd ayaa waxaa ka jeediyey khudbado qiiro leh oo wax ku ool ah labada Wasiir arima dibadeed ee dalalka Kenya iyo Djibouti – K. Musyoke iyo Cali A. Faarax. Intii ay khudbadahaasi socdeen waxaa isku dhinac taagnaa oo isu qoslayey labadii isugu

cadawsanayd ee Cabdiqasim iyo Cabdilahi Yusuf, oo ku caan baxay inuu midiba midka kale ku habaari jiray dhimasho.

Halkaa waxaa ka bilowday isku day isbahaysi cusub oo dhex maraya labadii isugu nebcayd – Cabdiqasim iyo C/llahi Yusuf oo dhawr jeer intay kulano kala gooni gooni ah yeesheen iska dhaadhicinayeen in iyagu uun meesha isku haystaan ayna haboon tahay inay ku heshiiyaan oo midna madaxweynaha qaato midna Ra'isulwasaaraha. Hase ahaatee taasi maalmo yar ka dib waa talansan weyday oo kuftay, iyada oo su'aashu noqotay yaa dabbaal ah oo duurka loo diraa – waa kuma kan ku qancaya in uu Ra'isulwasaare qaato. Waxayna isla keeni waayeen fikiradii ay iska qabeen oo is diidanaa awgeed, halka uu C. Yusufna aaminsanaa in uu C.Qasim quustay oo ku fashilmay dawladnimadii uu sheegtay sida aawgeed uusan ka dayrin doonin xataa hadduu Wasiir caadi ah u balan qaado.

Sidaas badelkeedana waxaa aaminsanaa C. Qasim oo is lahaa alleylehe markaan C. Yusuf wuu garwaaqsaday inuusan madaxweyninimo indhasaarayn oo xataa wasiir caadi ah ayuu kaaga qanci doonaa ee la heshii. Alleylehe laba kala bariday kala war la', intaan la isku ajarmin dad yaa ukala warama wax isma yeeleene. Isku soo duuduuboo waxa uu shirkii Safari Park ee 20 cisho loogu talo galay in uu ku soo afjaro khilaafka gaamuray ee hogaamiye kooxeedyada ka dhexeeyey noqday "dhedo roob noqon weyday".

Sida iska caadiga noqotay kooxdii ama qofkii ay khayaanadu jiq ku noqotaaba waxa uu marka ugu dmabaysa ciirsan jirya halhays loo bixiyey; "ownership" oo macanaheedu yahay "lahaanshihii" oo loola jeedo lahaanshihii shirka oo ay Soomaalidu lahayd ayaa la leexiyey ee ha la soo celiyo.

Halku dhegaas loo isticmalai jiray qoolka khayaanada waxaa la soo dejiyey ama la sii amba qaaday maalintii taariikhdu ahayd 18 kii Disembar 2002 ee uu banaanbaxa culusi ka dhacay xerada Eldoret iyada oo lagaga soo horjeeday fikrad qaladanayd oo ay IGAD ku qancinaysay SRRC iyo soo saarayaashoodii Ethiopia. Fikradaasi waxay ahayd in 250 ergay oo reer SRRC ah iyo 200 oo DKG ah la isku daro oo 450 kaas laga dhigo xildhibaano shirkana halkaas lagu af jaro.

Taasina markay socon wayday ayaa lagu afjaray in la qabto 360 Ergay oo ka barax la' cinwaanada qadarineed ee ay ka midka yihiin; Prof, Dr., iwm.

## 6. 6. QODOBKA 30 AAD EE AXDIGA OO LAF DHUUN GASHAY NOQDAY

In muddo ah haday arintu jiq ahayd ayey labada Wasiir Arima Dibadeed ee Kenya iyo Djibouti waxay bilaabeen in ay kooxaha ukala dab qaadaan iyaga oo ku eegaya "colka waraf ma lagu dayey". Waxay bilaabeen inay koox walba gooni u arkaan oo muwaafaqa ka keenaan qaabka ugu sahlan ee looga gudbi karo caqabada taagan ee ay ugu weyn tahay tafsiirka qodobka 30 aad ee Axdiga ku Meel gaarka ah. Taasi waxay ahayd musiibo ka hortaagan inay kooxaha Soomaaliyeed fahmaan oo tixgeliyaan 76 da qodob ee kale ee ku xusan Axdiga, oo markaa ay ka gudbaan muranka qodobka 30 aad oo xusaya cidda soo dooranaysa qofkii xildhibaan ka noqon lahaa dawladda soo socota.

Ugu dambaystiina iyada oo ay labada Wasiir Arima Dibadeed raacayaan nidaamkoodii ahaa ukala dab qaad iyo gooni gooni wax uga dhaadhacsiin ayey ku gulaysteen inay kooxihii oo dhan isugu keenaan Aqalka Madaxtooyada Kenya oo ay halkaa madaxweyne Kipaki ee Kenya hortiisa ku saxiixaan heshiis loo dhan yahay. Waxaa ugu muhiimsanaa u kala dab qaadkaas in la isu soo dhaweeyey labadii garab ee DKG ah oo aan la is tusi karinin.

Waxaase xusid mudan sidii uu ukala sirayey Wasiirka Arimaha Dibadda ee Kenya, K. Musyoka oo u ekaa nin kala maslaxaya caruur isku masayrsan. Intuu koox walba gooni ula shiray ayuu ka dhaadhiciyey wixii loo baahnaa in ay wada aqbalaan oo ay ugu muhimsanayd in ay waafaqaan ansaxintii qodobka 30 aad ee 15 kii Sebtembar 2003. ansaxinta qodobkaas oo nuxurkeedu ahaa in ay xubnaha xildhibaanada noqon doona soo xulanayaan Hogaamiye kooxeedyada, Siyaasiyiinta si rasmi ah loogu casuumay shirka, iyo Oday dhaqameedyada oo

isugu jira xubnaha ka tirsan kooxaha kala duwan ee DKG ah, SRRC, NSC, G8, iyo Civil Society, iyada oo qaybtana lagu salaynayo qaabka hab beeleedka 4.5.

Hogaamiyeyaashii usgu tagay Hotel Safari Park waxaa laga wada saxiixay qodobo ay ka mid ahaayeen kuwa soo socda:

1. in magaca Axdi Qarameedka Soomaaliyeed ahaanayo "Axdiga Ku meel Gaarka ah ee Federaalka ah ee Jamhuriyadda Soomaaliya"
2. in magaca dawladdu ahaanayo "Dawladda Ku Meel gaarka ah ee Federaalka ah ee Jamhuriyadda Soomaaliyeed"
3. in qodobka 24 ee Axdiga, Faqradiisa 9 aad oo xusaysay "laguma faafin karo dugsiyada diin aan ahayn tan Islaamka, tani ma khusayso dugsiyada aan Muslimku lahayn" laga saaro oo dib uhabayn lagu sameeyo.
4. in xubnaha Baarlamaanku ay ahaanayaan 275 xubnood oo ugu yaraan 12% ahaanayaan Haween.
5. in ay xubnaha Baarlamaanka soo xulayaan madax kooxeedyada isgu jira; DKG ah - TNG, SNC, SRRC, G8, Maamul goboleedyada, iyo Bulshada Rayidka ah
6. in wixii saxiixa heshiiskaan ka dambeeya loo gudbay wejigii 3 aad ee shirka[20]

Haddaba K. Musyoka waxa uu qola walba goonideeda ugu qanciyey in ay heshiiskaas sidiisa u qablaan iyo in koox walba uu mid uun ka mid ah hogamaiyeyaalkeeda usaxiixo. Sidaa awgeed kooxda SRRC waxaa usaxiixay Cabdulahi Yusuf, DKG ah waxaa usaxiixay C/Qasim, Civil Society waxaa u saxiixay Sharif Saalax, NSC na waxaa usaxiixay M. S. Yalaxow. Sidaa ayaa lagu dhameeyey in afartaa qof ay saxiixa ku qalinka ugu duugaan iyaga oo jooga madaxweynaha Kenya hortiisa ee aqalkiisa madaxtooyada. Markii goobtii ballanta saxiixa la tagay ayey sheeko kale oo yara sirgaxan soo baxday, taas oo ka dhex

[20] . Baaq ay soo saareen Guddiga Dib isu waafajinta ee Ergada ee Wada Tashiga Dib u gurashada, Shirka Dib u heshiisiinta Qaran, Nairobi, Kenya, 29 Janaayo 2004.

dhalatay tallaabooyinkii u dhexeeyey Hotel Safari Park iyo Aqalka madaxtooyada – State house.

Koox walba abaabul hoose oo ay wax ku badelayso ayey bilowday. Tusaale; DKG ah waaxay keensatay in uu Maxamed Cabdi Yusuf u saxiixo, halka uu Xasan Abshirkii hore dibadda ku dhacay. Cabdiqasim isaguna waxa uu halkaa u fariistay sidii madaxweyne dal Afrikaan ah oo goob joog ah. Xafladii ayaa la isku arkay iyada oo qolo walbaba horay loogu soo sheekeeyey in ay iyagu uun madax yihiin oo aan laga saraynin. Tusaale; markii ay kooxdii 24 ka ahyd weydiiyeen waxa ay nimanka tirada badan ee Balcad ka yimid meesha ka samaynayaan waxa uu K. Musyoka u sheegay inay yihiin dalxiisayaal Hotelka dhan ka degan oo lacgtooda la baxaya, markii ay kuwii Balcad

Weydiiyeen derajada ay meesha ku leeyihiina waxa uu usheegay in iyaga iyo nimanka 24 ka ihi ay wada siman yihiin oo hogaamiyeyaal Soomaaliyeed wada yihiin. Halkaa ayey markay Aqalka madaxtooyada isugu yimaadeen ku wada dhegaysteen qodobadii heshiiska ay soo wada ogolaadeen oo loogu akhriyey AfSoomaali, iyada oo weliba loogu celceliyey hadana qoraal ahaan loogu qaybiyey. Halkaa ayeyna si ka hadal la'aan ah ku wada saxiixeen in ay aqbaleen qodobkaas lam. 30 iyo furitaanka wejiga 3 aad ee shirka oo ah kii ugu dmabeeyey ee awood qaybsiga.

Nasiib darro maalin ka bacdi ayey shir qabteen kooxda SRRC oo ay wehliyaan garabkii hore ee DKG ah, waxayna cadeeyeen in ay ka noqdeen saxiixii ay shalay qalinka ku duugeen. Markii dambe ee la weydiiyey sababta ay uga noqdeen, laakiin hadana waxay dhiibi waayeen jawaab toos ah. Halkaa ayaa waxa loo fahmay in ay qolo kale ku soo tiri diida saxiixii aad qalinka ku duugteen oo ka noqda, hadana aysan weli jawaab cadaynaysa sababta ka heleen cidii soo amartay. Markii dhawr jeer su'aasha inta la weydiiyey ay reer SRRC ka jawaabi waayeen ayey ugu dambaystii ku af gobaadsadeen "markaan saxiixaynay waa nala sixray oo malaha biyihii aan xafladda ka cabnay baa sixir nalookugu daray".

Taariikhdu markay ahayd 5 tii Febraayo ayuu mar kale Wasiirka Musyoka soo qoray warqad uu wax xoogaa ku khafiifinayo kuna sii sharaxayo qoraalka la

saxiixay ee la isku raacay oo mugiisu ahaa qodobka lam. 30. mar kale ayuu hadana Misyoka soo qoray warqad kale oo sharaxaad iyo cadayn ka bixinaysa heshiiskii lagu saxiixay 29 kii Janaayo 2004 xarunta madaxtooyada, gaar ahaan qodobka lam. 30 oo isagu noqday laf dhuun gashay. Waxa uu cadeeyey in hogaamiyeyaasha uu saxiixu sheegaya aayihiin kuwii lagu martiqaaday wada hadalkii dib ugurashada ee 9 kii Janaayo 2004, cidda xubnaha Baarlamaanka soo xulaysaana tahay siyaasiyiinta ka kala tirsan DKG, SRRC, SNC, G8, iyo Bulshada Rayidka ah oo u dhacaya heer jifa jifo hoosaad[21].

Hase ahaatee taasi weli waxba ma daaweyn. Hadana mar kale ayuu soo qoray faahfaahin dheeri ah 17 kii isla Febraayo. Markaa ka dib waxaa la fariisiyey xubnihii ergada oo dhamaa 366 qof oo loo qabtay plenary loo dhan yahay oo loo akhriyey qaabkii wax loo akhriyey, wax loo qoray, wax loo saxiixay iyada oo ugu dambaystii laguna dhameeyey doodii mudada dheer soo jiitamaysay. Halkaa waxaa fadhiyey Col C. Yusuf oo ku soo tala galay in uu ansaxinta iyo meel marinta heshiiskaas gaashaanka ku dhufto isaga oo ka dhaadhicinaya xubnaha ergada inay diidaan ansaxintiisa.

Hase ahaatee taasi waxay u gadoontay dhanka kale oo si cod buuxda ah oo ay cadad yar oo fara ku tiris ihi ka dhiman yihiin ayey ergadii oo kax ka taagnayd sii daba dheeradka shirku ku ansaxiyeen halkaana waxaa guul darro iyo jab kala noqday Col C. Yusuf kii SRRC da. C. Yusuf waxa uu inta is madax maray halkaa ka geystay af lagaadooyin badan oo uu shakhsiyaad iyo kooxo ugu gefay, isaga oo ku celcelinaya "aniga ayaa iska leh Puntland wax u qaybinteeda, aniga ayaa oranaya kani waa tuug, tani waa wareegtooy, kani waa Al-Qaacida, iwm". Xataa waxay maalinkaa xanaaq awgii si xun isugu dheceen C. Yusuf qaar ka mid ah saaxiibadiisii SRRC sida Salaad dheere oo ka dib markii uu warqad ku akhriyey Af Ingiriis oo uu ku qanci waayey Cabdulahi uu ku qayliyey "Ingiriiskii waxaa iga dilay Salaad oo ku hadal dambe ma lahan", dadkii oo dhan oo hal mar ku wada

[21] . Mudane K. Misyoka, Wasiirka Arimaha Dibadda ee Kenya, Bayaan lagu qeexayo go'aankii 29 kii Janaayo 2004, 17/2/2004.

qoslay illeen iyaga oo dhanbaa la yaabanaa Ingiriiska qaabka ku cusub loogu dhawaaqayey ayaa waxay ku kala abuurtay labadaas saaxiib shaki iyo foorjo.

Ugu dambaystiina waxaa gogosha shirkaas soo xiray Ergaygii khaaska ahaa Mr. Kiplagat oo afka ku dhuftay in aan mar dambe laga raalli noqon doonin in Soomaaliya ay la hasyte u ahaato dawlad gaar ah oo ka mid ah kuwa jiidda hore (dabcan Ethiopia).

Maalintaa ka dib ayey SRRC shirka mar kale ka xirxirteen boorsooyinkoodii, iyaga oo firdhiyey warqad ay cinwaan uga dhigeen "bye bye Nairobi". Arintaas oo ay dhawr jeer inta ku dhawaaqeen ay waayeen cid ka hoos qaada oo soo cara celisa ayey markii dambe shir isugu yimaadeen oo ku go'aamiyeen inay iska joogaan iyaga oo isku waansaday xageebaan u noqonaa illeen waan iska wada war qabnaa oo qofkeena qof kale ma marti gelin karee. Weliba waxay isku dayeen inay u yeeraan kuwii kale ee Jawhar u baxsaday oo iyagiina ay colaado iyo dagaallo badani ka soo food saareen xaga deegaankii reer Jawhar, iyada oo laga diiday Maxmed Dheere in uu keeno magaalada qof aan u dhalan. Sidaa awgeed ay joogi waayeen oo ka carareen saaxiibadiisii uu ku dhaaranayey ee kala ahaa Moorgan, Cabdilahi Sheekh Ismaaciil iyo Maxamuud Siid oo midba meel u fakaday.

Mirihii ka soo baxay shirkan Uganda ayaa waxay wada noqdeen kuwa u hiillinaya dawlada Djibouti. Taasina waxay si hal haleel ah uga caraysiisay dhankii kale ee dawlada Ethiopia, sidaana ay uga baxday shirkii. Intaa keliya ugama harine Ethiopia waxay amar ku siisay taageerayaasheedii in ay isaga baxaan shirka oo iyaga oo dagaal cusub ka bilaabaya Soomaaliya ay dib ugu noqdaan. Waxay si talantaali ah ugu soo gurtay hub iyo saanad culus, iyada oo aan u aabayeelaynin cuna qabatayntii hubka ee uu caalamku ku soo rogay Soomaaliya. Qaabka ay Ethiopia shirka uga baxday oo ahaa mid tartiib tartiib ah ayaa mugdi iyo cawaweer gelisay qaabkii looga war bixin lahaa shirka. Waxay dagaaladaas cusub ee dawladda Ethiopia abaabushay marteen nafta in badan oo Soomaaliyeed.

Waxaa xilligaa dawladda Ethiopia lagu eedeeyey in ay hurisay dab colaadeed oo ka dhacay dhawr goobood iyo gobollo ay ka mid yihiin Galgaduud oo ugu yaraan laba meelood ah; Xeraale-Cabudwaaq iyo Ceelbuur, Mudug meel ka mid ah, Marka iyo nawaaxigeeda, ciidan culus oo Ethiopian ah oo la keenay Gedo, iyo weeraro dhawr ah oo loo qorsheeyey in lagu soo qaado Muqdisho.

Waxaa kale oo siyaasad ahaan loo dareemayey in ay Ethiopia oo isku dayeysa inay taageero iyo kalsooni ka hesho xubna Soomaaliyeed ay si qalbi xaarnaan ah isugu muujinaysay taageerayaasheeda iyada oo uga dhigaysa cadaw aan laga cadwsanayn DKG ah iyo taageerayaasheeda. Waxaa ceeb iyo dambi laga dhigayey in qofkaasi uu ka tirsan yahay ama la shiray DKG ah. Dadaal kaas barbar socda ayaa ahaa in ay dawladda Ethiopia buunbuuniso oo garab siiso dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee Riyaale oo sheeganayey in uu madaxweyne gaar ah ka yahay magaalada Hargaysa.

Waxyaalaha faaxishooyinka ah ee uu sameeyey Riyaale isaga oo Ethiopia taageero iyo kalsooni uga raadsanaya waxaa ka mid ahaa in dadkii magaalada Hargaysa degenaa loo kala saaro kuwa horay u degenaan jiray iyo kuwa dhawaan soo degay. Halkaa ayaa waxaa magaalada laga soo saaray boqolaal qoys oo asalkoodii ka soo jeeda Koonfurta Soomaaliya. Inkasta oo dadkaasi ay aaminsanaayeen in dhulku dhul Soomaaliyeed uun yahay oo aan la kala xigin, hadana looguma jixin jixin ee dharaar cad ayaa lagu yiri ka qaata shadaafadiina.

Waxaase taa ka sii naxdin weynaa markii ninkii lagu arko calaamad ahlu diin isaga oo ka soo jeeda mid ka baxsan qabiilada aan sida buuxda u degin Hargaysa, siiba haddii uu fir ahaan ka soo jeedo qabiilka Daarood, inta la qabto ayaa gacanta lafa gelinayey dawlada Ethiopia iyada oo markiiba lagu eedaynayo inuu ka tirsan yahay ururka Argagixisada ahe Al-Qaacida ama jabhadda gobanimo u dirika Ogadenya ee OLF, halkaa oo inta badan lacag khaash ah lagu badelanayey qofkii la dhiibaba. Ficiladaas uu Riyaale ku kacay ayaa ka xagjirsanaa kuwii odeygii ka horeeyey ee Cigaal ahaa, sababta oo u ekayd in uusan Riyaale haysan kalsoonidii uu shacabkka ka haystay Cigaal oo uu is lahaa

isu xaqiiji shacabka iyo in uu Riyaale dabeecad iyo dhaqan u lahaa dil iyo dagaal, maadaama uu weligii ku soo jiray ciidan iyo colaad.

Waxaa dhawr jeer isa soo taray dacwooyin iyo doodo ay dawladda is magacawday ee Soomaaliland ku doonayso in caalamku u aqoonsado dawlada ka gaar ah Soomaaliya, isla markaana waxay ku celceliyeen in aysan iyagu wax shuqul ah ku lahayn shirka nabadeynta Soomaaliyeed ee ka socda Kenya.

Haddaba 19-25 kii Disember 2003 ayaa wafdi aad u ballaaran oo ka socda Jaamacadda Carabta uuna hogaaminayo Mr. Samiir Xasan kormeer uu ugu kuur gelayo xaaladda nololeed, amaan, siyaasdeed iyo qaab dhismeed ee ka jira gobolkaas ku kala bixiyeen gobolka. Wafdigaas oo ka jawaabayey cabashooyinkii isa soo daba jiitamayey ee maamulka halkaa ka jiraa ay kaga codsanayeen aqoonsi gaar ah ayaa go'aankiisu markan ahaa in ay si toos ah ugu waramaan maamulka Soomaaliland iyaga oo wax uga dhaadhicinaya weji walaalnimo.

Waxaana ka mid ahaa waxyaalihii ay tooska ugu cadeeyeen, ka dib markii ay uga tacsiyeeyeen falal kii argagixiso ee ayaamahaas lagu dilay halkaa dhawr ka mid ahaaa shaqaalaha ajnabiga ee joogay, in ay Jaamacadda Carabtu taageersan tahay oo hiil iyo hooba la garab taagan tahay shirka nabadeynta Soomaaliyeed ee ka socda Kenya ayna dawladii halkaa lagu soo dhiso u aqoonsan doonto dawladda keliya ee Soomaaliyeed[22].

Waxay amuuruhu ku socdaan god aan laga war qabin wax ka soo bixi doona, waxaa soo kordhay loolankii siyaasadeed iyo is eryadkii dhex marayey dawladaha jiidda hore. Waxaa la gaaray waqti ay dawlada Djibouti soo rogaal celiso dagaalkeedii siyaasadeed. Waxaa aad loo dareemayey in ay Djibouti gacan weyn ka helaysay bulshada Soomaaliyeed ee qabiil kasta leh oo had iyo jeer ku cabanayey "kaalaya walaalayaalow ha nooga taginina cadawga Ethiopia". Waxaa is daba marayey qoraalo kala duwan oo isku wada nuxur ah oo ku qaylinayey

[22] . Xaafiiska Xoghayaha Guud ee Ergayga Khaaska ah ee Jaamacadda Carabta uga wakiilka ah arimaha Soomaaliya

Beesha Caalamka in ay dawladda Djibouti ku soo noqoto madasha shirka iyo in uusan caalamku ku sii deynin Ethiopia in ay gacan xor ah ku hayso Soomaaliya.

C/qasim waxa uu bilaabay in uu dawlad iyo Baarlamaan cusub dhiso si uu boorka uga jafo habaca galay dawladiisi iyo is khilaafka xoogan ee ku salaysan amar diidada ay ku hayaan madaxda uu horay udhistay ee Ra'isulwasaraha iyo Ra'isul Baarlamaanka. Waxa uu Madaxa Baarlamaanka umagacaabay mudane: Mustaf Guudow, halka uu Ra'isulwasaarana umagacaabay Maxamed Cabdi Yuusuf. Hase ahaate labadii hore oo ku sugnayd madasha shirka way ka biya diideen badelkaas oo iyaga oo gaashaanka u daruuraya ayey soo saareen baaq ay ku sheegayaan in ay weli yihiin Madaxa Baarlamaanka Soomaaliyeed iyo Ra'isulwasaaha taariikhdu markay ahayd 9 kii Desembar 2003[23].

Markaa ayey dawladda Ethiopia isla markiiba saaxiibtinimo iyo xiriir fiican la samaysatay labadii nin ee ay weligeed colka la ahayd ee lagu kari waayey inay xiriir deris wanaag ah la samayso. Waxaa shir ay leeyihiin Baarlamaanka Afrika oo dhan lagu qabtay magaalada Addis Ababa, Ethiopia. Hadaba markii uu soo xaadiray shirkaas madaxii Baarlamaanka ee cusbaa ayuu arkay kii hore, Cabdalla deerow oo kursigii Soomaaliya ku fadhiya. Waxa uu Deerow ka helay dawladda Ethiopia isaga oo jooga madasha shirka dib u heshiisiinta ee Kenya. Markii ay labada nin goobtii ku doodeena waxaa isla markiiba goobtii fadhiga laga eryey Madixii Baarlamaanka ee cusbaa mudane Guudoow. Waxaa iska daba wareegatay dacwooyin iyo is cuuryaamin is daba joog ah oo dhex martay kooxdii hore ee DKG iyo kuwa cusub. Waxaa dhacday in ay Xasan Abshir iyo saaxiibadiis qoraalo is daba joog ah u qoreen adduunyada iyaga oo ka digaya inay siiyaan wax taageero ah dhaqaale iyo taageero siyaasadeed toona.

[23] . Xasan Abshir Faarax iyo Cabdalla Deerow Isaaq, War Saxaafadeed, 9/12/2003.

## 6. 7. ISKU MAAWEELIN SHIR DIB U GURASHO AH

Mar kale ayaa dib loo dhigay wada hadaladii gaarka ahaa ee loogu magacdaray Dib ugurasho *(retreat*). Waxa la cadeeyey in ay Wasaaradda Arimaha Dibadda ee Kenya go'aansatay in dib loo dhigo wada hadaladaas oo la maaganaa in la qabto 20 Nofembar 2003, laguna badelo mid lagu beegayo kulan heer Wasiir ah oo la qabto 9ka Disembar 2003 [24].

Taariikhdu markay ahayd 20 kii Nofembar 2003 aya wafdi ballaaran oo ka kooban IGAD iyo IPF uuna hogaaminayo Dr. Attala Hamad Bashir, Xoghayaha Guud ee IGAD booqasho ugu tageen madaxweynaha Jamhuriyadda Djibouti mudane Cumar Gelle si ay ugu soo qanciyaan in uu shirka ku soo noqdo isla markaana ku soo celiyo C/Qasim. Socdaalka Wafdigaasi waxa uu ka amba qaadayay heshiiskii lagu gaaray kulankii labaad ee Heerka Wasiir Arima Dibadeed ee dhacay 28 kii Oktoobar 2003 ee lagu gaaray in la qabto wada hadal loogu magac darayo Dib u gurasho (*retreat)* oo dhex maraya inta hogaamiye kooxeedyada ah oo keliya.

Haddaba wafdigaas ayaa warbixnitoodii ku soo qoray in ay soo dhaweyn wanaagsan kala kulmeen madaxweynaha Djibouti uuna u ballan qaaday in uu shirka ku soo noqon doono dawlad ahaan, C/qasim na uu isagu keeni doono. Hase ahaatee marka ay wafdiga qaybtiisii kale tageen Muqdisho si ay C/qasim ugu soo qanciyaan in uu shirka ku soo noqdo waxay kala soo kulmeen guul darro oo C/qasim wuu ka diiday in uu ku soo noqdo shirka aslanba. Dhanka kale kooxihii 24 ka nin ahaa ee isku tilmaamay inay iyagu yihiin Guddiga Hogaamiyeyaasha waxay ka soo istaageen oo la marsiin waayey in ay aqbalaan in qof tiradoodaas ka dheeri ah lagu soo daro, marka laga reebo C/qasim laftiisa. Sidaa darteed waxay wafdigaasi soo jeediyeen in la qaado tallaabooyin wax tar

[24] . Amb. John Lanyasunya, Xiriiriyaha Shirka Dib u Heshiisiinta Qaran ee Soomaaliyeed, 15 Nofembar 2003.

keenaya oo looga gudbo sheegashooyinkaas iyo is jiid jiidkaas shirkana looga dhigo mira dhal[25].

Wafdigaasi waxay ku dadaaleen inay madaxda ka saraysa ku qanciyaan faa'iidooyinka uu yeelan doono wada hadalkaas dib ugurashada ihi oo ay ku doodayaan in uu abuurayo jawi cusub oo ay fursad isugu helaan hogaamiye kooxeedyadu ay wax isaga dhaadhiciyaan iskuna fahmaan iyada oo aan lagu dhex jirin. Taasina waxay u ekayd mid looga jwaabayo fikrado badan oo ay ergada Soomaalidu soo jeediyeen oo ku wada salaysnaa in laga tanaasulo qaban qaabada wada hadalka dib ugurashada loogu magac daray maadaama la isku af garan waayey cidda ka qayb galaysa oo uu waqti dheer qaatay. Waxaase dhan walba laga tixgelinayey dulqaadka sii dhamaanaya ee dadweynaha Soomaaliyeed iyo Beesha Caalamkaba oo ka xun mudada aadka u dheer ee u shirku qaatay iyo dhibaatada dawlad la'aanta sii kordhaysa.

Iyada oo tan iyo maalintii uu shirku bilowday ay dadaalo is daba joog ah wadeen aqoonyahanada iyo indheergaradka ergada iyo korjoogtada ka mid ahi qoraalo, daraasado, shirar, tababaro, wacyigelin, muxaadaraad iyo idaacado ka hadlid intaba si ay uga badbaadiyaan shirka waxyaalaha duminaya iyo waxyaalaha laga yaabo inay sii kala geeyaan dadka Somaaliyeed ee maanta isu helay fursada kulan. Waxa ka mid ahaa siminaaradaas iyo shirarkaas kuwa ahaa noocyada siyaasad iyo fikrad wadaaga ama is weydaarsiga ah.

Mid ka mid ah siminaaradaas ayaa ahaa kii ay Xarunta Dumarka Soomaaliyeed ee shirka ku qabatay Hotel Silver Spring 3-5/11/2003. Halkaa oo laga soo saaray buugyare koobaya waxyaalaha shirka ka qaldamay iyo sidii lagu xalin lahaa. Kooxdii diyaarinta buugyaraha lahayd waxay shardi ku galeen in ay wixii markaan ka dambeeya qaadayaan olole lagu badbaadinayo shirka ilaa uu mira dhal ka noqdo oo dawlad macquul ah looga dhiso Soomaaliya, waxayna la baxeen magaca ah "*Somali Vigilliant Politician*" – oo la macna ah "Siyaasiyinta Ma

[25] . Dr. Attala Hamad Bashir, Xoghayaha Guud ee IGAD, Warqad ku socota Wasiirka Arimaha Dibadda ee Kenya, Mudane; K. Misyoka oo xilligaas ah Guddoomiyaha Guddiga Wasiira Arima Diabdeedka ku

daalayaasha ah ee Soomaaliyeed". Qoraalkaas wuxuu iftiimiyey waxyaalo badan oo IGAD iyo IPF mugdi kaga jiray ama ay ka gaabsanayeen inay afka ku dhuftaan, ka dibna intay ka qaateen qoraalka ay ku dhaqmeen.

Buugyarahaas oo ay ku saxiixnaayeen labada qof ee abaabulka iyo hogaaminta shirka lahayd ee kala ah Dr. Qasim Xirsi iyo Hon. Casha A. Cabdallah oo soo aruurshay fikradihii halkaa la isugu keenay ka dibna dhiraandhiriyey ayaa lagu soo bandhigay golihii kal-fadhiga (*plenary*), 6 dii Disembar 2003, laakiin markii buugyaraha lagu qaybiyey goobtii ayaa isla markiiba waxaa kacay buuq iyo qaylo cirka isku shareertay sii sababay fara saar iyo aflagaado tii ugu fool xumayd. Waxaa aad uga xanaaqay qoraalkii buugyaraha raggii Dagaal-oogayaasha ahaa iyo xataa maamulkii IGAD oo iyagana uu qoraalku ku eedeeyey inay ka seexdeen taageerida kuwa sama jeclayaasha ah, isla markaana ay naas nuujiyeen xumaha ay qabqablayaasha dagaalku ku hayaan guud ahaanba Soomaaliya.

Maalintaa oo Qabqablayaasha dagaalka u noqotay maalin madow ayaa keentay inay ragii waaweynaa fara saaraan dumarkii iyo dhalinyaradii oo aflagaado ka dib gacan ku dayey. Waxaa naxdin lahayd in la arkayey Cabdalla Deerow oo intuu hoos ka soo booday Marwa Caasha A. Cabdalla oo hadlaysay feerna ku bilaabay oo ku qaylinaya "SHARMUUTO…. SHARMUUTO…IWM". Sidaa si u egna waxa ku cataabay Gen. Moorgan iyo asxaabtiisii yar yareyd ee burarka ka daba sidatay oo iyagana maalintii oo dhan laga qab qabnayey Hon. Caasha, tooshana ku raadinayey Dr. Qaasim.

Intaa keliya maahane tan iyo maalintii dambe dhawr jeer ayaa marwa Caasha la soo weerary rag iyo dumarba iyada oo ay u ekayd in la khaarijiyo, maadaama uu shirku beryahaas kuleyl awgii gaarsiisnaa heerka is khaarijinta. Inkasta oo ay waxaas oo dhami ahaayeen kuwa aad uga soo horjeeda dhaqanka iyo xeerka Soomaaliyeed hadana cidi kama jawaabin, waayo waxaa loo arkayey in ragaasi ay yihiin kuwa ay waxaasi u caadi yihiin oo aan dhaqan Soomliyeed iyo

---

hawlan Shirka Dibu heshiisiinta Soomaaliyeed

xeer midna qabanin oo horey ay uga gudbeen. Qoraaga Dr. Qasim oo buugyaraha qoraalkiisa la wadaagayey Hon. Caasha isna waxaa lagu helay bartamaha magaalada oo lagu handaday inkasta oo uu isaga caabiyey qaab dagaal iyo xataa qaab dacwo uu u gudbiyey booliska Kenya.

## 6. 8. MILANKII IYO KALA MIIRANKII ERGADA

Waxay taariikhdu iska socotaba xubnihii wafdiga shirka u yimid ayaa sidii loogu tala galay sii kala caajisay oo ku kala leexday dhankii fikirka, rumaysadka, caadada, iyo dhaqanka intaba. Waxaa la arkayey dadkii shalay isku meel ka wada yimid iyaga oo heshiis ah oo isku hadaf ah kuna wada socday go’aan mid ah oo ku salaysna mabda’ooda ama dantooda oo durba sii kala siibanaya oo iska soo horjeesanaya.

Isku soo duboo ergadii waxay u kala baxday dhawr qaybood oo kala ah;

1. Koox khamri cab ku noqotay meeshii oo waqtigii ku dhamaaday goobtiina ka gadoomay iyaga oo Aalkoliisteyaal ah. Waxa ku jiray dadka noocaas ah qaar iyaga oo wadaado ah madasha shirka yimid, laakiin si fudud lagu dufeeyey,

9. Koox qaad ku baratay ama ku sii fogaatay oo sii badsaday kimiyadii ay horay uga cuni jireen, sidaa awgeedna daroogiisteyaal (*addicted*) ku noqdeen.

10. Koox maskax khafiif ku dhacay oo ay waali yar oo *stress* ama laba miyirle ku keenay kala rogmaday meeshii oo ay dhaandhaanimo aysan horay u lahayn ku soo baxday siday derbiyada isaga fadhiyeen oo u fikirayeen,

11. Koox si kale maskax waalli kale ugu dhacday oo intay ku dadaaleen hawlo siyaasadeed oo aysan waxba ka mira dhalin karin orodkii ka dhamaaday,

maskaxdoodiina buuq ku furmay, sidaa awgeed iyaga oo badelan la arkay sida iyaga oo dabeecad xumo iyo xanaaq ka soo haray, dhiig kar ku dhacay, dhiig iyo nafaqo la'aan ku dhacay, iwm oo soo noqday iyaga oo bukaan socod liita ah,

12. Koox si toos ah u waalatay oo ka rogmaday meeshii iyaga oo aan waxba gelin, ayna usii dheer tahay inaysan wax daryeel naafo ah (*disabillity*) oo la ogyahay haysan illeen lagamaba hoos qaadaynine,

13. Koox uu ku dhacay cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDS oo shaac ku ahaa geyiga la joogay, iyada oo laga dareemayey gabdhaha ku gaaf wareegayey xerada shirka ee tumasha doonka ahaa inay yihiin kuwa ku soo tala galay galaafashada dad badan,

14. Koox u dhimatay siyaabo kala duwan oo halkii lagu soo aasay- Allaha u wada naxariistee,

15. Koox tiro yar oo intay dadkii Kenyanka ahaa dhex galeen ka soo guursaday gabdhihii Baantuuga ahaa oo aan dib usoo noqon ee la degay iyagii,

16. Koox tiro yar oo halkaas lagu soo qaadsiiyey maskax ka badel gaarsiiyey heer ay ka ridoobaan diintoodii oo soo gaaloobay,

17. Koox kaga faaiidaysatay waqtiga dheeraaday inay meeshii ku guursadaan oo ku ilma dhalaan, iyada oo qaarkood ay horay u la'aayeen fursad noocaan oo kale ah, gaar haan dhalinyaradii qurabaha ka timid oo u baahnaa fursada noocan oo kale ah,

18. Koox kaga faaiidaysatay waqtiga dheeraaday inay ganacsi ka samaystaan dalkii loo martida ahaa oo dukaamo ka furtay iskana xasilay ama ganacsi alaab dhoofin iyo alaab soo dejin ah ka bilaabay,

19. Koox intay xaasaskoodii keensadeen halkaas ka sii raajiciyey dibad u qixitaan iyo laymanka lagu dhoofo sida warqadaha la isugu soo dacwoodo (*sponsorship)* iyo nooca is xambaarka (*human smuggling*),

20. Koox dulaaley ka noqotay dad dhoofiskii, farsamayn ama soo dhamayn fiisooyin Keenya lagu soo galo iyo kuwa looga baxo, iyo kala dulaalida hay'adaha horumarineed ee hawlaha Soomaaliya ka shaqeeya oo saldhigoodu yahay Kenya,

21. Koox ka soo faaiiday inay xildhibaanimadii iyo dawladnimadii ay soo doonteen soo heleen oo soo gadoomay iyaga oo faraxsan walow uu waqtigu ku dheeraaday,

22. Koox ugu dambaystii xeradii looga kala guuray oo ayaamo ka dib ay askartii Kenya iska xirxirteen ama ku kala dhuuntay suuqa xaafada Eastleigh ee Soomaalidu ka degto Nairobi.

# CUTUBKA SHANAAD

## 5. 0. SIDA LOO XUSHAY HOGAAMIYEYAALKA SOOMAALIYEED

## 5. 1. MURASHAXIINTII MADAXWEYNENIMO OO ISKU MAANDIIMAYA

Horaa loo yiri nin madaxa ku socda iyo nin mijaha ku socdaa waa isku maandiimaan. Weligeedba wax qof la toosan ayaa qof kale la tuur leh ama hadaan si kale u dhahno waxaad ceeb iyo dhaqan xumo moodaa nin bay

camalkiisa tahay ee weligaa ha la yaabin. Waxaa la yiri; laba nin oo midna musaali dhawrsan yahay midna faasiq taariku salaad ah yahay ayaa safar dheer oo lug ah isla galay. Musalligii markii waqtiga salaada la gaaraba wuu tukadaa isaga oo marka uu saxaroodaba istijoonayey. Laakiin kii taarikusalaadka ahaa waxa uu la ciilkaambinayey ninka mar walba saxarada gacanta isaga dhaqaya oo hadana cuntada hacanta kula cunaya. Dhjanka kalena musaaligu waxa uu ka xun yahay in uu cunta la cuno nin aan salaad isku dayeyn. Ugu dmabaystii ayuu mussaligii oo adkaysan waayey ku yiri Taarigii "saaxiibow cuntada yaanaan isku weel ku cunin maadaama aad faasiq tahay. Markaa ayuu Taarigii; War ninyohow kheyr Allaha ku siiyo welwelkii I haystay baad iga goysaye. Waxan ka welwelsanaa sida aan cunta weel ugala cunayo "NINKAAGA MAR WALBA DABADA GACANTA KULA JIRA EE HADANA ISLA GACANTII WEELKA ILA GELINAYA".

Waxaa xilka Madaxweynenimada u tartamay in ka badan 40 qof oo rag iyo hal gabar isugu jira, laakiin maxaa sababay? Ma fikrad qaldan baa? Ma ceeb siyaasadeed baa? Ma dabi la galay baa. Su'aalahaa soo dhan waxaa dhab uga jawaabi kara qofkii goob joog ahaa oo qaab u socodka madasha shirka xog ogaal u ahaa. Hase ahaatee kan akhristaana wax weyn buu ka ogaan karaa ama ka garawsan karaa.

Markii ugu horaysay waxaa isa soo sharaxay ilaa toban qabqable dagaal, ka dibna qaar ka mid ah aqoonyahanadii meesha joogay ayaa ficilooday oo go'aansaday in ay la tartamaan raga ay u arkayeen inay yihiin cadawga Soomaaliyeed ee cadaabta adduunka ku raajiyey dadkooda oon wax dambi ah galabsan. Waxa ugu muhiimsan ee kiciyey ama dhiiri geliyey kooxda aqoonyahanada ah ee isa soo sharaxday waxay ahayd ku adeegashada ay qabqablayaalka dagaalku ku adeeganayeen oo mar walba ka codsanayeen in ay wax u qoraan. Waxay u adkaysan waayeen dhaqan qallafsanaanta qabqablayaalka ee ku salaysnayd dhaqanka reer baadiyenimo. Tusaale ahaan waxaa dhacaysay in uu qabqabluhu ku amro aqoonyahanka sidaas wax iigu qor. Ka dib uu aqoonyahanku damco in uu toosiyo deedna uu kula dagaalo oo ku

yiraahdo ha badelin warkayga ee sidaan kuu iri iigu qor. Waxaad mar walba maqlaysay dagaalyahan ku canaananaya ina adeerkii aqonyahan ah "war heedhee adiga ayaan waxba aqoonina hebel baan arkay oo sidaa u qortay waxaana u qoray wiilka yarka ah oo ina aderekii ah oo wadan hebel wax ku soo bartay ee malaha adiga ayaan qabiilka danihiisa ugu adeegayn si daacadnimo ah". Markaa ayuu aqoonyahan ku qancinayaa dagaalyahankiisa "mudane; qofkaad aragtay isaga oo sidaa u qoraya ujeeduu ka laha adiguna ujeeda kale ayaad leedahay ee aan sida damacaagu yahay kuugu toosiyo".

Run ahaantii waxa ugu weyn ee aqoonyahanada iyo siyaasiyiinta rasmiga ah hor yaaalay waxay ahaayeen iyada oo dadweynuhu ay siyaasi u yaqaaneen dagaal-oogayaasha iyo kuwii ay waayo hore magacooda maqli jireen iyaga oo badanaaba xumaan uun ku maqli jiray. Waxaa mar kaste murug iyo uur kutaalo ku reebaysay qofka qalbiga fayow ama siyaasiga saxda ah in waxa keliya ee hor taagan ay yihiin magacaaga iyo magaca aabahaa lama maqli jirin waayadii hore, ka soo horjeedka kaasna waxa calanka loo luxayey oo dhulka laga qaadayey kuwii hantidii qaranka qof ahaan ama qoys ahaan u xaabsaday, kuwii kumanaan qof qudha ka jaray, kuwii sharta iyo xumaanta intaa maleegayey, iyada oo waxa kaliya ee lagu qadarinayey ahayd magacooda ayaa la maqli jiray.

Waxaase xusid mudan in iyada oo runta loo dhaadhacayo ay yaryihiin hadayba jiraan qof Soomaali ah oo magaciisa wanaag lagu maqli jiray, hade kadibse Allaha noo dhaliyo. Waxaa taas ka sii daran in ragii aan weligeen siyaasiyiinta heerka sare ah u aaminsanayn aan aragnay kuwiiyoo aan wax dhaamin kuwii maalintii Axada ahayd dagaalka ku soo galay caasimadda. Kuwooda ugu sareeya xaga aqoonta siyaasada waa kuwa ka hadlaya mawjadihii laga hadli jiray waagii Shuuciyadii, Dagaalkii qaboobaa, Militarigii, Isticmaarkii, iyo Gobanimodoonkii. Nasiib darro cidina saacad gadaal uma celin karto oo taariikhdii qarnigii la soo dhaafay kuma noqn karno illeen duni aan la macaamilno oo waqtigaas ku joogta kama helayno koonkaane (*planet*).

Halkaa marka la joogo waxaa iska soo daba kacay aqoonyahano dhallinyaro u badnaa oo dhawr ah, kuwaas oo badankoodu ka yimaadeen

qurbaha. Halkaana waxaa iska soo if baxay laba nooc oo Murashaxiin madaxweynenimo ah. Markaa ayaa kooxiba kooxda kale waxay bilowday inay kula dagaalamayso halku dhega ah "wuu waalan yahay". Haddaba aan is weydiinee kooxdee waalan? Mise kulli waa wada waalnaayeen? Mise kulli waa wada caafimaad qabeen ee siyaasad bay isku weerarayeen? Mise siyaasada qudheedaa waalli ahayd?.

Qurbaawiyiintaas ka qiiraysnaa ba'a iyo hooga dalkooda haysta waxaa u baxay magaca Qurbaawiyiin oo af Ingiriisiga ku ah diyaasbara (*diaspora*). Haddaba waxa la isla dhex marayey waxan yaa sameeyey iyo waxan yaa qoray oo hadana la leeyahay ciyaalkii diyaasbara. Markaa ayuu maalin afka furtay Muse Yalaxow oo ku dhawaaqay "Areey ciyaal asparo aa na wareeriyey", isaga oo ku qaldaya magaca kaniinka madax xanuunka oo leh waxan wareerkay na geliyeen hadana ma kaniinka magacooda ahaan ka qaadanaa??!!!.

Maalinkaa ka dib waxaa la dareemayey in dagaal oogayaashu ay il adag isaga hayeen ragaas iyo gabadhaas qurbaawiyiinta ah. Sidaa darteed waxaa bilowday dagaal lagu hayey kuwooda isa soo sharaxa. Waxaa laga dhaadhiciyey dawladihii safka hore in ay kuwan aqoonta sheeganayaa yihiin kiwii dalka burburkiisa u sabab ahaa ayna lama huraan tahay in xerada laga saaro, hadii meesha nabad laga doonayo.

Laakiin maalintii dambe ayaa talo aan ku qancay waxaa inaga oo kuwaa ka mid ah noo soo jeediyey nin ka mid ah saraakiishii sare ee maamulka shirka ee reer Kenya. Waxa uu yiri: "idinka hadaad aqoonyahano tihiin waxaad doonaysaan xaq daro idinkana yeeli mayno. Waxaad rabtaan in aad jagooyinka wadanka wada qaadataan laakiin ogaada in ay dagaal-oogayaashuna muwaadiniin xaq leh yihiin oo ay barkooda rabaan. Alleyhele waa gar ayaan ugu jawaabay, waxaanan u ballanqaaday in aan maslaxa noocaas ah gaarsiinayo saaxiibaday. Markaa ayaan bilaabay barnaamij ku talinaya in ay labada dhinac ee aqoonyahanada iyo dagaalyahanadu wada tashadaan jagooyinkana loo badiyo dagaalyahanada laakiin aqoonyahanada si looga faaiidaysto aysan meesha ka marnaan, aniga oo ku qancinaya inay labadu is kaabayaan isuna baahan yihiin.

Qoraalo guubaabadaas xambaarsan ayaa ku soo baxaya faafintaydii rasmiga ahayd ee aan soo saari jiray todobaad walba.

Hase ahaatee waxaa mar walba taagnayd in aysan labada kooxood wada shaqayn karin, waayo isku dayayaashii siyaasada ee dagaalyahanada ahaa waxay ku shaqaynayeen nidaam ku salaysan ganacsi iyo dulaalnimo oo loo adeegsanayo siyaasad, kaas oo ah intaas anaa raba ee intaas ma kuu ogolaadaa iyo mayee wallee hadaadan intaa ii ogolaan intaas baan dhib ku gaarsiinayaa. Dhanka kale aqoonyahanada qurbaawiyiinta ubadani waxay isku dayayeen inay dabakhaan siyaasad waafaqsan tan caalamka aan ku ag noolnahay een hawlgalkiisa kulaalayno inaga oon ku xisaabsanayn.

Dhab ahaantii, waxa la hardamayey ama jebiyey Murashaxiintii rayidka ahaa waa gacan shisheeye ee ma ahayn dagaal-oogayaasha keligood. Horta qof kaste oo is sharaxaya waxa uu ku qasbanaa in uu taarriikh nololedkiisa u gudbiyo beesha caalamka oo ay ugu horayso saddeexda dawladood ee safka hore. Dawladahaasina waxay markiiba daraasad ku saabsan asalka iyo raadka qofkaas isa soo sharaxay, deedna waxa hangool la isaga qabanayey qofka laga dareemo aqoon, ilbaxnimo, firfircooni wadaninimo, iyo cadaaladnimo hor ujeed ah. Haduusan Murashaxu soo gudbin taarrikhdiisa oo ku adkaysto Soomaalida uu codka ka rabo keliyana cidina ma oga is sharixidiisa oo liiskaba kuma jiro.

Madaxweyne u tartamayaalkii rayidka ahaa ee u badnaa aqoonyahanada qurabaha ka timid waxay isku bahaysteen urur-daladeed ay ula baxeen "*Civilian Presidential Candidates* – CPC", iyaga oo isku ballansaday in ay si hagar la'aan ah isula shaqeeyaan ugu dambaystana mid iyaga uun ka mid ah dhismihiisa isugu tagaan. Nasiib darase ugu dambaystii waa la kala daadiyey oo laga raayey illeen waxaa la dheeraa dhaqaale, khibrad hagardaamo, khayaano, iyo garab shisheeye intaba. Sababaha ugu muhiimsan ee kallifay inay aqoonyahanada qurbaawiyiinta ihi isa soo sharaxaan waxaa ka mid ah:

1. Waxay soo dhadhamiyeen dhibaatada qurabaha iyo sharaf la'aanta laga helo dal shisheeye. Illeen ninkii wadankiis ka tagee wehelkiis ka dheeraada welwel ma huro iyo walbahaare.

2. Waxay ka xanaaqsanaayeen dalkooda 15 sano aan dawlad lahayn ayna dagaaloogayaal isaga cayaarayaan shacabkiisa. Sidaa darteed waxay ku dadaalayeen inay ula ficiltamaan dagaal-oogayaasha si aan xabad ahayn ee waafaqsan nidaamka aduunka la joogo,
3. Waxay dareemayeen in aqoontoodu ka qayb qaadan karto badbaadinta dalkooda iyo dadkooda,
4. Waxay rabeen in ay shacabka Soomaaliyeed ee dulman ku dhiiri geliyaan ama niyada ugu dhisaan in ay suurta gal tahay in lala xisaabtamo dagaal-oogayaasha.

Intaasi waa qaar ka mid ah fikradaha guud ee ay qabeen murashaxiinta rayidka ah ama aqoonyahanada qurbaha lagu tilmaamayey oo aan ka aruuriyey intaan Dalladii ay ku midoobeen uga ahaa Xoghayaha. Hase ahaatee waxaa jiray sababo kale oo qofba si ugu gaar ahaa. Tusaale; qaar baa waxaa dhiiri geliyey u shaqayn ay u shaqaynayeen murashaxiin dagaal-ooge ah oo aan waxna qorin waxna akhrin oo ay qoralada u diyaarinayeen. Qaar kalena waxaa iska qaaday ficilo shakhsi iyo hinaase iyaga oo aan ujeedo fog lahayn. Qaar kalena waxay ka rabeen in ay taasi u noqoto sallaankii ay ku soo fuuli lahaayeen dabaqada siyaasadda.

Markii ay murashaxiinta rayidka ihi samaysteen dalladaas siyaasadeed ee CPC ayna bilaabeen in ay xisaabtamaan oo dalbadaan xaq iyo tixgelin la mid ah midka la siinayo dagaal-oogayaasha ayaa waxaa baraarugay dagaal-oogayaashii oo markiiba bilaabay halgan ay uga takhalusayaan siyaasiyiinta curdunka ah. Si ay isaga reebaan oo u wiiqaan murashaxiinta aqoonta ku hubaysan ayey qabqablayaalkii hubka ku hubaysnaa mareen dariiqyo fara badan oo kala duwan. Waxaana ugu khatarsanayd midii lacag shardi ka dhigida oo ay hirgelinteeda laaluush badan ku bixiyeen. Waxay laaluush ku bixinayeen si lacag kale oo baad ah looga qaato. Qiimaha lacagtaas oo markii hore ka soo bilaabatay boqol kun oo doolar waxayse ku hirgashay laba kun oo doolar. Dhanka kale kooxdii dhallinyarada u badnayd ee aqoontooda xukunka ku doonaysay uma seexan ee

way ka dagaallameen taas oo ay in mudo ah ka rafanayeen. Waxaana ka mid ahaa kuwa ka dhiidhiyey shardigaas aan xariga sharci cuskanayn Ustath Xuseen Cilmi, Dr. Qasim, Hon. Caasha, Prof. Mahdi iyo kuwa kale.

Qiyaastii 30 ka mid ah ku dhawaad 50 kii utaagnaa jagada madaxweynenimo waxa uu mid kaste oo ka mid ihi si dhab ah u aaminsanaa in uu isagu ku soo baxayo doorashadaas oo aan cidina ku haysan madaxweynonimada Soomaaliyeed. Mid walba waxa uu ku kalsoonaa oo cuskanayey riyo iyo wahmi ka dhaadhicinayey in uu ku guulaysanayo, intay doonto ha u le'ekaato daliishiisuye.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha ay raga tartamayey qaarkood ku xisaabtamayeen; faal iyo sixir uu soo dhigtay, isla weyni iyo is cajabin qof aahaaneed ama qoys uu ka soo jeedo, lacag badnaan uu is biday isaga oo aaminsan in ay Soomaalidu la mid yihiin digaagad masago loo daadinayo, dhiiri gelin dawlad ama hay'ad shisheeye oo gadaal ka soo riixaya, aqoon iyo siyaasad toosnan uu is biday qof ahaan, iyo wanaag ama samajeclenimo uu qofkaasi arkayey in uu buuxin karo oo uusan uga muuqan meesha mid kale oo buuxinaya.

Anaga oo hoos usii dhaadhacayna, raga badan iyo halka gabadh ee murashaxiinta ahaa waataanu qeexanay siday ugu kala baxsanaayeen laba kooxood oo iska soo hor jeeda; koox dagaal oogayaal ah iyo koox aqoonyahano reer dibadeed – qurbaawiyiin ah (*diaspora*).

Hadalada dhaxal galka maadaysiga noqday ee laga hayo qaar ka mid ah murashaxiintii, siiba kooxdii aqoonayahanada Qurbaawiyiinta ahaa waxaa ka mid ah mid yiri daqiiqadihiisii qudbada: "waar hooy Soomaaliyeey anigu maanta abaal weyn baan idiin galay oo aan idina inaad iigudaan idinkugu fadhiyaa hada. Abaalkaasi waa in aan kumanaan mayl oo dalkaan ka imid iyo halkan u dhexaysa idiin soo gooyey daraadiin si aan idiin badbaadiyo ee idina iga faaiidaysta oo iidoorta inaan idiin noqdo madaxweyne". Qof kaste oo ninkaan warkiisa maqla waxa uu markiiba go'aan ku gaarayaa in uu murashaxani waalan yahay, laakiin

waxa hadana suurta gal ah in lagu fikiro may u baahnayd Soomaalidu nin aqoontiisa iyo ilbaxnimadiisa oo kale wata oo ku badbaadiya dadka iyo dalka isaga oo naftii hure ah (*samaritan*)?. Jawaabtuna waxay noqonaysaa haa, balse isaga ayaa qaab aan haboonayn u shukaamiyey.

Saaxiib kale oo isna sharaxnaa waxay uu ku doodi jiray marka ay idaacaduhu weydiiyaan sida uu ku mutaysanayo in la doorto; "war anigu Soomaali wax weyn oon cidina u qaban baan u taray; 50 ton oo bariis ah baan ku qaybiyey tuuladaan ku dhashay waagii UNOSOM". Saaxiib kale waxa uu ku doodayey; "anigu ina hebel baan ahay oo markay dadku magaca aabahay maqlaan ayey kulligood iigu shubayaan codka illeen qoyskii aan ka dhashay baa qalbi wanaagsan loo wada hayaaye", inkastoo aanan magaca qoyska uu sheeganayo isaga ka hor maqal anigu. Saaxiib kalena waxa lagula taliyey in uusan iska bixin lacagta 2000 dolar ah ee baadda la isaga qaadanayo illeen way muuqataa in uusan ku guulaysanayne. Markaa ayuu ku jawaabay; war iska aamusa oo iidaaya idinku waxaa la arkaa in ay mucjiso dhacdo oo ay kulligood aniga ii ilduufaan iyaga oo rabay in ay qofka kale cod siiyaan ay hal mar aniga iigu wada shubaane". Saaxiib kale waxa laga hayaa "hooyaday baa iigu soo ducaysay". Saaxiib kale waxa uu isku hallaynayey faal iyo sixir oo waxa laga hayaa aniga Shiikh hebel baa iigu riyooday, faal la dhigayna waan ku soo baxay ee waxaba ha i shaki gelinina.

Waxaa xusud mudan in arinta faalka iyo sixirku ay ahayd mid si aan yarayn uga shaqaynaysay madasha jaahilnimada iyo iimaan la'aanta siyaasi isku dheegyada haysatay awgeed. Waxan xaqiiqsaday in guud ahaan qabqablayaalka dagaalku haysteen sixiroolayaal iyo faaliyeyaal ay kharash fara badan ku bixiyaan. Qaarkoodna waxayba ka tixraacayaan madaxdii hore ee dalka oo waxaas iyo waxyaalo u eg ku dhaqmi jiray iyaga oo u arka in ay taasi muhiim tahay siyaasad ahaan. Waxaa xusid mudan in sheeko noocaas ahayd oo maalin la iila yimid qudhayda. Waxaa ii yimid sadex nin oo aan mid ka aqaan. Wuu i baray labadii kale igana codsadeen in aan makhaayad fariisiyo si ay iigu

sheegaan fariimo muhiim ah ooy ii sidaan. Cashadii ka dib ayey warka ii fureen, waxayna fariintoodu xambaarsanayd akhbaartaan soo socota:

Shiikh hebel ayaa la tusay (inkastoo cida tustay ay iigu qarinayaan Ilaahay, dhab ahaantii waa Sheydaan hadiiba wax la tusay) in uu shirkani guulaysanayo oo dawlad waarta lagu dhisayo, madaxweynaha Soomaaliyana uu ku soo baxayo nin dhallinyaro ah oo qabiilkaas ah (kay igu tirinayaan). Ninkaas dhallinyarada ah ee da'daas ihi (da'daan jiro) waxa uu noqonayaa mid aan la filanayn oo marka lagu dhawaaqo ay dadku wada yaabi doonaan, laakiin ay dib ka wada mahdin doonaan. Sidaa si la mid ah waxaa faaliyey Shiikh hebel oo isna isla intaa oo kale soo saaray. Waxaana diinta lagu sheegay in marka laba Awliyo ay wax isaga markhaati kacaan ay la mid tahay Waxyi soo degay. Hade waxan ku leenahay Awguuriyo Allaha kula garab galo taasi way fushaye, wax welwel ah ha ka qabin ee iska seexo hadaad dhawaan madaxweynaha Soomaaliya noqon weydana kitaabadeena gub. Hade iminkana waa xilli dambe oo waan sii soconaynaa ee waxaan rabnaa in aad gado jawaan Qaad ah oon caawa Shiikha u geyno si uu ugu sii dhafro khilaawada, hadaad wax kale Shiikhaaga oo hada ka dib xertiisa kugu darsanaya wanaagaaga awgii ku quruxsanaysana waa adiga.

Waxan ka codsaday in ay ii raacaan dhawr nin oo saaxiibaday ahaa oo iyagu ka soo hor jeeday Murashaxnimadayda si ay uguqanciyaan khilaawada Shiikha. Waxan qaadanay Tax oo ugu tagnay nimankaan rabay oo qudhoodu khayilaad malaha taas oo kale la mid ah u fadhiya. Sheekadiina faraha ayaan ka saarnay. Laakiin markay warkii dhamaysteen oon isla helay dhegaha kuwii khilaawada iisoo sheegay iyo kuwii aan la rabay in aan ka qanciyo ayaan afkayga furtay oo cay iyo wasakh aanan markaa ka hor sii deyn ku sii daayey aniga oo dhanka kalena ku cadaynaya sida ay ugu qaldan yihiin turifadaas iyo gaalnimada ay ku gelayaan, meeshiina sidaa loogu kala haaday. Mindhaan mar dmabe kuma degdegtaan mar hadaad ku baraarugteen in dadkii maanta jaahilnimo cilmi ka bartay.

Xoogaagaas shactirooyinka ah ee aan kor ku soo xusnay waxaa lagu kala garan karaa heerka ay koox waliba isla joogtay iyo siday ugu aragtay inay iyagu qof ahaan iyo koox ahaanba xaq ugu lahaayeen. Inkasta oo mid kasta oo labada kooxood ka mid ihiba uu danihiisa gaarka ah ee khuseeya (*lobby)* – halgankiisa goonida ah watay hadana hoosta ayuu kala jiray kooxdiisa oo arintu waxay ahayd "geel jire geela waa wada jiraa waana kala jirtaa".

Waxa ugu daran ee dad waalayey waxay ahayd in badanaaba inta isa sharaxday ay salka ku hayeen dawlado iyo sharikado ay waxun isku soo af garteen. Dawlad walba midkay hoosta ku wadatay ayey dhegta ugu sheegtay in haduu soo bixi waayo aysan xeraday ku jirto dawladi ku jirin. Intaana waxaa dheeraa dabeecada qallafsan ee Soomaalida oo weligeedba ku salaysan isla weyni iyo naf jeclaysi oo qof walba waxa uu aaminsan yahay in uu keligii yahay Mahdigii soo daahiray. Markaa waxaa aad u adkayd in la helo qof xil ku doonaya mudnaan macquul ah oo uu isugu dareemay in uu leeyahay.

Kooxda dagaal-oogayaasha ihi waxay aaminsanayd in shirkuba iyaga keliya u gaar yahay, mararka qaarkoodna waxay ku doodayeen ha na loo kaga saaro madasha shirka dhalinyardaan aqoonta iyo ilbaxnimada aanan waqtigeedii joogin la boodaysa. Waxaa xusid ku celin mudan shactiradii ama maaddii laga dhaxlay Al-Xaaji Yalaxow oo intuu kuwii la socday marba mid dhalin yara ah oo shirka hor boodaya weydiiyey waxa uu yahay iyo halka uu ka yimid loogu wada jawaabay waa dhalinyaradii qurbaha ka timid (Arreey halkaanu xaw ahaay? Waa ciyaal *diaspora*!!. . . yaa xey tahay ciyaal aasbaraa (aspora) na wareeriyee yaa nagu soo fasaxay)!!

Xaga isku xukunka Diinta Islaamka, inkasta ooy jireen dhawr qof oo ku tala galkooda ugu weyni ahaa siday ku dhaqanka Islaamka meesha uga hirgelin lahaayeen, hadana hal Murashax ayaa si toos ah u cadaysanayey oo weliba ku doodayey had iyo jeer. Murashaxaasi waxa uu ahaa Al-Xaaji Maxamed Yaasiin oo isagu u arkayey xukunka uu raadinayo fardu cayn uu gudanayo. Al-Xaji Yasin

waxa uu kaga duwanaa guud ahaanba Murashaxiinta kale haday yihiin aqoonyahano iyo haday yihiin dagaalyahano labadaba xagga Qayixitaanka ama la jahrida hirgelinta Shariicada Islaamka, labiskiisa, dhaqankiisa sheeko iyo macaamil, kalsoonida uu isku qabo, isticmaalka jeebkiisa qof ahaaneed oo la waayey meel ay xaaraani ka soo gashay weligiis, iyo dhawr sifooyin oo kale oo wada amaan ah. Nasiib darose xildhibaanadii lagu soo xulay shuruudaha aan hoos ku xusnay way ka weecdeen u codayntiisa marka laga reebo laba ka mid ah. Malaha waxay ka baqeen in inta la baaro la soo saaro xildhibaan kaste oo codka siiyey oo dabadeed loo qabsado in uu argagixiso yahay illeen waxaa iska caadi ahayd in macnaha argagixisonimo loo fasirto Muslinimada qudheeda.

Dawrka ay lacagtu ka cayaartay cod bixinta ayaa, inkastoo uu jiray, hadana aan gaarsiisnayn halkii la filanayey. Malaayiin doolar oo badankeedu, hadaysanba kuligeed ahayn, horay looga soo dhacay shacabka Soomaaliyeed ee faqriga iyo gaajadu kala reebtay ayaa tan iyo intuu shirku bilowdayba diyaar ku ahayd madasha shirka oo aan sidaa looga fogeyn. Mar haday raga ugu lacagta badan meesha ahaayeen rag is wada og inaysan wax sharaf iyo weji waanagsan ah u haysan umada Soomaaliyeed horteeda, waxay ku wada hadaaqayeen iyaga oo jees jeesaya: "war heedhee Soomaali anagaa idinka naqaan oo waa marba inta aad shilin siiso anigana la igama shilin badin karo, balaq baan u daadinayaa sida digaagadii ama Eeyda, iwm". Taasina waxay u ekayd mid ku soconaysa xildhibaanadii awabla loo diyaariyey in ay ahaadaan tiimbare (*rubber stamp*) marba wixii loo baahdo laga saxiixdo.

Raga mici libaaxa ahaa oo ka faa'iidaysnaaya khibradahooda ku salaysan jajabinta iyo bahdilka kuwa tacliinta isku hallaynaya oo mar kaste iyaga ugu muuqda cadawga keliya ee ay leeyihiin ayaa kala dhex galay isku xir iyo midow yar oo ay yeesheen murashaxiinta rayidka ihi. Waxaa lagu dadaalay oo lagu guulaystay in rag tartamayaal ahaa laga dhigto ololeeyeyaal iyo taageerayaal kuwa kale. Sidaa darteed tartamayaalkii rayidka ahaa waxay ugu dambaystii u kala baxeen qayb waqtigu ku dheeraaday oo isaga noqday dhulalkay ka

yimaadeen, qayb boos hayn u noqotay qabqablayaal dib iska soo sharaxayey, qayb lagu reebay lacagtii baadda ahayd ee ay soo dejiyeen kuwii isku hallaynayey hantida qaran ee ay la hullaabnaayeen, qayb ballanqaadyo yar yar oon la xaqiijin lagu maslaxeeyey, iyo qayb isku qalajisay halkoodii oo ugu dambaystii geedka soo taabatay iyaga oo ku mahadsan naftooduna ku maqsuudsan tahay.

Hadaan carrabka ku dhufano raga doolarka la taagnaa ee aan baryo iyo axsaan wax ku doonayn waxaa ka mid ahaa ama ugu muuqaal dheeraa oo derajada heerka koowaad la siin karay sadexda nin ee kala ah:

a. Cabdiqasim Salad Xasan (ina Booy)
b. Cabdiraxmaan Jaamac Barre (Buluq buluq)
c. Faarax Wehliye Cadow (Sendiko)

Derajada heerka labaadna waxaa ku tartamayey sadexdii nin ee isugu soo haray wareegii sadexaad ee ugu dambeeyey is reeb reebka (*semifinale*) oo kala ah:

i. Cabdulahi Axmed Cadow
ii. Cabdulahi Yuusuf Axmed
iii. Maxamed Qanyare Afrax

Hadaba, halka ay lacagta xad dhaaf ka ah ee umada ay ku indha sarcaadiyeen ka keeneen bal adba garo. Hadaanse ka eegno dhanka waxtarka lacageed, marka ay derajada labaad galeen sadexdii iyagu isku soo gaaray wareega sadexaad ee guusha, waxaa meesha laga garan karaa in aysan lacagtu cayaarin dawrkii laga filanayey ee ay ahayd fal gargaare ama kaabiye uun. Saddexda hore waxay Soomaali oo dhan uga caan baxeen bakhylnimo. Waxaa la isla qiray inay yihiin raga Soomaali oo dhan ugu gacan adag oo naftooda xataa cuntada ay cunayaan kala bakhayla. Laakiin sadexda dambe, siiba labada liiska

gadaal uga jirta ee Cabdulahi Yusuf iyo Qanyare iyagu ma ahayn rag bakhaylnimo lagu xanto.

Inkasta oo loo kala lacag adeegsi badnaa sida liiskaan kor ku xusan loogu kala horeeyo, hadana waxa lagu kala duwanaa habka lacagta loo kala bixin jiray. Tusaale, labada bakhayl ee caanka ah, Buluq buluq iyo ina Booy waxay ku tashanayeen beec rasmi ah oo halka mar ee ugu dambeeya is gacan gelinta sayladda unbay qof walba codkiisa ka siisanayeen qiimaha ugu sareeya ee lagu gaaro naadada iyo xaraashka. Sidaa si la mid ah waxaa samaynayey Cabdulahi Cadow. Laakiin sadexda kale Cadulahi Yuusuf, Sendiko iyo Qanyare waxay intii shirka la joogay beeranayeen dad ay shilimaad ku kasbadaan iyaga oo siyaasada kale ee jirtana ugu ololaynayey si heer sare ah.

Intii xaalada xaniinyo taabadka lacagta la joogay, waxaa fursad dahabi ah helay Cabdulahi Cadow oo inta badan lacagta uu ku ololaynayey ay ka bixiyeen tujaar ku qaraabo ah ninka ugu daran ee ay iska soo horjeedeen Cabdulahi Yusuf. Waxaa hiil iyo hoo uusan horay ugu soo tashan la soo garab istaagay jifada Wabeeneeye iyo xubno ka mid ah isla Cumar Maxamudka uu ka dhashay Cabdulahi Yusuf, iyaga oo ka dagaalamayey si uusan ina adeerkood Cabduli Yusuf oo ilaaqi kala dhexaysay ugu soo bixin.

Kooxda dagaal-oogayaasha ihi waxay aaminsanayd in shirkuba iyaga keliya u gaar yahay, mararka qaarkoodna waxay ku doodayeen ha na loo kaga saaro madasha shirka dhalinyardaan aqoonta iyo ilbaxnimada aanan waqtigeedii joogin la boodaysa. Waxaa xusid mudan shactiradii ama maaddii laga dhaxlay Al-Xaaji Yalaxow oo intuu kuwii la socday marba mid dhalin yara ah oo shirka hor boodaya weydiiyey waxa uu yahay iyo halka uu ka yimid loogu wada jawaabay waa dhalinyaradii qurbaha ka timid (Arreey halkaanu xaw ahaay? Waa ciyaal *diaspora*!!. . . yaa xey tahay ciyaal aasbaraa (aspora) na wareeriyee yaa nagu soo fasaxay)!!

Xagga lacagta malaayiinta ah ee ay raga qaarkood la ciirayeen inkastoo aysan dunidu weydiinayn halka ay ka keeneen iyaga oo ka soo jeeda dalka aduunka ugu faqiirsan ee halka doolar ay wadaagaan ugu yaraan shan qof bishiiba, Cabdulahi waxa uu ku dagaalamayey kiishash waa weyn meeshuu rabo ha ka soo shaqeeyee.

Waxaa cajiib ahayd sida bahalnimada iyo naf la caarinimada ahyd ee uu ugu dagaallamay lacagtaas. Waxaa iska caadi ahayd in ay raga sidiisa oo kale malyan dheerka ahaa sida; Buluq Buluq, Sendiko, Cabdiqasim, iyo kuwa kale ay ku aqdaamanayeen halku dheg ahaa; "kun iyo kitaab". Intay qofka kun doolar ama ka badan u taagaan ayey kitaab jaamac ahna marinayeen in uu dooranayo. Laakin korneylku isagu taa ma yeelin ee wiilashii u ololaynayey intay kunka doolar qofka faraha ka saaraan ayey siinayeen hanjabaad heer dil gaaraysa iyaga oo ku oranayey "walaalow anagu lacagtaas dhibka ana ka soo marnay Ilaah baa og mana doonayno in ay naga khasaarto, hadaadan codka na siinayn hadaba ha naga qaadan hadaad naga qaadato asaad cod na siin weydana ogow in aan indha dambe lagu saarayn ee aan kugu jihaadayno illeen xoolahayagii baad xaq daro ku qaadanaysaaye".

Qaar Murashaxiinta ka mid ah oo aan iyagu malyan dheer ahayn waxay ku xisaabtameen isla lacagta ay kuwa ka soo horjeedaa haystaan, waxayna dadka ku waaninayeen in ay lacagtna ka qaataan codkana kii u qalma siiyaan xataa haduu yahay mid aana weligii shilina siinin. Kooxdaas aniga qudhayda aya aka mid ahaa, halku dhageenuna waxa uu ahaa mid aan ka tis qaadanay dalkii aan martida u ahayn oo isla ayaamahaas intay doorasho ka dhacday isticmaalay nidam u halku dhegiisa oo af Sawaaxil ihi ahaa; "*kula besa, kura kwa siru*" oon u af Soomaaliyeynay; "lacagtu waa cunis codkuna waa qarsoodi iyo kan u qalma". Waxaan intaa ku akhrinaynay xildhibaanada in wax aay gadanayaan yahay mustaqbalkoodii, kii caruurtoodii, kii qabiilkoodii (maadaama ay reera qabiil ahaayeen), kii dhulkoodii, kii magacoodii qaran ahaan, qabiil ahaan, qoys ahaan

iyo qof ahaan intaba. Dhanka kalena uu yahay xaqoodii oo ay is dhaafinayaan kuna dalbayaan xaq daro lagu sameeyo, waase haday dhegta geliyaan.

Tan iyo intuu tartanku bilowday siiba maalmihii ugu dambeeyey ee legdankii lala wada liicay waxaa loo wada hadlayey qaab yaraha waalli xigeen ah oo laga dhar la'aa xishood iyo ixtiraam laguna dhaqmayey halku dhega siyaasadeed ee la yiraahdo "siyaasadu waa cayaar wasakh ah waxaana cayaara dadka wasakhda ah" (*politic is a dearty game played by dearty people*). Tartamayaal badan markay dareemeen in laga rayn doono oo miisaankii xulashada xildhibaanada uu dhankooda ka liicay ayey u dagaallamayeen qaab ku sifaysan "lax gawracani geedo kama waabato".

Intay taasi socotay waxaan ka Qoraa ama Murashax ahaan ku dadaalayey in aan soo bandhigo wejiga siyaasada ee saxda ah, kaas oo dhawaanahan ay ku qanceen inta wax garadka ihi. Wejigaasi waa in siyaasada lagu wado run iyo xaqiiqo (*reality*). Sidaa darteed waxan ku soo bandhigi jiray Faafintaydii rasmiga ahayd ee todobaadlaha ahayd qoraallo xaqiiqo taabad ah laakiin dadku markay akhriyaan iska aamusayeen iyaga oon wax warcelin ah ka oranayn, illeen waxay la wada khushuucayeen dareenka runta ah iyo sida aysan waxba uga qaban karin xumaha laga dhigtay samaha ee la dhex dabbaalanayo. Waxan naftayda iyo tartamayaalka kale een isku jeelka nahay ku guubaabin jiray in aan ku dhaqano siyaasada nooceeda cusub ee dhabta ah oo ay Faransiisku yiraahdaan "*la vrai politique c'est la politique de veraite*" (siyaasada runta ihi waa siyaasadda runta sheegta).

Ka run sheega siyaasada waxaa mar walba laf dhuun gashay ku ahaa isla qumanaanta iyo isla madaxweynaanta tartamayaasha oo mid waliba uu isu haystay in uu shaki la'aan isagu ku soo baxayo madaxweynaha dalka. Mar ayaan aniga oo riwaayada noocaas ah wax ka jilaya ku soo bandhigay kulankii anshax xumada ahaa ee la isugu kaaya yeeray inteenii madaxweynenimada doonaysay.

Markii la dhaariyey xildhibaanadii ayey shaqadoodii ugu horaysay ee doorashada madaxweynaha ku dhaqaaqeen. Waxay iska soo saareen tobaneeyo nin iyo hal gabadh oo loo xilsaaray in ay soo diyaariyaan doorashada madaxweynaha iyaga oo ah Guddiga doorashada (*electoral committee*). Haddaba Gudigaan oo guranaya lacagtii baadda ahayd oo dhamayd $2000 ayaa maalin isugu kaaya yeeray si ay noola shiraan. Intaan shirka la bilaabin ayey nagu bilaabeen yasid iyo bahdalayn ku salaysnayd inkiritaan (*ignoring*). Waxaa la yeeriyey magacyada inta tartamaysay iyada oo marka la sheego magaca kuwa ugu caansan la lahaa waa kuma kaasi weligeen ma maqale, iwm. Laakiin kaasina isaga oo muran ka carar ah oo dabakhaya xikamada ah "dantaada maqaar eey baa loogu seexdaa" ayuu oranayey "Xaadir waa aniga, waa i kanaa".

Haddaba kolkii xaadiriskii la dhameeyey ayuu saaxiibkaygii i garab fadhiyey oo ahaa " Faarax Wehliye Cadow –Sendiko" inta soo booday codsaday intaan hadalka la furin in codsi laga dhegaysto. Waa la siiyey fursadii, markaa ayuu sheegay in magaciisa laga reebo Cadow isaga oo ku cillaynaya in ay jiraan ilaa saddex Cadow oo kale oo meesha u fadhiya Murashaxnimo uuna ka baqayo in ay codkiisa si qalad ah ku qaataan isa shabihid magacyada awgeed. Halkaa ayaan aniguna Aayadayda subciska iiga soo aadan qaatay oo la soo booday "aniguna dood baan qabaa, inta meeshaa fadhida keligey baa Ph.D. ka sita waxaadna ugu wada yeerteen Dr., Col, Prof., Gen. Iwm, ama ugu yaraan Mudane, haba dhacdo inaysan qaarkood lahayn derajadaase, anigii keligii ka mutaystayna waxaad iigu yeerteen magacaygii oo qaawan. Haddaba waxaan rabaa in yeerinta magacayga lagu noqdo oo loo saxo in horay laga raaciyo Dr. gadaalna laga raaciyo Ph.D.". waa la iga yeelay shirkiina waa socday.

Markaan shirkii ka soo baxnay ayay dhallinyaradii war baahintu nagu soo xoomeen sidii caadadooda ahayd, waxayna nagu bilaabeen su'aalo ay qiyaastii ku doonayaan war xun sheegnimo. Laakiin aniga oo u waramaya idaacada BBC da laanta "Focus on Africa" ayaan ka war helay koox dhinacayga taagnayd oo mar qura intay isoo wada eegeen qoslaya. Markaan dhamaystay waraysigii ayaan

weydiiyey sababtii loo qoslay waxaana la ii sheegay dacaayad shactiro uu iigu dhiibay saaxiibkey Sendiko ii xanaaqsan uu yirina: "Arey tii Habar aheydoo Igaarkaan dhallahoo da'diisa ka dheereyhaaya dhashayaan u baahanahay in la ituso isaga oo farta igu soo fiiqaya. Markaa ayaa la weydiiyey sababta. Suuye: su'aal jawaan warsa lahaay oo ah; noo tiri intaad dhashay. Miney tiraahdo hebel, hebel iyo hebel iyo Qasim. Igaarkaan waa u yeeraynaa aasaan leenahay arey naga shib dheh habartaa Qasim ay kuula baxdaye. Miney tiraah; hebel iyo hebel iyo Ph.D. waa xaal mariheynaa asaan hada ka bacdina Ph.D. ugu wacaynaa".

Hadaan taxanka sheekadaan soo gaabino, waxaa todobaadkii laga farxashay doorashadii madaxweynenimada laga waayey gudaha Nairobi ragii isku hallaynayey lacagta ee jeebadaha waynaa. Waxay u kala jabeen qaar iska xaadiriyey Muqdisho iyo qaar ku laabtay Waqooyiga Maraykanka oo ay horay uga yimaadeen. Dabcan kuwa dibadaha ka yimid waxay u muuqdeen kuwo aan markii horeba sal buuxa u fadhiyin Soomaaliya oo musaafuris uga maqnaa, laakiin kuwa ku noqday waxay ahaayeen rag xoog ku leh Muqdisho. Haddaba xildhibaanadii lacagaha boobka ah daldashay waxay bilaabeen inay la kulmaan handadaado kaga imaanayey dhinaca ragaas. Waxaa la maqlayey kelmado garab socday kelmadihii siyaaisga ahaa ee la qorshaynayey in lagu hawl galo. Hub ka dhigis ka hor ayaa lagu adkaysanayey in ay dhici doonto, lacag ka dhigis. Haday lacag ka dhigistu hirgeli weydana in ay hir gasho naf ka dhigis.

Jawaabta fikirkii ahaa kooxdee ayaa waalan waxay ku soo baxaysaa; dhab ahaantii labada kooxoodba waxaa ku jiray rag waalan iyo rag fayow intaba oo waalidu waxay noqonaysaa mid lagu sifayn karo heer shakhsi. Waxaana ila quman in aan raacno isla taladii aan ku bixiyey buugaygii hore ee ahaa "Mushkiladeenu waa Caqliga". Taladaasi waxay ahayd in qof kaste oo Soomaali ah la marsiiyo baaritaan caafimaad ee xaga maskaxda ah (*mental screening*). Hase ahaatee maadaama ay taasi hada adag tahay waxan ku sii talinayaa in ugu yaraan baaritaankaas la mariyo qofkii la damacsan yahay in xil mas'uuliyadeed loo dhiibo. Waxan shaki ku jirin in marka ay ciqaabta rabbaaniga ah ee nagu

dhacday ku dhacdo umad sideena oo kale ah oo weliba duruufta aan ku noolnahay oo kale ku jirta ay u badanayaan waalli kala heer heer ah. Waxa keenayey in uu qof waliba qofka kale ku tuhmo waalli wax kale ma ahan ee waa heerka kala tagsanaanta fikiradooda iyo aqoontooda oo keenayey isku maan-diin.

Hase ahaatee waxaan shaki ku jirin in ay dagaal-yahanadu ku gar daran yihiin damacooda xukun, balse waxaa aqoon-yahanadana looga baahan yahay in aysan la dhabiiltamin ee ay ula dhaqmaan si waafaqsan waxa ay farayso aqoontoodu.

## 5. 2. XULASHADII XILDHIBAANADA

Tan iyo maalintii shirka la furay ee 15 kii October 2002, waxaa lagu dagaalamayey xulashadii xildhibaanada. Waxaa intaa lagu mashquulsanaa khayaanooyin iyo dibindaabooyin la isku jillaafaynayo oo qolaba weji lagu xusho xildhibaano soo jeedinayso. (si aad taas u sii fahamto akhri cinwaanada kore siiba qodob 30 oo laf dhuun gashay noqday). Waxaa lagu rafanayey ergadii oo lagu tala galsanaa in laga miiro ama laga soo dhaliyo xildhibaano.

Intaan laga soo dhaqaaqin xeradii hore ee gogoshu tiilay ee Eldoret waxaa la abaabulay tiro ergo ah oo ay dawlada Ethiopia soo farsamaysatay ayna ku adkaysatay in iyaga uun laga dhigo xildhibaano. Hardan iyo faagasho badan ka dibna ay intoodii badnayd ku guulaysatay. Halkaasina waa tallaabadii hore ee xulashada aqoon laawayaasha iyo erinta aqoonyahanada.

Hadaba hadaan dhab usii taabano jawaabta ah sidee kuwaan xildhibaano ahaan lanoo kugu soo xulay, waxaa marag ma doonto ahayd in uu Cabdulahi Yusuf ku soo baxay taageerada qotada dheer ee uu ka helayey dawlada Ethiopia oo iyadu siday rabto u maamulanaysay shirka dib u heshiisiinta Soomaaliyeed.

Waxa uu maamulkaasi u qabtay Cabdulahi waxaa ka mid ahaa tallaabooyinka hoos ku taxan:

B. Tan iyo intii uu shirku socday oo ahayd laba sano iyo bar waxaa la xulayey xubno noqda Baarlamaankii Soomaaliyeed oo lagu xulanayey in ay soo buuxiyaan shuruudaha soo socda:

1. Waa in uusan wax aqoon ah oo la taaban karo lahayn, haday ahaan lahayd mid diini ama mid maadi toona,

5. Waa in uu si xad dhaaf ah u taageersan yahay faragelinta Ethiopia ay ku hayso Soomaaliya oo uu Ethiopia ka jecel yahay cid walba oo kale, isla markaana uu neceb yahay cid kaste oo iyadu Ethiopia neceb. Taasina waxay dhalisay in ay qaar xildhibaanadii la soo doortay ihi kalfadhigii Baarlamanaka kaga qudbeeyeen hadalo ay ka mid ahaayeen: " aniga dhiigeyga ayaaba ku shaqeeya Ethiopia oo hadaan waayo waan dhimanayaa".
6. Waa in uusan dareensanayn wadaninimo iyo damiir sharafeed heer Qaran iyo heer qof ahaaneed toona,
7. Waa in uu yahay jabhad khibrad dheer u leh hawlaha falfal xumo ee qawlaysatenimada ku salaysan, isla markaana ay balwadiisu tahay dagaal iyo dagaal hogaamiye,
8. Waa in uu si xad dhaaf ah u cunaa qaadka oo uusan habeenka intiisa badan ama kulliba ka seexan, khamriga iyo tumashada hadii uu ku darana waa derajo dheeri ah oo loo tixgelinayo,
9. Waa in uusan salaada tukan ama ugu yaraan u googooyaa,
10. Waa in uu ka maran yahay fikir, hal abuur, xikmad, iyo guud ahaanba caqli shaqaynaya,

11. Waa in uu xaga qabiilkiisa ka yahay mid gebgeble ah oo aan dhibkiisa laga amaan helin.

Dhawr jeer oo aan si u kuur gelid ah u weydiiyey dhawr ka mid ah safiiradii beesha caalamka ee maamulka ku guda jiray waxay ii wada sheegeen in aysan aqoon yahanadu keligood wadaniyiin ahayn xaqna u yeelan karin inay keligood jaahiliinta maamulaan, sidaa darteed ay mar walba iyagu la safanayaan kuwa aan aqoonta lahayn maadaama ay taag daran yihiin siyaasad ahaan.

Alleylehe waa gar ayaan aan isku wada qanciyey laakiin waxan isku dayey inaan ka wada dhaadhiciyo in xilalka dawlada la isugu qaso wada shaqaynta kuwa aqoonta leh iyo kuwa aan aqoonta lahayn si ay isu kaabaan illeen wayba isu baahan yihiin oo waxaa la arkaa in midka aan aqoonta lahayni yaqaano wax uusan kan aqoonta lihi aqoon sida siyaasada dhaqan ee lagula dhaqmo beelaha dhexdooda iyo caadooyinka dadka. Sidoo kale waxa la hubaa in ay yaqaanaan dagaal oo u eg mid aan marnaba laga maarmayn. Sidaa darteed labada qolo waxay isku kaabayaan in ay horta wada siyaasiyiin yihiin oo midna ku takhasusay siyaasada weyn ee sare, midna siyaasada hoose (*micro politics and macro plitics*).

Haddaba shuruudahaas ayaa laga xulayey dadka Soomaaliyeed ee qabiilada kala duwan ah mudo aan ka yarayn laba sano iyo bar oo la sheegayey in shir loo fadhiyey. Waxaase mucjiso la yaab leh noqotay in caalamka laga dhaadhiciyo shir baa loo fadhiyaa mudada intaa la eg, iyada oo la wada ogsoon yahay in shir loo fariisto kan ugu dheer lagu gebagebayn karo hal asbuuc oo keliya.

Khayaanooyinka khatarta ah ee la isticmaalayey waxaa ka mid ahaa in asbuuc walba diyaarad lagu sii rarayey qaar ka mid ah ergadii shirka joogtay iyada oo lagu marmarsiyoonayo in ergada oo isku badatay la kala dhimayo oo qaar lagu celinayo halkii laga keenay. Laakiin hadana asbuuca dambe ayey isla diyaaradii dib ugu noqonaysay isla gobolkii lagu celiyey ergayga oo laga soo qaadayey ergay kale badelkiisii.

Haddaba qof kaste oo fikiraya waxaa isaga cad in qofka la celiyey uu ahaa mid ku dhacay tartankii oo soo buuxin waayey shuruudahaas aan kor ku soo xusnay. Laakiin midka la doonay ee badelkiisa lagu keenayaa uu yahay mid laga filayo inuu shuruudahaas soo buuxiyo. Marka la keeno eragada cusub oo si habaqtan ah mid mid isaga soo daba dhacayey, waxaa laga ilaalin jiray in uu qofkaasi ku dhex milmo kuwii la ogaa in aysan barnaamijkaas u daacada ahayn, markaa ayaa sidii neef jar ah gooni loo dhaqaaleyn jiray.

Bilihii ugu dambeeyey waxaa la arkayey odayaal da' weyn oo macawiso iyo shaalal ku labisan oo mar walba hakinaya baabuurta maraysay jidka guud ee degmada Laangaata oo ah halka loo marayey xeradii doofaareey si ay u gooyaan jidka aysan horay u goyn jirin. Inkasta oo odayaashaas aan cidina ilaa hada garan sababtii loo keenay ee kharashka loo soo geliyey hadana waxay u ekayd in ay qaarkood, siiba kuwii kalsooni dhab ah ka haystay beelaha ay matalayaan, hawl samaysteen oo waxay dhex galeen maamulkii xulashada xildhibaanad ee beelahooda kala duwan. Waxaa socday heshiisyo uu nuxurkoodu isugu imaanayey:

Xildhibaan doone dagaalyahan ah: Kaaba qabiil aan wiilkaaga kaaga dhigo safiir adigana guri weyn kaaga dhiso tuuladeenii oo naag hor leh kuu guuriyee igu qor xildhibaanka beesha adaan kuu shaqayne,

Xildhibaan doone aqoonyahan ah: anigu caalamka ayaan idinku soo xiri karaa oo mashaariic horumarineed bana gobolkaan ku dhalanay ka horgelinayaa, caruurta cida oo dhan waxbarasho dibadaan u kala dirayaa ee dadkaygow idoorta.

Xildhibaan doone dagaalyahan ah: waryaa aqoon yahan, sow ma aragtid inay reer hebel ku heshiiyeen in ay dagaal yahankooda soo difaacay jagada xildhibaanka ku qortaan, si uu isaguna aqoon yahankooda uga dhigo Wasiir ama safiir. War doqon baad tahay aan garanayn sida dhiil –heshiis (*deal*) loo galee soo raac taladeena, ma garanayo aqoonta aad sheeganayso miday tahaye,

Madaxweyne doone: kaaba qabiil, hebel iigu soo qor xildhibaan ha idoortee adigana mushaar baan kuu qori doonaa, wiilkaagana jagana dawlada ka siin doonaa, xoogaagaan lacagta ahna bal maanta ku khayil. (ogow kaaba qabiilada badankooda way khayilayeen oo ama hadaan la baray ama horay u yaqaaneen, kaaba qabiil asturana meeshaba ma imaan ama intuu yimid baa la cayriyey)

Xildhibaan guulaystay: haye, madaxweyne doone hadaan ku doorto aniga Wasiir ma iga dhigaysaa? intaas oo qof oon ka wakiil ahay jagooyin kale ma ii siinaysaa? Kharash meeqaad ii ogoshahay aniga hebel oo iiga kaa sokeeya ayaaba intaas ii ogole, iwm.

Waxay taasi socotaba, taariikhdu markay ahayd 27.August.2004 - Madaxweynaha Wadanka Ugandha Yuweeri Musaveni oo ah Gudoomiyaha Urur Gobaleedka IGAD ayaa soo gaaray magaalada Nairobi halkaasi uu ay u jeedada socodkiisu ahayd in oo soo indha indheeyo hanaanka ay ku socdaan hawlihii awood qaybsiga ee lagu soo xulanayey xubnihii Baarlamaanka iyo guud ahaanba halka uu marayo shirkii Soomaalida ee ka socday Nairobi wakhitgaasi.

Madaxweyne Muzaveni oo sidii looga bartay ahaa nin si daacadnimo ah ugu dadaalayey ka mira dhalinta ujeedada shirka ayaa bilaabay inuu mid mid ula kulmo dagaal oogayaashii uuna ku qanciyo inay ku wada dadaalaan xaqiijinta gebangebaynta shirka iyo gunaanadkiisa oo ay hada taagan yihiin, isaga oo ku leh war cimri dhamaaday ceeb laguma sagootiyo ee wada isu tanaasul iyo isu sabir oo idinka oo gacmaha is haysta dawladna ah gala gudaha dalkiina oo ka taga meeshaan aad ku sharaf dhacdeen.

Muzaveni waxa uu ka dhabeeyey go'aamkisii ahaa in maalinta uu yimaado maalinta xigta la soo xirayo shirka iyada oo la dhaarinayo xubinhii Baarlamaanka oo la soo xushay. Hadaba laba cisho ka dib, 29-Augst 2004, kii ayaa waxaa lagu gabtay dhismaha Qarmada Midoobay, xarunta adduunka ee hay'ada UNEP o ku taalla Gigiri ee magaalada Nairobi xaflad lagu dhaariyano dufcadii labaad ee

xubnaha Baarlamaanka Soomaaliyeed. Dufcadii koowaad ee ugu horaysay ayaa isla goobtaas lagu dhaariyey shan cisho ka hor imaatinka Muzaveni, 22kii isla bishaas, waxaana ay tiradoodo gaarayasay 81 xubnood.

Waxaa mucjisadii la bixin waayey noqotay sida boobka iyo muquuninta ah ee loo qaybiyey ama loo xulay xildhibaanadii. Markii hore qaybta ayaa laga dood qabay laakiin hada arintu waxay maraysaa qaabka xulashada. Tan ugu muhiimsan oo ah tayada xubnaha xildhibaanada iyada la isma weyiinayn oo qofkii dareemayaana wuxuu iska ogaa in ana laga yeelayn ee isaga uun afku daalayo kii kalena maba ogeyn hade.

Si kaste oo qodobkii 30 aad ee lafta dhuunta gashay ahaa loo habeeyey ama xeer cusub loo dejiyey sinaba way ku suurtoobi weyday in la helo nidama rasmi ah oo xildhibaanada lagu soo xusho. Masalan waxaa lagu gebangabeeyey fikradii ahayd in ay beel walba ka soo xulaan Qabqablayaalkooda dagaal, iyo Siyaasiyiintooda rayidka ihi deedna ay ka soo ansaxiyaan oday dhaqameedyadooda. Intaas ka dib haday dhacdo in uu qof ama qolo ay qanci weydana in loo diyaariyo Guddi isku dhaf ah oo la bidayo cadaalad iyo dhexdhexaadnimo.

Guddigii dhexdhexaadka ahaa oo isaga qudhiisa mudo la isku haystay cida beel walba u gelaysa oo loo bixiyey Guddiga dhex dhexaadinta (*mediators*) ayaa la sheegay in xaafiis looga furay madashii shirka laakiin xaafiiskoodii waxa uu shaqeeyey hal maalin iyo habeenkeedii. Markii la kala hoydayna waxa aroortii la soo toosay xafiiskii oo la jabsaday lana qaatay dhamaan wixii qalab iyo faylal dacwo beeleed iyo qofeed ah yiilay. Ka dibna waxa lagu maaweeliyey Gudigaas in beri iyo beri dambe dib loogu furayo xafiiskii ayna hawshooda halkii ka soo wadanayaan. Ilaa hadana malaha sidii bay ku sugayaan in dib loogu soo bandhigo dacwadihii beelaha ooy kala xalliyaan.

Gudigaasi waxa keliya ooy ahaayeen ciidan raacda reeb ah oo sii mashquuliya ergada inta lala cararayo xubnaha loo xushay xildhibaanada ee

boobka ah. Ugu dambaystiina daf iyo daf ayaa maalmo yar lagu dhamaystay iyada oon la tixgelin wax sharci iyo nidaam ah oo la dejistay. Tan ugu qaabka daran ee dhacdayna waxay ahayd sida ay qabqablayaalka dagaalku u diriqsadeen talo soo jeedintii ahayd in aan iyaga laga tagin ee wax laga siiyo xukunka iyada oo weliba xulashada xildhibaanada lagu qadarinayo. Laakiin iyagii waxay si xoog ah uga dhigteen in ay iyagu iska leeyihiin meesha oo inta kale iyaga uun u marti tahay, maadaama ay taageero ka heleen Etheopia oo meesha ugu firfircoonayd, iyada oo dagaalyahanada intooda badan wadata inta yar ee kalena maslaxo danaysi ah la gashay oo wax uga tanaasushay.

Maalmihii la kala dhaariyey xildhibanaada waxaa marba loo xanibnaa qabiil ka mid ah shantii qabiil oo aan weli ku soo heshiin xulashada xildhibaanadooda. Waxaa ugu dhib badnaa oo dadka waqti badan ka lumiyey beesha Daarood gaar ahaan beesha Marreexaan oo iyadu aan aslanba wax ku heshiin ee saacadii ugu dambaysay markii la kari waayey ay ukala tuureen sadexdii wiil ee safiirada sadexda wadan ee safka hore kala ahaa, waxaana hubaal ahayd in hadaysan sidaa yeeli lahayn ilaa maanta laga sugi lahaa in ay beesha Marreexaan ku soo heshiiso xildhibaano.

## 5. 3. XUBNIHII XILDHIBAANADA OO SI AXMAQNIMO AH U HAWLGALAY

Taariikhdu markay ahayd 22-Augst 2004, Magaalada Nairobi ayaa waxaa lagu qabtay dhismaha qarmada midoobay ee magaalada Nairobi xaflad dhaarinta xubnaha baarlamaka Soomaaliyeed oo dhamaystiran waxaana ay tirada xubnahaasi gaaraysay intii loogu tala galay oo ah 275 xubnood. Xubnahaas la dhaariyey ee rasmi ahaan u noqday Baarlamaanka ama Golaha Shacabka Soomaaliyeed waxaa xaga waxbarashada heer jaamacadeed ka dhamaystay 10

xubnood oo keliya, heer machad ama wax u dhigma inta gaartay waxaa lagu qiyaasay ilaa 25 xubnood. Qiyaastii dugsiga sare waxaa dhamaystay 35 xubnood. In lagu qiyaasayo in aysan ka badnayn 30 ayaa iyaguna haysta wax xoogaa khibrad militari ah.

Hase ahaatee 175 xubnood oo laba jibaar ka badan tirada aqlabiyada uu Baarlamaan isticmaalo iyagu waa dad aan weligood meel wax lagu baranayo soo istaagin, laguna xisaabin karo nooca dadka loo yaqaan ummiyiin (*illiterate*) oo casrigaan aduunka lagu socdo in laga cirib tirayo iyada oo la faafinayo ololе wax lagu barayo (*termination of illiteracy)*. Waxaa taa sii dheer in in kabadan kala badh oo badh xubnahaas lagu xisaabin karo dad aysan maskaxdoodu ku filnayn oo kala dhiman una baahan dhaqan celin akhlaaqeed ama mid caafimaad ama labadaba.

Sidaa awgeed waxaa la isku raacay in ay dawladan loo bixiyo magac uyaalka ah "Dawladii Indhaha la'ayd". Taasina waxay soo if baxday oo dhab ahaan loo wada qiray markii uu bilowday kulankii ama hawlgalkii ugu horeeyey ee xubnaha Golaha Shacabku oo la arkay dhaqankoodii ku salaysnaa go'aan la'aanta iyo garasho la'aanta. Hadaan usoo dhaadhacno hawlgaladii ugu horeeyey ee ay fuliyeen xubnaha xildhibaanadu waxan tusaale ahaan usoo qaadanaynaa dhawrkii tallaabo ee ugu horeeyey ayna ka mid ahaayeen:

2. Ficilkii koowaad waa kan ugu dambeeya taxakan laakiin kii labaad ayaa waxa uu ahaa "Kala hufidii murashixiinta madaxweynenimada": waxay dad badani la yaabanaayeen oo ay weliba qaar ka yaqyaqsiyoonayeen tirada faraha badan ee u taagnayd xilka madaxweynaha dalka oo loo rabay hal qof oo keliya ayna soo dalbeen in ka badan 50 qof.

Inkasta oo ay jirto in ceeb laga dareemayo hunguri weynida siyaasadeed ee Soomaalida ee ay u hamuunan yihiin xukunka, hadana taasi ma ahayn wax qalad ama gef ah, balse waxay ka tarjumaysay wanaag, ilbaxnimo, qanaacad

heshiis, dimoqraadiyad, tartan ka soo leexday wejigii dagaalka iyo gacan ka hadalka oo ku soo dhacay tubtii toosnayd ee tartanka.

Waxaysan kuwa arinkaas ceebsanayey ogeyn in ay dunida iska caadi tahay in tiro aan xadidneyn oo fara badani intay halka jago usoo wada tartamaan kala reeb iyo kala saar ku salaysan tixgelinta qiimahooda qof ahaaneed lagu soo saaro mid keliya oo ka mid ah inta kalena ay meesha ku soo hungoobaan. Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa in aysan arag iyada oo tartan heer hoose ah laga qabanayo mid ka mid ah wadamada reer galbeedka oo inta laga soo bilaabo 100 qof oo ka soo wada tartanta gobol kaste, markaa gobol walba uu ka soo baxayo mid qura, deedna kuwaas la is hardisiinayo ilaa uu kuligood mid keliyihi ku soo baxo is reeb reebka ugu dambeeya.

Waxba yey taasi nala dheeraan ee waxaa jirtay in ay xubnihii Golaha Shacabku go'aamiyeen in qof kasta oo madaxweyne u tartamaya hal shardi uun lagu xiro si loo kala reebo. Shardigaasi ma noqon wax tarka qof ahaaneed, ma noqon aqoonta qof ahaaneed, ma noqon qorshaha horumarineed iyo siyaasdeed ee qof ahaaneed, iwm. Waxa keliya ee la go'aamiyey in lagu xiro lacag baad ah oo uu qofkaasi siiyo qaar tira yar oo ka mid ah xubnaha Golaha Shacabka.

Sidaas ayeyna ku noqotay in ay goobtii u firaaqowdo intii horay dalka usoo dhacday oo keliya ayna daaqada uga baxaan kuwii isku halaynayey aqoonta, qorshaha horumarin, dawlad dhisid, ammaan sugid, samafalka, siyaasad wanaaga, hogaan aqoonshaha, daacadnimada, iyo guud ahaanba ka samata bixinta umada godka naarta ah ee ay ku jiraan iyo ujihaynta tubta toosan ee lagu aflaxayo aduun iyo aakhiro.

Sidaa ayeyna ku noqotay in lacagtaas shardiga ah la dhiibo, ilaa hadana lacagtaas meel ay 10 xubnood ee loo dhiibay geeyeen lama garanayo, qiyaastiina iyaga unbaa malaha u tashaday. Nasiib darro, lacagtii waxaa qaatay 10 xubnood oo keliya iyaga oo aan kumina ka siin kuwii la go'aamiyey ee ka filanayey in ay wax ku soo tuuri doonaan. Halkaa ayeyna ka bilaabatay hawlagalkii ugu

horeeyey ee ay qaadeen xubnaha Golaha Shacabku iyaga oo judhiiba ku cawarmay tallaabadoodii ugu horaysay, waase haday ceebi wax ka dhintaba.

3. Ficilkii taas ugu xigay ee ay dadweynuhu la qaracmeen waxa uu ahaa markay soo doorteen Cabdulahi Yuusuf oo ay dadku ka baqayeen in uu dagaal hor leh u horseedo iyo xiriirka qotada dheer ee uu la leeyahay Ethiopia, inkastoo ay qaarna ku fikirayeen in ay wanaagsan tahay inuu dagaal weyn inta mar soo qaado dhan u tuuro kuwa kale. Waxay suuqyada iska weyndiinayeen "war maxay ahaayeen kuwaan xildhibaanimada lagu sheegayaa, malaha Soomaaliba ma ahan".

12. Ficilkii shanaad ee ay daweynuhu ku quusteen waxa uu ahaa markay isku waafaqeen cod dheeri ahaan in ay keligood noqdaan xubnaha dawlada oo dhan oo wax kaste iyaga keliya gacantooda ku jiraan. Maalintaas waxa quustay aqoonyahanadii masaakiinta ahaa oo axdiga la galay qawlaysatada. Waa tay laba kaste oo horay isugu haysatay kursiga xildhibaanimada ku soo heshiiyeen in kursiga xildhibaanka beesha loo daayo dagaal yahanka, laakiin kursiga Wasiir iyo wixii ka hooseeya aan lagu qabsan aqoonyahanka, iyaga oo taas u wada arkayey inay tahay maslaxada qaran ahaan, qabiil ahaan iyo qof ahaanba. Laakiin aqoonyahanadu iskama eegin kuwa ay la heshiinayaan nooca dad ee ay yihiin. Waxay arintu noqotay "dhurwaa hilba ku raro". Ficilkaasi waxa uu ka nixiyey guud ahaan umaddii Soomaaliyeed gaar ahaana aqoonyahanadii ku rafaaday kulaalka dheriga, markii dabkii laga qaadayna laga qadiyey. Ciil iyo caro awgeed ayaa laba kaste dhabarka isu duwday oo la kala aamusay. Aqoonyahanada badankoodu waxay qaadeen colaad dhab ah oo waxay ku xilafureen inay nimankaan iyo kooxda gabdhaha ah ee albaabka hoosta ka xirtay kor uga xiraan oo ka carqaladeeyaan wixii aqoonsi iyo taageero dawladnimo ah. Waxaa soo if baxay halku dhega ah **"hoostay ka xirteen albaabkii anaguna kor baan handaraab uga sii xirnay kana furi mayno ilaa ay meesha gaajo ugu dhintaan oo**

**cabaadaan**". Waxaa mucjiso iyo dhakafaar noqotay xaasidnimada ay la soo baxeen kooxdii loo dhaariyey xildhibaanada Soomaaliyeed. Mucjisooyinkaas xaasidnimada ku astaysan ee aan aniga qoraa ahaan indhaha iyo dhegaha ku qabtay waxaa ka mid ah markii aan subax soo dhex galay shirkii golaha wasiirada ee ugu dambeeyey ee lagu qabtay Nairobi oo ay dood culusi ka socoto. Markaa ayay judhiiba dhegtayda ku soo duushay kelmadii ubucda u ahayd dooda maalintii

13. Ficilka wixii oo dhanba isku fuuqsaday soona if bixiyey nooca dad ee ay xildhibanadaan dooranay ama la noo dooray yihiin waxa uu ahaa markii ay si macna la'aan ah ku rideen dawladii la soo dhisay ee 3 sano ku dhawaadka meesha lagu sugayey.

14. Ficilka warba la isaga daayey oo keenay in gebigoodba loo arko waabaayo aruurtay waxa uu ahaa markay maalmo gudahood hadana cod buuxa ku ogolaadeen dawladii ay shalay diideen oo aan car isku rogin.

15. Ficilkii xigay ee ay umadaha caalamku ku baraarugeen laakiin Soomaalida oo horay u quusatay iska lahaayeen "war naga daaya waxaas sheeg sheegooda" waxa uu ahaa markay inta dheheen waa shiraynaa ay tooreyda iyo qaarta iskala daaleen oo gamta iska sureen, Hotelkii dadowna qalabkii ka jajabiyeen illeen waa dibiye.

Ficiladaas waxaan usoo qaadanay tusaale aad u gaaban maadaama ay ahaayeen kuwa aad ugu wada muuqday dadweynaha ama la wada dareemi karo, laakiin way yar tahay mar wax wanaagsani ka soo yeereen kooxdaas. Dhab ahaantii kulligood ma wada xuma mana ku wada tala gelin xuma samaynta laakiin waxa qurminayaa waa aqlabiyadooda oo aqoon li'aani dubatay.

Run ahaantii waxaan loola yaabi karin xubanaha Baarlamaankeena waa in ay maanta dadka Soomaaliyeed gudaha iyo dibadaba u badan yihiin noocaas. Sidaa awgeed waxa na xukumayaa ma ahan dad soo galooti ah oo meel kale

nooga yimid ee waa caaradkeenii ama horgalkeenii. Waxaase lama huraan ah in ay dadkeenu gartaan dhibaatada ay ku jiraan, deedna ay isku dayaan sidii ay hada ka dib isu toosin lahaayeen iyaga oo hada kuwan isaga daynaya sidooda.

Waa iska mid ka mid ah mucjisooyinka uu ina dhaxalsiiyey dagaalkii sokeeye in ay maanta dalkii hogaankiisa u soo kacaan kuwii dunida inteeda kale laga aruuriinayey ee lagu xaraynayey goobaha waxbarashada qasabka ah iyo dhaqan celinta naafada. Laakiin waxba kama qabi karno oo waa danteena inay iyagu naga saaraan hoogii iyo bi'ii ay nagu keeneen iyaga oo ah qalabkii uu Ilaahay hawshaas u adeegsanayey.

## 1. SIDAY KU SUURTOWDAY IN LA DOORTO GUDOOMIYAHA BAARLAMAANKA

## " SHARIIF XASSAN SHEEKH AADAN".

Ficilkii ugu horeeyey ee dadweynuhu uga shakiyeen xildhibaanada waxa uu ahaa markay Gudoomiyahooda ahaan usoo doorteen nin ay xataa akhrinta Af Soomaaligu ku adag tahay oo lagu tilmaami karo ummi (*illiterate*). Gudoomiye Shariif oo ahaa nin aan maalintaa ka hor weligii lagu arag madasha shirka iyo saaxada siyaasada toona waxaa cod aqlabiyad ah lagu doortay taariikhdu markay ahayd 15 kii September ee 2004, iyada oo laba asbuuc oo hore uu si ku meel-gaar ah usii hayey kursigaas xildhibaan Xirsi Faarax (Bulxan) oo loo dhiibay 2 dii September 2004 markii la isku raacay in uu ahaa ninka ugu da'weynaaday inta xildhibaan ah.

Shariif Xasan waxa uu ahaa ganacsade aan weligii ku riyoon siyaasad iyo xil dawladeed. Inkasta oo la cadaynayo in uu la soo qaraabtay dawladii kacaanka ahayd ee Barre hogaaminayey hadana way adag tahay in loo qiyaaso in uu kala haray garaad siyaasadeed iyo damac toona, waayo waxa uu kula xiriiray arimo

ganacsi oo uu la lahaa qaar ka mid ah dawladii gaar ahaan xilliyadii dambe ee ay madaxdu dalka kala boobaysay.

Sidaa awgeed waxaa la qiyaasi karaa in ay waxun sandareerto ihi ka soo gaareen hantidii qaran ee la kala boobayey sanadihii ugu daambeeyey xukunkii madaxweyne Barre. Waxayse u muuqataa in aysan taasi wax dambi ah ku ahayn balse ay amaan iyo sharaf ku tahay mar haddii intii tooska u boobaysay oo dhami ay maanta ku wada doodayaan aniga ha la ii dhiibo talada aniga ayaa idinkugu xariifsan xaga boobka hantida qarane.

Shariif Xasan markay dad badani ka yaabeen siyaasadiisa khatarta ah ee aan laga filanayn ee uu la soo baxay ayey u bixiyeen "Xariif Xasan". Run ahaantii ragii kula hardamayey siyaasada mar qura ayey gacan u wada taageen oo yaab iyo daaman hays ka soo haray. Waxa uu ku sifoobay "la mood noqonse wayday". Ma waxay u dhigteen oo u doorteen mise waxa uu noqday, Alleylehe waa kaaf iyo kala dheeri. Shardiga ugu muhiimsan ee lagu doortay waxa uu ahaa aqoon la'aantiisa iyo qabiil yaridiisa. Waxa uu mid walba ku fikiray in uu Shariif Xasan yahay miskiin wadaad ah oo Asharaaf ah oo aan wax aqoon iyo ilbaxnimo toona ah lahayn, dib bayse u shallaayeen. Waxaa xusid mudan in Shariif Xasan maalmihii ugu horaysay lagala noogay in uu kiciyo qoraalka afka Soomaaliga ama ugu yaraan uu si hufan ugu dhawaaqo (*pronounciation*) inkasta oo uu ugu dambays ku guulaystay in uu noqdo aftahan dhaqso ku akhrin kara qoraalka farta Soomaaliga.

Hadaan soo gabaino sababta uu ku soo baxay Shariif Xasan waxay ahayd;

1. Lacag waalan oo uu ku harqiyey xildhibaanadii awalba iyaga lagu soo doortay shakhsiyad xumada.

2. Yasitaan la yasayey sidaan kor ku xusnayba.

3. In xal iyo samatabixn la biday iyada oo laga cararayo rag ay Xabashidu wadatay oo uu ugu horeeyey Sheekh Aadan Madoobe.

4. Si looga faa'iidaysto Digil iyo Mirif oo ay iska go'nayd in markaste lagu khaarajiyo Raisulbaarlamaanka oo hadana la damcay in mid maqaar saar ah loo suro albaabka.

5. Iyada oon sidaa loo qiimaynayn jagadaas Gudoomiye Baarlamaanka ah oo loogan wada weecday reer Digil iyo Mirif. Isla cidaasna qofka keliya ee ku qabsaday uu noqday Madoobe aan kor ku xusnay oo isagu siyaasad xumo awgeed Xabashi uun isku halleeyey umadaha kalena aan wax cilaaqaad ah la yeelan.

6. Colaad loo qabay kooxdii SRRC oo ay xabashidu wadatay oo si looga badbaadiyo kursigaas looguna naceeyo lagu sallidayey ninkaan sooma jeestaha ah la hor keenayey.

7. Markii doorashadiisa laga hadlayey waxa keliya ee ay qaar xildhibaanada ka mid ihi isku soo hadal qaadeen in ay nuqsaantiisu tahay ama ceebtiisu tahay caruur iyo xaas badni. Waxa uu soo qortay in uu leeyahay Afar xaas iyo 29 caruur ah isaga oo weliba da' dhexaad ah. Markaa ayey qaar badan is weydiinayeen war ninka intaas oo caruur ah leh sidee bay qasnada dawladu kafaalo qaadaysaa korinta iyo wax barida caruurta intaa tiro la eg ee qabiilka dhan ah.

## 5. 4. SIDAY KU SUURTOWDAY IN LA DOORTO MADAXWEYNE CABDULAHI YUUSUF

Taariikhdu markay ahayd 10 kii October ee 2004 ayaa garoonka dedan ee loo yaqaan Kasazarani ee magaalada Nairobi laqu doortay Cabdulahi Yusuf Axmed. Afar cisho ka dibna 14 kii October isla 2004 xafladii dhaarintiisa oo ay madax badan ee aduunku ka soo qayb gashay ayaa isla goobtaas qudheeda lagu qabtay.

Waxay siyaasiyiintu is weydiinayeen sababta doorashada iyo dhaarinta madaxweynaha loogu qabtay garoon kubad lagu cayaaro, halka dhaarinta xildhibaanada lagu qabtay xarunta adduunka ee Hay'ada Qaramada Midoobay ee Dhawrida Deegaanka (UNEP), taas oo si toos ah u keeni karta aqoonsi ay bixiyaan UN ku?. Laakiin jawaabta su'aashani way iska cadayd oo waxay ahayd in muhimada shirka laga lahaaba ay ugu weynayd in laga soo saaro meesha Baarlamaan uun. Xataa mar aan weydiiyey mid ka mid ah safiiradii maamulayey waxa uu iigu jawaabay "madaxweyne waa shaqaale xildhibaana waa dawladda shaqaalaysa".

Waxay u muuqatay in Madaxweyne doorashadu qiimayn weyn aysan ka lahayn meesha. Xataa xilligii ay tartamayaashu wada halgamayeen waxa keliya ee muuqday waxay ahayd in dadka soo tartamaya loo kala fiirsanayey oo mid walba marka uu dadka iska soo dhex saaro oo ani yiraahdo inta farta lagu fiiqo la sii daba galayey tan iyo markuu dhashay. Marka la ogaado halka uu ku sal leeyahay murashax kaste waxba jawaab lagama bixinayn ee waxa la gashanayey diiwaanka si waa dambe loo daba raaco raadkiisa. Waxa la waayey oo keliya in saacado la wada hadalsiiyo ama la doodsiiyo inta tartamaysa si ay dadweynuhu fikradahooda u kala dhegaystaan. Xataa waxaa ka mid ahaa hadalada ay beesha caalamku isku soo hadal qaaday; may naga tagaan markaan Golaha Shacabka u dhisno oo dalkooda madaxweyne markay rabaan ku doortaan?.

Si kastaba ha ahaatee, dhacdadani waxay noqotay mid ka mid ah kuwa ugu cajiibsanaa ee ay carada kaga jawaabeen inta badan dadweynaha Soomaaliyeed. Waxaad meel walba ka maqlaysay nacalad ay dadku ku tuurayaan xubnihii xildhibaanada oo ay ku eedaynayaan maxay u doorteen Cabdulahi Yuusuf waa nin dagaal ee ma ahan nin nabadeede.

Dhab ahaantii marka la daraaseeyo nuxnuxdii iyo siyaasad qiyaaskii soo if baxay asbuucii ka horeeyey doorashada waxaa la isku wada raacsanaa saadaasha ah in laba Cabdulahi midkood uun soo bixi doono, laakiin dadka

badankoodu waxay dareemayeen in labaduba aysan ku haboonayn oo yihiin “laba daran mid dooro”. Dadka ay ku fogaatay neceybka qabyaaladu oo rabay inay ka dheeraadaan wax kaste oo soo dhaweyn kara qabiil waxay lahaayeen “ wallaahiyoo labada nin waxay qof ahaan noqon lahaayeenba waxay leeyihiin cilad ay wadaagaan oo ah in midkii la doortaba aan qabiilkiisa laga nabad gelayn, faanka iyo xukun is xijinta awgeed, xataa haday iyagu awliyo socota noqdaan". Marka ay sidaa leeyihiin waxay badanaaba isla barbar dhigayeen labada sifo ee labada nin laga kala filanayey oo kala ahaa nin dagaal wax ku xallin doona iyo nin maslaxa wax ku xallin doona.

Hadaan toos u abbaarno xaqiiqada mawduuca, waxaa la arkayey in dadweynaha Soomaalidu ay siyaabo kala duwan ku diidanaayeen Cabdulahi Yuusuf, inkastoo inta yar ee jeclayd inuu soo baxo ay iyaguna weji kale ka eegayeen rabitaankooda odayga. Tusaale, dadka reer Muqdisho iyo nawaaxigeeda waxay marka horeba ka biyo diidsanaayeen in uu madaxweyne ku noqdo nin ka soo jeeda qoladii ay iyagu xukunka ka tuureen kana eryeen dalka. Haday ka soo hartana waxay diidanaayeen shakhsi ahaanta Cabdulahi Yuusuf iyaga oo u arkayey in uu yahay nin dagaal yahan ah oo hawsha ugu horaysa ee uu galayaa tahay xasuuq iyo xabad.

Sidaa si la mid ah, dadka reer Waqooyiga ee la baxay Somaliland waxay aad u nebcaayeen shakhsi ahaanta Cabdulahi Yuusuf oo ay weligood colaadi kala dhexaysay, balse ayba u arkayeen caqabada ugu horaysa ee hortaagan aqoonsi caalami ah oo la siin lahaa, maadaama uu dawlad goboleed ka ag furtay oo caalamka usoo istaagay hadaad gobolkaan aqoonsataan taydana waa in aad aqoonsataan. Qolooyinka reer Gedo iyaguna diidanaanta ay diidanaayeen reerka uu ka soo jeedo ka sokow waxay shakhsi ahaan udiidanaayeen oday Cabdulahi oo ay u arkayeen shakhsiga isagu keligii qof ahaan u dumiyey dawladii uu ka madaxda ahaa ninka iyaga ka tirsanaa. Waxaa kuwaas oo dhan ka darnaa isla jifada uu ka soo jeedo, siiba kuwa reer Bari oo iyagu ayaamahaas kula jiray colaad iyo dagaal ba’an.

Waxaa la yaab ahayd in qaar badan oo ka mid ahaa tujaartii qoyska uu ka soo jeedo Cabdulahi Yusuf ay taageero hiil iyo hooba ah la kor taagnaayeen raga tartanka kula jiray oday Cabdulahi oo ay ku bixinayeen dhaqaale fara badan oo galaaftay hantidoodii. Laakiin waxaas oo dhan iyaga oo jira oo si daran u socda ayuu Cabdulahi Yuusuf ka soo dhex baxay. Waa yaab iyo amakaag in uu cod aqlabiyad ah oo aan dheeh yarina ku jirin ku soo baxo nin intaa oo cadaw neceb ah lihi. Kolleey Allah baa horay u qoray xikmaduu doonaba ha ka lahaadee oo waa lama celiyaan, laakiin hadana waxa uu maciinsaday sababan aan hoos uga hadlayno ee soo socda.

Cabdulahi Yuusuf waxa uu ku riimayey ama ku tallamayey in uu noqdo Madaxweynaha Soomaaliyeed mudo aan ka yarayn 40 sano. Waa la wada ogsoon yahay dhibkuu usoo maray iyo intuu xabsi dhinaca soo dhigay ama geed hoostiis usoo seexday. Sidaa darteed waxa uu dhab ahaan ugu sifoobay halku dhega foolxumada ah ee ka dhashay dagaalkii sokeyee ee qudhiisuba axmaqnidamada ugu weyn ahaa. Kelmadaas oo markii ugu horaysay ka soo shaac baxday magaalada Hargeysa waxay tahay "anaa kaadida usoo cabay". Waxaana taas rumaynaya isla hadalkii uu ku jawaabay oday Cabdulahi markii ugu horaysay ee uu isu sharaxay madaxweyne Soomaaliyeed ee lala yeeshay waraysigii ugu horeeyey. Waxay idaacada BBC du weydiisay sababta uu ku doonayo madaxweynenimada, wuxuuna ku jawaabay hadal uu nuxurkiisu ahaa; "maxaad anigii intii la ogeyd dhib usoo maray iigu diidaysaa kuwa xunoo aan waxaba ahaynba waa doonayaane".

Xirfaddii xulashada xildhibaanada oo ku salaysnayd sidii uu doorashada ugu soo bixi lahaa Cabdulahi Yuusuf waxay socotaba markii ay soo dhawaatay doorashadii iyo gebangebadii shirka ayaa la bilaabay olole ka dhan ah dhamaanba murashaxiinta ku tartamaysay xilka madaxweynaha Somaaliyeed, marka laga reebo Cabdulai Yuusuf. Si loogu hiilliyo Cabdulahi Yusuf waxaa la adeegsaday dhawr tabcooyin oo lagu legdayo tartamayaasha kuwoodii ugu ad-adkaa ee laf dhun gashay ku noqday oday Cabsulahi iyo colkiisa la baabuurka

siyaasada u waday, tabcooyinkaasna waa lagu guulaystay, waxase aanan garanayn halka gaarsiin. Waxaana ka mid ahaa tabahaas;

b. Waxaa Cabdulahi Yusuf loo xaqiijiyey in uu isagu xildhibaanimo u soo xusho kuwii isaga madaxweynimo usii dooran lahaa, laakiin murashaxiinta kale taas looma ogoleyn. Ma ahayn in qabiilkiisa oo keliya uun uu ka soo xusho laakiin Soomaalida badankeeda. Reer Puntland waxa ka jira qof uusan isagu ka soo dhigin xildhibaan 5 qof oo keliya. Shantaasna waxaa lagu magacaabi jiray xildhibaanadii IGAD oo gooni ayaa la isaga fongoray. Qabiilka 5 aad ee loo bixiyey 0.5 qiyaastii dhamaantood isaga ayaa gacantiisa ku soo xushay. Sidoo kale qabiilada Digil iyo Mirif iyo Dir kulli baac weyn buu ku yeeshay Cabdulahi. Sidaa darteed Cabdulahi waxaa loo gardaduubay murashaxiintii la tartamayey oo dhan.

c. Waxaa kale oo mar horeba Cabdulahi Yusuf iyo dagaalyahanadii kaleba lagu dhiiri geliyey inay gudaha wadanka ka keensadaan oday dhaqameedyo iyaga taabacsan. Hadayse ka waayana beesha oday dhaqameed raacsan ay hada mid cusub soo abuurtaan. Xuseen Caydiid oo kolkii shirkii Carta loo fadhiyey ka cabanayey oday dhaqameedyada la iska allifanayo ayaa BBC oo waraysanaysay ugu jawaabay: "kuwaasu oday dhaqameed beeshayda ma ahan ee waa gacan ku rimis". Hadaba kelmadaas oo hirgashay ayaa laga aqoonsanaa meesha oo marka oday dhaqameed la tilmaamayo la is weydiin jiray " kani ma oday baa mise waa gacan ku rimis".

d. Waxaa mid kaste oo ka mid ah Murashaxiintii Hawiye lagu booriyey oo lagu adkeeyey in uusan sinaba uga tanaasulin tartankiisa, waayo anaga ayaa ku wadana oo ballantii ku soo saarayna ayaa dhegta loogu sheegay. Taasna waxaa loola jeeday in lagu kala jajabiyo tabarta iyo codka xildhibaanada Hawiye, waana lagu guulaystay.

e. Waxaa si sarbeeb iyo maskax ahaan ah loo handaday xildhibaanadii oo suuqa la soo geliyey xildhibaan kaste qofkuu ugu riday waa la soo

saarayaa, kii aan Cabdulahi Yusuf ugu ridina waxaa cadaanaysa in uu Al-qacida yahay oo waa la daba gelayaa. Taasina waxay ahayd mid looga faaiidaysnayo jaahilnimada xildhibaanada oo horay looga soo shaqeeyey waxaana laga dhaadhicinayey in dawladaha aduunka oo dhan uuna Maraykan ugu horeeyo ay dawlada aqoonsan doonaan oo taageeri doonaan hadii Cabdulahi Yusuf la soo doorto, laakiin hadii cid kale la soo doorto ay tallaabo ciqaab ah ka qaadi doonaan xubnaha xildhibaanada, isla markiina ay xoog ugu qabanayaan dalka Cabdulahi Yusuf. Nasiib daro xildhibaanadeenu xataa may garan in ay ku fikiraan dawalada qof xoog ugu qabanaysa dalka doorasho fashilantay ka dib may intana doorashaba dhicin oo aan shir iyo muran lagu daalin dalka oo dhan xoog ku qabtaan isagana iska magacaabaan.

f. Waxaa lala garab istaagay hiil iyo hoo iyada oo kharash fara badan oo laaluush ah laga bixiyey,

i. Waxaa, inkasta oo ay dhab u shaqayn wayday, lagu dadaalay in xildhibaanada laga dhaadhiciyo in lagu duufsado caadifad qabiil. Waxaa Daaroodka loo sheegayey in ay markani kalkoodii tahay ee aysan iska dayn fursada, halka Dir iyo Digil iyo Mirifna loo sheegayey sida uu markaan Daarood ugu haboon yahay madaxweynaha Soomaaliya, maadaama Hawiye dhawr jeer la soo tijaabiyey.

Isku soo duuboo, waxaa loogu hiilliyey oday Cabdulahi dhawr arimood oo ay ugu waaweynaayeen: siin awood xulasho xildhibaan, siin awood martiqaadid oday dhaqameedyo, isku jejebin murashaxiintii Hawiye, abuuritaan xin iyo ficiltan dhex mara xildhibaanadii Hawiye, cadaadin iyo gardaduub murashaxiintii Daarood, ucaga jugleyn dadban ee kuwa aan lacag iyo jago toona lagu qancin karin, dacaayad ku salaysan aduunkaa wata oo hadaan la dooran wadanka xoog baa loogu qabanayaa ee hada la sii xirta, iyo tan gu foosha xun oo ahayd sii deyn ama ku sii dhiiri gelin xildhibaanadii Hawiye ee rabay in ay qof ay ka daadin

karaan ama ka qaadan karaan usii dhiibtaan jagada ka dibna fashiliyaan miraha shirka maadaama ay shirkii qudhiisii soo fashilin waayeen.

Run ahaantii marka laga eego dhaqanka siyaasada dunida maanta ee ku salaysan danaysiga gaarka ah, waxaas aan soo xusnay oo dhami ceeb kama ahan ee waa ka caado oo lalama yaabo. Hadaanse soo koobno inta Cabdulahi dooratay waxay kala ahaayeen qaybaha soo socda:

g. Qayb ka mid ahayd xubnihii dawladii Cabdiqasim oo ciil iyo caro dilatay, ayna ka taagneyd mar uun hala helo madaxweyne Cabdiqasim ka soo hor jeeda oo idinkaga aara intuu dhib iyo lug gooyo idiin geystay,

h. Qayb xildhibaanadii Hawiye ka mid ah oo ka dib markii ay jifooyinkii kale ee Hawiye la dooran waayeen murashaxii jifadooda ahaa ee ay wateen ku go'aansaday in ay abuuraan madaxweyne ay ku jabiyaan jifadooda kale ee ku xumaysay iyaga si foorjo ahaana,

i. Qayb ay soo kartay dhibaataynta dagaal-oogayaashu siiba kuwa reer Muqdisho oo u arkay in uu Cabdulahi yahay ninka keliya ee dagaaloogayaashaas dhagaha ka garaaci kara oo ka fujin kara umada Soomaaliyeed,

j. Qayb kula heshiisay jagooyin dawlada dhexe uu ka siin doono, u fududayn warqado ganacsi, iyo mashaariic horumarin oo gobolkooda laga fuliyo. Tan ugu darana waxay ahayd ballanqaadyada jagooyinka sare,

k. Qayb Hawiye ah oo uga dan lahaa soo saaristiisa in aysan meesha wax dawlad ihi ka soo bixin oo inta Cabdulahi la doorto ay ka fashiliyaan, maadaama ay Cabdiqasim oo ka suurta gelin okaab aka fashiliyeen, iyaga oo ka faaidaysanayey colaada ay u qabeen wadaadada iyo dadka reer Muqdisho,

l. Qayb yar oo lacag iyo dhadhamo ugu xilatay, iyo

m. Qayb aad u tira yar oo qabiil ahaan utaageertay.

Run ahaantii mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan ee keentay in la doorto Cabdulahi Yusuf waxaa la oran karaa caloolxumadii iyo uur kutaaladii ay kala gadoomeen CabdiQasim dadkii la soo shaqeeyey mudadii gaabnayd, inkastoo uusan ay yarayd in la helo mas'uul la shaqaynayey guud ahaanba mudadii gaabneyd ee 4 sano ahayd, illeen qofna uma adkaysan karin inuu sanad la dhamaysto wada shaqayne. Sidaa ayaana weligeedba u dambayn jirtay mas'uul xun oo aan ka soo bixin waajibaadkiisa.

Halkaa marka aan mawduuca tusaale ahaan dib ugu celino Cabdiqasim waxaa noo soo baxaya in madaxda xumi ay murugo iyo uur kutaallo reebto. Weli ma arag qof Cabdiqasim la soo shaqeeyey oo abaal iyo wanaag ka tirsanaya. Qudheyda waxan aaminsanaan jiray in uu ahaa kan keliya ee ku haray Soomaaliya ee la dooran karo anoo ka eegayey xaga taariikhdiisa (*portafolio*) oo isugu jirta waxbarasho ahaan, khibrad maamul ahaan, barbaarin ahaan, caqiida ahaan, cibaado ahaan, iwm.

Waxan xusuusanayaa in aan markii ugu horaysay een maqlay in Cabdiqasim madaxweynaha Soomaaliyeed loo doortay aan isla maalintii ka soo xirxirtay shaqadii aan haystay oo ahayd macallin jaamacadeed aniga oon dhamaysan caqdigii (*contract*) aan saxiixay, balse aanba sugin mushaaradaydii bisha oo ii maqnayd. Intii aanan soo bixina bil kaamil ah ayaan, aniga oo ka faaidaysanaya jagadaan hayey ee Gudoomiyaha Jaaliyada Soomaaliyeed ee Bariga fog, inta ku soo wareegay wadamada Japan, Bronei iyo Malaysia ku soo qabtay war saxaafadeedyo aan ku cadaynayo in ay maanta Soomaaliya heshay dawladnimadii dhabta ahayd ee ay ku illobi karto wixii ay dhib iyo halaag soo martay. Wareegaas siyaasadeed ka dibna waxan toos u soo abaaray Muqdisho oon moogaa 10 sano ku dhan oonan cidna ka aqoon. Laakiin 4 sano oon la shaqaynayey maalina mushaar la iima taagin balse aniga ayaa jeebkayga xafiiskayga ku nafaqaynayey. Ha jirto in aysan dawladu wax dhaqaale ah haysan laakiin hadana waxaa muuqatay in la dabooli karay nolosha shaqaalaha muhimka ah.

Aniga oo u maleeya in uu keligey Cabdiqasim in niyad jebiyey ayaan dib ka dareemay in aan ahay kan ugu roonba dadka la soo shaqeeyey. Dadweynahana warkoodba ha sheegin, yey ku daqrin hadaad ku soo hadal qaado, waxayna u bixiyeen "Cabdi-Gaajo". Sidaa awgeed waxaa la oran karaa Cabdiqasim waxa uu is raacsiiyey isaga oo niyad ahaan u dilay xoogaagii shacabka ka soo haray xabadii dagaal-oogayaasha. Anaga oon cadaalada ka tagayn waxa mudan in la xuso in uu Cabdiqasim ku amaanan yahay in uu aad u neceb yahay wax dhiig ah oo la daadiyo, loona malayn karo in wax bi'iskiisu ka yahay dabeecad xumo iyo daciifnimo ka haysatay xaga aqoonta iyo tabarta ee aysan xumaan ku tala gal ah ka ahayn.

Aan usoo noqdee warka runtiisu waxay ahayd Cabdulahi Yusuf waxa uu ku soo baxay feer iyo faralaab aan baryo ahayd. Waxa xasuusasho mudan hadal uu maalin shir looga xanaajiyey ku booteeyey oo ahaa; "waryaaya ma i maqlaysaan, 13 shir oo hore aniga ayaa soo burburiyey, dawladii Soomaaliyeedna anaa riday, jab-had kacdana ana augu horeeyey, kana wallee waan burburinayaa hadaan qashqashaada la iga deyn".

## 5. 5. SIDAY KU SUURTOWDAY IN LA XUSHO RAISULWASAARE CALI MAXAMED GEEDI

Sida ay inta badan Murashaxiintii madaxweynenimo aaminsanaayeen, waxa uu Cabdulhi aaminsanaa oo uusan shaki yarna ka qabin inuu noqon doono madaxweynaha Soomaaliyeed ee la soo dooran doono. Sidaa darteed waxa uu diyaarsanayey Raisulwasaarihii la shaqyan lahaa ee uu ku aamini lahaa ka amar qaadashadiisa, u hiilintiisa, ka dambayntiisa iyo ixtiraamkiisa, hawlkarnimadiisa, soo jiidista dhaqaale iyo sumcad, iwm.

Ninkii ugu horeeyey ee uu oday Cabdulahi arintaas kula heshiiyey ayaa ahaa Maxamed Maxamud Sheekh (Gacmadheere). Gacmadheere waxa uu ahaa

nin aad ula soo shaqeeyey Cabdulahi oo qiyaastii inta Hawiye raacsanayd oo dhan usoo jiiday una galay olole aad u qota dheer. Nasiib darase waxaa iska muuqatay in uusan Cabdulahi marnaba ku tashanin in uu Gacmadheere ka dhigto Raisulwasaare, sababo jiray awgood. Gacmadheere waxa uu ka tirsan yahay Habargidir oo uusan Cabdulahi ku niyad samayn, haday taa ka soo hartana Cabdulahi marka uu madaxweyne noqdo waxaa aad u yarayd awooda uu ku keensan karo Raisulwasaare isagu uu rabo oo waxa jiray awood ka saraysa isaga.

Haddaba Cabdulahi inkasta oo uu go'aankiisu ahaa in uu Raisulwasaare siiyo nin qabiilka Abgaal oo hadana xarun soo dhaweyn ugu deeqi kara dawlada, si uu ugu qab jebiyo Habargidir, hadana waxa uu go'aankiisu uu isugu soo biyo shubtay in uu taladaas faraha uga qaado Ethiopia oo isagaba usha u haysay.

Halkaa marka ay xaaladu marayso ayaa Mr. Geedi oo ka faaiidaysanaya nasiibkiisa saacad la fariistay Cabdulahi Yusuf oo uu markaa u keenay hambalyadii uu ugu soo dhiibay xafiiska IGAD ee ahayd bogaadinta iyo taageerada Madaxweynenimada loo doortay. Isla munaasabadaas ayuu Geedi oo horayba ugu riyoonayey kursiga Raisulwasaarenimada u bandhigay Cabdulahi Yusuf damaciisa kursiga. Mr. Yuusuf qudhiisa oo ku fikirayey sidee baad u heshaa nin aqoon yahan ah, taageersan fikirka iyo man-hajka Ethiopia, Abgaal ah, mudiicna ah ayay taasi markiiba ugu muuqatay muhim suurta gal ah. Hadaba waxa uu galay in uu ku dhiiri geliyo una tilmaamo qaabkii uu ku heli lahaa. Waxa uu u bidhaamiyey inay dawlada Ethiopia tahay mida ay taladu ka go'do.

Halkaa ayuu Mr. Geedi kala gudoomay farxad isaga oo malaha qalbiga iska leh "waw, ar ma Ethiopia mise cid kale"?. Wuxuu markiib aka faaidaystay xiriirkiisii wanaagsanaa ee uu la lahaa madaxda sare ee Etheopia sida Raisulwasaraha iyo qoyskiisa oo ay tan iyo caruurnimadii Geedi macaarif ahaayeen. Waxaana isla asbuucii soo gaaray madaxweyne Yuusuf ku dhiiri gelinta iyo kula talinta Raisulwasaarenimada Geedi.

Taas awgeed ayaa Cabdulahi Yusuf waxa mar ku dhacay aflagaadeyn iyo af weerar ka soo gaaray dhanka Maxamed dheere. Taasi waxay ahayd markii uu Mr. Yusuf ka codsaday Maxamed dheere oo ka mid ahaa ragii madaxweynaha ugu fadhiyey ku magacaabida Raisulwasaarenimo uu si af cad ah ugu sheegay in uusan sinaba ku noqon karin Raisulwasaare. Waxa loo sheegay in ay Beesha caalamka ee masruufka shirka bixinaysay diiday in Raisulwasaaruhu noqdo damiin dagaalooge ah, mar haduu madaxweynihii dhinacaas ka soo jeedo.

Waxa shardi laga dhigay in uu Raisulwasaaruhu noqdo nin aqoonyahan ah ee aan dagaalyahan ahayn. Sidaa darteed waxa uu madaxweyne Cabdulahi ugu baaqay Maxamed dheere inuu keeno nin cidiisa ah oo aqoonyahan ah si uu booskaas usiiyo, iyada oo isna jagooyin kale lagu maslaxaynayo. Hase ahaatee Maxamed dheere intuu kursigii ka booday ayuu dhaqaajiyey isaga oo xanaaq culus ku qaylinaya “aryaa ma gawaaduu ii maleeyey aniga? Xay tahay nin ii keen, habartaa cun. . .”. ku dhawaad laba asbuuc ayaa la kala aamusnaa ugu dambaystiina waxaa gartii galay guurti ka soo jeeda beesha Abgaal, gaar ahaan Warsangeli Abgaal.

Odayadii guurtida ahayd waxay dhib ka dib ku soo qanciyeen Maxamed dheere in uu jagadaas siiyo ina adeerkiis Prof. Geedi, iyada oo isna la siinayo jago kale oo aan ka yaraysan iyo xildhibaanimadiisa oo gacanta ugu jirta, iyaga oo cumaamada ku wada tuuray baroor ku salaysnayd “war magacaa jiryee maanta fursada hana gefsiinin” ka dib.

Hadaba markuu Porf. Geedi soo dhamaystay shuruudihii looga baahnaa kuwii ugu waaweynaa ee kala ahaa: taageerada Ethiopia, Abgaal ka dhalashada, taageerada Abgaal, qancinta Maxamed dheere, aqoonyahanimo, mudiicnimo, ka dheeraanshaha wadaadnimada, iyo ku mamanaan ra’yiga iyo talada Cabdulahi ayaa la go’aamiyey in lagaga gaarsiiyo magacaabidiisa si looga boobo harjadka iyo dadaalka ay wadeen rag kale oo dhigiisa ahaa lagana baqayey in ay kaga hormaraan intaas oo shardi, ragaas oo ay ka mid ahaayeen: Dr. Afrax iyo Bood.

Xaaladu markay halkaa marayso oo warkii suuqa dhab ahaan usoo galay ayey xubnihii Baarlamaanku is weydiiyeen waa kuma Porf. Geedi? Waxaa la waayey cid sheegta ninka warkiisa suuqa lagu hayo meesha uu ka soo jeedo iyo halka ay maskaxdiisu u socoto. Sidaa awgeed xubnihii way ka biyo diideen in laga dulkeeno nin aysan wax aqoon hore ah u lahayn.

Si ay biyo diidkoodaas uga dhabeeyaan ayey gaareen go'aan ay awalba ku tallamayeen oo ah in uusan dawladaba ka mid noqon qof dhaafsiisan 275 toodaas horay u boobtay xildhibaanimada. Waxay u ololeeyeen in Raisulwasaaraha iyo Wasiiradiisuba ka soo dhex baxaan xubnaha Baarlamanaka ee aysna kor ka imaaniin. Fikradaan oo beergooyo weyn ku ahayd Soomaali oo dhan ayaa waxa u ololeeyey dagaal-ooge Qanyare oo isagu ahaa ninka ugu xariifsanaa xaga ololaynta (*campaigning system*). Qanyare, xilligaas aad buu u dhibi-dhisanayey oo waxa daaha ka qaadmatay in uu yahay nin waxa uu rabo ka fulin kara meesha, maadaama uu ku guulaystay dhisitaanka Gudoomiyihii Baarlamaanka oo ah in uu isagu keensaday, kana soo shaqeeyey doorashadiisa oo kaga guulaystay rag kale. Sidaa darteed waxa uu haystay kalsooni buuxda in uu Geedi ka hor istaagi doono Raisulwasaarenimo. Halkaa ayey laantii ugu dambaysay ee uu cuskaday lagana fujin waayey noqotay in Raisulwasaare laga dhigo nin xildhibaan ah oo keliya. Waxa uu adeegsaday kharash iyo qaylo-dhaan habar wacasho ah, wuuna soo diyaar garoobay intii tabartiis ah.

Haddaba taariikhdu markay ahayd 3 dii November 2004 ayaa loo fariistay in la magacaabo Raisulwasaare, laakiin intaan qodobkaas la gelin ayey xubinhii Baarlamaanku go'aamiyeen horta in marka hore la isla meel dhigo in shardi laga dhigo Raisulwasaaruhu inuu noqdo mid ka mid ah xildhibaanada iyo in dibada laga keensan karo. Hadaba qodobkaas ayaa la guda galay in loo codeeyo. Kooxdii aaminsanayd in gudaha Baarlamaanka uun laga qaato Raisulwasaare iyo Wasiiradiisba oo si fiican u diyaarsanayd ayaa markiiba si hal haleel ah ugu guulaystay inay Golaha Wasiiradu ka soo dhex baxaan xildhibaanada.

Laakiin intii uu codku socday ayuu Maxamed dheere oo fulinaya dardaaran hore durba kaga tanaasulay kursigiisii xildhibaanimada Cali Maxamed Geedi, kana sii baxay irida shirka. Halkaa ayuu Geedi oo horay inta loogu soo labisay meesha la soo fariisiyey sidii gabar la mehrinayo ku soo booday saaladii dhaarta oo codsaday in horay laga dhaariyo. Markaa aya aloo dhaariyey xildhibaanimo laguna fariisiyey kursigii Maxamed dheere isla daqiiqadihiiba. La yaab ma lahayn in golahaas loo kala garan waayo Gole Shacab ama Baarlamaan ku shaqeeya qorshe, ajande, nidaam, mooshin, cod dalbasho, cod fasixid, iwm. mise in uu u muuqdo sidii gole fadhi ku dirir.

Halkaa ayaa isla daqiiqadihiiba Madaxweyne Cabdulahi Yuusuf ku dhawaaqay in uu Raisulwasaare ka dhigay Prof Cali Maxamed Geedi, isaga oo xubnaha Baarlamaanka ka codsaday in ay ku waafaqaan oo codkooda kalsoonida siiyaan, dhanka kalena waxa uu Raisulwasaaraha cusub ka codsaday in uu Golihii Wasiiradiisa dhaqso ku soo dhiso.

Raisulwasaare Geedi waxa la siiyey fursad ah in uu hal bil gudaheed ku soo dhiso dawladiisa, laakiin ninkii waa wareeray oo intuu kolba dhan u ruclaynayey ayuuba waqtigii saacadii ugu dambaysay garaarcay. Si uu waqtigii uga gaarsiiyo ayuu Geedi taariikhdu markay ahayd 1 dii Desmeber 2004 soo bandhigay liis dheer oo ay ku taxan yihiin magacyadii Golihii Wasiirada ee uu ka soo dhex xushay xubnihii Baarlamaanka oo keliya. Markii uu liiskii usoo bandhigay ragii ay taladu kala dhexaysay ee Soomaali iyo Ethiopian isugu jiray ayaa mudo shan cisho ah waxaa lagu jiray kala hufid iyo kala ansaxin. Ugu dambaystiina 6 dii Desember 2004, ayuu Cali Maxamed Geedi ku dhawaaqay oo Baarlamaanka hortiisa ka akhriyey boqol ku dhawaad Wasiir iyo saddex Raisulwasaare ku xigeen. Waxaana codkii kalsooni siinta ama kalsooni udiidista la isku mudaystay shan cisho ka dib.

Haddaba 11 kii December 2004, ayey xubinhii Baarlamaanku ka fariisteen arintii isla daqiiqado gudahoodna ku rideen dawladii Raiisul Wasaare Cali

Maxamed Geedi oo isugu jirta Raisulwasaarihii qudhiisii, ku xigeenadiisii iyo dhamaanba Wasiiradii uu magacaabay. Waxaana lagu riday 153 cod oo ah aqlabiyad xoog leh. Waxay ugu marmarsiyoodeen xubanaha Golaha Shacabku in uu Raisulwasaaruhu jabiyay labo qodob oo kala ah qodobka 14-aad iyo 49-aad ee Axdiga ku meelgaarka ah. Waxayna sheegeen inay u cafiyeen xataa dhawr qalad oo kale oo uu galay ayna ka mid ahayd in aslanba xukuumadiisa waqtigii loogu tala galay in lagu soo gudbiyo uu ka dhacay oo aysan astaahilin wax lala hadlaba. Laakiin xaqiiqadu waxay tahay in boohintu orgiga ka weyn tahay.

Waxaa riditaanka dawladaas ka sii fool xumaa in halkaas marka la riday ka dib dagaal gacan ka hadal ihi ka dhacay oo la feeray dhawr qof oo xubnaha ka mid ah oo lagu eedeeyey in ay ka soo horjeesteen ama ugu yaraan ka aamuseen codka lagu ridayo Raisulwasaarihii iyo Wasiiradiisii la soo bandhigay. Halkaa ayaa laga rogmaday iyada oo lagu joogo xubno Baarlamaan iyo Madaxweyne keliya.

Maalintaan dambe madaxweyne Cabdulahi Yuusuf oo aan gurigiisa ka soo tagin ayaa markiiba la gaarsiiyey cajalad fiidiyow ah oo laga duubay siday wax udheceen. Markaa ayuu mudo 24 saac ah iska aamusnaa oo qaabilaadna diiday. Ka dib ayaa lagula taliyey in uusan u bixin ee inta is jilciyo wax walbana hawraarsan - waayahaye idinkaa iga saxsan ka yiraahdo uu dib usoo magacaabo isla Raisulwasaarihii qudhiisii.

Haddaba marakan ayuu odaygu guntiga dhiisha isaga dhigay oo dadaal hor leh galay. Wiilkii uu u watay Raisulwasaarenimada waxa uu ku booriyey in uu meesha ka kaco oo kalsooni kala yimaado xildhibaanadii iyo dadkiisa intaba. Markaa ayuu Geedi oo ku baraarugay in uusan santaagiisu meel gaarsiin karin bilaabay orod iyo tol beelayey, dadkii uu maalmo ka hor iskala weynaaday oo ka faanayey inuu qaabilo ayuu guryahooda ku wada garaacay oo u soo balanqaaday in uu hada ka dib albaabadiisa u furayo.

Guurtidii horay usoo dhistay ayaa mar kale iyaguna cumaamada riday oo qaylo-dhaan isugu yeeray beeshii Mudulood iyaga oo ka bilaabay inay jifo jifo ula

kulmaan. Waxay ku mashquuleen ka dhaadhicinta Abgaal in ay maanta fursad dahabi ah haystaan oo ay qabiilo kale ka shaqaynayaan siday uga ciidayn lahaayeen. Al-Xaaji Yalaxow ayaa ugu darnaa oo mudo lagu daahay. Ugu dambaystiina heshiis fiican lala galay, laguna xukumay in uu inta isagu gacantiisa ku soo qabto meel shir Mudulood ah keeno ku dhawaaqo "Arey waa qaatay aniguye ma ila qaadateen"?!!. Sidaa ayuuna yeelay. Ka dib ayey Abgaal oo isku duuban u soo hoydeen Habargidir oo jifaba abaal gooni ah loo sheeganayo. Tusaale; Cayr ayey Warsangeli Abgaal ku soo oogeen xujo cad oo ahayd in ay soo dhaweeyeen oo marti geliyeen dawladii uu ka madaxda ahaa C/Qasim, iyaga oo hooy dejiyey Raisulwasaareheedii.

Intaas oo shukaamis ah waxaa garab socday oo aan la bakhaylin tii lacag ahayd oo u muuqatay in horay loo hagraday. Waxaa la iska ogaa in aysan marnaba xubnaha xildhibaanadu cod kalsooni ah subixii bixinayn mar hadaan habeenkaas min kun doolar loo soo laabin. Haddaba duhurnimadii 12 kii December ayuu madaxweyne Cabdulahi oo gacanta haya Raisulwasaarihii la riday Prof. Geedi qado sharaf heer sare ah xildhibaanadii ugu qabtay Hotel Intercontinental isaga oo u cataabay xildhibaanadaas una qayaxay sida uu isu madluuminayo oo uu wax walba ooy keenaan isaga raali noqonayo inta uu dantiisa ka gaarayo.

Waxa uu qirtay in aysan isaga iyo Raisulwasaruhu weligood baalna ka soo rogin oo akhrin buuga Axdiga, illeen waxa uu is lahaa cidina waxan ma akhrin doonto. Maalintaa waxaa wejiga iyo hadalada Cabdulahi Yusuf ka muuqday ciil iyo caro uusan soo bandhigi karin waxa uuna ku siganayey markuu afka kala qaadaba in uu yiraahdo; war anigu madaxweynenimo caynkaan ah ma doonayn ee iga ceshada marba hadaanan xor u ahayn in aan sameeyo waxaan rabo. Isla saacadahaas ayaa saqdii dhexe ee habeenimo markay taariikhdu ahayd 13 kii December 2004, Hoteladii ay degenaayeen xildhibaanadu ayaa lagula wareegay kumanaan doolar subixiina lagu ballamiyey inaysan codka kalsoonida la daahin. Hawraarsan iyo hawraarsan baa hadal lagu soo af jaray. Aroortii markii la

gaarayna Madaxweynaha Dawladda Federaalka KMG ah ee Soomaaliya Mudane Cabdullaahi Yuusuf Axmed ayaa waxaa uu mar kale u magacaabay Ra'iisal Wasaaraha DFKMG ah ee Soomaaliya Cali Maxamed Geeddi. Isla sidii hore oo kalena codsaday in codka kalsoonidana bartaa lagu siiyo, isna ka sii codsaday inuu golihiisa Wasiirada ka soo gaarsiiyo inta uusan waqtigu ka dhamaan mar kale.

Prof. Geedi oo xoogaa yara ilbaxay ayaa beryahaas dhididka sayrayey oo shaqo culus ku jiray, illeen dadkii ayuu ku qasbanaaday inuu qaabilo oo weji furan iyo af macaan kula hadlo isaga oo aan inaba isla weyni tusinayn. Orodkiisii waxa uu dhalay in uu 10 cisho gudahood ku soo bandhigo liiskii Golaha Wasiirada oo uu ku dhaweeyey 100 Wasiir oo ah tiro aan aduunka lagu maqal hada ka hor.

Taariikhdu markay ahayd 23 kii December 2004, ayaa Baarlamaanka DFKMG ah ee Soomaaliya waxay siiyeen codkii Kalsoonida Dawlada Raiisul Wasaare Cali Maxamed Geedi oo ay maalmo ka hor udiideen, waxaana ansiyay codka 229 xildhibaan oo ku dhaw isla intii cod ee shalayna diiday. Xildhibaanada Soomaaliyeed badankoodu ma muujinayn wax khajilaad iyo dareen ceebeed ah ee waxay ku faraxsanaayeen in ay codkooda daqiiqad kaste siday doonaan u isticmaalaan ayna ku shaqeeyaan hadaba inta ay calooshoodu ka tusiso. Bal ku noqo oo mar kale soo akhri qisadii ninkii intuu qunbaha subaga ah afka dhulka u geliyey yirir: "Ceeb ninkii yaqaanay waa dhintay ninkii kalena waa dhex fadhiyaa". Allaylehe waa tan oo waa dhex fadhinaa ceeb iyo calool-xumo, waase haday uga badan tahay horseedayaalkeeda laba af maroojis.

Intaa markii uu helay Raisulwasaare Geedi isla markiiba waxa uu dib ugu noqday dabeecadiisii ku salaysnayd isla weyniga iyo san taagleynta, waxayna u ekayd in uu kuwii uu shalay inta is hoos dhigay tol beelayey ku beerlaxawsaday uu maanta ku leeyahay "Aarrey baxa naga taga, qurun yohow dabaalada uhu". Sinaba qaabilaad waa loogu heli waayey oo baadi arag lagu raadshay. Ragii isu

haystay inay iyagu soo dhisteen oo rajaynayey in ay subax kaste qolka xafiiskiisa isaga qaxweyn doonaan sida Al-Xaji Yalaxow iyo kuwa kale oo waxaa la arkay telifoonada ay ku marin habaabinayaan ama ku daminayaan wiilasha waardiga u ahaa Raisulwasaare Geedi. Halkaana waxaa Yalaxow ka soo yeertay in uu ku ciil kaambiyey: "habarteeyaa ii banaan minowsan ka shallaayin".

Intay waxaas oo dhami socdeen cidi isma weydiin xagee ayaanu usoconaa? Maxaa inoo qorshe ah? Maxaan haysanaa? Xagee wax ka soo dhacsanaa? Iyo boqolaal su'aalood oo kale oo la is moodsiinayey. Sadexda sano ee halkaa la fadhiyey la isma weydiin barta dawlada la dhiso la dajin doono iyo waxa lagu dajin doono. Waxaa mucjiso ahayd in dhawrkii biloodba mar loo diri jiray dalka Guddi xaqiiqo raadin ah (*fact finding mission*), laakiin ilaa hadda lama oga meel la geeyey intay warbixin soo gudbiyeen. Waxaa mudan in aan halkan ku cadeeyo in Gudigaas warbixntiisii oo aan dhawr jeer si iskaa wax u qabso ah ula diyaariyey aqoonyahankii hogaaminayey Dr. Cismaan Galti oo hawsha ku keligiis ahaa. Waxa ugu darnaa ee lagu dhaliili karay Gudigaas isla dhaliisha ay guud ahaanba maamulka shirku wadaageen oo ahayd isku habays la'aan (*disorganization*) iyo kala daadsanaan sababaysay in wax tarkooda oo dhami hal bacaad lagu lisay noqdo. Waxan hubaa in ay warbixanadu kuwa dhaxal gal ah ahaayeen, laakiin waxaan weli is weydiinayaa xagee lagu xaseeyey? Maxaa loola dan lahaa? Maxayse markii horeba u qiimayn waayeen oo ugu yaraan ugu samayn waayeen aqoonyahanka xaafiis u gaar ah oo uu ku diyaariyo warbixnada sirta ah?. Waa yaabe, halkii aan ka sugaynay in dawlada la dhiso ay ku hawlgali doonto warbixinada gudigaas xaqiiqo raadintu ay soo gudbiyeen ayey dawladii la isku dayeyna haab haabasho aan ujeedaysnayn bilowday. Bal aan aragno halkay caga dhigato iyo halkay ku biyo shubato ayaa la isla dhex maray, Allow ur u bixi.

## 5. 6. CADDAALADII DAWACADA EE AWOOD-XUKUN QAYBSIGA

Tan iyo bilowgiiba waxaa socotay dhiillo rere walba uu goonidiisa ula guuxayey oo ku salaysnayd; anaga sanad walba wa anala boobaa ee bal manata waan isu soo qaylo dhaansanaye car halana boobo. Maadaama lagu dhaqmayey saami qaybeedkii lagu soo dejiyey Carta ee ahaa afar beelood iyo bar in ay Soomaalidu u qaybsan tahay, waxay cid walba tirsanaysay tirada la siiyey in ay ka yar tahay intay xaq u lahaayeen iyaga oo badankoodu ka ficil qaadanaya tirada la siiyey beel kale oo ay colaadi kala dhexayso.

Markii la soo gaaray qaabkii wax qaybsiga ee la bilaabay in beel walba tira go'an loo asteeyo. Waxaa la go'aamiyey in la tixraaco qorshihii aqooleed ee lagu dejiyey dalka Djibouti shirkii kan ka horeeyey. Aqooshaas oo ahayd in Soomaalida loo qaybiyo afar beelood iyo beel bar. Haddaba beel kaste oo ka mid ah afarta beelood ee waaweyn waxaa loo qoondeeyey in la siiyo 61 xildhibaan, beesha barka lagu sheegayna la siiyo 31 xildhibaan.

Qaybtani ma ahayn mid lagu degdegay ee waxay ahayd mid soo jiitamaysay mudo dheer. Waxaa jirtay in laba jeer oo hore mar walba la bilaabay inay beeluhu wada fariistaan oo soo qaybsadaan xisaabtaas laakiin markay mudo iska wada daba jiitamayeen ayna ugu dambaystii garan waayeen haday wax qaybsadaan xataa ciday ula tagayaan qaybtooda oo wax ku kala siinaysa ayey arintii iska shiiqday oo lagu kala aamusay. Waxaa la kireeyey hotelo fara badan oo magaalada Nairobi ku yaalla oo kulligood wada ah kuwa qaaliga ah ee loogu tala galay dalxiiska sare. Taasina waxay ka mid ahayd naas nuujintii iyo maal gurubsigii socday oo intaa la kiraynayey diyaarado, baabuuro, hotelo iyo goobo shir (*halls*).

Si lacag loo sameeyo waxaa iska caadi ahayd in maalin walba diyaarad loo kireeyo gobol Soomaaliyeed oo la leeyahay waxaa laga keenayaa ergo loo

baahan yahay. Ka soo horjeedka taas waxaa jirtay in maalin walba diyaarad kale loo kiraynayey gobol Soomaaliyeed iyada oo la leeyahay waxaa la celinayaa ergo laga kaaftoomay oo dheeri ah. Haddaba su'aasha qof kaste maskaxdiisa ku soo dhacaysa ayaa ah maxay kala yihiin ergada laga maarmay iyo ergada loo baahday? Ma waxaa jiray shuruudo lagu heshiiyey oo markii hore lagu xiray nooca dad ee ay noqonayaan ergada Soomaalida shirkaas ku matalaysaa?.

Taariikhdu markay ahayd 20 kii Augst 2004, ayaa waxaa ka dhacay madashii shirka mudaaharaad ballaaran oo ay soo qaban qaabiyeen qaar ka tirsan siyaasiyiinta iyo ergada Soomaalida ee ka qaybgelayay shirkaasi dib u heshiisiinta ahaa ee xiligaasi socday waxaana ay ka cabanayeen sida loo soo gudbiyay saamiga beelaha ay ka dhasheen oo aysan raali ka ahayn.

Waxa horay looga qaylinayey qaybtii iyo saamigii uu reer walba ka helay xubnaha Golaha Shacabka. Cid waliba iyada oo faruurta hoos ka qaniinaysa ayey iska aamustay. Waxa aad loogu qosli karay marka la arko cid walba oo ku doodaysa " bal eeg reer hebel oo aan meelna degin intaas oo xubnood ba ala siiyey, reer hebel oo sidaa u weyna intaas baa la siiyey. Waa maxay caddaalad xumadaasi?. Koley anaga beesheena waa nala xumeeyey laakiin sidee ayey noo dhici doonaan marka ay intay cadaaladi timaado la yiraahdo cid walba deegaankeda halaga soo doorto oo ay arintu qof tirsi gaarto, bal maalinkaa isaga ah reer hebel yay cod ka xoogin xageese laga soo dooran doonaa?, iwm".

Kelmadahaas ayaa ahaa kuwa dhegaha u raaxaynaya, maadaama ay ku tusinayeen in cid waliba ay ku qanacsan tahay in horta xaalada la dejiyo, deedna dib goboladii la iskula noqdo cod tirsi madax kow ah. Laakiin waxaa dhabaqo meel beeshay kolkay beelaha qaarkood si bareere ah u xoog sheegteen. Beesha Hawiye oo ahayd mida ay Soomaalida inteeda kale ka cabaadaysay ayaa wakiiladeedu afka ku ballaariyeen; "anaga ha lana siiyo cad dheeri ah hadaad rabtaan in aan xaalada dejino, hadii kale kor baan u laadaynaa waxaba".

Kooxdii fidnoolayaasha ahaa ee ay hor boodayeen Caato iyo Qanyare ayaa qado deg deg ah ku qabtay Hotel Intercontinental ee Nairobi, waxayna bayaan ku soo saareen in hadaysan beel walba xisaabteeda Wasiirada qaar uga soo celin beesha Hawiye, iyada oo beel walba ay dhiibayso ugu yaraan hal Wasiir iyo hal Wasiir ku xigeen oo baad ah dhab ahaan meesha loogu kala tagayo. Bareerahaas ayey, iyaga oo weliba la gunuunacaya in ay fikradu ka hoos baxday markii xildhibaanada la qaybsanayey, usoo jeediyeen xukuumaddii tabarta yarayd hadaysanba tabar la'aan ahayn ee weli dherebta ku jirtay. Madaxweynihii ayaa beelihii kale ka codsaday in ay ogolaadaan baadaas iyaguna way wada ogolaadeen si shuruud iyo ka hadal aan lahayn.

Haddaba si heshiiskaas loo fuliyo ayaa 5 tii Janaayo, 2005. Markii ay xubnihii Baarlamaanku isugu yimideen kalfadhigoodii caadiga ahaa uu Ra'iisul Wasaare Geedi oo isaga qudhiisuna Hawiye xisaabta hal dheeri ugu ihi ka hor akhriyay dawladiisa isla fadhigaas, isaga oo qeexaya inta Wasiir ay kala qaadan doonaan beelaha Soomalida oo kala ah sida soo socota:

1-Beesha Hawiye 11 Wasiir iyo 11 Wasiir ku xigeen.

2-Beesha Daarood 9 Wasiir iyo 9 Wasiir ku xigeen

3-Beesha Dir 9 Wasiir iyo 9 Wasiir ku xigeen

4-Beesha Digil iyo Mirifle 9 Wasiir iyo 9 Wasiir ku xigeen

5-Beesha 5aad 4 Wasiir iyo 4 Wasiir ku xigeen

Sidaas ayeyna qaybtii libaaxa iyo dacawadu u dhacday in beesha Hawiye ay dheeraadaan beelaha kale laba Wasiir, Raisulwasaare ama Wasiirka koowaad ee dalka, Caasimada iyo guud ahaanba miisaaniyada dalka oo sanadaha ugu horeeya oo dhan ku soconaysa halka caasimad laga dhigo, waase fiicnaan lahayd hadii maslaxa lagu gaarayo sidaa qudheeda. Allow maslaxa kheyr qabta ku keen.

# MAXAA LAGU HESHIIYEY AAKHIRKII

Dhab ahaantii waxba laguma heshiin, haddaanba lagu heshiin inaan weligeed la isu imaanin oo la heshiin iyo in aan weligeed dalka burburka iyo baaba'a lagu wado aan laga deynin ee lagu sii kordhiyo. Jawaabtaas faahfaahinteeduna waa sidatan hoos ku taxan:

Si ahaanteedaba sidii loo sugayey in la bilaabo barnaamij dib u heshiisiin oo rasmi ah oo wax ku ool ah ayaa subixii dambe gogoshii lagu soo kala tagay oo ka baxaay ka dhacday. Inkasta oo Soomaalidu ay wada ahaayeen dad ka baxaayda la qabsaday oo wleigood habeenba meel ka qaxayey hadana waxa dhacday in ay qaarkood ka qalab aruursan waayeen Nairobi oo u muuqatay meel ay is lahaysiiyeen ka dib markay mudadii ku dheeraatay. Waxaa jiray dhawr qodob oo la isugu soo hadal qaaday si ay uga mid nodaan ama horudhac ugu noqdaan qodobada laga wada hadlayo ama laga heshiinayo sida kuwii ay soo diyaariyeen lixdii Gudi ee aan kor kus oo xusnay, laakiin kulligood waxay ku dhamaadeen shimbirayohow heesa.

Qodob kaste oo la isku soo hadal qaaday intii shirka loo fadhiyey laguma heshiin wax go'aan ahna lagama gaarin ee waa la isaga aamusay ka dib markii dhawr jeer inta la isku soo hadal qaaday la isku af garan waayey, arintiina looga tagay si ma dhamaato *(open ended*) ah. Haday dhici lahayd daacadnimo la isku af garto waxaa hadana aan marnaba laga aamin noqonayn shakhsiyaad fara ku tiris ahaa oo mar kaste wax u diidayey ha lagaa sheego, iyaga oo u fikirayey mar hadaysan wax cod ah meesha ka geysan oo wax is hor taagin ay noqonayaan wax la illaawo oo aan lagu tashan kolka xukun qaybsigu yimaado, sidaa darteed ayeey qodob kaste oo la soo hadal qaado ka dhigayeen jiq (*deadlock*).

Waxaa muuqatay in shaqaalihii ay IGAD usoo xil saartay fulinta hawsha ka mira dhalinta iyo najiixnta shirka ay iska indha saabayeen waajibaadkooda oo inta badan is raacinayeen danahooda gaar ahaaneed. Waxay intooda badani ku dadaalayeen gaarsiinta shirka heer burbur iyo fashal, ama ugu yaraan si uu u noqdo mid ay ka biya cabaan qabqablayaalka dagaalka oo iyagu la wadaagayey xiriir hoose oo wadaaytinimo. Waxay ka sinaayeen qabqablayaalku gaar ahaan kuwa soo baxay dhaqaalaynta iyo xiriirinta shaqaalaha ka shaqaynaya maamulka shirka. Waxaad intaa arkaysay hadiyado iyo garab daar loo leexinayo mid ama laba ka mid ah maamulayasha shirka.

Haddaba si ujeedadaas nacasnimada ah looga gun gaaro xoogaa dhaqaale ahna looga samaysto meesha waxaa inta badan waqtigii la isku dhaafiyey oo ra'yul caamkii lagu mashquuliyey kala miiritaan Ergo, maaweelin qabqable, ka xanaajin wax garad, iyo tallaabooyin kale oo wada khatar ah.

## WAA MAXAY XALKU?

***"Cadawgaaga markuu sun ku siiyo subag sii***": xikmad.

Waxaanu ka soo waranay sidii ay wax udheceen iyo asbaabihii dhaliyey dawladdii lagu soo dhisay Nairobi dhamaadkii sanadkii 2004 ilaa bilowgii sanadkii 2005 ee ahayd mirihii shirkii ugu fadhiga dheeraa ee ay taariikhda caalamku abid sheegtay, shirkaas oo socday intii u dhexaysay sanadihii 2002-2005. Waxaan xog warankeenii ku soo bandhignay xaqiiqadii wixii ka socday madashii shirka ee dawlada lagu dhisayey anaga oo ku soo hoorinay sababtii keentay dawlada iyo noocaddii dawlad ee dhalatay. Marka la isku soo duuduubo ujeedada qormada ayaa waxaa laga dhadhansan karaa in ay dawladu ahayd mid ay si dirqi iyo qoor qabad ah noogu dhistay dawladda Ethiopia ee aanu jaarka nahay, nasiib darana ay xurgufta dhaxaltooyada ihi naga dhexayso.

Haddaba mar haday xaaladu taas tahay maxaa nala gudboon iminka oo aan ka yeelnaa dawladaas? Jawaabta su'aashaas ayaan hadaba gebangebada

qormada uga jawaabayaa aniga oo ka duulaya fikirkayga iyo aragtidayda oo aan la cuskanayo xaqiiqada jirta ee aan la iska indhasaabi Karin. Anaga oo u sii dhaadhacayna jawaabtii su'aasha ayaan leeyahay waxaa nala gudboon keliya ma ahane waxaa lagama maarmaan nagu ah in aan si buuxda oo hagar la'aan ah u taageerno dawladaan anaga oo ka duulayna duruufteena iyo danteena illeen waa taan ku maahmaahnaye " dantaada maqaar Eey baa loogu seexdaa". Waxanan halkan ku qeexayaa dhawr sababood oo ay noolga gudboon tahay in aan sideeda dawladaan ku taageerno, waxaana ka mid ah:

1. **"Hadba kiina Talinaaya taageera weligiin**". Waxaan jeclahay ama ku talinayaa in aanu wax ka badelno heesta calankeena ee aan had iyo jeer ku celcelino inagoo og in aanaan ku camal falayn ee ah: "**Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsanaada. Hadba kiina taag daran taageera weligiin**". Waxay iigu muuqataa in aan xilligaan la joogo u badelno " **Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsanaada. Hadba kiina Talinaaya taageera weligiin**", maxaa yeelay;

B. Way inoo suurtoobi weyday inaan taageerno hadba keena taagta daran, hadalkana in la iska saarnaado ma wanagsana kol haduusan hawlgal yeelanayn.

T. Waan diidnay in aan isku tiirsanaano oo faylaha ayaanu is jaraynaa in yar baana naga soo hartay oo waanu is cunay.

J. Halkii lana ka doonayey in aanu toosno waan dheelalownay oo maacuuntii gurigaan jab jabinay. Haddaan isku dayno inaan saddexdaas qodob xilligaan la joogo isku baraarujino waan ognahay in ay nagu adagyihiin qaadashadoodu illeen waxaa nagu dhacay cudur musiibo ah oo jeermiskiisu ka hor joogsanayo in ay soo galaan ama ka hawlgalaan xubnaha jirka. Cudurkaasina waa Qabiilaysiga, Qabyaaladda, Qof jeclaysiga, Naf jeclaysiga oo qeexitaankoodu isugu wada imaan karo "**Tacasub**". Qabiilaysi waa cudurkii ugu darnaa ee weligiis hor taagnaan jiray ilbaxnimada, samafalka, horumarka, diinta, iyo danaha gaarka ah ee dadka. Inkasta oo uu yahay

cudur ay maanta ka koreen dunida inteeda badan hadana waxa uu fara ba'an ku hayaa dadkeena oo ah kuwa dunida maanta ugu faqiirsan, ugu jaahilsan, ugu ilbaxnimada hooseeya, ugu maamul la'aansan, uguna ammaan darada badan ama ugu khatar badan. Qof jeclaysi iyo naf jeclaysi iyaguna waa musiibooyin aad u halaag ah laakin mar hadaanaan ku joogin mawduucii looga hadli lahaa waxaan uga tagaynaa akhristaha in uu soo ogaado inta ay gaarsiisan tahay dhibaatada ay leeyihiin.

Haddaan ku noqono sababta aanu u badelayno heesta Qaranka oo tooshka ku qabano ujeedada aan u iri: "Hadba kiina talinaaya taageera weligiin", waxay iigu muuqatay inaan u baahanahay hogaan si la mid ah sidaanu ugu baahanahay cuntada. Marka aanu leenahay hogaan noo haya maamulka guud waxan fursad u heli karnaa in aan dib u habayn iyo wanaajin ku samayno dhammaanba waxyaalaha naga hallaysan ee fasahaaday.

Waxaa xusid mudan in la ogaado ama shaaca laga qaado in aan mid kaste oo talinaaya lagu taageerayn wax kaste oo uu la yimaado samo iyo xumo labadaba. Inkasta oo ay samankaan lagu jiro adag tahay in la helo hogamaiye wanaag iyo caddaalad ku maamula xukunkiisa, hadana Soomaaliya waaba mid aan looga fadhiyin. Xataa hadduu Hogamaiye Soomaaliyeed damco caddaalad iyo horumar wuxuusan garanayn dariiqadii loo mari lahaa illeen ma qiyaasayno xilligaan in la dooranayo Hogaamiye isku darsaday aqoon iyo qalbi fiyoobi.

Laakiin ujeedada aan ka leenahay "Hadba kiina Talinaaya Taageera Weligiin" ma ahan in aan wax kaste ugu ansaxinayno sida uu ku wato sax iyo qalad tay ahaataba ee waa in aan wixii samaan ahna ku sii dhiiri gelino kuna taageerno hirgelintooda, wixii xumaan ahna u cadayno raadkooda xumaaneed anaga oo ka waaninayna. Marka aan sidaas yeelno waxaan fulinaynaa Xadiiskii Nabigeena NNKHA tee uu ku yiri: **"U gar gaar walaalkaa hadduu wax dulmiyo iyo haddii la dulmiyaba**", markaasay Asxaabtii weyiiyeen: Nabbi Allow haddii la dulmiyo waaba garanaye waa side hadduu isagu cid dulmiyo? Markaas ayuu ugu jawaabay: "Hadduu cid dulmiyo gacantaad ka

qabanaysaan markaa ayaad u sheegaysaan in uu dulmi wado". Weli su'aaha la is weydiin karaana waxay tahay; side ayaanu nin Madaxweyne ah gacantiisa u qaban karnaa oo ugu sheegi karnaa in uu qaldan yahay. Laakin su'aashaas qudheeda ayuu Nabigu ka jawaabay oo waxa uu yiri NNKHA: **"Qofkii idinka mid ah ee arka Xumaan ha ku baabi'iyo gacantiisa, hadduusan awoodina carrabkiisa, hadduusan awoodina qalbigiisa, kaasina waa iimaanka kan ugu tabarta liita**".

Si aanu ugu dhaqano xadiiskaan waxaan awoodnaa in aan adeegsano labada khiyaar ee dambe marba midkii noogu haboonaada tabar ahaan. Waxaa muuqata maanta haddaan ka bilowno kan ugu koreeya in ay ka dhalan karto fidno ka sii weyn tii aanu ka cabanaynay. Tusaalena waxaa noogu filan in aan dib u eegno sidii ay ku bilaabatay tan maanta ina haysataa. Waxaa kale oo nasiib wanaag ah in ay maanta ilbaxnimada cusubi nagu dhiiri gelinayso ku camal falka qodobka dhexe ee Xadiiska oo macneheedu yahay; Hadduusan awoodin gacan Carrabkiisa ha furto. Waxaa iska cad in uusan maanta Madaxweyne jiraa xor ahayn sida uu doonana wax u maamuli Karin. Waxaa maanta Madaxweynaha la awood ah wiilka ama gabadha dhallinyarada ah ee ku hawlan saxaafadda – war is gaarsiinta. Waxa uu Madaxwenuhu xumaan ku kaco aroortii ayaa war baahinta laga sii deynaya aiyada oo cadaymo dhab ah lagu adkaynayo deedna waxay Madaxweynahaas u noqonaysaa canaan iyo edbin uga daran dhenged lagu garaaco. Hadduu Madaxweynahaasi mid caqli wanaagsan yahayna aad buu uga mahad naqayaa ceebayntaas illeen waxay u tahay toos toosin iyo guubaabe.

Haddaba waxay ila tahay in aan halqabsi aan cuskano ka dhigano ku badelka "**Hadba kiina Talinaaya taageera weligiin**", halkay ka ahayd "hadba kiina taag daran taageera weligiin".

2. "**Usii daa macangaga xariga idiin dhexeeya sal jugle ha u dhecee**". Taasi waa qaacido wanaagsan oo la raaci karo welibana ku

habboon macaamilka siyaasadeed ee samankaan jira. Laakiin waxaan u sii baddeli lahaa qaab kale oo lagu hormarin karo iyada oo loo sii qormaynayo "**Iska sii macangaga xarigaad isku haysataan**'. Qaacidada wejigeeda hore waa mid ku salaysan cadawnimo oo ma habboona laakiin teeda dambe waa mid ku salaysan ku dhaqanka Diinta Islaamka iyo ilbaxnimada fiyow ee laga qaato cilmiga nafsaaniga ah.

Nimanka hogaanka dawladda qabtay waa Bani'aadam, haba ahaadeen kuwa dambi naga galaye. Ma oranayno waa Soomaali oo keliya mana oranayno waa Muslim oo keliya laakin waxaa nagu filan in ay Bani aadam yihiin oo keliya. Aadanuhu si kaste oo uu isugu qaldamo waa kii is fahma marba haday labada dhinac usoo jeedaan maslaxo iyo muwaafaqo. Haday jirto in dhinac labada garab ee is haysata ah uusan sinaba maslaxa doon ku ahayn oo ku adag yahay xaq daradiisa waxaa weli maslaxo keeni kara dhinaca kale ee isagu samajeclaha ah. Marka uu macangaga isku garsiinaya xaqdaradiisa ku adkaysto waxa la isku haysto waxa uu samajecluhu usii deyn karaa xariga udhexeeya si uu macangagu usoo tijaabiyo waxa laga celinayo. Laakiin waxaa taas shardi u ah in aysan arinta la isku haystaa ahayn mid keeni karta macsi Ilaahay oon laga maadan Karin. Xataa haddii macsida ka imaanaysaa ay ka hoosayso ama la bar bar dhac tahay dhibka ka imaanaya haddii la isku adkeeyo xarigaas waxaa banaan in loo sii daayo xarigaas si looga nabad galo shar ka aloosanta halkaas.

Taasi waa mid laga baran karo tacaaliinta Diinta islaamka iyo culuumta ama ilbaxnimada casriga ah ee ka dhalatay tijaabooyinka iyo duruurfaha dunida. Waxaa hubaal ah haddii maalintay nagu bilaabatay fidnada iyo halaagu aan u dayn lahayn xukunka kuwii isku dhejiyey ay maanta soo wada mari lahayd fursadu dhammaanba inta u hamuuman. Waxay noogu suurtoobi lahayd taasi inaan Dastuurka ku dhigano in mudada Madaxweynuhu tahay afar sano oo keliya, ka dibna madaxweynihii wax tar la taaban karo muujiya waxa la siinayaa nolol qaali ah iyo ammaan

waarta, halka kii wax fasahaadiyana afar sano ka dib maxkamad la soo saari doono, tiiyoo awoodda ciidana laga ilaalinayo gacantiisa, iyada oo dhanka kalena lagu maamulayo ciidanka nidaam uusan inqilaab ku suurtoobi karin. Kolkaa imisa qof bay fursadu soo mari lahayd intaanu is haysanay, dalkuna ma burburi lahayn ee dhab ahaan wuxuu ugu dhisman lahaa is xilqaanka qof kaste oo jagadaas hela isaga dhana rajaynaya sumcad wanaagsan iyo barwaaqo dhanka kalena ka baqaya maxakamad iyo toogasho, illeen waxaa dambi loogu soo oogayaa maxaad ka soo doontay jagadaan hadaadan sidii loogu tala galay eed ballan qaaday u gudan Karin?.

Teeda kale waxaan malaha moognahay in dadweynuhu kaga abbaaran yahay madaxweynaha xagga wanaag samaynta iyo horumarinta dalka. Halkaa markaanu arinta ka eegno waxaa noo caddaan karta in aanu shacab ahaan isu dhisi karno inaga oo hogaamiyahana u haysanayna mukul ahaan oo keliya.

**3. “Aan kuwii lanoo gardaduubay dadnimo iyo wanaag ka raadino”**. Intaa ka dib aan usoo dhaadhacno ujeedada qormada oo ahayd AAN TAAGEERNO DAWLADDA. Waxaa habboon in ay dhammaan aqoonyahanadii iyo siyaasiyiintii lagu hungeeyey shirka ee madaxa ciidda loo daray guntiga dhiisha isaga dhigaan sidii ay u taageeri lahaayeen oo u gacan qaban lahaayeen kuwii Qabqablayaalka dagaalka ahaa ee khayaanay ama looga hiilliyey.

Waxaa lama huraan ah in uu aqoon yahan kaste tababar iskaa wax u qabso ah u furo dagaalyahanka beeshiisa ee ka khayaanay kursigii uu ku haminayey ee Xildhibaanka ama Wasiirka ah, maxaa yeelay waa Mas’uul Soomaaliyeed siduu doonaba ha ku yimaadee. Waxaan shaki ku jrin in uu Mas’uulkaasi ka san taagleyn doono tababar uu u furo aqoon yahanka ina adeerkiis ihi, laakiin weli aqoon yahanka ayey mas’uuliyadi ka saran tahay sidii uu uga dhaadhicin lahaa fikradaha wanaagsan ee uu xambaarsan

yahay e eku dhisan aqoonta iyo ilbaxnimada. Waxaa looga baahan yahay aqoon yahanka dhabta ah in uu ku gudanayo tababarkaas uu iskaa wax uqabsada ku bixnayo qaab sheekaysi, xog waran, hawl fulin, tuurasho hadallo dulmar ah, tababar toos ah, wax barid toos ah iyo noocyha kale ee dadban oo ka mid ah qaababka wacyi gelinta bulshada.

Si kastaba oo arinta loo eego waxa lama huraan ah in ay iskaashi ku dheehan hagar la’aan iyo is aaminitaan ay kuwada shaqeeyaan dhinacyaha iska soo horjeeda ee dhufayska isugu jira iyaga oon midkoodna weli cadaysanayn difaac iyo weerarka ay ku jiraan dagaalkii labaad sidiisii. Waxaa maanta Soomaaliya lagu hagaajin karaa wada shaqyanta Dagaalyahanada, Aqoonyahanada, Ganacasatada, Xoogsatada, Masaakiinta dhiban, iyo Mooryaanta isbaarooyinka. Hadday intaasi garba siman u wada raadshaan dawladnimadii iyo sharaftii Soomaaliyeed iyaga oo meel fog isaga soo aasaya isnacaybka, isxaqiridda, isufaanka, is feer orodka, iyo guud ahaanba is riix riixyada kale ee ay had iyo jeer iskala soo horjeedaan isla markaana aaminsan in uusan midkoodna midka kale ka xigin dalka iyo danihiisa waxaa dhici lahayd in la helo dawladnimada ay maanta ku naalloonayaan dadyowga adduunka ugu hooseeya dhan walba oo la eego.

Marka uu Aqoonyahanka siyaasiga ihi tilmaanta siyaasada bixiyo ama gar wadeen ka noqdo, Aqoonyahanka horumarinta yaqaana ku dhaqaaqo dhisamaha dalka, Dagaalyahankuna ujeesto sugitaanka amaanka iyo difaaca dalka isaga oo xoogiisa uu maanta ku dhamaynayo burburinta dalka uleexinaya dhawritaanka iyo ilaalinta dhismaha dalka, Masaakiintuna ay codkooda oo buuxa ku taageeraan kuwa wanaaga laga filanayo, Xoogsataduna ay ku dhaqaaqaan wax soo saarka iyo la dagaallanka gaajada waxaa hubaal ah in aanu halkaa ka soo saaran lahayn Dawlad ku taagan udub aan liicin oo noqota libaaxii qaaradda. Haddaba wada jir bay laba gacmood wax ku goyn karaane aan is weheshano walaalayaal aan wada jirno walaalayaal. Run ahaantii waxay dhinacyadaani isu yihiin laba

gacmood oo is kaalmaysanaya isna kaaba illeen far keliyihi fool ma dhaqdee.

4. "**Aan Ethiopia la walaalowno**": Dhanka kale marka aan ka eegno la macaamilka dawladda aan deriska nahay ee Ethiopia. Waxaan shaki ku jirin in labada shacab ay weli isu hayaan colaad iyo cuqdad. Taasi ma ahan mid si sahlan lagu baabi'in karo waayo waa soo jireen oo waxay soo bilaabatay tan iyo bilowgii Diinta Islaamka. Markaa ayey Boqorradii ka jiray geyigaas dagaallo ba'an oo naxariis darro ah ku qaadeen dadyowgii rumaystay Islaamka. Waxayna ku qaadayeen dagaallo aan loo aabayeelin oo isugu jiray; xasuuq, dil toogasho ah, jir dil, dal ka cayrin, dhac, kufsi, bililiqo, jisya ka qaadid – Gibir, addoonsi, shaqo u diidid, jinsi tagoor, xaqirid, iyo cadaadisyo kale oo fara badan, illeen waxay u arkayeen awoowayaasheen in ay ahaayeen dad Diintoodii badelay oo ka gaaloobay uuna bannaan yahay dhiigooda iyo maalkoodu. Sidaa darteed hala yaabin weligaa ee ku fakir sidii aad colaadahaas u soo afjari lahayd oo wanaag u abuuri lahayd, waxaana haboon in mar kaste oo la soo xasuusto loogu mahad celiyo loona duceeyo awoowayaasheenii u soo dulqaatay ama ka soo if baxay intaas oo ciqaabo iyo gumaad ah.

Kuwaasina waa kuwa maanta dadka Soomaaliyeed ka dhigay faroojo col u joogyo wada ah oo beygag iyo argagax ku nool illeen way ugaaroobeene. Halkaa ayey intii la soo dhibaaba u soo qixi jirtay dhanka xeebaha iyaga oo is biirsanaya umado kale oo ama geyigaas ku noolaa ama geyi kale ka kala yimid ayna ku samaysantay Qawmiyadda Soomaaliyeed. Sidaa awgeed maanta waxaa la xaqiiqsan yahay in labada shacab ee Ethiopia ama Wejigii gubtay iyo Soomaaliya isaga mid yihiin xagga cunfiga iyo colaadda, waxayna maanta yihiin labada Qawmiyadood ee ugu xag jirsan xagga Diinaha ay kala aaminsan yihiin ee kala ah Orthodox oo Ethiopia ah iyo Islaam oo Soomaalida ah. Labaduba waa mintid xag jir ah oo lagu tilmaami karo dabiici ahaan Argagixiso (*Terrorists by nature*).

Hase ahaatee waxaas oo dhan oo jira ayaan waxaan door bidi lahaa in uu si gaar ah waajib uga saaran yahay dadka Soomaaliyeed ee aqoonyahanada ama wax garadka ah in ay cuqdada intaas la eg cirib gooyaan oo illowsiiyaan taariikhda mid qoran iyo mid afka la isugu gudbiyo labadaba.

Maanta waxaa muuqda weji cusub oo wada noolaansho ooy cid walba dantoodu ku jirto. Waxaan indhaha laga qarsan Karin inay labada Qawmiyadoodba ku baraari karaan iyaga oo is dhex gala oo walaalooba meel fogna iska dhiga soo xasuusashada wixii dhib iyo colaad horay u soo dhex maray awoowayaashood.

Waxaa in carrabka lagu adkeeyo u baahan qodobka Diinta; walaalayaalow haddaad arrin diineed ku colaadinaysaa shacabka reer Ethiopia ogaada in aad idinku Muslim ahaan haysataan oo ku doodaysaan diinta xaqqa ah oo aysan kuwooda iyaga aan Muslimka ahayni haysan wax xujo iyo xaq la taaban karo ah oo ay idinku mucaaradaan. Sidaa awgeed waxan shaki ku jirin marka ay labada shacab is dhex galaan in ay malaayiin iyaga ihi Muslimi doonaan haddii Alle idmo. Ogow dadkaasu waa Bani Aadam oo hadaad wax sax ah oo qanciya u sheegto way kugu raaci karaan. Laakiin hadaad ka baqayso in adiga Diintaada lagaa duufsado oo lagu gaaleeyo ogow waxay u ekaanaysaa in aadan adigu Diin sax ah haysan oo isku kalsoonayn. Haddaba waxaan ku guubaabinayaa walaalka Muslimka ah ee Soomaaliyeed in uu ku dhiiranaado dhex galka iyo la macaamilka umadaha adduunka guud ahaan gaar ahaana dadka reer Ethiopia ee deriska nala ah.

Dhinac kale hadaan ka eegno isla qodobka Diinta, ma og tahay Muslimka Soomaaliyeedow in ay Muslimiinta Ethiopia shan jibbaar ka tira badan yihiin Muslimiinta Soomaaliya balse laga yaabo in ay ka akhlaaq iyo dhaqan wanaagsan yihiin? Run ahaantii maanta dawladda Ethiopia badankeedu waa Muslim haba inkireen dawladda iyo reer Galbeedka la xulafada ihiye. Sidaa awgeed ma ahan meel iyo dad gaalnimo looga

cararo. Iyada oo labada dhinac ay ka wada faaiidaysanayaan xorriyada hadalka ee Dimoqraadiyada waa ciddii laga adkaado oo la dhaqan duwo ee cid waliba waxay isku hayso ha la soo xera gasho oo ha la midoobo. Hubaal waxaa ah in ay fikradaasi gar gaar u ahaanayso fiditaanka Islaamka ee waa in kalsooni iyo niyad sami aqoon kaashanaysa lagu wajahaa.

Xagga dhaqaalaha waa mid iska cad oo aan cidna uga baahnayn sharax iyo qeexitaan sidaa darteed kuma dhex qaldi karno mawduucaan siyaasadeed. Xagga dhaqanka waxaa ila haboon in cid waliba keeda ku salaysan jaahilnimada iyo macangagnimada ay ka tanaasusho oo la isugu yimaado dhaqan casri ah oo waafaqsan tilmaamaha Diinta Islaamka (intii Muslim ah), inta kalena xaq tusintooda loo wada gurmado.

Haddaba intaa iyo in la mid ah inaga oo ka duulayna ayaan u arkaa in aysan Ethiopia waxba noogu dhimin loolankaan siyaasdeed ee ay dawlada noogu dhistay. Waa inaga Soomaali ahaan cidda ama dawladaas mid xun ka dhigan kara ama mid wanaagsan ka dhigan kara. Waxaa laga yaabaa in cadawgaaga oo is leh xumee uu isagoon is ogeyn ku wanaajiyo oo ay dhanka kale uga baydho ama xumaanta uu kugu sameeyo aad wanaag u adeegsan karto. Waxay tiri gabar iyada oo dhaanta ka soo boodaysa wiilkii la cayaarayey garaarka ka gooyey "Garaarka ina adeerkay iga jaray hadba waa sidaan ka dhigto". Sidaa darteed Ethiopia waxba nagama hallayn ama bi'in ee wayba na wanaajisay.

Intaas oo dhan hadaan ka soo harno, war walaalayaalow ma dawlad baan haysanay marka ay Ethiopia noo xushay kuwii noogu liitay? Waa maya. Haddaba siba sibay dhaantaaye aan kuweena liita qiimo iyo muunad u yeelano oo dhayano waa intaasoo ay noo noqdaan kuwa noogu wanaagsan. Waa tuu Nabiga NNKHA tee yiri: "Kuwii idinku akhyaarsanaa xilligii Jaahiliyada ayaa idinkugu akhyaarsan xilliga Islaamka" (*Khayaarukum fil jaahiliyati khayaarukum fil Islaam*).

6. Markaan cagaheena si dawladnimo ah ugu istaagno ayaan ka hadli karnaa cid qaldan iyo cid saxan. Waxaa naxdin leh inaga oo aan meelna jirin oo ay doodi ka furan tahay in l inagu xisaabiyo umadaha iyo qaaruumaha laga aqoonsan yahay caalamka iyo in la iska keen inkiro aan dhexdeena uga doodno hebel baa qaldan iyo hebel baa saxsan. Dhab ahaantii taasi waxay la mid noqonaysaa is eedaynteenii iyo dagaallankeenii aan dhexdeena isu haysanay reer hebel iyo reer hebel xilli ay umadaha adduunku noo arkaan qoys caqli xumo iyo waalli ku dhashay oo kulligood isku mid ah. Taasna waxaa la yaqiinsaday marka ay wafdiyo ka socda qabiilo qaarkood u tagaan dawlad ama hay'ad aan dawli ahayn ee ay u soo bandhigaan fikrado taageerayo qoladooda ooy ugu jawaabaan "anagu idin maanu kala naqaane miyaad kala duwan tihiin"?.

Marka aan isla barbardhigno shirkaan aan hada ka hadlayno iyo shirrakii ka horeeyey waxaa noo soo baxaya aragtida koowaadba in uu shirkani kaga duwanaa arinta ah loolanka iyo hardanka af iyo addinba isugu jiray ee dhex socday Dagaalyahanada iyo Aqoonyahanada. Dagaalkaasi kuma ekayn mid siyaasadeed oo keliya ee waxa garab socday in markii laga adkaado koox gaar ahaan kooxda Dagaaloogayaasha ah ay gacantooda la baxayeen oo beerka ka garaacayeen kuwa aqoonyahanada ama siyaasiyiinta ah ee laf dhuun gashay ku noqda, haday arintu la gashana waxayba gaaraysay dil qarsoodi ah (*Assasination*).

Laakiin shirkii ka horeeyey ee tuulada Carta ee dalka Djibouti lagu qabtay waxa uu ahaa mid guud ahaanba ka soo qayb galayaashiisu ay ahaayeen dad Aqoonyahano ah oo nadiif ah oo ay ka wada go'nayd in dawlad Soomaaliyeed oo calankeedu babanayo la helo. Intaa waxaa dheeraa in dhamaanba shacabka Soomaaliyeed oo meel walba kala joogay ay u wada heellanaayeen helitaanka dawlad Soomaaliyeed waxayna ku wada jireen farxad iyo damaashaad iyaga oo wada rajaynayey in halkaa dawlad Soomaaliyeed lagu dhiso. Waxaa shanta Qaaradood ee adduunka ka soo kala boqoolay fanaaniintii dalka oo aan

qudhoodu muddo dheer is arag, waxayna qaadayeen heeso qiiro wadaninimo leh oo ay ka mid ahaayeen;"waa la noqonayaa, dib baa loo noqonayaa".

Shirarkii kale ee kaas Carta ka sii horeeyey iyagu waxay ahaayeen kuwa la sheegayey in lagu heshiisiinayo Dagaaloogayaasha oo keliya si ay iyagu qaybsiga wadanka ugu heshiiyaan, iyada oo loo sawirayey masraxa riwaayada sidii dhurwaayo – waraabayaal isku dagaalaya neef ay wada disheen. Waxaa kale oo xusid mudan in xilligaas Qabqablayaalka dagaalku aysan ilbax ku noqon fidno-walanimadooda oo ay gacan ku gabad ahaayeen ayna ka wada baqayeen in la qabto oo maxkamad la soo wada hor taago. Sidaa awgeed waxay u wada diyaar ahaayeen wax loo yeeriyo. Marka laga reebo hal ama laba iyaga ka mid ah. Dhanka kale Aqoonyahanadu waagaas wax siyaasad ah diyaar uma ahayn waxayna ka war sugayeen bal wixii ay Dagaalyahanadu dhexdooda ku heshiiyaan oyo siday wax ku qaybsadaan.

Tan ugu dambaysa waxay tahay ma bannaan tahay diin ahaan in dad Muslimiin ihi ay taageero siiyaan Hogaamiye Dilaa ah oo aan Diinta Islaamkana wax tixgelin ah u haynin?. Jawaabta su'aashaasi waa mid ay horay uga hadleen culimadii Muslimiinta ee hore waxayna isku raaceen in marka xaaladdu taagan tahay isla tabta maanta ina haysata ee Hogaan l'aanta iyo fawdada ah ay bannaan tahay balse habboon tahay in laga dhigto Hogaanka dalka midka ugu dagaal yahansan ee fidnoolayaasha si kale lagu kari waayey ku jabinaya isla noocooda shar iyo fidno si loo gaaro nidaam iyo kala dambayn. Haddaba aan u isticmaalno dawladaan buundadii aan kaga gudbi lahayn webiga naarta ah ee nagu soo fatahmay.

Gintii iyo gunaanadkii hor Ilaahay baa laydin ku dhaarshee ha halmaamina Daa'inkeena, haw iyo horumarna ha diina Soomaaliyeey. Waxan allaha awooda sare iska leh ka baryeynaa in uu nawad waafajiyo xaqqa iyo samaha.

## DULMAR GUUD EE UBUCDA BUUGA

Soddon buuxadii da'ada dawladnimo markay gaartay Soomaalidu waxay ku caana diideen gobonimadii iyo calankii xuriyada oo halgankoodii gobonimadoonka ee ay ku caan bexeen u badesheen halgan gunimodoon ah. Halkii laga sugayey 1991 waa tii la galay 1990 iyo kala haad.

Si daadkaas cadaabka ah ee fakaday loo mooso waa tii la isugu yeeray dagaaloogayaasha Soomaaliyeed in ka badan 14 jeer oo meelo kala duwan gogol nabadoon loogu fidiyey. Hadana markay gogolahaas oo dhami wax tari waayeen waa tii ugu dambays la isugu yeeray gogoshii ugu fadhiga dheerayd, ugu rajada weynayd, ugu ka soo qayb galka badnayd, ugu dooda kululayd, ugu dhiiranaanta badnayd, ugu danaynta badnayd, ugu kharash garaynta badnayd, ugu khayaanada iyo dibindaabyada badnayd, ugu tahlukaynta badnayd, ugu tacsiyaha badnayd, ugu tartamayaalka badnayd, uguna tiiraanyada iyo welwelka badnayd, taas oo socotay intii u dhexaysay sanadkii 2002 – 2005, min Eldoret ilaa Mpagathi, Kenya.

Hadaba sidee ayay waxaas aan kor ku xusnay oo dhami u wada dhacayeen isku mar? sidee la isu khiyaanaynayey ama la isu jillaafaynayey, dawrkee ayey dawladaha safka hore ee kala ah; Ethiopia, Djibouti iyo Kenya ku kala lahaayeen maamulka iyo danaynta shirkaas? Sidee la isu khayaanay? Maxay ahaayeen ceebihii iyo fadeexooyinkii ka dhacay? Intee bay la ekayd fara gelinta Etheopia maxayse uga dan lahayd? Dawrkee ayey dawladaha masruufka deeq ahaan u bixinayey ee Midowga Yurub iyo Isutaga Carabtu kala lahaayeen? Dawrkee ayuu Maraykanku ku lahaa?. Sidoo kale dawrarkee ayay kala cayaareen guutooyinkii ama kooxihii kala duwanaa ee madasha shirka isku arkay si ay uwada hardamaan? Hadaladoodii iyo ficiladoodii ma waalli bay ku qotomeen

mise fayoobi? Heer kee bay ka gaartay diin ka baxa iyo fasahaadku maxaase kallifayey? Dhib intee la eg bay dadku u marayeen xukun doonka? Dhanka kale maxaa shirka mudadiisa sidaa u dheereeyey ilaa uu qaato sadax sano ku dhawaad halkii looga tala galay sadex todobaad oo keliya?. Maxaa loo samayn waayey wax dib u heshiisiin dhab ah mar hadii waqtiga intaa ah la is hor fadhiyey?.

Sidee lagu soo xulay 275 ta xubnood ee Baarlamaanka oo ay ku noqdeen caqligii iyo indhihii umada Soomaaliyeed?. Sidoo kale maxaa keenay ama sidee lagu soo doortay Gudoomiyaha Baarlamaanka Mr. Shariif Xasan, Madaxweynaha Cabdulahi iyo Raisulwasaraha Geedi oo iyagu noqday mirihii ka soo baxay shirka ee shukaanta u qabtay gaarigii dawladnimo ee la soo dhaqaajiyey? hadana maxaa isku diray oo ay judhiiba labaca iska wada qaniineen? Hadda halkee buu ujeedaa xaalka Soomaaliya? Xagee baan ku dambayn doonaa?. Iminka maxaa nala gudboon in ana ka yeelno dawlad ku sheega ay noo dhoodhoobeen?. Waa maxay danteenu?

Su'aalahaas oo dhan waxaa kaaga jawaabaya buugan uu ka soo shaqeeyey qoraaga caanka ah ee Dr. Qasim oo isagu goob joog ka ahaa dhacdada min bilow ilaa dhamaad, isaga oo qudhiisu ka mid ahaa kuwii cayaarta ka soo boodayey. Qoraaga Dr. Qasim waxa uu ka mid ahaa Murashaxiintii kursiga madaxweynenimada.

Waxa uu qoraagu diyaarinta kitaabkaan ku saleeyey xeerka qoraanimada ee caalamiga ah. Xeerkaas oo loo raacayo habka diyaarinta qoraalka ku qotoma xog dhab ah oo la aruuriyey dhiraan dhirinteedana la waafajiyey taxliil siyaasi ah oo aan dhana loo dhaafi karin, kana barax la' caadifad iyo hawo raac si gaar ah loola jeedo. Sidaa awgeed waxa aad helaysaa in uu qoraalkani yahay daraasad cilmiyeysan oo xaqiiqo doon loola jeedo. Waxa keliya ee ay ujeedada qoraalku tahay in la helo dariiq siyaasadeed oo lagu kalsoonaan karo raacitaankiisa, ama ugu yaraan in dib uhabeyn lagu sameeyo xoogaaga fikir siyaasadeedka ah ee ay

Soomaalidu isugu dhex gudbiyaan habka bawsiga ah ee sheekooyinka fadhi ku dirika la isku gaarsiiyo.

Waxaan Allaha awooda sare leh ka baryeynaa in uu na wada wafajiyo tubta siyaasadeed ee ku haboon waayaheena aan ku noolnahay, taas oo ah mid aan ku badbaadi karno noloshan dhaw iyo dan dambe ee daaimiska ah labadaba.

**By: Qasim Hersi Farah, Ph.D.**

## DARDAARAN

Waxaan walaalkayga/shayda akhristaha ohow idinkaga dardaarmayaa in aad akhriska buugaan ku kaashataan dulqaad iyo fikir ku qaabaysan cadaalad iyo dhan walba wax ka eegid. Weligaa iska ilaali caadifad iyo laab la kac ku salaysan tacasub oo macnihiisu yahay qabiil jeclaysi, qof jeclaysi iyo naf jeclaysi intaba.

Dhammaan waxyaalaha aan buugaan ku soo aruuriyey waa wax aan goob joog u ahaa oon indhahayga iyo dhegahayga ku dheegay ama ku aruuriyey. Waxaaba jira dhacdooyinka qaarkood inaan qudhaydu wax ka sameeyey oo jilaa ka ahaa qaybtaas riwaayada ka mid ah maadaama aan masraxa joogay.

## FILASHO WACAN

Akhrsiatahayga wanaagsanow adiga oo mahadsan waxaad u sii diyaar garowdaa silsilada buug ee kan xigta oo ah: “Mushkiladeenu waa Caqliga”. Buugaan waxaan ku dhalaaliyey maskax shiilan oo mudo dheer qaadatay. Waxan soo miisaamay caqliga dadka Soomaaliyeed aniga oo ka eegay dhawr weji oo kala duwan sida; deegaanka – Bii’ada aan ku noolnahay, dabeecada dhaqandhaqaale ee nagu meegaaran, garaadkeena aqooneed, macanaha caqliga oo loo eegayo Diinta Islaamka, macanaha caqliga oo loo eegayo cilmiga nafsaaniga ah, u bandhigid iyo barbar dhigid caqligeena midka dunida horumartay iyo dunida ku daba jirta ee iminka isku filnaanshaha gaartay.

***<u>Waxa qoray: Dr. Qasim Hersi Farah</u>***

# TUSMO


01. Hibayn, Xuquuq daabacaad, iwm

02. Arar

03. Xusitaan siyaasiyadda "Caasha Axmed Cabdallah"

## 1. Cutubka koowaad

1. 1. Hordhac

2. 1. Curintii shirka Eldoret

## 2. Cutubka labaad

2. 0. Min Eldoret ilaa Mbagathi

2. 2. Furitaankii shirka

2.3. Abuurkii koox isku magacawday "sideedaad" (group- 8)

## 3. Cutubkii Saddexaad

3. 0. Dawrarkii la kala cayaaray

3. 1. Dawrkii wafdigii dawlada KMG ah (TNG)

3. 2. Dawrkii bulshada rayidka ah

3. 4. Dawrkii Madaxweyne Muzaveni iyo Wasiir Mizyoke oo gaaban

3. 5. Dawrkii dumarka

3. 6. Dawrkii dalalka shisheeye

3. 7. Dawrkii bahda war baahinta

## 4. Cutubka Afraad

4. 0. Midnimadeenii mugdi gashoo magaceen ba'yeey

4.1. Diyaar garow la'aan

4.2. U quurid la'aan kaadir hawlaha heshiisiinta hanan kara

4.3. Durba nidaamkii qaybi oo xukun
4.4. Booyaasooyin iyo kariyeyaal amar kutaaglaynaya
4.6. Soomaaliya iyo federal – dawlad wadaag: dulmar gaaban
4. 7. Waa la isku haystaa wixii madaxda kaa dhigay

## 5. Cutubka shanaad

5. 0. Lix guddi farsamo oo la qabtay
5. 1. Qeexitaan gudiyada
5. 2. Guddiga nidaamka federaalka iyo diyaarinta axdi qarameedka
5. 3. Guddiga xiriirka gobolada iyo caalamka
5. 4. Guddiga xallinta khilaafaadka iyo dib uheshiisiinta
5. 5. Gudiga hub ka dhigista, abaabul ka saarka iyo dhaqan celinta
5. 6. Guddiga doodaha dhulka iyo xuquuqda lahaanshaha

## 6. Cutubka lixaad

6. 0. Wejigii labaad iyo doofaarey
6. 1. Waxaa loo guurayaa mpagathi (Doofaarey)
6. 2. Hawshii oo ka bilaabatay mbagathi
6. 4. Dawladihii jiidda hore oo is eryanaya
6. 5. Is hardigii (SRRC) & samata-bixinta oo madaxweyneyaal dhibay
6. 6. Qodobka 30 aad ee axdiga oo laf dhuun gashay noqday
6. 7. Isku maaweelin shir dib u gurasho ah
6. 8. Milankii iyo kala miirankii ergada

## 7. Cutubka todobaad

7. 0. Sida loo xushay hogaamiyeyaalka soomaaliyeed
7. 1. Murashaxiintii madaxweynenimo oo isku maandiimaya
7. 2. Xulashadii xildhibaanada

7. 3. Xubnihii xildhibaanada oo si axmaqnimo ah u hawlgalay

7. 4. Siday ku suurtowday in la doorto gudoomiyaha baarlamaanka " shariif Xassan Sheekh Aadan".

7. 5. Siday ku suurtowday in la doorto madaxweyne Cabdulahi Yuusuf

7. 6. Siday ku suurtowday in la xusho raisulwasaare Cali Maxamed Geedi

7. 7. Caddaaladii dawacada ee awood-xukun qaybsiga

7.8. Maxaa lagu heshiiyey aakhirkii

7. 9. Waa maxay Xalku?

8. 8. Dulmar guud ee ubucda buuga

8. 9. Dardaaran

8. 9. Filasho wacan

*F. G. Dhammaan xuquuqda buugani waxay u gaar tahay Qoraaga; Dr. Qasim Hersi Farah, Ph.D. (Qaasim Xirsi Faarax)*